# AMIIRKA CAS

*Sarkaalkii Yuhuuddu ay ka ledi weyday*

KAMAAL MARJAAN



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN
AFKAAGA HOOYO
Telegram

Buugaan iyo Kuwo la mid ah waxaad ka helyesaa Almaz Books Telegram
Buugaag Xul ah oo tayo leh waa astaan teena,
Raac Linkgaan- https://t.me/maktabadasharciga

Fiiro Gaar Ah PDF kaan haduu beec kugu soo galay waa gaadantahay buugaan origina
PDF kiisa waxaa soo gudbisay Almaz Books.

# AMIIRKA CAS

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN AFKAAGA HOOYO
Telegram

# AMIIRKA CAS

## Sarkaalkii Yuhuuddu ka ledi weyday

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN
AFKAAGA HOOYO

KAMAAL MARJAAN

AMIIRKA CAS

Sarkaalkii Yuhuuddu ka ledi weyday

Kamaal Marjaan

Madbacadda: HIIL PRESS

Email: contact@hiilpress.com

Qaahira / Hargeysa

Daabacadda Koowaad: 2022

©Dhammaan xuquuqaha buuggani waxa ay u dhawrsanyihiin Qoraaga, Kamaal Marjaan.

Dib looma daabici karo, lama sawiran karo, gacan ama qalab kale laguma minguurin karo, maqal iyo muuqaal ama cod looma beddeli karo, sifo kale oo kastana looguma takrifali karo qayb buuggan ka mid ah ama dhammaantii, haddii aan ogolaanshiyo qoraal ah laga haysan turjumaha

Kamaal Axmed Cali

Email: marjaankam@gmail.com

Tel: +252 63 4247777

https://t.me/maktabadasharciga

https://t.me/maktabadasharciga

# HIBAYN

Buuggan waxa aan u hibaynayaa akhristaha Somaaliyeed ee xiiseeya barashada iyo fahamka culuumta siyaasadda iyo arrimaha ammaanka.

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU OORAN
AFKAAGA HOOYO
Telegram

https://t.me/maktabadasharciga

# TUSMO

MAHADNAQ 11

Hordhac 13

1. Cali Xasan Salaama 17
2. Hawlgalladii Sabtembarta Madow 37
3. Baacsashadii Amiirka Cas 177
4. Khaarajintii Amiirka Cas 195

TIXRAACYO 225

Sawirro xusuuseed 229

# AFEEF

Cali Salaama waxa uu ahaa halgamaa caan ka noqday dunida, sidaas awgeed qoraayo aan isku aragti iyo ujeeddo ahayn ayaa siyaabo kala duwan qisadiisa wax uga qoray. Maadaama oo tixraaca kutubtu ku yaryahay dhulka Soomaalida, sheekaduna muddo dheer ka hor ahayd, waxa aan ka afeefanayaa haddii ay soo baxaan xogo aanan helin intii aan baadhista ku jiray.

Waxaa kale oo aan ka cudurdaaranayaa in buuggani aanu marnaba ahayn taariikhda halyeeygaas oo ay aad wax uga qoreen dad badan oo iiga xogogaalsan ama iiga dhow ogaanshaha taariikhdiisa. Sidaas awgeed buuggani waa qaybo kooban oo ka mid ah taariikhdiisa iyo halgankii adkaa ee uu u galay dib u helidda xuquuqda dadkiisa ka maqan.



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

# MAHADNAQ

Hawl kastaa waxa ay leedahay tiirar aanay la'aantood dhammaystiranteen, qorista buugganina waa la mid uun. Waxaa jira haldoor aanu qalinkaygu sida ugu wanaagsan u dhigi karin ereyo ku habboon u mahadnaqooda. Kuma koobna qofaf magacyadooda la diiwaangelin karo, waxaa se aanay naftu dhaafi karin in ay xusto akhyaarta ay ka mid yihiin, Xildhibaan Maxamed Xuseen Jaamac (Rambo) oo ah shakhsiga ay dhiirrigelintiisu ibafurtay qalinkayga iyo Jaamac Nuur Axmed oo ah walaal tan iyo xilligii ardaynimada dugsiga igu riixayey qalinka iyo qoraalka, mar kastana kaalin ka qaata soo akhriska iyo talo ka bixinta buugaagtayda.

Qoraa Khadar Cabdi Cabdillaahi ayaa ka mid ah udubdhexaadka aanan akhris-sixiddooda iyo taladooda uga maarmin buug kasta oo aan soo saarayo. Waxaa iyaguna la mid ah Xuseen-Mahdi Xasan Xuseen iyo Sheekh Cabdirisaaq Rakuub oo aan talada iyo dhiirrigelinta igala hadhin illaa uu buuggu madbacad galo. Abwaan Yuusuf Shaacir iyo Abwaan Axmed Aw Geeddi oo ah bareyaal dadban iyo waardiyeyaasha afkeenna hooyo ayaa ah cidda aan mar kasta kula noqdo kala xulashada ereyada afka iyo habsami u adeegsigooda.

Waa tobannaan iyo tobannaan haldoor oo aanan qoraal kaga geyoon karin, ee inta aan xusay iyo inta badan ee hadhayba waxa aan leeyahay, dadaalkiinna Alle ha ka yeelo kii la intifaacsado.

BUUGAAG KOOGU QORAN
AFKAAGA HOOYO



Telegram

Ugu dambayntii, buuggan waxaa ku jira sawiro badan oo isugu jira laba sawir oo jaldiga labadhiisa dhinac galay, iyo sawirro la xidhiidha Cali Salaama iyo hawlgelladii ay Sabtembarta madow fulisay oo aan bogagga dambe raaciyey. Dhammaan sawirradaasi waxa ay ku jireen, lahaanshiyaha dadweynaha (Public Domain) ee internet ka, waxa aanay uu badan yihiin sawirro nus qarni ka hor la qaaday. Si kastaba ha ahaato ee waxa aan qirayaa in xuququdooda ay leeyihiin hay'adihii warbaahineed iyo sawirqaadayaashii taariikhda inoogu dhigay.

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN AFKAAGA HOOYO
https://t.me/maktabadasharciga
Telegram

AlmaZ Books
Telegram

# HORDHAC

Duufaannadii ka horreeyey aasaaska dawladda Yuhuudda iyo halganka weli socda ee tan iyo bilowgii ay Falastiiniyiintu ku doonayaan soo dhacsashada dhulkooda la boobay, waxaa jiray loollan dhinaca ammaanka ah oo u dhexeeya labada dhinac. Hubkiisa ugu weynina uu yahay dagaalka sirdoonka oo ah waxa ugu dambaynta lagu kala guulaysanayto.

In kasta oo aanay Falastiiniyiintu marna noqon dawlad buuxda, haddana waxaa la isku waafaqsan yahay xirfadda aadka u sarraysa ee sirdoonkooda. Hay'adahooda sirdoonku marar badan, si dunida oo dhan mucjiso ku noqotay ayaa ay u garbiyeen ama loollan iska-caabbineed oo adag ula galeen sirdoonka Israa'iil.

MOSSAD, hay'adda sirdoonka dibadda u qaabbilsan Israaiil, waxaa lagu tiriyaa in ay kaalmaha hore kaga jirto sirdoonnada adduunka, laakiin tobannaan sano ayaa ay mararka qaarkood ku qaadataa in ay soo helaan hal basaas oo Falastiini ah.

Marka laga tago wakaaladda sirdoonka Falastiiniyiinta ee hadda dhisan, RASD ama Mukhaabaraat Alcaamah, waxaa jira hay'ado kale oo tiro badan oo aan lahayn magac rasmi ah iyo astaan sugan. Mid kasta oo ka mid ah ururrada xoraynta

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Falastiiniyiintu, gaarkiisa ayaa uu u dhistay qayb sirdoon oo ku waajahan Israa'iil. Waa nidaam ammaan oo suurtagelinaya in ururrada iyo jabhaduhu ku dhex noolaan karaan dhulka Israa'iil haysato, iyo in ay yareeyaan khasaaraha ka soo gaadhaya MOSSAD.

Sirdoonnada Falastiiniyiinta waxaa marar badan soo mara halyeeyo caan noqda oo muddo tamariya, khasaare laxaad lehna gaadhsiiiya Israa'iil ammaankeeda. Dagaal dheer oo dhaqaale iyo nafba galaafta iyo hawlgallo sirdoon oo maskax iyo waqti badan qaata kaddib, ayaa ay Israa'iil ku guulaysataa in ay qabato ama khaarajiso hadba halyeeyga ay ka seexan weydo, waana ay dhacdaa in aanay weligeedba soo helin.

Buuggani waxa uu xambaarsanyahay qisada mid ka mid ah halyeeyada Falastiiniyiinta ee halganka ka galay kaalin aad u muuqatay oo dhinaca sirdoonka ah. Waa Cali Xasan Salaama oo dunida sirdoonka marka la joogo aad loogu garan ogyahay 'Amiirka Cas'. Waxa uu ka mid ahaa dhalinyaradii la kacaantay colaadda Yuhuudda. Waxa uu ku garaadsaday dhismihii dawladda Israa'iil iyo qaabkii foosha xumaa ee Falastiiniyiinta dhulkooda looga qaaday, waxa aanu Israa'iil la galay halgan caalamiya oo khasaare naf iyo moodba leh iyo dhakafaar ku riday MOSSAD.

Waa qiso aan ka soo ururiyey ilo kala duwan oo isugu jira buuggaag ay qoreen dad xogogaal ah oo ka soo kala jeeda labada dhinac ee is haya, Falastiiniyiinta iyo MOSSAD, iyo maqaallo kala duwan oo mararka qaarkood ay qoreen dad aan labada dhinac ahayn oo dunida galbeedka iyo Carabta kalaba ka soo jeeda. Maadaama oo ay sidan tahayna waxaa suurtogal

naZ Books
Telegram



ah in mararka qaarkood aad la kulanto hal qiso oo hadba dhan aynu ka istaagayno, si warku isu dhammaystiro. Salaama waa sarkaal ay gacal iyo nacabba isku waafaqsan yihiin in uu yahay mudanta dhifta ah ee soo maray sirdoonka Falastiiniyiinta.

Marka laga tago xirfaddiisa sirdoon, waxaa yaab leh awooddiisa dhinaca xidhiidhada; waa sarkaalka ku guulaystay in uu la dagaallamo MOSSAD, haddana uu la shaqeeyo CIA.

Salaama, oo ay illaa maanta ku dhaataan dhamman dadyowga ku jira halgannada kala duwan ee xornimadoon ee dunida ka jira, gaar ahaan kuwa u shaqeeya qaabka qarsoodiga ah ee la dirirsan cadow ka itaal roon oo hoostiisa ay ku jiraan. Waa nin magaciisa iyo qisadiisuba ay tobannaan jeer yimaaddeen miiska talada lagu gooyo ee Israa'iil, lagana dooday sidii wax looga qaban lahaa, illaa heer raysalwasaarihii Israa'iil ay u bixisay naanaysta uu caanka ku noqday ee Amiirka Cas.

Waxa aynu si gaar ah u dul istaagi doonnaa sooyaalka carruurnimadiisii, bilowgii halgankiisa iyo dhacdooyinka ugu caansan ee taariikhdiisa ku jira sida dhacdada la baxday Sabtembartii Madoobayd, dilkii ciyaartoygii Israa'iil sannadkii 1972, uga qayb geli lahaa ciyaarihii Olambikada oo ka dhacayey Jarmalka, afduubkii diyaaraddaha, iskudaygii dilka Gold Meir iyo iskudayadii dilkiisa ee Israa'iil ku fashilantay.

Waxaa kale oo uu buuggu ka warramayaa guurkii Cali Salaama iyo ugu dambayntii qaabkii ay Israa'iil u khaarajisay, oo aynu xusi doonno gabadhii MOSSAD u shaqaynaysay ee hawlgalkaas fududaysay.

**Kamaal Marjaan**

**Hargeysa. 31 Oktoobar, 2021**

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU DORAN AFKAAGA HOOYO
Telegram
https://t.me/maktabadasharciga

# 1

# CALI XASAN SALAAMA

Sannadkii 1940, ayaa uu ku dhashay tuulaha Qawlat oo ka mid ah deegaanka ay Israa'iil qabsatay 1948 kii, dadkii deegaanka u lahaa ee Carabta ahaana ay gebi ahaanba ka caydhisay. Qawlat oo imika ka mid ah dhulka loo aqoonsanyahay in ay Israa'iil leedahay oo aanu wadahadal ka furnayn, waxa ay dhinaca woqooyi bari 15 Kiiloomitir ka xigtaa magaalada Raamallaah oo ah caasimadda Ismaamulka Falastiiniyiinta. Qoyska Cali Xasan Salaama magac weyn ayaa uu ku lahaa tuulahan, gaar ahaan aabbihii oo ahaa ruuxa ugu caansan ee ka dhashay deegaanka.

## Xasan Salaama

Waxa uu ahaa halgamaa taariikhda Falastiin baal dahab ah ka galay oo ay jaal ahaayeen hoggaamiyihii waddaniga ahaa ee Cabdalqaadir Alxusayni. Waxa uu ka mid ahaa hoggaamiyeyaashii kooxihii hubaysnaa ee Carbeed ee dagaalka adag kala hor yimid gumaystihii Ingiriis iyo Yuhuuddii uu u abaabulayey in uu dhulkan dawlad uga dhiso. Waa kacdoonkii

AlmaZ Books
Telegram

Carbeed ee dhulka Falastiin ka dhacay intii u dhexeysay 1936 kii illaa 1939 kii.

Xasan oo dhashay sannadkii 1912, waxa uu ka qaybgalay dibadbaxyadii dhiigga badani ku daatay ee ka dhacay magaalada Xayfa sannadkii 1933, kaddib waxaa raadiyey ciidamadii gumaystaha Ingiriiska ee dhulka joogay.

Sidaas awgeed waxa uu baxsi ku tagay dhulka baadiyaha ah. Isaga oo mararka qaarkood inta uu tuuleyaasha dhex wareego, Carabta deegaanka ugu baaqi jiray in ay gumaystaha ka hor yimaaddaan. Sida oo kale Xasan Salaama waxa uu ka mid ahaa hoggaamiyeyaashii ciidankii la baxay Jayshul Jihaad Almuqaddas socday dagaalkii 1948 kii, oo ah kii Falastiiniyiinta lagaga qabsaday inta badan ee dhulka hadda ay ka dhisan tahay dawladda Israa'iil.

Waxa uu madax u noqday ciidamadii la baxay naftood-hurayaasha ee degaanka Raamallaah oo dhinaca bari ka xigay Xayfa. Waxa uu qorsheeyey ama hoggaamiyey dagaallo tiro badan oo ka dhan ahaa Ingiriiska iyo maleeshiyadii Yuhuudda ahaa, kuwaas oo badankooda uu ka gaadhay guulo uu ku kasbaday quluubta shacabka reer Falastiin oo u arkayey in uu yahay halyeeygooda.

Mid ka mid ah dagaalladii kululaa oo maleeshiyada Yuhuudda ku dhexmaray magaalada Raasulcayn ee woqooyi galbeed ka xigta Quddus ayaa bishii Mey 1948, uu Sheekh Xasan si xun uga dhaawacmay sambabka bidix, laba maalmood kaddibna dhaawacaas ayaa uu u geeriyooday 2$^{dii}$ Juun 1948.

Sheekh Xasan Salaama waxa uu dhalay Cali Xasan Salaama oo noqday sarkaal sirdoonka Falastiiniyiinta ka tirsan oo hawlgallo si yaab leh loo diyaariyey ka fuliyey Israa'iil gudaheeda iyo danaheeda dibadda. Muddo dheer ayaa uu sirdoonka Yuhuudda ee MOSSAD waqti, maaan iyo maalba itaalkiisa isugu geeyey sidii uu u khaarajin lahaa, laakiin Qaddarka ka sokow ku badbaaday feejignaan, ildheeri iyo maskax furnaan uu caan ku ahaa.

Sarkaalkan oo magaciisa lagu soo koobi jiray Cali Salaama, waxa uu ahaa nin dhalinyaro ah oo aad u maskax badan, nacaybka ay guud ahaanba Falastiiniyiintu u hayeen Yuhuuddana waxaa isaga u dheeraa, goobjooggii uu isaga oo 15 sano jiray, indhihiisa ku arkayey aabibhii oo u dhimanaya dhaawaca ka soo gaadhay dagaalkii Yuhuudda dhulboobka ahi kula jireen Falastiiniyiintii deegaanka uu awoow ka awoow ku abtirsanayey.

Markii aabbihii geeriyooday, hooyadii oo ka cabsi qabta in maleeshiyada Yuhuudda, oo ay isku deegaan isguryo iyo cid yaqaanna ahaayeen, ay soo raadsadaan si ay u tirtiraan tafiirta halyeeygaas dhiigga badan ka daadiyey, waxa ay ula qaxday dalka Lubnaan, waxa aanu muddo ku noolaa xerada qaxootiga Falastiiniyiintu deggen yihiin ee ku taalla deegaanka magaalada Naabulis. Waxa ay ahayd xero nolosheedu aad u liidato.

***

AlmaZ Books
Telegram

Cali Salaama magaaladaas Naabulis ayaa uu ku qaatay waxbarashadiisa dugsiga oo uu caan ku ahaa kaalmaha hore. Inkasta oo uu dhalinyaranimadiisii ahaa nin da'diisa ka dhex muuqda, oo lahaa ragannimo, garasho badnaan, dhiirranaan, qurux, iyo dhammaan dabeecadaha iyo astaamaha ragga aanay hablaha facooda ahi gafin, haddana isagu markaas ma uu ahayn nin dunida haweenka ku hawlan. Himiladiisa iyo higsigiisa ugu weyni waxa ay ahayeen in uu u aqoon iyo waayoaragnimo urursado ku biirista siyaasadda oo uu u arkayey in ay tahay xirfad uu kaalin kaga geli karo soo dhicinta dhulkii uu aabbihii u godgalay difaaciisa.

Maadaama oo uu waxbarashada ku fiicnaa, kalgacal badanna ka kasbaday macallimiintiisa iyo masuuliyiintii waxbarashadiisa, marrkii uu dugsiga sare dhammaystay waxa uu deeq waxbarasho ka helay jaamacadda Maraykanka ee ku taalla magaalada Beirut.

Cali Salaama waxa ay waxbarashada jaamacadda isku soo gaadheen rag badan oo ahaa Falastiiniyiin markii dambe caan ku noqday siyaasadda iyo halganka. Isagana xiddigiisu waxa uu ifay isaga oo aan weli waxbarashada dhammayn. Waxaa jaamacadda looga yaqaannay 'Saciim'; oo ah erey Carbeed oo macnihiisu uu yahay 'hoggaamiye', oo waxa inta badan ku soo ururi jira ardayda jaamacadda oo kaalin hoggaamineed uu ku lahaa. Waxa uu u furi jiray doodo la xidhiidha halganka dhul soo dhacsiga ee Falastiiniyiinta iyo iska caabbinta Yuhuudda, mararka qaarkoodna waxa uu jeedin jiray khudbado kacaan oo shucuurta waddaniyadeed aad u taabanaya. Taariikhda aabbihii ayaana qudheedu kaalin ku lahayd in uu xurmayn iyo



AlmaZ Books

sumcad fiican ku dhex yeesho maamulka iyo ardayda.

Cali Salaama doodihiisa ardayda dhexdooda iyo hadalladda uu u jeedinayaba waxa uu ku furi jiray ereyo guubaabo ah oo ay ka mid yihiin "Yeynaan illaawin in aynu raadsanno xaqeennii. Haddii aynaan fadhiga ka kicin, waxa aynu abidkeen dhex fadhiyi doonnaa dhooqada innaga oo dullaysan oo bilaa waddan ah."

Waxa uu bartay Injineernimo, muddo gaaban kaddib waxbarashadana waxa ay is barteen Yaasir Carrafaat, oo waqtiyadaas aasaasay ururka Xoraynta Falastiin ee FATAX.

Marka laga tago taariikhdiisa carruurnimo iyo waxbarashadiisii, sannadkii 1965, waxa uu ahaa agaasimaha waaxda dadweynaha ee ururka xoraynta Falastiin. Julay 1968, waxaa loo magacaabay hoggaanka hay'ad lagu magacaabo "RASD Athawra" oo ah erey Carbeed macnihiisu ku dhowyahay Kor-joogtaynta Kacaanka. Cali Salaama waxa uu madax ka noqday farac ay hay'addani ku lahayd dalka Urdun. RASD A-thawra oo ahayd Laanta Sirdoonka ee ururka FATAX, waxaa magaceeda loo soo gaabin jiray RASD.

Sannadkii 1970, Cali Salaama waxaa uu noqday taliyaha laanta hawlgallada gaarka ah ee la dagaallanka sirdoonka Israa'iil gudaha iyo dibaddaba. Waxa ay ahayd laanta ugu khatarsan, isla markaana haysay qaybta ugu xasaasisan shaqadii sirdoon ee wakaaladda RASD. Waajibkeeda ugu weynina waxa uu ahaa fulinta hawlgallada khatarta ah ee ka dhanka ah Israa'iil, gaar ahaan danaha Israa'iil ee dunida oo dhan.



AlmaZ Books
Telegram

AlmaZ Books
Telegram
https://t.me/maktabadasharciga



Cali Salaama waxa uu magaciisu caan noqday markii lagu xidhiidhiyey hawlgallo khatar ahaa oo uu isagu qorsheeyey ama xitaa mararka qaarkood fulintooda ka qaybgalay. Waxa ka mid ahaa hawlgalkii bushqadaha qarxaya boosta loogu dirayey saraakiisha Yuhuud ee ku sugnaa Yurub, dadka ku dhintay uu ka mid ahaa sarkaalkii ugu sarreeyey MOSSAD laanteeda ka hawlgeli jirtay Ingiriiska;

Hawlgalka Muunikh ee lagu dilay ciyaartoygii Israa'iil uga qaybgeli lahaa ciyaarihii Olambikada adduunka ee 1972; hawgalkii lagu fashiliyey basaasaddii caanka ahayd ee Amiina Almufti[1]; iskudaygii khaarajinta boqorka Urdun iyo dilkii sarkaal sare oo MOSSAD uga wakiil ahaa dalka Beljam iyo hawlgallo kale.

## Xidhiidhadii sirdoonka

Ururka FATAX waqtiyadaas waxa uu dunida ugu suntanaa argagaxiso, gaar ahaan garabkiisa sirdoonka iyo hawlgallada ee uu hoggaankeeda ka midka ahaa, haddana Cali waxa uu xidhiidh adag iyo wadashaqayn la lahaa wakaalado sirdoon oo Reer Galbeed ah, gaar ahaan Maraykanka. Xidhiidhkaas oo uu Yaasir Carafaat qudhiisu ka warhayey, ayaa dadka ka faalloodaa marka ay ka hadlayaan waxa ay ku naanaysi jireen, "Saaxiibka Maraykan ee Beyruut".

In kasta oo uu Salaama khaarajiyey saraakiil badan oo ka tirsanaa sirdoonka Yuhuudda ee daafaha dunida ka

(1) Amiina qisadeeda oo buug gaar ah ayaa aan soo saaray sannadkii 2018.

hawlgalayey, isla markaana uu fashiliyey basaasiin qarsoodi ahaa oo ay MOSSAD ku lahayd qaar ka mid ah dalalka Carabta, gaar ahaan Lubnaan, haddana waxaa muuqatay in sirdoonka Maraykanku ay u arkayeen in uu yahay saaxiib fiican oo ay dano is dhaafsan karaan. Sidaa awgeed waxaa la aaminsanyahay in uu in badan CIA ka caawiyey hawlgallo iyo xogo muhiim ahaa oo ay aad ugu baahi qabtay.

## Aqoontiisa sirdoon

Cali Salaama waxbarashadiisa caadiga ah, waxaa u dheeraa tababarro iyo aqoon korodhsiyo sirdoon oo aad u tayo badan. Meelaha sida aadka ah uu aqoontiisa dhinaca sirdoonka iyo fulinta hawlgallada sirta ah ugu qaatay waxaa ka mid ahaa dalka Masar oo uu sirdoonka Masaaridu si aad u heer sarraysa ugu tababaray xarumihiisa Qaahira.

Sannadkii 1968, Cali Salaama waxa uu ka mid noqday koox toban nin ahayd oo tababar sirdoon loogu qaaday magaalada Qaahira. Tababarkan oo uu madaxweynihii xilligaas ee Masar gacantiisa ku saxeexay ayaa qayb ka ahaa dadaal ay Masar doonaysay in ay ku tayeyso quwadda ammaan ee Falastiiniyiinta. Markii uu ka soo noqday tababarkaas isaga oo weli aad u da' yar, ayaa uu taliyihii sirdoonka Falastiiniyiintu u doortay Cali in uu u noqdo taliye kuxigeenka wakaaladda RASD.

Salaax Khalaf oo ku magac dheeraa 'Abu Iyaad' ayaa mar dambe oo wax laga weydiiyey sida uu dareenkiisu ahaa markii Cali Salaama oo weli da' yar uu kuxigeenkiisa ka dhigayey, ku jawaabay, "In kasta oo uu Cali Salaama aad u da' yaraa, haddana



AlmaZ Books
Telegram

AlmaZ Books
Telegram



aniga ayaa doortay in uu kuxigeen iiga noqdo wakaaladdan, intii dambe ee aanu sii wadashaqaynayna, mar kasta waxa aan ku sii qancayey in xulashadaydii ay sax ahayd, xilkanina uu ahaa kii ku habboonaa Cali Salaama."

Dhalinyaranimada Cali Salaama iyo xilka sare ee loo magacaabay kuma ay beerin caadifad sababta in uu is muujiyo.

Maadaama oo uu ogaa culayska iyo xasaasiyadda uu leeyahay, cidi weligeed ma ay ogaan magacaabista rasmiga ah ee xilkan, taas oo sharci ahaan fursad u siinaysay in uu dafiri karo.

## Cadowga koowaad

Dagaalka sirdoon ee uu Cali Salaama mararka badan dhabarka kaga jebiyey MOSSAD, oo uu ugu madax xanuun badnaa weerarkii Muunikh ee lagu dilay ciyaartoyga, ayaa sababay in uu noqday ruuxa koowaad ee liiska dadka ay MOSSAD raadinayso.

Haweenaydii xilliyadaas raysalwasaaraha ka ahayd Israa'iil ayaa u adkaysan kari wayday holaca uu Cali Salaama ku shiday basaasiinteeda gudaha iyo dibadda, iyo dhirbaaxooyinka xanuunka badan ee ay hawlgallada uu qorsheeyey u geysteen. Sidaas awgeed waxa ay ku qasbanaatay in ay arrintan xal u raadinteeda u gacan dhaafto haayadihii ammaanka, xeeldheerayaashii iyo taliyeyaashii sare ee MOSSAD. Golda Maer oo lagu tilmaamo in ay ahayd hoggaamiye bir ah, ayaa si toos ah u bixisay amarro adag oo ay ku dalbanayso in cadowga koowaad ee laga fikirayo khaarajintiisu uu noqdo Cali Salaama.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa xiise iyo hadal hayn badan yeeshay magaca ay maalintaas ugu yeedhay Cali Salaama oo ahaa 'Amiirka Cas'. Waxa uu noqday mid ay si isku mid ah u adeegsadaan Israa'iil, Falastiiniyiinta iyo cid kasta oo ka warramaysa Cali Salaama. Si kastaba ha ahaato e', amarkeedii dilku waxa uu qaatay muddo aad u dheer oo khasaare badan oo naf iyo moodba lihi ka soo gaadhay Yuhuudda.

## Noloshii Qoysnimo

Amiirka Cas waxa uu jili jiray nolosha dadka barwaaqo ku korka ah ee inta badan looga barto dabacsanaanta iyo rabshad nacaybka. Waxa ay ahayd xeelad uu ku qarinayey sawirka arxandarrada, haladaygga iyo dhiirranaanta ah ee hummaaggiisu ku xardhanaa maskaxda xeeldheereyaasha iyo hawlwadeennada sirdoonka Israa'iil. Waa farsamo aanay qofna isu qaban karin qisadiisa iyo sawirkiisu, sidaas awgeed uu marar badan kaga badbaaday gacanta cadowgiisa.

Xaaskiisii koowaad waxa ay ahayd Nashrawn Shariif Mansuur. Waa gabadh Falastiiniyad ah oo uu dhalay sheekh ahaa mufti magac weyn leh. Waxa ay isu dhaleen laba wiil oo kala ahaa Xasan, oo uu aabbihii ugu magacdaray, iyo Usaama.

Mararka qaarkood waxaa la filan karaa in xusuusta aabbihii ka sokow, sababta kale ee uu wiilkiisa curad magaca Xasan ugu bixiyey ay ahayd xeelad uu doonayay in magaciisa saxda ahi uu jaahwareer ku rido dadka. Marka la eego magacbixinta Carabta ee naanaysaha, magaciisu waxa uu noqonayey, 'Abu Xasan Cali' oo Xasanku horreeyo iyo 'Cali Xasan' oo ah magaciisa saxda ah.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Cali Salaama waxa uu lahaa xaas labaad, oo magaceedu ahaa Georgina Risq. Waa gabadh Lubnaaniyad diinta Kiristaanka haysata ahayd, oo sannadkii 1971 kii ku guulaysatay taajka boqoradda quruxda adduunka. Xilliyadaas ay taajka quruxda qaadday ayaa ay is barteen Cali Salaama oo ay haasaawe muddo ahaa kaddib is guursadeen.

## Sabtembartii Madoobayd

Laga soo bilaabo 1970, boqor Xuseen kii dalka Urdun waxa uu xidhiidh adag oo dhinacyada diblumaasiyadda iyo ammaanka ah la yeeshay Israa'iil, oo muddo dheer naawilaysay xidhiidhkan. Israa'iil muddo dheer ayaa ay ka shaqaynaysay sidii uu xidhiidhkani u suurtageli lahaa, iyada oo sii dhexmaraysa dalalka Yurub iyo Maraykanka oo xidhiidh fiican la lahaa dalka Urdun. Boqor Xuseen isla markii uu xidhiidhkaas la dhistay Israa'iil waxa uu qaaday tallaabooyin raalligelinaya Israa'iil oo la sheego in ay iyadu cadaadis ku saartay ama dano kale tustay.

Waxa uu jaray xidhiidhkii uu la lahaa Falastiiniyiinta oo xarumahooda ugu muhiimsan ee siyaasadda iyo halganku ku yaalleen Urdun, isaga oo ku amray in ay dalkiisa ka guuraan.

Xilliyadaas qaxootiga Falastiiniyiinta ah ee ku nool Urdun waxa ay ku dhowaayeen kala badh dadka reer Urdun. Dhinaca kalana taariikh ahaan Falastiiniyiinta Daanta Galbeed ee webiga Urdun, waa dad asal ahaan reer Urdun ah oo sida la ogyahay dad badan oo ay isir wadaag yihiin weli ku dhaqan yihiin dhulka uu ku fadhiyo dalka Urdun. Sidaa awgeed, Falastiiniyiintu waxa ay boqor Xuseen ku ahaayeen culays laba weji ah: Waxa uu ka cabsi qabay tirada sii badanaysa ee

AlmaZ Books
Telegram



Falastiiniyiinta dhulkiisa joogta, oo weliba cudud hubaysanna haystaa, in ay ku xoogaystaan khatarna geliyaan boqortooyada qoyskiisa.

Marka labaadna weerarrada nafhuridda ah ee ay Falastiiniyiintu sida joogtada ah ugu qaadayeen gudaha Israa'iil, boqorka waxa ay ku hayeen culays iyo diiqad badan.

Cadaadis aad u badan ayaa kaga imanayey Yuhuudda iyo dalalka kale ee xidhiidhku ka dhexeeyo, saaxiibkana la ah Urdun, waxaa laga doonayey in uu wax ka qabto Falastiiniyiinta dhulkiisa ka soo qaadaysa weerarrada.

Waxaa sii raaci karta, in boqorku uu qabay cabsi ah in weerarradaas kooxaha Falastiiniyiintu dhulkiisa ka qaadayeen ay aakhirka Israa'iil u noqdaan marmarsiinye ay weerar ku soo qaaddo gudaha Urdun, iyada oo ku andacoonaysa in ay weerarayso xeryaha iyo saldhigyada maleeshayada Falastiiniyiinta ee ammaankeeda khalkhalka gelinaya.

Boqor Xuseen dhowr jeer ayaa uu hoggaamiyeyaasha Falastiiniyiinta ka dalbaday in ay joojiyaan weerarrada ka dhanka ah Israa'iil oo ay hubka dhigaan, haddii kale ka baxaan dhulkiisa. Kooxaha uu boqorku la hadlayey waxaa ka mid ahaa ururka FATAX ee argagaxisada qornaa oo uu hoggaaminayey Yaasir Carafaat oo qudhiisa xaruntiisu Urdun ahayd. Falastiiniyiintu uma ay hoggaansamin dalabkaas boqorka. Qaababka diidmadooda ay ku muujiyeen waxaa ka mid ahaa qaab uu boqorka Urdun u arkayey in ay xaqiraad iyo meelkadhac ku tahay, kuna sii kordhiyey cabsida uu ka qabay in kooxaha Falastiiniyiintu ku dhex awoodaystaan Urdun.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

Xilli isla waqtiyadaas ay arrintani taagnayd ahaa oo uu booqasho ku tegey dhulkii ay deggenaayeen qaxootiga Falastiiniyiintu, mar uu marayey xero ay deggenaayeen maleeshiyo Falastiiniyiin ahi, waxa uu ku arkay keenshali[1],

sida calanka loo dul sudhay mid ka mid ah gaadiidka dagaalka ee ururka FATAX.

Boqorka oo yaabban, cadho badanina ka muuqato, ayaa su'aalay waxa ay arrintani daarantahay. Masuulkii Falastiiniga ahaa ee su'aasha boqorku ku waajahnayd ayaa si ku wiirsi ah ugu jawaabay, "Waa astaan muujinaysa in aynu dumar nahay." Waxa aanu intaas ku sii daray, "Sow dagaalkii adigu nooma aad diidin, oo fadhiya sida dumarka maad amrin!"

Sabtembar 1970, ayaa ciidamada Urdun ay weerar aad u xoog weyn ku qaadeen xarumihii iyo saldhigyadii kooxaha Falastiiniyiinta ahaa iyo xitaa xeryihii qaxootiga Falastiiniyiinta. Ciidankan oo adeegsanayey cudud aad uga badan intii ay dhacadadani u baahnayd, ayaa gumaaday dad rayid ah oo tiradoodu ka badan tahay 10 kun, isla markaana cagta mariyey fadhiisimadii maleeshiyada Falastiiniyiinta iyo xarumahoodii. Waxa aana kala firdhaday hadhaagii maleeshiyaadka oo qudhoodu bilowgii iska-caabbin waxoogaa ah oo ay kala hor yimaaddeen ciidamada Urdun, khasaare aan u dhigmin ka Falastiiniyiinta gaadhay u geystay, dad badan oo rayid Urduniyiin ahna dilay.

(1) Labbis hoosaadka dumarka.


https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



17 kii Sabtembar 1970, ayaa ay ahayd markaas uu boqor Xuseen ciidamadiisa amarka ku siiyey in ay weerarka qaadaan. Waxa ay ciidamada Urdun geysteen xasuuq aad u foolxun.

Dhacdooyinka xanuunka badanna waxaa ka mid ahaa, in shaaracyada magaalooyinka dhexdooda laga ugaadhsado ragga Falastiiniyiinta ah oo lagu tuhmayey in ay kooxaha hubaysan ka tirsanaayeen ama taageerayeen, iyada oo aan maxkamad la geyn ayaana halka lagu soo gaadho lagu tooganayey.

Kuwii u firxaday gudaha xeryaha qaxootigu deggenaa qudhooduna ma ay nabadgelin oo ciidamada Urdun ayaa inta ay ka daba tageen, xeryihii si aan loo miidaan deyin ugu garaacay hubka waaweyn. Duqayntaas arxandarrada ah ayaa sababtay in ay kumannaankaas Falastiiniyiinta ah ee shacabka u badnaa le'daan.

Firxadkii kooxaha Falastiiniyiinta qaarkood, oo u yaacay dhinaca webiga Urdun (Xadka Israa'iil ku dhow), ayaa iyagana inta ay ciidamada Urdun qabteen ay gacanta u geliyeen ciidamada Israa'iil.

Inta badan masuuliyiintii ugu sarraysay kooxaha Falastiiniyiinta, kooxihii hubaysnaa iyo cid kasta oo is qaadi karaysay, waa ay ka firdhadeen dalka Urdun oo waxa ay galeen dalalka Suuriya iyo Lubnaan.

Dalal badan oo Carabta iyo dunida Muslimka ah ayaa Urdun uga digay in ay weerarkaas ku qaaddo Falastiiniyiinta, qaarkoodna waxa ay ku hanjabeen in ay dhinaca Falastiiniyiinta ka soo jeesan doonaan. Laakiin boqor Xuseen oo sida muuqata ay dhabarka ka taabteen Israa'iil iyo Maraykanku dheg uma dhigin warkaas.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

Markii dagaalku aad u kululaaday dad badan oo Falastiiniyiin rayid ahina ay dhinteen, waxaa Cummaan ergo u yimid hoggaamiyeyaal Carbeed, si ay uga hawlgalaan xabbadjoojin lagu badbaadinayo ururka xorayanta Falastiin.

Waxaa ka mid ahaa Jacfar Numayri oo ahaa madaxweynihii dalka Suudan iyo Albaahi Adqam oo ahaa wasiirka arrimaha dibadda ee dalka Tuuniisiya. Ergadaas boqor Xuseen kama uu aqbalin qorshihii ay ula yimaaddeen, waxa aanu ku sii socday weerarkii ka dhanka ahaa Falastiiniyiinta. Si kastaba ha ahaato 'e, masuuliyiintani waxa ay ku guulaysteen in ay la kulmaan Yaasir Carafaat oo isagu markaas dhuumasho ku joogay Urdun gudaheeda oo uu ku go'doonsanaa, isaga ayaana ay sii qarsoodi ah uga saareen dalka Urdun.

Waxaa la sheegaa in Yaasir Carafaat maalintaas loo xidhay dhar dumar si aan loo garan. Inkasta oo xogaha marka dambe soo baxay sheegeen sirdoonka Urdun in uu ogaa, ruuxa dumar ah ee ay masuuliyiintani wadaan in uu yahay Carafaat, balse aanay wax tallaabo ah ka qaadin kaddib markii uu boqor Xuseen sidaas amray.

Xasuuqan iyo dhibaatada badan ee Falastiiniyiinta soo gaadhay awgeed, taariikhdii dagaalkani dhacay ee 17 Sabtembar waxa ay u aqoonsadeen magaca 'Sabtembarta Madow'.

## Farogelintii Suuriya

Xaaladda dagaal ee Urdun iyo kooxaha Falastiiniyiintu, waxa ay sii adkaatay markii Suuriya ay si badheedh ah u garab istaagtay Falastiiniyiinta. 18^kii Julay ayaa cutubyo ka tirsan

AlmaZ Books
AFKAAGA HOOYO



Telegram
https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



ciidamada Suuriya ay u soo ruqaansadeen dhinaca Urdun oo ay xuduud leeyihiin. Sida oo kalana waxa ay si badheedh ah hub u siiyeen maleeshiyadii Falastiiniyiinta.

Ciidamada Suuriya waxa ay qabsadeen qaybo badan oo ka mid ah dalka Urdun, si ay ku ilaalinayeen dadka iyo maleeshiyada Falastiiniyiinta. Waxa aana la sheegaa in Suuriya ay wadaqabsan kari lahayd Urdun, haddii aanu wasiirkii difaaca ee xilligaas Xaafid Alasad (Waxa uu markii dambe noqday Madaxweyne, waana Bashaar Alasad aabbihii) diidi lahayn in uu bixiyo amarkii ay ciidamada cirka ee Suuriya ku duqayn lahaayeen Urdun.

Boqor Xuseen oo talo ku caddaatay markii ay Suuriya ka dhabaysay hanjabaaddeeda, ayaa qayladhaan u dirtay Maraykanka iyo Ingiriiska. Taas oo mar kale abuurtay cadho ay dalalka Carabta iyo Muslimku u qaadaan boqorka, rumaystaanna dooddii marka horeba sheegaysay, sababta weerarka uu boqorku ugu soo qaaday in aanay ahayn arrin ammaankiisa iyo gudaha Urdun la xidhiidha ee ay tahay arrin ka timid Maraykanka.

Waraaqo beri dambe laga helay xafiiska madaxweynihii Maraykanka ee xilligaa, Nixon, ayaa sheegaya in boqor Cabdalla uu Maraykanka ka codsaday in la garaaco Suuriya. Maraykanka oo ka jawaabaya qayladhaanta Urdun ayaa xulafadiisa Israa'iil amray in diyaaraddahoodu ay garaacis hummaag[1] ah ku qaadaan hawada sare ee Suuriya, si loo moodsiiyo in Israa'iil

(1) Diyaarado ridaya bambooyin iyo gantaallo dhawaq keliya ah oo aanu gumac ka dhacayn. Cabsi gelinta ayaa loo isicmaalaa



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



oo ka faa'idaysanaysa cududda Suuriya ee ku maqan Urdun ay doonayso in ay dhul hor leh ka qabsato Suuriya. Garaacistaas ayaana sababtay in ciidamada Suuriya dhaqso uga baxaan dhulka Urdun oo ay dib ugu noqdaan xuduudka ay la leeyihiin Israa'iil si ay u difaacaan.

Sababta Suuriya ay u gashay Urdun doodo iyo muranno siyaasi ah oo badan ayaa weligeedba ka taagnaa, oo illaa maanta oo muddo dheeri ka soo wareegtay waxaa la is weydiiyaa ujeedsada runta ah ee Suuriya siyaasad ahaan ka lahayd. Si kastaba ha ahaato 'e, wasiirkii difaaca, Xaafid Al-Asad, oo ah madaxweynaha hadda Bashaar Al-Asad aabbihii, ayaa u sheegay Patrick Seale oo ah saxafi iyo qoraa Ingiriis ah  oo qoray xusuus qorka Xaafid, in sababta ay Suuriya u gashay Urdun ay ahayd keliya in ay difaacdo Falastiiniyiinta uu boqor Xuseen gumaadayay.

Bixitaanka ay Suuriya ka baxday Urdun waxa uu niyad jebiyey kooxihii iyo shacabkii Falastiiniyiinta ee ay ciidamada Suuriya ku ilaalinayeen Urdun gudaheeda, dhinaca kalana ciidamadii Urdun ayaa si buuxda ugu soo kacay oo cagta mariyey, khasaare nafeed oo aad u weynna gaadhsiiyey. Waana markaas marka ay Falastiiniyiintu bilowday in ay si buuxda uga qaxaan dhulka Urdun.

Kooxihii Falastiiniyiintu waxa ay xooggooda isugu geeyeen dalka Lubnaan, oo isagana aakhirkii ay ka mid ahaayeen sababihii keenay dagaalkii sokeeye ee dalkaas ka dhacay, iyo in Israa'iil ay xoog ku soo gasho gudaha Lubnaan oo xitaa caasimaddu ku jirto si ay u qabtaan Yaasir Carafaat iyo madaxda sare ee jabhadaha Falastiiniyiinta. Gaar ahaan

AlmaZ Books
Telegram



waxaa Israa'iil cabsi ku hayey awoodda uu Carafaat markiiba ku yeeshay gudaha Lubnaan oo uu ka samaystay qaybo dhan oo ay Falastiiniyiintu deggen tahay ciidamadooduna xeryo ku leeyihiin, isla markaana cidda si rasmi ah uga talisa ee xoogga milateri ku ilaalisa dawladda Lubnaanna uga hadhay ay ahayd Falastiiniyiinta.

Badhtamihii sannadkii 1968, waxa uu Yaasir Carafaat dalka Masar u diray toban dhalinyaro ah oo soo qaata tababarro hawlaha milateriga iyo sirdoonka ah. Waxa uu qorshuhu ahaa in ay noqdaan dhimbiisha hurinaysa halganka hubaysan.

Cali Salaama, Maxamed Daa'uud Cawdah, Fakhri Alcumari, Majiid Alaaqaa, Qaasi Alxusayni, Mahdi Bisiisuu, Nasaar Cammaar, Shawqi Almubaashar iyo Muriidi Addajaan waxaa tababarro aad u heer sarreeya soo siiyey waaxda cilmibaadhista istaraatijiga ah ee sirdoonka Masar, taas oo shaqadeedu ay tahay soo saarista saraakiisha sare ee sirdoonka iyo Milateriga.

Soo noqoshadii, kooxdani waxa ay bilow u noqotay dhismaha hay'adda RASD ee sirdoonka iyo arrimaha ammaanka u qaabbilsanayd ururka FATAX, taas oo hoggaamiyena looga dhigay Salaax Khalaf. Halka Fakhri Alcumari madax looga dhigay laanta la dagaallanka sirdoonka gudaha oo noqonayey farac ka mid ah RASD, oo uu kuxigeenna u noqday Abu Daa'uud.

Sabtembar 1971, oo uu socday xasuuqii Falastiiniyiintu, waxaa shir isugu yimid masuuliyiintii sare ee kooxihii Falastiiniyinta ee joogay Lubnaan oo ka soo firxaday Urdun.

AlmaZ Books
Telegram



Waxa ay is tuseen in la gaadhay waqtigii ay muhiimka ahayd in ay halganka ku daraan cudud hubaysan, go'aamada shirkaas ka soo baxayna waxaa ugu muhiimsanaa; in la hubeeyo wax-iska-caabbinta, weerarro hubaysanna lagu qaado Israa'iil, iyada oo Koonfurta Lubnaan laga dhiganayo saldhigga laga duulayo. Laakiin maadaama oo aan xilligaas ururka xoraynta Falastiin laga aqoonsanayn dunida oo dhan.

Waxa ay qaateen siyaasad ah in aanay muujin halganka hubaysan si aan loo sii colaadin. Sidaa awgeed waxa ay go'aan ku qaateen in ay beeniyaan ficil kasta oo hubaysan oo ay ku qaadaan Israa'iil, si adagna u diidaan in ay leeyihiin garab hubaysan.

Hawshaas oo aakhirkii ay ku guulaysteen, ururka Sabtembarta Madowna uu sabab u noqday in uu dunida ku qasbo in la aqoonsado sharciyadda FATAX si loo helo cid Falastiiniyiinta ka mid ah oo lala shaqayn karo, lagalana xaalo arrimaha ammaanka iyo wax ka qabashada weerarrada hubaysan ee Falastiiniyiinta.

Dagaalkii Urdun kaddib, ururka FATAX ee Yaasir Carafaat hoggaaminayey, waxa uu si qarsoodi ah u sameeyey garab ka shaqeeya hawlaha sirdoonka iyo ka aargoosiga Urdun, waxa aanu u bixiyey, 'Sabtembarta Madow'. Waxa uu ahaa garab la qariyo in uu ka tirsanyahay ururka oo si madax bannaan u shaqaynaya, waxa aanu ka feejignaan jiray in dunidu ay hesho wax uun isku xidhi kara ururka. Waxaa la sheegaa in xitaa xubno ka mid ah masuuliyiinta sare ee ururka FATAX aanay ogeyn in kooxdan uu sameeyey Carafaat oo ay amarkiisa ku shaqayso.



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



'Sabtembarta Madow' waxaa madax looga dhigay Abu Yuusuf oo ka mid ahaa saraakiisha sare ee ururka FATAX, kuxigeenka oo isla markaana ah madaxa hawlgallada iyo qorshaynta weerarradana waxaa laga dhigay Cali Salaama oo qudhiisu ka mid ahaa ragga ka soo firxaday Urdun.

Yaasir Carafaat ujeeddooyinka uu garabkan ka lahaa waxaa ka mid ahaa, in uu dunida iyo Falastiiniyiinta is baro, qadiyaddoodana ku soo jeediyo indhaha, in ururka FATAX uu noqdo kan ugu awoodda badan Falastiiniyiinta ee ay tahay in lagala xaalo arrimahooda iyo in dunida uu cadaadis ku saaro in ururka FATAX laga saaro liiska ururrada argagaxisada ah, loona aqoonsado gobannimadoon.

Si arrintaasi u suurtagashana waxaa qasab ahayd in aanu halganka 'Sabtembarta Madow' ku koobnaan ka aargoosiga Urdun, ee sida oo kale lagu fidiyo dagaalka gobannimadoonka ah ee ka dhanka ah Yuhuudda. Gaar ahaan in dagaalka bisadda iyo jiirka lala galo wakaaladda sirdoonka Israa'iil ee MOSSAD, weerarro iyo xanuunjin joogto ahna lagu hayo danaha Israa'iil ku leedahay gudaha dhulka ay dawladdeedu ka dhisantahay iyo dunida kalaba.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

# 2

# HAWLGALLADII SABTEMBARTA MADOW

Sabtembarta Madow waxa ay hawlgalladeeda ku bilawday weerarro ka dhan ah danaha boqortooyada Urdun. Waxaa ka mid ahaa weerar ay ku qaadeen xafiiskii shirkadda diyaaraddaha dalka Urdun ay ku lahayd magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga; safaaradda dalka Urdun ee magaalada Baariis dalka Faransiiska; iyo in ay afduubeen mid ka mid ah diyaaraddaha shirkadda Jordanian ee Urdun, oo ay ka dejiyeen dalka Liibya. Sida oo kale waxa ay mu'aamaradeeyeen safaaraddii Urdun ku lahayd magaalada Berne, caasimadda dalka Switzerland. Waxa ay weerarro kala duwan ku qaadeen warshad soo saarta qalabka korontada oo dalka Jarmalka ku taalla, iyo warshado shidaalka sifeeya oo ku yaallay magaalada Hamburg iyo Rotterdam ee Jarmalka iyo Holland, sida ay u kala horreeyaan.

Kooxdan oo durbadiiba laf dhuungashay ku noqotay dalka Urdun, walaac badanna ku abuurtay boqor Xuseen, intaas

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN AFKAAGA HOOYO
Telegram

AlmaZ Books
Telegram



kuma ay joogsan ee waxa ay sidoo kale meelo kala duwan ku khaarajiyeen shan sarkaal oo ka tirsanaa masuuliyiinta xurmada ku dhex leh sirdoonka Urdun. Waxa aana ka fashilmay laba iskuday oo ay ku doonayeen in ay khaarajiyaan boqor Xuseen qudhiisa.

Midka hore waxa uu ahaa 9kii Juun, Shiishyahan Falastiini ah oo ku dhuuntay minaaradda Masaajidka Alxusayni ee badhtamaha magaalada caasimadda ah ee Cammaan ayaa rasaas ku liishaamay gaadhigii boqorku saarnaa, mar kolanyo uu ka mid yahay ay magaalada dhex maraysay. Mid ka mid ah rasaastii maalintaas boqor Xuseen lagu shiishay ayaa dishay Sayid Alrfaaci oo ka mid ahaa ilaalada boqorka, gaar ahaan kuwa xabbadda isaga dhiga.

## Khaarajintii Raysalwasaaraha

Wasfi Mustafa Wahbi At-Tel oo dhashay sannadkii 1919kii, waxa uu ahaa siyaasi caan ka ah dunida oo saddex jeer oo waqtiyo u dhexeeyeen raysalwasaare ka noqday dalka boqortooyada Urdun. Markii u dambaysay waxa ay ahayd intii u dhexeysay sannadihii 1970 illaa 1971 oo ah markii dalka Masar lagu khaarajiyey isaga oo weli xilkii haya.

Wafsi Tel waxa uu hoggaaminayey nidaam isbeddel siyaasadeed oo weyn ka dhaliyey dalka Urdun. Waxa uu si aad ah uga soo horjeeday halganka hubaysan ee Falastiiniyiintu xaqooda ku raadsanayaan in uu saldhiggiisu noqdo Urdun. Isaga ayaa xukuumadda hoggaaminayey xilligii ay ciidamada Urdun sida arxandarrada ah u gumaadayeen tobannaanka kun ee Falastiiniyiinta ah, dhacdadii la baxday Sabtembarta Madow.

AlmaZ Books
Telegram



Wasfi Tel qaddiyadda Falastiiniyiinta iyo mawqifkaas uu ka taagnaa waxa ay ku kala fogaadeen dalal badan oo Carbeed iyo xitaa kuwo aan Carab ahayn.

Waxaa se ugu cadcaddaa Suuriya oo si cad u garab istaagtay Falastiiniyiinta, ciidamadiisana u diray gudaha Urdun, iyo dalka Masar oo sababta ugu weyn ee ay u diiddanayd Wasfi aanay ahayn qaddiyadda Falastiiniyiinta balse ay la xidhiidhay loollanka awoodaha siyaasadeed ee gobolka. Masar waxa ay doonaysay in ay iyadu jihayso iyo Urdunta Wasfi Tel oo si cad uga soo horjeesatay.

Waxaa aad hoos ugu dhacay xidhiidhkii shakhsiga ahaa ee Wasfi Tel iyo madaxweynihii xilligaas ee Masaarida Jamaal Cabdinaasir oo isu arkayey ninka ugu mudan in uu Carabta oo dhan caynaanka u qabto. Xidhiidhka Urdun iyo Masar waa uu sii xumaaday. Waxaa intaas dheeraa Masar oo doonaysay in ay xoogagga Falastiiniyiinta ka dhigato hub ay ku cadaadiso Israa'iil, sidaas awgeed si hoose u taageeraysay, iyo Wasfi Tel oo arrintaas aad uga soo horjeeday, xoogna ku baabi'yey maleeshiyadii hubaysnayd ee Falastiiniyiinta, maadaama oo uu u arkayey in qarannimada dalkiisa ay khatar ku yihiin.

Tallaabadii koowaad ee uu qaaday ururkii cusbaa ee Sabtembarta Madow waxa ay ahayd khaarajinta Wasfi Tel, raysalwasaarihii dalka Urdun. Dabayaaqadii sannadkii 1971 kii, Jaamacadda Carabtu waxa ay soo saartay martiqaadka shir sannadeedkii caadiga ahaa ee wasiirrada difaaca dawladaha Carabta, kaas oo sannad kasta hal mar la qabto, Jaamacadda Carabtuna ay martigelintiisa iyo qabanqaabadiisaba leedahay. Kulankani waxa uu ka dhacayey xarunta Jaamacadda Carabta ee magaalada Qaahira ee dalka Masar.

AlmaZ Books
Telegram



Dalka Masar, sida uu baratakoolku yahay, waxa uu dalalka xubnaha ka ah Jaamacadda Carabta u soo diray dalab uu ku doonayo in dal kastaa soo sheego cidda hoggaaminaysa waftiga uga qaybgalaya shirka wasiirrada difaaca iyo sidoo kale xubnaha wehelinaya. Dalka Urdun waxa uu sheegay in uu shirkaas ku meteli doono Wasfi Tel oo ahaa raysalwasaaraha dalka, isla markaana ah wasiirka difaaca.

Safiirkii Urdun markaas Qaahira u joogay ayaa shirka ka hor fasax uu ku yimid magaalada Cammaan ee xarunta dalkiisa Urdun, waxa uu raysalwasaare Wasfi Tel soo gaadhsiiyey farriin afka ahayd oo uu ka siday qaar ka mid ah masuuliyiinta ururka Jaamacadda Carabta iyo wasaaradda difaaca ee dalka Masar.

Labaduba waxa ay sheegeen in aanay doonayn in Wasfi Tel uu ka soo qaybgalo shirka wasiirrada difaaca. Maadaama oo ay farriintu ahayd mid afka ah, suurtogal ma ay ahayn in uu si rasmi ah uga jawaabo, laakiin dad ka ag dhowaa ayaa sheegay in uu si aad ah uga cadhooday. Danjirihiisa warkan soo gaadhsiiyeyna si kulul ayaa uu ugu canaantay sababta uu farriin noocaas ahba u soo qaaday ee aanu markiiba halkeeda ugu joojin.

Cadhadan ayaa laga yaabaa in ay Wasfi ku sii riixday in uu ka qaybgalo kulankan, oo marka horeba sida la sheegay uu doonayey in uu tago. Waxa uu tegey Qaahira oo shirku ka qabsoomayey. Waxaa yaab lahayd in raysalwasaare Wasfi Tel gegida diyaaraddaha ee Qaahira ay ku soo dhoweeyeen keliya danjiraha Urdun u fadhiyey Qaahira iyo sarkaal ka mid ah shaqaale hoosaadka qaybta habmaamuuska ee Jaamacadda Carabta.

AlmaZ Books
Telegram



Arrintaas oo aad u baal marsan baratakoolka saxda ah ee Jaamacadda Carabta. Waxa ay filashadu ahayd in raysalwasaaraha uu soo dhoweeyo Xoghayaha Guud ee Jaamacadda Carabta oo markaas ahaa Cabdalkhaaliq Xasuunah ama uu soo wakiisho kuxigeenkiisa dhinaca milateriga, maadaama oo uu Wasfi 'Tel sida oo kalana ahaa wasiirka difaaca ee dalkiisa.

Marka ay hawshani ka socotay magaalada Qaahira, caasimad kale oo Carbeedna waxaa ka socday qorshaynta iyo u diyaar garowga fulinta hawlgal lagu khaarajinayo raysalwasaare Wasfi Tel. Waa xaafadda Alfukahaani ee magaalada Beyruut, oo ay ku taallay xarunta dhexe ee ururka Sabtembarta Madow. Waxaa si xawli ah u socday hawlo iyo kulamo lagu dhammaystirayo qorshaha khaarajinta.

Abu Iyaad oo magaciisa saxda ahi ahaa Salaax Khalaf ayaa si adag ugu adkaysanayey in Wasfi Tel la khaarajiyo, si loogaga aargoosto hawlgalkii Falastiiniyiinta lagu gumaaday Sabtembartii Madoobayd. Inkasta oo taliyaha garabkani, Muxammed Yuusuf Najaar oo ku magac dheeraa 'Abi Yuusuf', uu bilowgii ka soo horjeeday dilkan oo dabcan aan la saadaalin karayn waxa ka dhalan doona, haddana aakhirkii waa lagu qanciyey. Waxa aanu qayb laxaad leh ka qaatay diyaarinta hawlgalka oo dhaqaale fiican iyo tababarba u baahnaa.

Abi Yuusuf oo basaasiintiisa Urdun u joogtaa ay ku soo wargeliyeen waqtiga runta ah ee uu raysalwasaaruhu u baxayo Qaahira, waxa uu soo xulay afar ka mid ah ilaaladiisii gaarka ahayd oo uu u igmaday fulinta hawshan.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa tababar dheeraad ah oo arrintan la xidhiidha sii siiyey Fakhri Alcumari[1], oo isla markaana ula safray magaalada Qaahira horraantii Nofambar 1971. Waa maalmo yar ka hor safarka uu Wasfi ku imanayey Qaahira.

Fakhri Alcumari iyo raggiisu si gooni-gooni ah ayaa ay u tegeen magaalada Qaahira, waxa aana xusid mudan in masuuliyiinta ammaanka ee garoonka diyaaraddaha Qaahira ay qabteen Jawaad Albaqdaadi oo kooxdan ka mid ahaa. Sababta qabashadu waxa ay ahayd baastoolad ay ka heleen, waxa aana markii dambe dad badan shaki ku abuuray in ninkaas aanay xidhin ciidamada ammaanka ee Masaaridu, isla markaana aanay ka qaadin baastooladdii.

Kooxdani markii ay yimaaddeen Qaahira, si fiicanna hawshooda isugu dubbarideen, waxa ay basaas u soo direen madaarka si ay ula socdaan imaanshiyaha raysalwasaare Wasfti Tel. Waxa ay ka sii war heleen in lagu dejinayo huteelka caalamiga ah ee Shariton oo la dejiyey dhammaan waftiyada shirka ka qaybgalayey.

Ergada shirku marka ay soo dhammaystaan shirka oo lagu qabanayey xarunta Jaamacadda Carabta, waxa ay toos ugu hoyan jireen huteelka ay deggenyihiin, oo inta badan cidda aan kulamo gaar ah lahayn ama qolkeeda hawl u tegeyni ay galabtii iyo habeenkii barxaddiisa koox koox iyo keli keliba u fadhiyi jireen. Kooxda Falastiiniyiinta ee hawlgalka khaarajinta

(1) Fakhri Alcumari oo magaca afgarasho ahaan looga dhex yaqaanno ururku uu ahaa 'Abu Muxammed Alcumari', Magaca Alcumari waxa uu ka wataa abtirsiin hore oo ku xidhiidhsan tafiirtii lixaad ee saxaabigii Cumar Bin Khaddaab, Alle ha ka raalli ahaado.

AlmaZ Books
Telegram
https://t.me/maktabadasharciga



u socotay waxa ay huteelka dhigteen basaas ula socda dhaqdhaqaaqa Wasfi Tel.

Maalin Axad ah oo ku beegnayd 28[kii] Nofambar 1991, ayaa kooxda khaarajinta oo ka duulaya xogta ay hayeen ee ahayd in uu shirku maalintaas dhammaanayo, waxa ay fadhiisteen maqaaxida cabbitaannada ee huteelka Sheraton, oo ku taallay goob si fiican loogala socon karo dhaqdhaqaaqa masuuliyiintu marka ay dib ugu soo noqdaan huteelka.

Markii goorsheegta magaalada Qaahira ay daqiiqado yar weydaartay saddexdii galabnimo, ayaa masuuliyiintii waqtiyo aad isugu dhow ku soo qulquleen huteelka. Marka ay baabuurta ka degaan waxa ay soo hormarayeen maqaaxida iyaga oo toos u abbaaraya qaybta hurdada ee huteelka si ay qolalkooda u tagaan.

Raysalwasaare Wasfi Tel markii uu gaadhiga ka soo degeyba kooxda khaarajintu waa ay aragtay. Jawaad Albaqdaadi oo loo qorsheeyey jaahwareerinta qolyaha ammaanka ee huteelka ku sugan, ayaa dhaqso u kacay oo jaranjarrada fooqa uga sii horreeyey raysalwasaaraha oo markii uu gaadhiga ka degeyba toos u abbaaray qaybta hurdada oo ay xaaskiisuna u sii joogtay.

Jawaad Albaqdaadi waxa uu sugay inta uu raysalwasaaruhu wiishka fooqa fuulayo si uu u sii raaco, markii ay gudaha isugu galeenna waa uu khaarajiyey. Jawaad Albaqdaadi oo ay hay'adaha ammaanka ee Masar qabteen, waxa uu baadhitaankii ku qirtay in uu dilay raysalwasaaraha, isaga oo sheegay in uu xabbad keliya ku dhuftay. Galabnimadii dilku dhacayba waxaa magaalada Qaahira yimid taliyaha sirdoonka Urdun oo uu

AlmaZ Books
Telegram



wehelinayey mid ka mid ah saraakiisha sare ee hay'addiisu, si ay arrintan baadhis buuxda ugu sameeyaan.

Waxa ay Urduniyiintu ku cawdeen in masuuliyiinta Masaaridu ay ka yara warwareegeen in ay maydka raysalwasaaraha tusaan labadan masuul ee Urduniyiinta ah. Arrintani waxa ay xoojisay shakiga ay Urdun marka horeba ka qaadday sababta ninka Falastiiniga ah ee baastooladda lagu helay loo sii daayey. Waxa aana soo baxay tuhunno aan rasmi noqon oo ay ku sheegayaan in Masar ay caawisay Falastiiniyiinta dilka geystay.

Sirdoonka Urdun maydkii uu arkay iyo baadhitaannadii uu sameeyey kaddib waxa uu sheegay in raysalwasaaraha marka hore cududda gacanta midig xabbadda lagaga dhuftay, kaddibna uu iskudayey in uu la soo baxo baastooladdiisa gaarka ahayd oo uu sitay, laakiin uu u itaal gabay, dhulkana dhaqso ugu dhacay, kaddib markii xabbad labaad oo jidhkiisa hoos loo geliyey lagaga dhuftay qoorta oo weliba ah xagga dambe ee lafta kalxanta. Xabbaddan labaad sirdoonka Urdun waxa uu u fasiray in uu jiray nin labaad oo isna dilka qayb ka ahaa, kaas oo weliba meel ka sarraysa raysalwasaare Wasfi soo taagnaa ama ku joogay, hoosna u soo toogtay.

AlmaZ Books
BUUGAAG KUUGU QORAN AFKAAGA HOOYO

***

Ciidamada ammaanka ee Masar waxa ay ku guulaysteen in ay qabtaan raggii dilay Wasfi Tel, waxa aana la horgeeyey maxkamad ku taalla dalkaas. Laakiin xukunnadii la filayey laguma ridin, kaddib markii ay xeer ilaalintu keentay caddaymo

Telegram

AlmaZ Books
Telegram



diidaya eedaha loo haystay. Waxaa ka mid ahaa dhakhaatiirtii sharciga ee baadhista ku samaysay maydka raysalwasaaraha oo sheegay in sababta dhimashadu aanay ahayn dhaawaca cududda kaga yaalla, balse ay dishay xabbadda kaga dhacday garabku.

Warbixintii ay baadhayaashu soo saareenna waxaa lagu sheegay in xabbadda garabka kaga taallaa aanay ka dhicin baastooladaha ay siteen eedaysaneyaasha la qabtay.

Maxkamadda oo labadaas warbixinood cuskanaysaa waxa ay xukuntay in ay maqantahay ciddii dilka raysalwasaaraha geysatay, wax dembi dil ahna aan lagu helin dhammaan eedeysanayaasha la hor keenay oo uu ku jiray Jawaad Albaqdaadi. Si kastaba ha ahaato 'e, dawladda Urdun waxa ay xukunkaas ku tilmaamtay masraxiyad ay Masar kaga hortegeyso in Carabta iyo dunida kale ay argagaxiso u aqoonsadaan Falastiiniyiinta.

Wargeyska Al-Ahraam ayaa boggiisa hore ku qoray xukunkaas aan Urdun qancin, isla maalintii labaadna madaxweyne Saadaat ayaa dacwaddii laalay, maxkamaddiina ka joojiyey in ay dib u furto. Waxaa mar dambe la ogaaday, in hoggaamiyihii Liibiya, Mucammar Alqaddaafi uu arrintan soo farogeliyey, isaga oo la safnaa Falastiiniyiinta.

Waxa aanu qayb ka ahaa sababta sii deynta dhaqsaha ah ee eedaysanayaasha dilka Wasfi Tel oo dhowr bilood si xorriyad ah isaga sii joogay Qaahira.

Waxaa dib laga ogaaday in xabadda uu Jawaad Albaqdaadi raysalwasaaraha cududda kaga dhuftay ay ahayd keliya raadgasho, iyo in ciidamada ammaanku ay isaga oo badheedh

AlmaZ Books
Telegram



xabbadda u sita qabtaan. Si aan loo helin cidda dilka geysatay oo iyadu meel sare oo isla dhismaha huteelka ah ka soo shiishtay, iyada oo adeegsanaysa qori lagu xidhay qalabka dhawaqa ka xidha.

"Dilkani waxa uu u dhacay qaab Maafiyo ah, taas oo ah in rag la soo qorsheeyey ay rasaas si badheedh ah u rideen, si loo jahawareeriyo ammaanka, nin shiishyahan ahina uu qori aad u tayo sarreeya meel sare kala soo shiishay Wasfi oo xabbad keliya uu ku dilay." Sidaa waxaa yidhi Dr. Muxammed Aljamal oo ah qoraa Urduni ah oo wax ka qoray arrintan.

Sirdoonka dalka Urdun oo ka warhelay kaalinta uu Fakhri Alcumari ku lahaa khaarajinta Wasfti Tel, ayaa kaga jawaabay aargoosi foolxun oo ay ku dileen xubno ka mid ah qoyskiisa. Waxaa ka ka mid ahaa laba nin oo walaalo ahaa oo ay Fakhri ilma adeer ahaayeen, kuwaas oo uu sirdoonka Urdun maydkooda meel suuq ah ku soo tuuray.

## Dagaalkii Rooxaanta

Salaax Khalaf (Abu Iyaad) ayaa buuggiisa 'Filistiini Bilaa Hawiyah' (Falastiini aan Sawrac lahayn), waxa uu kaga warramay sida uu u dhacay dilkii raysalwasaare Wasfi Tel.

Siddeed iyo labaatankii bishii Nofambar 1971, ayaa goor duhur dabadii ah, Wasfi Tel oo ay ku xeeranyihiin ilaaladiisii gaarka ahayd iyo gacanyarayaashiisii uu si xarrago leh ugu soo tallaabsaday sallaanka huteelka Sheraton ee magaalada Qaahira.

AlmaZ Books
Telegram



Laba wiil oo dhalinyaro ah ayaa uga sii horreeyey wiishka, kaddib waxaa yeedhay dhawaaqa laba xabbadood. Raysalwasaarihii Urdunna dhulka ayaa uu ku dhacay, isaga oo barkad dhiig ah dhex dabbaashay. Dilkii qisaasta ahaa halkaas ayaa uu ku guulaystay, waxa aana la dilay mid ka mid ah dadkii gumaaday shacabka Falastiin.

Waana kaas ururkii qarsoodiga ahaa ee Sabtembarta Madow oo gu'gaas uun la dhisay uu guul ku dhammaystiray aargoosigiisii koowaad.

Falastiiniyiintu waxa ay diyaariyeen dhowr qorshe oo lagu khaarajinayo Wasfi Tel. Waxa ay diyaar u ahaayeen in ay ku dilaan Qaahira, Cammaan iyo meeshii ay ka heli karaan ee kasta. Waxa ay doonayeen haddii qorshe khaarajin ahi ka guuldarraysto, in aanay waqti ku qaadan diyaarinta qorshaha kale.

Laba wiil ayaa fulinayey dilka, gudaha huteelkana waxaa sii joogay laba wiil oo diyaar u ahaa in ay dilaan haddiiba raysalwasaaruhu uu ku guulaysto in uu bedqab kaga gudbo wiishka, oo uu gudaha u galo huteelka. Labada nin ee dilka fuliyey laba maalmood ayaa ay sugayeen fulinta dilka oo ay daba socdeen Wasfi Tel. Waxa aan u jeedaa in ay heleen waqti fiican oo ay wax kasta ku hubiyeen, dabagal sirdoon suganna ku sameeyaan, si aanu hawlgalku u fashilmin.

Raysalwasaaraha Urdun oo hormuud ka ahaa khiyaanada qaddiyadda Falastiin, waxaa lagu ag dilay wasiirradii kala duwanaa ee Carabta oo huteelkan iyaguna deggenaa.

https://t.me/maktabadasharciga 

AlmaZ Books
Telegram



Mar ayaa ay raysalwasaaraha la soo galeen huteelka, dhammaantoodna beerka ayaa ay dhulka dhigeen. Iyagu waxa ay doonayeen in ay is badbaadiyaan, laakiin beer-dhuldhigistoodu waxa ay caawisay raggii hawlgalka fulinayey. Waxa ay doonayeen in ay tani farriin cad u noqoto cid kasta oo Carbeed oo iskudayi lahayd in ay lumiso danaha iyo xuquuqda shacabka Falastiin.

Dilka Wasfi waxa uu ka turjumayey uurkutaallada uu xasuuqii kaga tagay Falastiiniyiinta, waxa aana taas ka marag ah damaashaadkii ay Falastiiniyiintu, meel kasta oo ay joogaanba, ku soo dhoweeyeen. Waana taas sababta dawladda Masar, iyada oo dhawraysa shucuurta shacabka, ay dhaqso ugu sii deysay raggii hawlgalkan fuliyey.

Sida uu mar dambe caddeeyey Jawaad Abu Casiis, oo ah ninka toogtay raysalwasaare Wasfti Tel, faa'idada koowaad ee arrintan ku jirtay, marka aargoosiga laga yimaaddo, waxa ay ahayd in warbaahintii dunida indhaheeda lagu soo jeediyey qaddiyadda Falastiiniyiinta.

Bin Balaala oo ka mid ahaa hoggaamiyeyaasha ururka Sambtembarta Madow ayaa qiray in dilka Wasfi Tel uu ruuxda dib ugu afuufay naftood-hurayaashii reer Falastiin. Abu Daa'uud oo isna ka mid ahaa saraakiisha sirdoonka FATAX ayaa warbaahinta uga sheegay in dilka Wasfti Tel uu ahaa aargoosi, maadaama oo wasiirka difaaca ahaa markii Urdun xasuuqaysay Falastiiniyiinta.


https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



## Iskudaygii Khaarajinta Sayid Rufaaci

Laba toddobaad kaddib dilkii raysalwasaare Wasfi Tel oo gigilay dalka Urdun, cabsi badanna ku beeray masuuliyiintii Carbeed ee si uun u hagardaamaynaysay qaddiyadda Falastiin, ururka Sabtembarta Madow waxa uu ku sigtay in uu khaarajiyo masuul labaad oo ka mid ah raggii ay aadka isugu dhowaayeen boqorka dalka Urdun. Waa Sayid Rufaaci oo xilligii uu socday xasuuqii Sabtembarta Madow ahaa lataliyaha ugu dhow boqorka.

Waxa uu ahaa nin aad u kibir badan oo ka soo jeeda qoyska ballaadhan magacna ku leh dalka Urdun, waxa aanu inta badan isu dhigayey oo warbaahinta marinayey, in uu yahay nin samatalis ah oo doonaya in nabad iyo isfaham ay ku dhammaato qaddiyadda Falastiiniyiintu. Laakiin sida uu Salaax Khalaf qudhiisuba ku sheegay buuggiisa 'Filistiini Bilaa Hawiya', kaalin aad u khatar badan ayaa uu ka qaatay hawlgalladii iyo taladii dagaal ee lagu xasuuqay Falastiiniyiinta.

Sayid Rufaaci oo markaas kooxda Cali Salaama dilkiisa qorshaynaysay, waxa uu ahaa danjiraha Urdun u fadhiya magaalada London. Waxa uu ahaa diblumaasi waxbarashadiisu heersare tahay oo magac fiican ku leh Urdun iyo dunidaba. Waxa uu hore u soo qabtay xilal kale oo ay ka mid ahaayeen wasiirka qasriga boqortooyada, danjiraha safaaradaha Qaahira, Beyruut, Qaramada Midoobey iyo dalka Ingiriiska oo uu joogay markii sannadkii 1971 kii in la dilo la doonayey.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Iskudayga dilka ee uu ka badbaaday kaddibna, waxa uu qabtay xilal uu ka mid ahaa raysalwasaaraha Urdun oo isla markaana ahaa wasiirka arrimaha dibadda iyo wasiirka difaaca.

$15^{kii}$ Disambar, xilli uu dib ugu noqonayey aqalka uu deggenaa oo ku yaallay xarunta safaaradda Urdun ku leedahay London, ayaa gaadhigiisa si kedis ah loo huwiyey rasaas ka soo dhacaysay qori kuwa darandoorriga u dhaca ah. Sayid Rufaaci waxa uu ku guulaystay in uu si dhaqso ah gaadhiga isaga tuuro oo uu dhulka jiifsado, inkasta oo uu dhaawac fudud gacanta ka soo gaadhayna waa uu ka badbaaday dilkii.

Hawlgalka waxaa fuliyey wiil ay Falastiiniyiintu ku sheegeen in uu ahaa Falastiini, oo inta uu qorigii ka takhallusay, markiiba galay gurigii ugu horreeyey ee markii uu cabbaar yar socday ka soo hor baxay. Guriga waxaa deggenayd gabadh da' ah oo aanu wax shaki ahi ka gelin ninkan dhalinyarada ah. Waxa uu u sheegay in uu yahay nin magaalada ku cusub oo meel uu tego waayey, in badan oo uu dhex wareegayey kaddibna u baahan nasiimo iyo meel uu yara fadhiisto.

Dhowr saacadood ayaa ay martigelisay, markii uu waagu baryeyna baasaboorkiisii labaad oo been-abuur ahaa ayaa uu isla maalintaas labaad kaga dhoofay gegida diyaaraddaha, isaga oo aan wax dhibaato ah la kulmin. (Falastiini Bilaa Hawiya, 1996).

Wargeyska Zamaanukum ee ka soo bixi jiray dalka Urdun, cadadkiisii $6^{dii}$ Jenaweri 1972, ayaa lagu qoray wiilkaas iskudayga dilka fuliyey, in uu u baxsaday, laguna qabtay dalka Faransiiska oo uu dhinaca badda ka galay. War uu cinwaan uga dhigay,

AlmaZ Books
Telegram



"Ninkii iskudayey in uu dilo safiirka dalkeenna ee London, ayaa lagu qabtay Baariis" waxa uu ku sheegay in Ingiriisku dawladda Faransiiska ka dalbaday in gacanta loo soo geliyo ninkaas oo ahaa 25 sano jir u dhashay dalka Aljeeriya.

Cadad dambe oo isla wargeyska Zamaanukum ah ayaa lagu dhejiyey sawirka wiilkaas oo uu faafiyey bilayska Faransiisku. Wiilka magaciisa waxaa lagu sheegay Khaliifa Saahil, waxa aanu u shaqaynayey ururka Sambtembarta Madow oo lacag ku siinayey hawlgalkan ka fashilmay.

## Hawlgalkii Safaaradda Maraykanka

Amiirka Cas iyo saaxiibbadiisii Sabtembarta Madow waxa ay go'aansadeen in ay xidhiidh ka dhigaan weerarrada ka dhanka ah Urdun ee gudaha iyo dibaddaba ay ka wadeen, iyo sidoo kale in ay gacantoodu gaadho dalalka ay Urdun saaxiibka yihiin.

Hawlgalladii ay sida heerka sare ah u diyaariyeen oo qaarkood qorshayntoodu bilo socotay, waxaa ka mid ah mid ay doonayeen in ay ku galaan safaaradda Maraykanka ee Urdun. Waxa uu qorshahoodu ahaa in ay madaxfurasho u qabsadaan danjiraha iyo hawlwadeennada, kaddibna dawladda Urdun ku qasbaan in ay ku beddelato boqollaalka maxaabiista Falastiiniyiinta ay ka haysay ah.

Waxaa si fiican loo tababaray laba kooxood oo ka mid ahaa naftood-hurayaashii Sambtembarta Madow. Kooxda hore qorshaha loo dejiyey waxa uu ahaa in ay qabsato safaaradda. Haddii kooxdaas hore ku fashilanto in ay galaan safaaradda, waxa uu qorshuhu ahaa in isla markaba ay kooxda

AlmaZ Books
Telegram



labaad oo gudaha Urdun ku sii diyaarsani ay qabsato xarunta raysalwasaaraha Urdun, ciddii masuuliyiin ah ee ay gudaha ugu galaanna afduub ku haystaan illaa inta ay boqortooyadu oggolaanayso in maxaabiista la is dhaafsado.

Hawlgalkan oo aad u dhib badnaa waxaa fulintiisa loo xilsaaray Abu Daa'uud oo lagu xushay geesinnimadiisii dunida dhifta ahayd. Abu Daa'uud waxa uu si halyeeynimo ah uga qayb qaatay dagaalkii wax-iska-caabbinta Falastiiniyiinta iyo ciidamadii Urdun, waxa aanu ahaa ninkii hoggaaminayey koox naftood-hurayaal ahaa oo gashay magaalada Cammaan, Sambtembar 1970.

Waxa uu ahaa nin aad u kala yaqaanna magaalada Cammaan. Waxa uu magaalada ku lahaa dad ehel ah, sirdoonka Urdun dhexdiisana waxa uu ku lahaa saaxiibbo, sidaas awgeed xogta si fiican ayaa uu u heli karayey. Si kastaba ha ahaato 'e, in uu dib ugu noqdo Urdun oo ay hay'adaha ammaanka iyo dad badan oo kalaba wejigiisa si fiican u garanayaan, waxa ay ahayd tallaabo aad u khatar badan.

Abu Daa'uud waxa uu hawlgalka ka hor galay dhowr bilood oo diyaargarow ah; gadhkii ayaa uu la baxay, waxa aanu isqarinta ka bilaabay magaaladii uu deggenaa ee Beyruut iyo Dimishiq oo uu tegi jiray.

Dhinaca kalana, Cali Salaama iyo Abu Iyaad waxa ay diyaariyeen qorshe aad u heer sarreeya; saddex nin oo ka mid ah ururka oo jooga Cammaan ayaa lala xidhiidhay, waxa aana la faray in ay kireeyaan saddex guri, iyaga oo isticmaalaya hadba marmarsiinyaha ay u arkaan maangal.

AlmaZ Books
Telegram



Saddexda guri waxaa degaya Shan iyo tobanka naftiihure ee hawlgalkan ballaadhan ka qaybgalayey. Abu Daa'uud oo isagu madax u ah, ayaa la xidhiidhay mid ka mid ah saaxiibbadiisa Cammaan. Waa nin magaciisa lagu soo koobay Mustafe oo uu ku degi doono, si uu marti ugu ahaado inta hawlgalku fulayo.

Mustafe waa 35 sano jir aad u aaminsanaa Shuuciyadda, toddoba sano oo cimrigiisa ka mid ahna ku soo qaatay xabsi ku yaalla dalka Urdun. Waxa uu ku eedaysnaa in uu faafinayey fikirka Shuuciyadda oo xilligaas Midowga Soofiyati si aad u xooggan dunida ugu faafinayey.

Mustafe oo aad uga cadhooday qaabka ay xukuumadda Urdun u ciqaabtay iyo aragtidiisa lagu haystay oo uu dulmi u arkayey awgeed, waxa uu go'aansaday si uu u aargoosto in uu la shaqeeyo kooxaha wax-iska-caabbinta Falastiiniyiinta.

Markii xabsiga laga soo daayey sannadkii 1968 kii, waxa uu shaqaale ka noqday wasaaradda warfaafinta ee dalka Urdun, taas oo uu shaaadiisa kale ku dhex watay. Saraakiisha sirdoonka ee Sabtembarta Madow muddo ayaa ay dabagal ku wadeen, si ay u hubiyaan illaa xadka uu daacad ka yahay la shaqayntooda. Markaas kaddib, ayaa ay bilaabeen in ay u adeegsadaan hawlgalladooda qarsoodiga ah ee ku aaddan dalka Urdun.

Abu Daa'uud socdaalka uu ku tegeyo Urdun keli kuma uu ahayn. Waxaa la socotay gabadh ka tirsan naftood-hurayaasha Sabtembarta Madow oo jilaysay in ay tahay afo uu qabo odaygan gadhka la baxay ee Abu Daa'uud. Lammaanahan Abu Daa'uud iyo afadiisa ahi waxa ay ku degi doonaan

AlmaZ Books
Telegram



Mustafe oo isagu aan xubin ka ahayn ururka Sabtembarta Madow balse haddana uu ururku kalsooni buuxda ku qabay.

Kooxda magaalada kaga sii horreysay Abu Daa'uud oo iyagu ahaa kuwa hawlgalka fulinaya, waxa ay dalka la soo galeen dhowr gaadhi oo uu Abu Daa'uud ku soo qariyey hub iyo walxaha qarxaya. Intii qorshaha hawlgalkani socday ayaa uu Abu Daa'uud dalkii Jarmalka Bari u tegey Barashada sida baabuurta loo furfuro ee hubka loogu qariyo.

Abu Daa'uud waxa uu magaalada soo galay isaga oo aad wax uga beddelay qaab muuqaalkiisa. Si aan looga shakiyin sheegashadiisa ahayd in uu yahay ganacsade khaliiji ah oo dalxiis u socda; waxa uu watay gaadhi nooca qaaliga ah, gadhweyn ayaa uu la baxay, waxa aana wehelinaysay gabadh uu xaaskiisa ku sheegay. Gabadhani waxa ay ahayd xaaska mid ka mid ah naftood-hureyaasha hawlgalkan fulinayey. Waxa ay hawlgalkan ugu tabarucday in ay kaalintan jisho si aan dareen shaki looga qaadan Abu Daa'uud, sida oo kalana waxaa ku jiray qorshe ah in ay soo sagootidu saygeeda hawlgalka fulinaya oo ay suurtagal ahayd in uu ku dhinto.

Abu Daa'uud markii uu gaadhay Cammaan waxa uu la hadlay Mustafe oo bilowgii hore gurigiisa dejiyey, kaddib Abu Daa'uud waxa uu isku daray gabadhii iyo Mustafe si uu u geeyo guriga uu dejiyey naftood-hureyaasha. Waxa uu doonayey in ay gabadhu soo aragto saygeeda, sida oo kalana ay gaadhsiiso farriin aanu ku aaminayn Mustafe oo la xidhiidhay hawlgalka. Waxa kale oo gabadha la faray in ay soo kaxayso Bin Balaala. Waa magaca afgarasho ee mid ka mid ah masuuliyiinta saddexda qaybood ee loo kala jebiyey lix iyo tobankii naftiihure ee ka qaybgalayey hawlgalka.


https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Mustafe iyo gabadhii la isku daray, markii ay waajibkii loo diray soo guteen waxa ay soo noqdeen iyaga oo uu weheliyo Bin Balaala, waxa uu u socday in uu Abu Daa'uud ka qaato faahfaahinaha dheeraadka ah ee qorshaha fulinta fulinta hawlgalka.

Markii uu dhammaaday kulankii Abu Daa'uud iyo Balaala, Abu Daa'uudna uu hubiyey in hawlaha fulinta hawlgalku sidii la rabay isugu dubbadhacsanyihiin, ayaa isaga iyo gabadhii wehelinaysay ay ka guureen gurigii Mustafe. Isla maalintaas fiidnimadeediina waxa ay guure lug ah kaga ambabaxeen magaalada Cammaan, iyaga afka saaray jidka isku xidha Urdun iyo Suuriya.

Markii ay muddo guuraynayeen waxaa jidka ka helay nin iyo gabadh Falastiiniyiinta Urdun deggen ah oo aanay aqoon hore isu lahayn. Lammaanahan dhalinyarada ah oo xaas ahaa, waxa ay si hoose ula shaqayn jireen kooxaha wax-iska-caabbinta ee Falastiiniyiinta.

Markan waajibka loo soo diray waxa uu ahaa in ninka tilmaamaha la siiyey leh ee afadiisu weheliso ay jidka ka qaadaan oo ay gaadhsiiyaan xuduudka dalka Suuriya, laakiin lammaanahani ma ay garanayn Abu Daa'uud shakhsi ahaantiisa. Wax xog ahna kama ay haynin hawlgalka ay u socdeen labada ruux ee in ay qaadaan la faray. Taliyihii guud ee Sabtembarta Madow, Abu Ihaab, waxa uu hawlgalkan dartii u joogay caasimad Carbeed oo aan la sheegin, si uu si dhow ula socdo sida ay wax u dhacayaan. Waxaa warwar weyn ku abuurtay in aanu wax war ah ka helin Cammaan. Maalintaas oo dhan waxa uu sugayey dhawaaq ka soo yeedha Urdun oo

AlmaZ Books
Telegram



weerarkii sheegaya, se nasiibdarro raggiisii waxba uma ay soo sheegin, warbaahinta oo uu la socdayna wax weerar ah ma ay tebin.

Markii ay u caddaatay in aanu dhicin weerarkii ay ahayd in naftood-hurayaasha gudaha ku jiraa ay ku qaadaan safaaradda Maraykanka, waxa uu nafta u sheegay in qorshihii ay ku timid caqabadi, waxa hadda muhiimka ahina uu yahay in uu raadiyo xogta halka ay ku dambeeyeen naftood-hurayaashii uu gudaha Cammaan geliyey.

Habeenkii warwar iyo walbahaar baa uu waagu ugu baryey, waagu markii uu dillaacayna waxaa hortiisa timid masiibadii uu sugayey. Masuul ka tirsan raggiisa ka hawlgeli jiray gudaha Cammaan oo isagu aan hawlgalka qayb ka ahayn, balse dusha kala socday si warka uu u tebiyo, ayaa u soo sheegay in dawladda Urdun ay gacanta ku dhigtay Abu Daa'uud iyo gabadhii la socotay, labadii ruux ee u xilsaarnaa in ay xuduudka gaadhsiiyaan, iyo sidoo kale dhammaan naftood-hureyaashii.

Abu Ihaab waxaa loo sheegay in ciidamada ammaanka ee boqortooyada Urdun ay u daateen saddexdii guri ee loo kireeyey naftood-hurayaasha, isla markaana magaalada Cammaan dhexdeeda, meel shaarac ah, lagu qabtay gaadhigii qaaliga ahaa ee uu Abu Daa'uud la galay Urdun.

Arrinta intaasba kaga sii xanuun badnayd ee loo sheegay Taliye Abu Ihaab waxa ay ahayd, in sida muuqata uu sirdoonka Urdun tan iyo bilowgiiba war buuxa ka hayey weerarka lala maaggan yahay Cammaan iyo qorshihiisa fulineedba.

AlmaZ Books
Telegram



Ninka hawshaas fashilinteeda kala shaqaynayey Urdun, waxa uu ahaa Mustafe, oo ah isla ninkii kooxda Sabtembarta Madowna kala shaqaynayey sidii uu u guulaysan lahaa hawlgalku. In ay sidaas tahayna caddaynteeda koowaad waa in uu Mustafe yahay qofka keliya ee aan laga xidhin dhammaan dadkii hawlgalkan ku lug lahaa.

Marka laga yimaaddo Abu Daa'uud iyo gabadha la socotay, Mustafe waxa uu ahaa qofka keliya ee ogaa faahfaahinta hawlgalkan oo dhammaystiran; oo xitaa naftood-hurayaasha looma sheegin tafaasiisha iyo bartilmaameedka hawlgalka midna, taliyeyaasha watayna war fiican waa laga siiyey bartilmaameedka iyo qorshaha hawlgalka, laakiin haddana xogtu uma ay dhammaystirnayn.

Qoraagii Patrick Seale (1930-2014) ayaa buuggiisa, 'Abu Nidal: A Gun for Hire (1992), waxa uu ku sheegay mar ay Abu Daa'uud ku kulmeen dalka Tuuniisiya oo uu sheekadan uga warramay in uu ku yidhi, "Ilbidhiqsigii koowaadba markii aan wejigiisa eegayba waxa aan indhihiisa ka akhristay in uu i khiyaamaynayo. Inta aan raqabadda (Kalarka) shaadhkiisa ka buuxsaday oo soo dhuftay ayaan dhegta ugu xanshaashaqay; I dhegeyso Mustafoow, haddii aad ku fikirto in aad arrintayda sheegto, ku talagal in aan ku dili doono"

Abu Daa'uud saacadihii u dambeeyey qorshaha fulinta hawlgalka ayaa uu dareemay in sirtiisu ay baxday, si uu uga taxaddaro in la fashilayana waxa uu isku dayey in uu soo dedejiyo waqtiga fulinta hawlgalka. Nasiibdarro se waxa ay ahayd goor warkiisu sirdoonka Urdun la yaallo.

Abu Ihaab markii uu urursaday wixii uu xog heli karayey, sida caadiga ah waxa uu durbadiiba bilaabay wejiga labaad ee hawlgalkaas fashilmay. Kaas oo ah in laga fikiro sida ugu fiican ee ururka Sabtembarta Madow u soo furdaamin karo ragga laga xidhay.

Waxaa se taas uu ka sii mudnaysiiyey qorshaynta sidii looga aargoosan lahaa Mustafe qudhiisa, si basaasiinta kale ee Sambtembarta Madow la shaqeeya ay tallaabadaasi ugu noqoto dersi aanay dabadii cidi ku dhiirran. Abu Ihaab oo warmoog iska dhigayaa waxa uu talefanka kala xidhiidhay Mustafe, waxa aanu weydiiyey waxa dhacay.

Mustafe, oo ku hadlaya ereyadii afgarasho ee hore ay Sabtembarta Madow ugu tababartay, waxa uu taliyaha u sheegay xadhigga kooxdii hawlgalka u joogtay Cammaan. Waxa se uu niyadda ugu qaboojiyey beenta ah in Abu Daa'uud aan wax cad lagu haynin, xaalkiisuna aad u fiican yahay oo aan dhibaato loo geysan. Sida markii dambe caddaatay, Mustafe waxa uu ogaa in markiiba ciqaab adag iyo jidhdil arxandarro ah lagu fuliyey Abu Daa'uud.

Mudd afar maalmood ah ayaa uu sirdoonka Urdun la sameeyey waraysiyo baadhis ah oo uu ciqaab aad u daran mariyey. Abu Daa'uud ciqaabta waa u adkaystay oo wax xog ahna ma' uu bixin, laakiin xilli ay baadhayaasha Urdun caddaymuhu isugu xidhmi la'aayeen ayaa ay bilaysku si kedis ah u soo qabteen wiil dhalinyaro ah doonayey in uu dalka ka baxo, isaga oo kelidii gaadhi wata. Waxa ay ka shakiyeen in uu ka ganacsado kontarabaanka daroogada, laakiin waxa uu ka mid ahaa kooxda Abu Daa'uud, gaadhiga uu wadana waxa uu ahaa kuwii hubka badan lagu soo qariyey.

AlmaZ Books
Telegram



Baadhayaasha sirdoonka Urdun, waxaa ku soo dhacday fikrad yaab leh oo albaabo aanay filayn u furfurtay. Iyaga oo ka duulayaa aragtida ah in dembiilayaasha isu kiiska eeg oo dhan la hubiyo in xidhiidh ka dhexeeyo, waxa ay wiilkii u geeyeen Abu Daa'uud, iyaga oo weydiinaya in uu garanayo ninkan. "Waa Abu Daa'uud, Isaga ayaa aanu Urdun wad animi" ayaa ay noqotay jawaabta uu wiilkii bixiyey. Waxa ay ereyadani baadhayaasha u fududeeyeen in la helo dhammaan raggii kale ee shabakadda Abu Daa'uud ka mid ahaa, qaarkood qolalkii la dejiyey ayaa ay ku sugayeen amarka fulinta iyaga oo aan ka warqabin waxa dhacay.

Abu Ihaab waxa uu maalintii labaadba gudagalay qorshihiisa ah in khaayinka la ciqaabo, waxa aanu dejiyey xeeladdii uu Mustafe gacantiisa ku soo gelin lahaa. Dhambaal uu u diray ayaa uu ugu sheegay in uu go'aansaday in hawlgal labaad si degdeg ah looga fuliyo isla magaalada Cammaan. Waxa uu u sheegay in ay jirto fursadweyn oo uu hawlgalka dambe ku guulaysan karo, maadaama oo uu sirdoonku ku mashquuli doono baadhista hawlgalkaas hore, isla markaana aanu filayn in Sambtembarta Madow sidaas dhaqsaha ah mar labaad hawlgal u abaabuli karto.

Abu Ihaab waxa uu Mustafe u sheegay in yoolka koowaad ee hawlgalka labaad uu yahay in masuuliyiin badan la afduubo, si loogu beddesho maxaabiista Falastiiniyiinta ah ee ay ugu horreeyaan Abu Daa'uud iyo saaxiibbadii.

Maadaama oo uu xogogaal yahayna, in aan looga maarmayn dejinta qorshaha hawlgalkaas aargoosiga ah, sidaas awgeedna ay qasab tahay in uu u soo safro Qaahira si ay halkaas ugu kulmaan.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Mustafe markiiba warkii Abu Ihaab waxa uu u gudbiyey madaxdiisii sirdoonka Urdun. Masuuliyiintii ammaanku khuseeyey ayaa isugu yimi shir ballaadhan oo ay kaga arrinsanayaan xogta soo korodhay. Waxaa goobjoog ahaa Nadiir Rashiid, taliyaha sirdoonka Urdun, Amiir Xasan, guddoomiyaha guddida Ammaanka qaranka Urdun, oo ay walaalo ahaayeen boqor Xuseen, Cadnaan Abu Cawdah oo ahaa wasiirka warfaafinta, iyo xeeldheerayaal sirdoon oo tiro badan.

Ajandaha ugu weyn ee shirkan lagu gorfeeyey waxa uu ahaa xogta uu Mustafe keenay ee ah in taliyaha Sabtembarta Madow uu doonayo in ay kulan Urdun dibaddeeda ah isugu yimaaddaan, si uu wax uga ogaado qorshayaal cusub oo weerar lagula maaggan yahay Urdun.

Masuuliyiintii shirka isugu timid aad ayaa ay u taageereen in Mustafe uu la soo kulmo taliyaha Sabtembarta Madow. Waxa ay filayeen in uu markanna xog kale oo waafi ah ka keeni doono, kolka laga reebo wasiirka wafaafinta oo isagu ka soo horjeestay safarka Mustafe. Wasiir Cadnaan waxa uu dareen shaki ah ka muujiyey yeedhmadaas taliyaha Sabtembarta Madow, waxa aanu si cad u sheegay cabsida uu ka qabo in ay tahay dabin lagu qabanayo Mustafe. Si kastaba ha ahaato 'e, aragtidiisani taageero kama ay helin xubnihii shirka intiisii kale. Go'aankii shirku waxa uu noqday in Mustafe uu la soo kulmo Abu Ihaab. Isaga oo qaba talada iyo dardaaranka madaxdiisu waxa uu u ambabaxay magaalada Qaahira. Laakiin markii uu tegey goobtii la isku ogaa, waxaa soo gaadhay farriin uu Abu Ihaab ugu sheegayo in uu beddelay goobta kulanka, sidaas awgeedna uu ku sugayo caasimad kale oo Carbeed.

AlmaZ Books
Telegram



Waxa uu ku marmarsoonaya in hawlo gaar ah oo uu u yimi magaaladaasi ay u dhammaan waayeen, taa darteedna ay qasab noqotay in uu sii joogo ballantana xaggaas u beddelo. Laakiin runtu waxa ay ahayd saraakiisha sirdoonka Falastiiniyiinta oo ogaaday in xaalado ammaan oo Qaahira ka jiray awgeed aanay markaas suurtagal ahayn in ay magaaladaas ka dhex fuliyaan qorshahooda.

Mustafe waxa uu Abu Ihaab iyo musuuliyiintii Sabtembarta Madow u sheegay in aanu dal saddexaad u sii gudbi karin, maadaama laanta socdaalka ee Urdun ay ku ogeyd in uu u safray Masar oo keliya. Waxa uu ku dooday in caasimad saddexaad oo uu u safraa ay keenayso khatar ah in laga shakiyo. Sida oo kale waxa uu u sheegay, in fasaxa uu haystaa uu shan maalmood oo keliya yahay, sidaa awgeedna uu doorbidayo in ay Qaahira ku kulmaan Abu Ihaab.

Ugu dambayntii, Abu Ihaab iyo raggiisii waxa ay Mustafe ku qanciyeen in ay u soo saaraan waraaqo socdaal oo been-abuur ah, kuwaas oo inta uu waraaqihiisa qariyo uu ku tegi karo dalka saddexaad ee ay ballanta cusubi tahay.

Kaddibna, marka dambe inta uu Masar ku soo noqdo uu si caadi ah dib ugu safri doono Urdun iyada oo aan baasaboorkiisa laga arkayn in uu Masar dhinac kale uga sii baxay. Waxa uu ahaa qorshe heersare ah oo Mustafe qanciyey, laakiin dhinaca kalana waxa uu u fiicnaa kooxda Sabtembarta Madow oo marka horeba raadinayey hab ay ku tirtiri karaan raadka Mustafe si marka ay xisaabtooda dhammaystaan aanu raadkiisu u soo gelin dalkan ay la tageen.

AlmaZ Books
Telegram



Mustafe waxa uu u safray caasimadda dal kale oo Carbeed oo aanay muddo dheer kooxda Sabtembarta Madow magaceeda sheegin. Markii uu gegida diyaaraddaha ka degeyba waxa uu la kulmay gaadhi ku sugayey, waxa aana toos loogu geeyey halkii uu Abu Ihaab ku sii sugayey oo ahaa guri arrintan Mustafe oo keliya loo sii kiraystay.

Mustafe oo soo dhoweyn badan ka filanayey saraakiisha Sabtembarta Madow ee uu isu dhigayo in uu abaal u galay ayaa loo keenay Abu Ihaab oo sugayay, wixii uu kala kulmayna waa uu ka duwanaa wixii uu filayey. Soo dhoweyn aad u qabow, salaantii gacanqaadka ahayd oo uu ka diiday iyo amar dareen leh oo uu ku siiyey in uu fadhiisto ayaa mar keliya isu raacay Mustafe. Isla markii uu fadhiistayna waxa uu ku bilaabay canaan iyo ereyo sida dhimbiisha laabtiisa u gubay oo si aan kala joogsi lahayn uu ugu eedaynayo in uu isagu yahay qofka fashiliyey hawlgalkii Cammaan.

Abu Ihaab waxa uu Mustafe isu tusay in uu xog sugan ka hayo sida uu u fashiliyey hawgalkii iyo weliba in uu ogyahay in uu sirdoonka Urdun ka caawiyey qabashada Abu Daa'uud. Mustafe oo aan tan filayn ayaa u adkaysan waayey hadallada sida dhibicda ugu hooray, waxa aanu bilaabay in uu ooyo. Waxa xigayna waxa uu ahaa in uu sheekadii bilow illaa dhammaad soo taxo. Waxa uu ka warramay sida uu ugu xidhmay sirdoonka Urdun, waxa aanu qiray in uu weligiiba xogaha Sabtembarta Madow u gudbin jiray sirdoonka Urdun.

Mustafe iyo sirdoonka Urdun waxa ay is fahmeen intii uu Mustafe xabsiga ku jiray, waana dhaqan uu sirdoonku yaqaanno in maxbuuska xogta heli kara ama cidda muhiimka ah ku xidhan basaas lagaga dhigto.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa basaasnimada lagaga beddeshaa; xabsiga oo laga sii daayo, in ciqaabta laga dhaafo ama in dhaqaale iwm lagula heshiiyo. Rag iyo haween badan oo Falastiiniyiin ah ayaa qaabkan basaas lagaga dhigay, waxa aanay ku kaceen hawlgallo waaweyn oo marar badan curyaamiyey halganka. Mustafe sababta xabsiga looga sii daayey ayaa ay ahayd in uu ka shaqeeyo dhexgalka kooxaha wax-iska-caabbinta Falastiiniyiinta, si uu xogtooda ugu keeno sirdoonka Urdun.

Isaga oo heshiiskaas ka duulayaa ayaa markii uu xabsiga ka soo baxayba waxa uu xidhiidho la samaystay kooxaha wax-iska-caabbinta. Waxa uu isu muujiyey nin ka cadhaysan xabsiga oo diyaar u ah in uu qayb ka noqdo dagaal kasta oo boqorka iyo xukuumaddiisa lagu waxyeellaynayo.

Arrintaas waxaa aad ugu qancay qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha Falastiiniyiinta, waxa aanay u arkeen in Mustafe uu ugu yaraan noqon karo halgamaa ay isaga iyo Falastiiniyiintu hal cadow wadaagaan oo ah xukuumadda Urdun. Waxa aanay u suurtogelisay in uu si aad ah u dhex galo Falastiiniyiinta gaar ahaan Jabhadda Shacbiga ah ee Falastiiniyiinta oo uu madax u ahaa halgamaagii caanka ahaa ee Joorj Xabash, wax badan oo xog ahna uu ka helay.

Waxaa isna markii dambe si aad ah u aaminay Abu Daa'uud oo ka dhigtay saaxiib uu ku kalsoon yahay xogo badan oo halganka khuseeyana uga warramo.

Qorshaha hawlgalka Urdun waxa uu Mustafe u arkayey in uu yahay nimco xeradiisa ugu timid. Dabcan, waxa ay ahayd xog aad u shilis oo uu si fudud u helay, kana filayo in uu

AlmaZ Books
Telegram



abaalmarin lacageed iyo ammaan badan kaga helo sirdoonka Urdun

Dhowr bilood ayaa kooxda Sabtembarta Madow ay gacanta ku haysay Mustafe oo ay waraysiyo joogto ah la yeelanayeen. Sida uu Abu Ayuub Khalaf ku sheegayo buuggiisa 'Filistiini Bilaa Hawiyah', waxa ay Mustafe ka heleen xogo badan, oo ay ka mid yihiin magacyada ragga ka tirsan dhaqdhaqaaqyada Falastiiniyiinta ee haddana sida qarsoodiga ah ula shaqeeya sirdoonka Urdun. Waxa aanay taasi u suurtagelisay in ay wax badan ka nadiifiyaan hay'adda Sirdoonka. Basaasiintaas waxaa ka mid ahaa lix iyaga oo jooga Urdun, sida Mustafe hab khiyaamo ah lagu soo saaray, kaddibna lagaga aargoostay dal carbeed oo aanay Falastiiniyiintu sheegin.

"Markii aanu aragnay khasaaraha nafeed ee basaasnimadiisu ku keentay hawlgallo badan oo aanu qorshaynay balse uu isagu fashiliyey, waxaa lagu xukumay dil, laakiin dilkaas lama fulin illaa uu Abu Daa'uud xabsiga ka soo baxayo".

Abu Daa'uud waxa uu Patrick Seale uga warramay halka uu ku dambeeyey Mustafe iyo magaalada la geeyey, "Waxaa loo tahriibiyey Liibiya oo xabsi lagu tuuray, laakiin saddex sano kaddib ayaa la sii daayey, kaddib markii uu bartootamay aabihii oo duq ahaa. markii uu Urdun ku noqdayna waxaa dhaqso loogu magacaabay agaasimaha Arrimaha hiddaha iyo dhaqanka ee wasaaradda warfaafinta"

AlmaZ Books
Telegram



## Sii deyntii Abu Daa'uud

15[kii] Febarweri ayaa la qabtay Abu Daa'uud, isaga iyo saaxiibbadiisii shan iyo tobanka ahaana dhammaantood waxaa lagu xukumay dil. Kulan ay madaxda Sabtembarta Madow yeelatay 28[kii] isla bishaasna waxa lagu go'aansaday in la fuliyo hawlgal boqor Xuseen qasab kaga dhiga in uu ka noqdo xukunkaas.

Bilowgii bishii Maarso, koox kamaandoos naftood-hurayaala ah ayaa qabsaday safaaradda boqortooyada Sucuudi Carabiya ee magaalada Khartuum. Waxa ay gudaha u galeen xilli ay joogeen ugu yaraan 40 diblumaasi oo xaflad safaaradda ka dhacaysay ka qaybgalayey.

Kooxda afduubku waxa ay safaaradda gudaheeda ku afduubeen 5 diblumaasiyiintaas ka mid ahaa; waxa ay ahaayeen danjireyaashii boqortooyada Sucuudiga iyo Maraykanka, iyo saddex ergey diblumaasiyadeed oo ka socday dalalka Beljam, Urdun iyo Maraykanka qudhiisa. Kooxdani markii ay gacanta ku dhigeen diblumaasiyiintan, waxa ay wadahadal la fureen hay'adaha ammaanka ee Suudaan. Shardiga ay ku xidheen nolosha diblumaasiyiintani waxa uu ahaa in boqor Xuseen uu xabsiga ka sii daayo Abu Daa'uud iyo saaxiibbadiisii hawlgalka Urdun u tegey.

Xilligaas waxa ay dad badani ku jaahwareereen sababta ay Falastiiniyiintu hawlgalkoodan uga dhex fuliyeen dal saaxiib la ah, iyo weliba waxa ay ku xusheen diblumaasiyiinta ay afduubeen oo badankoodu aan u dhalan Urdun. Laakiin sida uu Abu Ayuub Khalaf ku sheegay buuggiisa 'Falastiini Bilaa

AlmaZ Books
Telegram



Hawiyah', boqor Xuseen hawlgalkii uu 1970, ku gumaadayey Falastiiniyiinta waa uu ku wargeliyey Maraykanka.

Danjirahan Maraykanka ah ee ay afduubeen oo Urdun joogay xilliyadaasina isaga oo ka wakiil ah dawladdiisa ayaa uu aqbalay in Urdun ay fuliso hawlgalkaas. Markaas kaddib ayaa loo soo beddelay Suudaan, xafladdanina waxa ay ahayd sagootis ay safaaradda Sucuudiga ee Suudaan ku maamuustay maadaama oo ay ka dhammaatay shaqadii Suudaan oo uu dib ugu noqdo Washington. Sababtaas ayaa soo dedejisay hawlgalka.

Boqor Xuseen waa uu diiday dalabkii Falastiiniyiinta ee ahaa in diblumaasiyiintan loogu beddelo Abu Daa'uud iyo ragga la socday. Go'aanka uu qaatay madaxweyne Nixon oo xilligaa Maraykanka u talinayey waxa uu noqday, in xoog lagu soo furto lahaystayaasha. dawladda Suudaan oo ku socotay talada Nixon iyo madaxda dalalkii kale ee ay ka soo jeedeen lahaystayaashu, waxa ay weerar ku qaaday safaaradda.

2dii Maarso ayaa ciidamada ammaanku weerarka qaadeen, naftood-hurayaashiina waxa ay kaga jawaabeen in ay dilaan danjirihii Maraykanka iyo labadii diblumaasi ee Maraykanka iyo Beljam u dhashay. Diblumaasiga Beljam u dhashay ayaa isagana ay Falastiiniyiintu ku eedayn jireen in uu la jiro Yuhuudda oo aanu qarsan jirin la shaqayntooda.

Markii xaalku halkaas marayey, ayaa weerarkii safaaradda la joojiyey dibna loo bilaabay wadahadalkii. Gorgortan adag kaddib, Falastiiniyiintu waxa ay isdhiibeen afartii Maarso. Saacado yar kaddib markii ay is dhiibeen, boqor Xuseen kii

AlmaZ Books
Telegram



Urdun waxa uu saxeexay dhaqangelinta xukunkii dilka ahaa ee Abu Daa'uud iyo saaxiibbadii.

Si kastaba ha ahaato 'e boqorku fulinta dilkaas waa uu hakiyey cadaadis aad u badan ayaa kaga yimid qaar ka mid ah madaxdiii dalalka Carabta, waxaa ugu horreeyeen Saadaat kii Masar iyo Buu Madiin oo Aljeeriya ahaa, sidoo kale amiirkii Kuweyt ayaa ka ergeeyey, waxa aanay aakhirkii keentay in boqor Xuseen uu fulintii xukunka dilka ahaa dib u dhigo. Haddana 14[kii] Maarso, boqorku xukunkii ayaa uu ka fududeeyey oo uu ku beddelay xabsi daayin. Ugu dambayntiina cafis guud ayaa lagu sii daayey Abu Daa'uud iyo raggiisii.

Abu Daa'uud oo saaxiibkii Patrick Seale uga warramay sida lagu sii daayey waxa uu yidhi, "Muddo aan badnayn kaddib ayaa la i sii daayey, kaddib markii dhinacyo badani ay ka ergeeyeen. Kuweyt ayaa iyaduna ogolaatay in ay iga bixiso, 12 Milyan oo doolar oo la igu iibiyey xukunka. Saddexankii maamulayey Midowga Soofiyeti Brezhnev, Kosygin iyo Podgorny(1) ay iyaguna masuuliyiinta Urdun u soo diray dhambaal ay ku codsanayaan in la i sii daayo. Waxaa intaas dheeraa boqor Xuseen oo ogaa in bisha Oktoobar 1973 uu dhici doono dagaalkii Bariga dhexe (Carabta iyo Israa'iil), sidaas awgeedna aan doonayn in Falastiiniyiini maxaabiis u

(1) Xilligaas dawladdii Hantiwadaagga ahayd ee Midowga Soofiyeti, waxa ay ku dhisnayd nidaam dawladeed ay taladeedu ka go'do sadddex madax. Saddexankan dalka ugu awood badnaa oo lagu magacaabi jiray ereyga asalkiisu Ruushka yahay ee 'troika' waxa ay ahaayeen, hoggaamiyaha qaranka, raysalwasaaraha iyo guddoomiyaha xisbita hantiwadaagga.

AlmaZ Books
Telegram



ahaato. 18[kii] Sabtembar 1973, oo ahayd maalmo yar ka hor qaraxa dagaalkii Oktoobar ayaa lanagu sii daayey cafis guud. Boqorka qudhiisa ayaana igu soo booqday xabsiga oo ii sheegay in markaa laga bilaabo aan xor ahay"

## Hawlgalladii Urdun ka baxsanaa

Inkasta oo sababtii u weynayd ee loo dhisay ururka Sabtembarta Madow ay ahayd in Falastiiniyiintu ay kaga aargoostaan Boqor Xuseen iyo guud ahaan dawladda Urdun, haddana in dagaalku uu Urdun ku ekaadaa waa ay suurtogeli weyday.

Waxaa soo baxday in tallaabo kasta oo ay qaadaan kooxda Sabtembarta Madow ay si toos ah ama si dadban u taabanayso dal kale oo aan ahayn Israa'iil iyo Urdun. Ka soo bilow hawlgalkii ay ku khaarajiyeen raysalwasaare Wasfti Tell oo saamaynayay Masar, inkasta oo markaas la aaminsanaa in Masar ay ka raalli ahayd; iskudaygii dil ee lagu khaarajinayey danjiraha Urdun ee London Sayid Rufaaci oo isna saamaynayey Ingiriiska; weerarradii ay Sabtembarta Madow ku qaadday safaaradaha Urdun ee Talyaaniga, Faransiiska iyo Jarmalka iyo kii ay danjirayaasha reer galbeedka ah ku dileen safaaradda Sucuudiga ee Khartuum.

Waxaaas oo dhami waxa ay keenayeen in mar kasta dal kale oo aan ahayn ka loo jeedo ay dhibaatadu gaadho, sidaas darteedna ma ay jirin sabab ay Sabtembarta Madow ugu sii dheggenaato qorshihii hore ee ururkan lagu dhisay.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa iyaduna jirtay in boqorka Urdun uu ku hungoobay abaalkii uu filayey in weerarka Falastiiniyiinta uu kaga heli doono Israa'iil iyo dalalka xulafada la ah ee Maraykanku ugu horreeyo. Tusaale ahaan, sida mar dambe la ogaaday, markii ay ciidamada Suuriya si cad u garab istaageen Falastiiniyiinta uu dagaalka ku qaaday ee ay gudaha u galeen dhulka Urdun, dhinaca kalana Ciraaq oo iyaduna xad la lihi ay cadho badan iyo cadaadis diblumaasiyadeed muujisay, kuna sigatay in ciidamadeedu ay gudaha u galaan Urdun, waxa uu hareertiisa ka waayey Maraykanka oo uu filayey kana codsaday in uu arrinta soo farogeliyo.

Dhinaca kalana colaadda uu Falastiiniyiinta ku qaaday waxa ay ku keentay cadaadis badan oo dhinaca dawladaha iyo shacabka Carabta ah, iyo xitaa dadkiisa oo aan arrintaas jeclaysan, iyada oo la ogyahay in dadka Falastiin intooda badani isir ku leeyihiin Urdun. Arrinta kale waxa ay ahayd in Falastiiniyiintu ay noqdeen dad aan rabshaddoodu go'ayn, isla markaana xanuunjiyey Urdun, oo dilkii Raysalwasaaraha marka laga yimaaddo, ay sii jireen iskudayo aan joogsi lahayn oo ay xitaa boqorka qudhiisa ku sigeen.

Waxyaabahaas oo isu tegey waxa ay qab-jebiyeen boqorka oo ku qasbanaaday in uu u tanaasulo Falastiiniyiinta, wadahadallo iyo xidhiidho isfahamna uu la samaysto.

Ururka Sabtembarta Madow iyaga waxaa u kordhay qab iyo isku kalsoonaan dhinaca awoodahooda ah, waxa ayna isu arkeen in ay yeelan karaan awood ay Israa'iil qudheedana ku waxyeellayn karaan, sidaas awgeedna ujeeddadii hore ee ururku waxa ay isu beddeshay mid caalami ah oo ku waajahan Israa'iil

AlmaZ Books
Telegram



iyo cid kasta oo ay Falastiiniyiintu u arkayeen in ay danahooda ka soo horjeeddo. Israa'iil dhankeedana intii hore dan badan kama ay gelin Sabtembarta Madow iyo hawlgalladeedii ka dhanka ahaa Urdun, laakiin mar dambe ayaa ay ku war heshay in ay seeftu xaggooda u soo jeedsatay.

***

Cali Salaama waxa uu bilaabay in uu xidhiidho la sameeyo dhinacyo kala duwan oo caalami ah, tusaale ahaan waxa uu xidhiidh sirdoon dhex maray CIA, Maraykanka. Dad badan ayaa illaa hadda su'aalo ka qaba sida ay u wadashaqayn karayeen isaga oo col la ah MOSSAD oo ah saaxiibka koowaad ee Maraykanka.

Salaama isaga oo kalsooni ka haysta hoggaamiyihii Falastiiniyiinta waxaa uu sabab u ahaa xidhiidhkii muddooyinkii dambe aadka u wanaagsanaaday ee Carafaat iyo Maraykanka. Waxa uu noqday gacanyaraha koowaad ee Carafaat, sidaa awgeed isaga ayaa la socday markii uu ka qaybgalayey fadhigii Qaramada Midoobey ee 974 kii, uu ka jeediyey khudbaddii taariikhiga ahayd. Waxa uu sidoo kale ku wehelinayey shir waaxyaha kala duwan ee ammaanka Maraykanka uu la yeeshay intii uu New York joogay, shirarkaas oo ay labada dhinac ku heshiiyeen in ay arrimaha sirdoonka ka wadashaqeeyaan.

Marar dambe ayaa uu Salaama si qarsoodi ah Maraykanka ugu noqnoqday, si uu masuuliyiinta ammaanka ula yeesho kulamo qarsoodi ahaa. Dad badan ayaa dhaliilsan sababta isaga oo muddo dheer wejigiisa aanay cidi aqoonin, uu ugu

AlmaZ Books
Telegram



badheedhay in uu is muujiyo oo uu raaco Carrafaat. Waxaa iyaduna suurtagal ah in uu Carafaat doonayey in uu Salaama ka maydho madowga ay Reer Galbeedka iyo Israa'iil magaciisa geliyeen.

Aqalka Cad waxa uu wadashaqaynta Salaama u wakiishay nin lagu magacaabo Bob Ames. Waxa uu ahaa agaasime waaxeedka CIA ee Bariga Dhexe, Carafaat isna waxa uu hawshan u soo magacowday Cali Salaama, isaga gacanyarana uga dhigay Mustafe Sayn oo ahaa arday Falastiini ahaa oo Maraykanka wax ka baranayey. Xidhiidh fiican ayaana u bilowday labada dhinac. Illaa ay wadashaqayntoodu ay gaadhay in George Bush kii weynaa oo markaas CIA madax ka ahaa uu Cali Salaama ku casuumay Maraykanka. Tallaabadaasi waxa ay aad uga cadhaysiisay Israa'iil, waxa aanay khatar gelisay wadashaqayntii CIA iyo MOSSAD.

Xeeldheereyaal amni ayaa illaa imika aaminsan in Israa'iil ay ka dambaysay qaraxii 1983 kii lala beegsaday safaaraddii Maraykanka ee Beyruut. Qaraxaas oo ay ku dhinteen 63 ruux oo 17 ka mid ahi ay ahaayeen saraakiil ka tirsanaa safaaradda iyo sirdoonka CIA iyo weliba askar Maraykan ah, isla markaana uu ku jiray Bob Ames. Qaraxan waxaa lagu eedeeyey islaamiyiin Shiico ah, laakiin waxa jira tuhunno kale Israa'iil la xidhiidhinaya. Maadama oo uu Bob Ames ahaa ninka isfahamsiiyey Maraykanka iyo Carafaat, Cali Salaamana saaxiibkiisa koowaad yahay.

Salaama waxa uu si gaar ah uga masuul noqday xidhiidhada iyo arrimaha ammaanka ee Yaasir Carafaat iyo guud ahaan ururka Falastiiniyiinta ee FATAX, isaga ayaana gacanta ku

AlmaZ Books
Telegram



hayey arrimaha hawlaha sirdoon ee dibadda oo dhan. Sidoo kale waxa uu si gaar ah u hayey faylasha dhammaan naftood-hurayaasha dibadda ka hawgalaya iyo qorshayaasha ay ku hawlgelayaan.

Waxaa se hubaal ah in ujeeddo kasta oo ay arrintani lahaydba, sawirka ka soo baxay uu ahaa mid cadaawaddii Israa'iil ay u qabtay Salaama sii kordhiyey, waxa aana Cali Salaama loo arkay in uu yahay cidda beddelaysa Carafaat haddii uu si uun xilka u banneeyo. Sidaas awgeed qof kastaa waa uu dareemi karayey in Israa'iil ay sida ugu suurtagalsan dhaqso ugaga takhallusi doonto.

## Afduubkii diyaaradda Beljam (Belgium)

Sannadkii 1972, Sabtembarta Madow waxa ay qaadday weeraarro tiro badan oo ay meelo kala duwan oo adduunka ah ka fulisay. Waxa uu ahaa qorshe ujeeddooyin badan leh oo ay Falastiiniyiintu doonayeen in ay kaga aargoostaan boqor Xuseen; in ay xanuunjiyaan Israa'iil, iyo midka ugu muhiimsan oo ahaa in ay indhaha dunida ku soo jeediyaan qaddiyaddooda. Inkasta oo in badan oo ka mid ahi aanay guulaysan, haddana waxa ay ahaayeen weerarro lahaa dabeecad muuqasho oo warbaahinta dunidu aad u qaadaadhigtay, nabarro badan oo xanuun lihina ay ka soo gaadheen dawladda Yuhuudda.

8^dii Mey 1972, waxa ay Falastiiniyiintu afduubeen diyaarad Boeing 707 ahayd oo ay lahayd shirkadda duulimaadyada Beljam ee Sabena. Waxa ay ku jirtay duulimaadkii tirsigiisu

AlmaZ Books
Telegram



ahaa 571 oo ay isaga gooshaysay magaalooyinka Vienna ee Usteri iyo Tel Aviv, Israa'iil. Hawlgalkan oo uu qorshishiisa soo dejiyey Cali Salaama waxaa fulinayey afar naftiihure oo ka tirsanaa kooxda Sabtembarta Madow. Afartooduba waxa ay ku guulaysteen in ay ka mid noqdaan rakaabka ay diyaaraddani qaadday. Waxa ay ahaayeen laba nin iyo laba dumar ah oo jilayey in ay yihiin lammaaneyaal uu qoys kastaa gaarkiisa u safrayey.

Waxa ay ku hubaysnaayeen laba baastooladood, laba bamboo gacmeed iyo laba suun oo qarxaya oo dhexda ugu xidhnaa laba ka mid ah; waxa aanay nasiib u heleen in ay hubkooda la galaan diyaaradda.

Markii ay diyaaraddu 20 daqiiqo oo keliya hawada ku jirtay kooxda afduubku waxa ay gudaha u galeen qolka diyaaradda laga hago. Waxa aanay kabtankii iyo kaaliyihiisii ku wargeliyeen in daqiiqaddaas laga bilaabo ay iyagu leeyihiin masuuliyadda diyaaradda iyo waxa saaranba, amarkooda oo keliyina uu ku shaqayn karo. Kabtanka oo lagu magacaabi jiray Levy ayaa aqbalay amarkan, sameecadda diyaaradda ayaa aanu rakaabkii oo tiradoodu 90 ruux ahayd uga sheegay in diyaaraddu afduuban tahay, "Marti ayaa diyaaradda inala saaran." Ereyadaas ayaa fure u ahaa wargelintiisa.

Nasiibwanaaggiisa se, waxa uu kooxda afduubka ka qariyey in diyaaradda ay saarantahay xaaskiisu, waxaa suurtogal ah in ay iyada ka dhigan lahaayeen hub ay isaga ku ciqaabaan. Afduubayaashu ma ay dalban in diyaaradda jidka duulimaadkeeda laga leexiyo, sidaas awgeed uma ay oollin hawl badan oo ah in garoonnada diyaaraddaha ee dalalka kale la xidhiidhaan si ay u fadhiistaan.

AlmaZ Books
Telegram



7:30[kii] fiidnimo ayaa ay diyaaraddu soo cagadhigatay gegida Ben Gurion, magaalada Tel Aviv. Isla markiiba Cali Daaha Abu Siniinna oo hoggaaminayey kooxda afduubka ayaa la wareegay isgaadhsiinta diyaaradda. Cali oo magaca afgarasho ee uu ku hawlgalayey ahaa Waliim Nasiim, waxa uu raadaarka gegida diyaaraddaha ku wargeliyey in 'kooxda Waliim Nasiim oo ka tirsan ururka Sabtembarta Madow ay diyaaradda iyagu gacanta ku hayaan.

Dalabkooda ku xidhan sii deynta diyaaradduna uu yahay in 10 saacadood gudahood lagu sii daayo 100 naftiihure oo ku jira xabsiyada Israa'iil. Haddii waqtigaas ay qabteen dalabkoodu ku fuli waayo, waxa uu ku hanjabay in ay qarxin doonaan diyaaradda iyo rakaabka saaranba'.

Cali Daaha waxa uu akhriyey magacyada boqolka naftiihure ee ay Sabtembarta Madow doonayso in ay dhaafsato diyaaradda iyo rakaabka saaran. Intaas kaddib, kooxda afduubku waxa ay ku dhaqaaqday in ay kala soocdo rakaabka diyaaradda; intii dhalashadoodu Yuhuudda ahayd gaar ayaa ay isugu ururiyaan diyaaradda qaybteeda dambe.

Markii waqti yari uu ka hadhsanyahay saacadihii ay qabsadeen, waxaa gegida diyaaraddaha yimid nin sheegay in uu wakiil ka yahay hay'adda Laanqayrta Cas ee caalamiga ah. Waxa uu codsaday in waqtiga loo kordhiyo, si ay haayaddiisu u hesho fursad ku filan oo ay masuuliyiinta Israa'iil cadaadis ku saarto in waxa ugu badan ee suurtagal ah la sameeyo si dadka maxaabiista ah loo badbaadiyo. Kooxda Waliim Nasiim waa ay aqbashay muddo kordhintaas. Intii waqtiga la kordhiyey lagu gudo jiray, waxaa gegida diyaaraddaha yimid wasiirka difaaca Israa'iil,

AlmaZ Books
Telegram



Moshe Dayan, taliyaha guud ee ciidamada oo ahaa David Alcaasaar iyo Shimcoon Beerees oo ahaa wasiirka isgaadhsiinta. Saddexda masuul waxa ay madaarka u yimaaddeen in ay wadaxaajood la galaan kooxda diyaaradda afduubka u haysata. Waxaa kale oo wadaxaajoodka qayb ka ahaa oo masuuliyiinta Yuhuudda la socday masuuliyiin laga soo diray dalka Beljam, maadaama oo diyaaradda dalkaas laga lahaa.

Waqti yar ka hor duhurnimadii ayaa wakiillo sheegay in ay ka socdaan Laanqayrta Cas ee caalamiga ahi ay dalbadeen in loo oggolaado in ay diyaaradda gudaha u galaan si ay xaalka rakaabka u indho'indheeyaan una gaadhsiiyaan cunto, biyo iyo dawo ciddii u baahan. Dalabkaas oo ay kooxda Waliim Nasiim aqbaleen. Markii ay gudaha galeen ee ay hawshoodii dhammaysteenna waa ay ka dageen diyaaradda. Dhinaca kalana waxaa socday wadaxaajood iyo gorgortan adag oo ay masuuliyiinta Israa'iil kula jireen afduubayaasha.

Afartii galabnimo ayaa baabuurta cuntada iyo biyaha siday ay diyaaradda soo gaadheen, kooxda afduubakana waxaa loo sheegay in sanduuqyada ay cuntadu ku jirto gudaha diyaaradda ay soo gelinayaan gaadhigacmeedyo loogu talogalay, iyo shaqaale ka socda Laanqayrta Cas ee caalamiga ah. Mar kale ayaa ay kooxda Waliim Nasiim aqabaleen dalabkaas. Markan warwar badan ma ay qabin oo wadaxaajoodka ay la lahaayeen masuuliyiinta Israa'iil ayaa meel fiican marayey, sidaas awgeed waxa ay filayeen in dalabkooda la fulin doono. Waa se lagu wacad furay.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Albaabkii diyaaradda ee ay fureenba, waxaa gudaha soo galay koox dharka shaqaalaha maqaaxiyaha cuntada xidhnaa, balse ahaa ciidamada sida gaarka ah u tababaran. Gudaha diyaaradda ayaa aanay isku qabsadeen kooxdan iyo afduubayaashii oo aan qorshaha ku darsan in tan oo kale ku dhici doonto. Inkasta oo uu hawlgalkani milateri ahaan u fashilmay, isla markaana dadkii ku lug lahaa aanay badbaadin, haddana kooxda Sabtembarta Madow warmurtiyeed ay soo saareen markii hawlgalka afduubku soo gabagabooday waxa ay u dhigeen qaab kale oo ay ugu yaraan niyadda ugu dhisayaan naftood-hurayaasha ururka.

Warmurtiyeedkaas ka soo baxay ururka Sabtembarta Madow ee hawlgalkan ka hadlayey waxyaabihii ay ku sababeeyeen in uu iyaga guul u yahay waxaa ka mid ahaa, "Waxaa noo muhiim ah in aanu sheegno xaqiiqooyinkan hoos ku taxan:

Markii aannu qorshaynay in aanu diyaaraddan afduubno, oo weliba aanu fadhiisinno Tel Aviv, qorshahayagu waxa uu ahaa in uu hawlgalku noqdo carin iyo santaabasho ka dhacday gudaha dhulka Falastiiniyiinta ee ay Yuhuuddu haysato, waayo waa ay noo fududayd in aannu diyaaradda geyno dal kale oo dalalka gobolka ka mid ah.

Dagaalku waa dagaal u dhexeeya doonista shacabka Falastiin oo ay metelayaan dagaalyahannada kacaanka Falastiiniyiinta iyo doonista Yuhuudda oo ay hoggaaminayso Sahyuuniyadda khiyaamada badan ee dhulka boobtay, doonistayadiina waxa ay ku guulaysatay in aannu wasiirkii difaaca ee cadowga iyo masuuliyiintii sare keenno gegida



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



dayuuradaha, muddo labaatan saac ka badanna ay iyaga oo dullaysan garoonka u joogaan shaqo iyo hawl dhibaato badani ka soo gaadhay.

Qorshahayaga fashilaaddiisa waxaa sabab u ahaa goldaloollooyin dhinacayaga ah oo soo dhexgalay, taas oo ku timid shucuurta bani aadamnimo ee dagaalyahannada diyaaradda saarnaa, kuwaas oo inta ay dadnimada qiimeeyeen oggolaaday in cunto iyo biyo loo keeno dadkii rakaabka ahaa. Laakiin waa dersi aannu barannay oo mararka soo socdaba goldaloolladaas oo kale ma iman doonaan.

Hay'adda Laanqayrta Cas ee caalamiga ah ayaa ka qayb qaadatay khiyaamada, waayo halkii ay shaqadoodu ka ahayd in ay iyagu maamulaan oo ay si buuxda u kormeeraan hawsha cunto gelinta diyaaradda, isla markaana laga rabay in ay hubiyaan shakhsiyadda shaqaalaha ay diyaaradda soo saarayaan, si aanay ugu dhex dhuuman ciidamo hubaysan, waxa ay qayb ka noqdeen mu'aamaraddii. Sidaa awgeed, hadda laga bilaabo, Laanqayrta Cas ee caalamiga ah laanta fadhigeedu yahay magaalada Qudus, waxa aannu ku tirinaynaa in ay Israa'iil shuraako kula tahay dhagarta.

Waxaa nala soo xidhiidhay masuuliyiin ka tirsan dawladda Beljam, oo qaarkood ay ka qaybgaleen wadaxaajoodkii dhex marayey kooxda Waliim Nasiim iyo Israa'iiliyiinta, waxa aanay noo xaqiijiyeen in shuruudda aannu qabsannay la fulinayo; laakiin halkii laga sugayey in ay ka qaybgalaan fududaynta iyo suurtogelinta fulinta shuruuddaas, waxa ay ka qaybgaleen khiyaamadii oo ay ka shaqeeyeen in ay guulaysato. Sidaa awgeed, xukuumadda Beljam waxa aanu u aragnaa in ay

iyaduna qayb aasaasi ah ka tahay dhagarta, hadda kaddibna halkaas ayaa aannu kaga talagelaynaa, kulana macaamilaynaa.

Halyeeyadayada kooxda Waliim waxa ay rumeeyeen in dareenka bani aadamnimo ku dheeryahay, markii ay aqbaleen in ay waqtiga kordhiyaan, iyo markii ay oggolaadeen in cunto iyo biyo loo geeyo dadka diyaaradda saaran, si loo dhawro nolosha dadka rakaabka ah.

Ugu dambayntii halgameyaashayadu waxa ay diideen in ay isu dhiibaan ciidamadii cadowga, saraakiil iyo askar badanna waxa ay u geysteen khasaare dhimasho iyo dhaawacba leh.

Dadka hawlgalka fuliyey waxa ay ahaayeen, Cali Daaha oo la dilay, Theresa Halsa oo la xidhay, Riima Ciisa oo la xidhay iyo Cabdara'uuf Aladrash oo la dilay".

## Theresa Halsa oo ka sheekaysay afduubka

Qisada diyaaraddan ay Falastiiniyiintu afduubeen waxa ay noqotay mawduuc siyaabo badan wax looga yidhaahdo, labada dhinac ee Falastiiniyiinta iyo Israa'iiliyiintana mid kastaa ku faano isaga oo ku eegaya halbeeg u gaar ahna ku doodo in uu hawlgalkaasi dhinaciisa guul u ahaa. Dad kale oo badan oo dunida kale ah ayaa iyaguna siyaabo kala duwan wax uga qoray.

Saxafiga Stuart Jeffries ayaa Nofamber 2015, warbixin aad u xiise badan ka sameeyey qisadan, gaar ahaan sida ay uga warrantay Theresa Halsah. Warbixintaas oo uu magac uga dhigay, 'Afar Afduube iyo Saddex Raysalwasaare: Qisada yaabka leh ee Sabena duulimaadkeedii 571'.

AlmaZ Books
Telegram



Isaga oo ku halqabsanaya in diyaaraddan hawlgalkii lagu soo furtay ay ka qaybgaleen saddex nin oo marar dambe raysalwasaarayaal ka noqday Israa'iil; waa Shimcoon Beerees oo markaas ahaa wasiirka gaadiidka iyo Isgaadhsiinta, laakiin mar dambe noqday Raysalwasaare iyo haddana markii dambe Madaxweynaha Israa'iil, Ehud Barak oo watay kooxda kamaandoosta ah ee gashay diyaaradda oo isna marar dambe qabtay xilal wasiirnimo, aakhirkiina loo doortay raysalwasaaraha Israa'iil, iyo Benyaamiin Netenyaahu oo isagu ahaa sarkaal ka tirsan kamaandoosta gashay diyaaradda, markii dambana noqday raysalwasaaraha Israa'iil oo uu muddo dheer ahaa.

Warbixintaas waxa uu Stuart ku xusay in Theresa Halsa ay 18 sanno jir ahayd markii ay hawlgalka ka qaybgashay, waxa aanu is weydiinayaa, "Toloow, iyada oo da'daas ah in ay dhimato diyaar miyaa ay u ahayd?" Isaga oo jawaabta ka soo xiganaya Theresa qudheeda oo joogta magaalada Cammaan ee dalka Urdun waxa uu qoray, "Haa, Dabcan. Qof kasta oo hawlgalka ku lug lahaa waxa uu diyaar u ahaa in uu dhinto."

Halsa oo markan uu waraysanayey (2015) 61 gu' nolosheedu tirsanaysay, ayaa uu saxafigani warbixintiisa ku yidhi, "Theresa Halsa waa qofka keliya ee ka nool afartii afduube ee ka tirsanaa kooxda Sabtembarta Madow. Hadallada ay Theresa Halsa ku tidhi warfidiyeenkan, sida uu ku sheegay warbixintiisan uu ku daabacay wargeyska The Guardian, waxaa ka mid ahaa, "Waxa ay nagu sheegeen argagaxiso, laakiin ma aanu ahayn. Argagaxisada runta ahi waxa ay ahayd Israa'iiliyiinta dadka Falastiiniyiinta ah dibadda uga qubay dhulkoodii."

AlmaZ Books
Telegram



Warfidiyeenka Stuart waxa uu sheegay in sababta ay Theresa Halsa ugu warrantay ay tahay iyada oo doonaysay in ay ka jawaabto xogta uu sheegayo filimka Sabena Hijacking- My Version oo lagu soo bandhigay carwada filimada ee Ingiriiska. Hal-abuurka filimkaas oo Yuhuudi ahaa ayaa ku andacooday in xogta filimkiisu ay tahay mid labada dhinac ee hawshani dhex martayba uu ka helay.

30 saacadood ayaa Theresa Halsa iyo saaxiibbadeed ay afduub u haysteen 90 ruux oo rakaab ahaa iyo 10 shaqaalaha diyaaradda ah. "Waxa aan ku fikirayey in ay askarta Israa'iil i toogan doonaan. Ama aannu diyaradda dusheeda isku qarxin doonno haddii aan dalabkayaga la fulin oo aan halkaas ku dhiman doonno. Waxa aan doonayey in aan dhinto, waayo waxa aan doonayey in aan reer Yurub iyo Maraykanka tuso wax ay ku xaqiiqsadaan in ay jiraan dad Falastiiniyiin ah oo si xaqdarro ah ay Yuhuuddu ula dhaqantay" ayaa ay tidhi Theresa Halsa.

"Toloow, sidee ay Israa'iiliyaddan Carabiyadda ah ee kalkaalisada caafimaad ahayd u noqotay afduube?" Su'aashaas ayaa uu Stuart is weydiiyey isaga oo talefanka kala hadlaya Theresa Halsa oo joogta gurigeeda magaalada Cummaan. Waxa ay ku jawaabtay, "Waa sheeko aad u dheer. Waa ay adag tahay in aan talefan kaga sheekeeyo iyada oo weliba afka aan ku hadlayo ee Ingiriisiga ah aanan ku fiicnayn." Laakiin Theresa waa ay iskudayday in ay waxoogaa ka tidhaahdo sheekadaa. Sida ay sheegtay, Theresa Halsa waxa ay ka dhalatay qoys Kiristaanka Falastiiniyiinta ka soo jeeda, waxa aanay waxbarashadeeda ku dhammaysatay dugsi ku yaalla Israa'iil

AlmaZ Books
Telegram



oo ay jinsiyaddeeda haysatay. Sababta ay u xiisaysay ku biirista ururka Xoraynta Falastiin ee PLO waxa ay ahayd cadho ay ka qaadday cadaawadda sii badanaysay ee ay Yuhuuddu u qabtay Carabta Israa'iiliyiinta ah iyo kuwa kalaba.

Lix bilood oo keliya ka hor markii ay afduubka ka qaybgalaysay ayaa ay ka tallowday xadka Israa'iil iyo Lubnaan, waxa aanay ku biirtay dugsi tababar oo kooxaha wax-iska-caabbintu ku lahaayeen duleedka magaalada Beyruut ee caasimadda Lubnaan. Waxaa la baray sida hubka fudud loo isticmaalo iyo qarxinta suumamka iyo bambo gacmeedka.

Horraantii 1972, iyada iyo saddex kale oo Falastiiniyiin ah oo ka tirsanaa ururka Sabtembarta Madow ayuu ururku u doortay in ay fuliyaan hawlgalkan afduubka diyaaradda Sabena. Arrinta xiisaha leh ee ay Theresa Halsa sheegtay ayaa ah in iyada iyo saddexda ruux ee hawlgalka la fulinayey la is baray maalintii ka horreysay dharaartii hawsha afduubka diyaaradda, iyada oo aanu midkoodna saddexda kale markaas ka hor aqoon u lahayn, waxa aana loo sheegay in afartooda laba kasta oo wiil iyo gabadh ahi ay dhinacooda u jilayaan in ay yihiin lammanae is qaba.

Waxa ay ka soo duuleen Lubnaan oo ay baasaboorro been-abuur ah ku tageen magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga, halkaas oo markii ay tageen haddana laga siiyey baasaboorro been-abuur ah oo Talyaani ah, kaddibna waxa ay u duuleen magaalada Frankfurt ee dalka Jarmalka oo ay uga sii duuleen magaalada Brussels ee dalka Beljam. Markii ay dalkan tageen ayaa koox ku sugnayd oo isla sirdoonka Sabtembarta Madow ka tirsani ay afartoodaba siiyeen baasaboorro Israa'iili ah

oo iyaguna been-abuur ah. Halkaas ayaa aanay ka bilaabeen tallaabadii koowaad ee safarkooda Israa'iil.

Sidii ku talogalku ahaa, diyaaraddu markii ay cago dhigatayba waxa ay afduubayaashu masuuliyiinta raadaarka ku wargeliyeen dalabkooda madaxfurashada ah. Si badheedh ah ayaa ay Israa'iiliyiintu wadaxaajoodka u dheereeyeen. Waxa ay iska yeel-yeelayeen in ay aqbaleen dalabkii afduubayaasha, si ay fursad ugu helaan diyaarinta 16 ka mid ah kamaandoosta oo ay ka soo xuleen ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee Sayeret Maktal oo marka horeba loogu talogalay in ay xoog ku geli karaan diyaaraddaha la afduubo. Afar iyo labaatan saacadood markii diyaaraddu ay fadhiday iyada oo afduuban ayaa uu bilowday hawlgalkan Israa'iil oo ay ugu magacdartay Istope. Dhammaan kamaandoosta loo qorsheeyey in ay diyaaradda gudaha u galaan waxa ay xidhnaayeen dharka shaqaale hoosaadka, si ay afduubayaasha u moodsiiyaan hawlwadeenno cuntada u qaybinaya rakaabka.

Waxaa uu saxafigu weydiiyey Marwo Theresa Halsa, 'Bal in ay hadda ka qoomamoonayso falkaas ay ka qayb qaadatay' maadaama oo aynu joogno xilli uu is beddelay wejiga dunida ee dhinaca ammaanku, aragti adag oo midaysanna lagaga soo horjeedo ficillada noocaas ah. Theresa waxa ay ku jawaabtay, "Haa, waa aan ka qoomamooda, oo waxa aan isku canaantaa sababta aannu diyaaraddaba u qarxin weynay."

Warfidiyeenka oo sida muuqata u qaadan waayey jawaabta ayaa ku celiyey, "Waayo?!" Waxa ay ugu jawaabtay, "Reer Yurub iyo Maraykan arrimaha Israa'iil labada indhood ayaa ay ku eegaan, laakiin marka ay dadka Carabta ah noqoto, il keliya ayaa ay ku eegaan" oo ay uga gol leedahay in aanay

Carabta arrimahooda u danayn sida ay u daneeyaan arrimaha Yuhuudda.

Halsa waxaa lagu xukumay in mid kasta oo la haystayaasha ah ay ku mutaysatay xabsi daayin, taas oo markii sannado loo beddelay noqotay 220 sanno oo xabsi ah. "Xukunka dheer ee la nagu riday waxa uu maamulka Israa'iil uga dan lahaa in uu niyaddayada dilo oo uu na hammi jebiyo, in uu shakhsiyaddayada burburiyo, iyo in uu burburiyo ruuxda dadka Falastiiniyiinta ah. Laakiin uma ay suurtogelin" ayaa ay Theresa Halsa ku tidhi saxafiga waraysanayey.

Nofambar 1983 kii, maxaabiis ay is dhaafsadeen ururka xoraynta Falastiin ee Sabtembarta Madow iyo Israa'iil, kaddib dagaalkii koowaad ee Lubnaan oo dhacay 1982, ayaa Theresa Halsa ay ka mid ahayd maxaabiista ku jirtay liiska Falastiiniyiinta ee la soo daayey. "Anigu ma aan dooran in aan Israa'iil dibaddeeda ku noolaado, balse waa la igu qasbay" ayaa ay tidhi. Laakiin waxa ay sheegtay in ay Urdun ku haysato nolol farxad leh.



AlmaZ Books
Telegram



## Afduubkii diyaaradda El-Caal

Hawlgallada ay fulinaysay Sabtembarta Madow, marba marka ka dambaysa waa ay sii kululaanayeen, dulqaadka Israa'iilna waa uu sii yaraanayey. Sida oo kalana waxa ay dhiirrigelin u noqdeen ururradii kale ee Falastiiniyiinta ahaa oo iyaguna halgankoodii ku soo daray in ay qaadaan tallaabooyin la mid ah kuwan Sabtembarta Madow.

Waxa aynu xusi karnaa kooxdii caanka ahayd ee Jabhadda Xoraynta Falastiin oo iyaguna sannadkii 1968, afduubay diyaarad ay leedahay shirkadda duulimaadyada Israa'iil ee El-Caal (El Al) oo ah shirkadda ugu weyn, dawladduna saami ku leedahay. Afduubkan oo ahaa kii ugu horreeyey ee abid lagula kaco shirkadda El-Caal tan iyo markii la aasaasay dabayaaqadii sannadkii 1948, maadaama oo ay tahay shirkad si aad u weyn loo ilaaliyo ammaankeeda, ayaa nabar ku noqday suuqa ganacsi ee shirkadda iyo guud ahaanba dawladda Israa'iil.

Axmed Jibriil oo ah Falastiini sannadkii 1938 kii ku dhashay gudaha dhulka hadda Israa'iil loo yaqaanno, laakiin sannadkii 1948 kii markii Israa'iil dhisantay isaga iyo dadkii kale ee Carbeedba qasab dhulkooda lagaga saaray, ayaa cadho ku gaamurtay tan iyo toban jirkiisii waxa uu sannadkii 1968 oo uu 30 sanno jiray dejiyey qorshe yaab leh oo lagu fulinayey afduubka mid ka mid ah diyaaraddaha xammuulka ee Israa'iil, waxa aanu dalka Talyaaniga u diray koox si aad ah u diyaarsan oo hawlgalka fulisa.

Arooryo hore oo ahayd 23kii Julay 1968, ayaa duulimaadkii 426 ee shirkadda El-Caal oo rakaab dhan 35 ruux kala duulaysay gegida diyaaraddaha ee Rooma, Talyaaniga.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa rakaabkeeda ka mid ahaa saddex nin oo leh muuqaalka dalalka Bariga Dhexe laakiin aan Yuhuud ahayn. Diyaaradda oo ku jihaysnayd gegida diyaaraddaha ee Ben Gurion oo ku yaalla duleedka Tel Aviv, rakaabka saaran waxa ay u badnaayeen dad xilliga xagaaga tegeyey Israa'iil iyo toban ruux oo ahaa Yuhuud dib ugu noqonayey Israa'iil. Marka laga reebo saddexda nin oo ahaa Falastiiniyiin xabsiga Israa'iil laga soo daayey oo wacad ay xabsiga ku soo wadagaleen ahaa, in ay mar u wadashahiidaan ciiddooda, hawlgal nafhurid ahna isku raacaan.

Sida ay warar kale sheegayaanna waxaa raggan isna ku jiray mid ka mid ah ragga diyaaraddii hore ee Beljam ka u afduubay Israa'iil, dadkii rakaabka ahaa ee diyaaradda saarnaa oo qaarkood mar dambe warrameenna afduubayaasha tiradooda illaa shan nin ayaa ay gaadhsiiyeen. Mid ka mid ka mid ah afduubayaasha ayaa markii ay diyaaraddu hawada gashay inta uu furay albaabka qolka diyaaradda laga hago ka sooca qaybta rakaab, baastooladdiisa madaxa ka saaray duuliyaha, kuna amray in uu khadkiisa u beddelo dalka Aljeeriya ee woqooyiga Afrika.

Waxaa mar dambe soo baxday in uu baastooladda xaggeeda dambe si xoog ah xoog madaxa ugaga dhuftay duuliyaha oo yara madax adaygay, sidaas awgeed uu soo gaadhay dhaawac. Labadii afduube ee kalana waxa ay la soo kala baxeen baastoolad iyo bambo gacmeedyo ay rakaabka tuseen si aanu midkoodna isugu dayin in uu ku kaco tallaabo ka dhan ah doonistooda, kaddib waxa ay rakaabka codbaahiyaha kaogeysiiyeen in diyaaraddu iyaga taladooda ku hoos jirto, hadda kaddib magaceeduna noqon doono diyaaradda xoraynta Falastiin.

AlmaZ Books
Telegram



Diyaaraddii waxaa la fadhiisiyey gegida diyaaraddaha ee magaalada Aljeris, caasimadda Aljeeriya. Maalintii labaad waxaa la sii daayey dhammaan dadkii diyaaradda saarnaa ee dhalashadoodu aanay Yuhuudda ahayn, waxa aana loo duuliyey dalka Faransiiska si ay dalalkooda u kala tagaan. Waxaa gudaha diyaaradda ku soo hadhay 12 rakaab ahaa iyo shaqaalaha diyaaradda oo ahaa 10, dhammaantoodna Yuhuud ahaa. Dhowr maalmood kaddib haddana waxa ay afduubayaashu sii daayeen toban rakaabka ka mid ahaa oo isugu jiray dumar iyo carruur.

Kooxda afduubka oo ka tirsanayd jabhadda xoraynta Falastiin ee markaas fadhigeedu Urdun ahaa waxa ay siteen baasaboorro Iiraani iyo Hindi ah oo been-abuura. Waxa ay ahaayeen rag si aad u taxaddar badan loo soo xulay, iyada oo la eegayo waayoaragnimadooda dhinaca duulimaadyada, waxa aana tababar fiican soo siiyey Axmed Jibriil oo ahaa duuliye, darajada Kornayl ka gaadhay ciidamada, isla markaana ahaa macallin ku xeel dheer dagaalka gacanta ee kaarateega loo yaqaanno oo uu lahaa dugsi uu dadka ku baro.

Shan toddobaad oo ismariwaa ahaa kaddib ugu dambayntii waxaa afduubkii lagu soo afjaray heshiis ahaa in lahaystayaasha hadhay oo toban ruux ahaa iyo diyaaradda la sii daayo, Israa'iilna ay xabsiyadeeda ka sii deyso 16 ka mid ahaa halgamaagii magaca lahaa ee Falastiiniyiinta oo xukunno ku dhacay oo muddo dheer ahaa ugu jiray xabsiyada Israa'iil. Afduubkii afartanka maalmood ahaa ayaa lagu tilmaamay kii abid ugu muddada dheeraa ee diyaarad rayid ah lagu haysto.

AlmaZ Books
Telegram



## Qarxintii Haamaha Kaydka Shidaalka Ee Jarmalka

Hawlgalladii Sabtembarta Madow ay ku hayeen Israa'iil waa ay sii socdeen. Ogosto shanteedii hawlgal ay iska kaashadeen Sabtembarta Madow iyo jabhadda shacbiga ah ee xorayta Falastiin waxa ay ku qarxiyeen lix ka mid ah haamaha kaydka shidaalka, oo ku yaallay dalka Jarmalka. Shirkaddan Jarmalka ah oo ay Falastiiniyiintu ku eedaynayeen in ay Israa'iil gacansaar la leedahay, waxaa weerarkan ka soo gaadhay khasaare u dhigmayey 7 Milyan oo doolarka Maraykanka ah.

## Sabtembar

11$^{kii}$ Sabtembar waxaa magaalada Brussels ee Beljam, lagu dhaawacay sarkaal sare oo ka tirsanaa waaxda sirdoonka ee safaaradda Israa'iil ku leedahay dalkaas.

Duruusta sirdoonka la siiyo waxaa ugu muhiimsan, sida ugu habboon ee ay tahay in uu ugu horreynba naftiisa u ilaaliyo.

Waxa uu ka taxaddarayaa in la fahmo shaqadiisa, waxa aanu ilaalinayaa noloshiisa oo uu mar kasta ku talogalsan yahay in uu jiro cadow warkiisa helay oo ku soo maqan, laakiin haddana uu u dhaqmo qaab leh muuqaal dayacan, sida meel aan laga filayn ama u qalmin in uu tago iyo in uu u noolaado sida ruux aanay cidi ku soo maqnayn, si aanu u shaki gelin dadka aan ogeyn warkiisa ee uu la macaamilayo. Waa isdiiddooyin ay qasab tahay in uu iswaafajiyo basaas kasta oo xiisaynaya in uu sii noolaado.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa basaaska la baraa in uu yaqaanno sida uu u dooranayo meesha uu ballanta ku gelayo, sida haddii uu meel dadweynuhu isugu yimaaddaan fadhiisanayo barta uu ka fadhiisanayo iyo muhiimadda ay kala leeyihiin hadba jihada uu wejigiisa u jeedinayaa. Haddiiba ay dhacdo in basaasku ruux uu xog ka doonayo meel ugu yimaaddo, sida huteel uu kula ballamay, waxaa muhiim ah in waqtiga ballanta ka hor uu cid u diro goobta ama isagu si aan la dareemayn u indho-indheeyo, si uu u hubiyo in cidi ugu sii tashanayso. Waxaa kale oo muhiim ah in goobta ballanta aanu kaga soo horreyn qofka uu la ballansan yahay oo ay tahay in ay mar wadayimaaddaan.

Waxaa maskaxda basaas kasta lagu shubay dareen ah marka ay qol, huteel ama meel kale oo ay ballan ku leeyihiin isaga iyo cid kale ay gelayaan, in laga rabo in qofka la socdaa cagta hore yeesho oo uu albaabka hor galo, isaga oo aan isna ka hadhayn ee cagta cagta u saaraya. Inta uu goobta fadhiyo xarakaad kasta iyo dareen kasta oo qofka ay wadafadhiyaan bixinayaa waxa ay leedahay xeerar ay tahay in uu ku eego, haddii qalad aad u yari dhaco, ama uu la socon waayo dareenka qofka la fadhiyana, waxa ay u dhowdahay in la dilo.

Haddii qofka uu basaasku huteelka kula ballansanaa kaco oo uu u sheego in uu ku soo noqonayo, sida in uu shay soo iibsanayo ama xitaa xamaamka gelayo, waxaa basaaska loo sheegaa in markaba uu dareemo in xaaladdiisa ammaanku meel daran marayso oo uu bartilmaameed yahay, in uu goobta sii fadhiyaana ay tahay nacasnimada ugu weyn ee dil ku hoggaamin karta.

AlmaZ Books
Telegram



Ugu yaraan waa in uu isaguna dhinac kale u kacaa, sida ruux qudhiisu dan kale yeeshay. Kolka la soo ururiyana, qalad aad u yar oo uu basaasku xaaladahan oo kale sameeyaa waxa uu sabab u noqon karaa dhimashadiisa.

Ma aha hadallo qurux badan iyo duruus goobaha tababarka sirdoonka oo keliya lagaga sheekeeyo, ee iyada oo ficil ah waxaa innagaga filan qisada Tasduuq Cawfer oo ahaa basaas ka tirsan MOSSAD. Waxa uu sheegan jiray diblumaasi ka tirsan safaaradda Israa'iil ee Beljam, laakiin shaqadiisa ugu weyni waxa ay ahayd in uu la socdo dhaqdhaqaaqyada ka dhanka ah Israa'iil ee Falastiiniyiintu ay xilligaas sida aadka ah uga wadday dalalka Yurub, gaar ahaan kooxda Sabtembarta Madow oo xilligaas Yurub ka fulin jirtay hawlgallo tiro badan oo Yuhuudda ka dhan ah.

Tasduuq waxaa ku xidhnaa basaasiin uga soo warranta dalal kala duwan oo Yurub ah iyo xitaa kuwo ku xeeran gudaha xarumaha kala duwan ee kooxaha Falastiiniyiintu ku lahaayeen Lubnaan. Waxaa jiray basaasiin badan oo dhalasho ahaan Carab ah oo Tasduuq uga soo warrami jirtay dhaqdhaqaaqyada Falastiiniyiinta, kuwaas oo qorshayaasha kooxda Sabtembarta Madow ugu horreeyaan.

Tasduuq 28kii Sabtembar ayaa uu huteel ku yaalla magaalada Brussels, waxa uu ballan kula lahaa wiil Carbeed oo ahaa basaas warka u keena. Dhowr daqiiqo ayaa ay huteelka wadafadhiyeen. Markii cabbaar la is waraystay ayaa basaaskii Carabka ahaa kacay. Waxa uu Tasduuq u sheegay in uu daqiiqado yar gudahood ku soo noqonayo.

AlmaZ Books
Telegram

Waxa uu soo noqday Tasduuq oo halkiisii iska fadhiya, inta uu baastoolad la soo baxay ayaa uu rasaas madaxa kaga dhuftay. Tasduuq waxaa soo gaadhay dhaawac weyn laakiin aanu u dhiman. Falkan waxaa markiiba sheegtay kooxda Sabtembarta Madow, Israa'iil qudheeduna waa ay ku eedaysay kooxdan.

Isla bishaas dabayaaqaadeedii ayaa ay ahayd markii Sabtembarta Madow ay Yurub ka bilowday hawlgal ay dhambaallo qarxaya u kala direen Israa'iiliyiintii ka hawlgalayey safaaradaha iyo danaha kale ee ay Yuhuuddu Yurub ku lahayd. Dhambaalladaasi waxa ay Yuhuudda iyo ciddii ay isku danaha ahaayeenba ku abuureen cabsi aad u badan iyo argagax joogto ah. Waxa aanay Cali Salaama ka dhigeen shakhsi heerka khatartiisa ay kor u qaadeen dhammaan sirdoonnada adduunka, gaar ahaan MOSSAD. Waxa aanay kalliftay hawlgal ballaadhan oo ay Israa'iil kaga jawaabtay.

Warqaha la isugu diro boosta oo xilligaas aanay tiknoolajiyaddu sida hadda u horumarin aad loo adeegsan jiray, ayaa ay kooxda Salaama ku dhex ridi jireen walax rabadh khafiifa ah oo aan dusha laga dareemayn iyo maaddooyin budo ah oo qarax iyo gubasho aan awood yarayn keenaya marka bushqadda la furo. Waxa ay boosta ugu diri jireen jireen cinwaannada safaaradaha Israa'iil ay ku lahayd dunida. Dhambaalladan badankoodu waxa ay dusha sare ku lahaayeen astaanta boosta ee waraaqaha laga diro dalka Holland, waxa aana ku qornaa qoraallo iyo calaamado muujinaya in laga diray magaalada Amsterdam. Haddaba waraaqahaas mid ka mid ah ayaa 19^kii Sabtembar loo diray xoghayaha beeraha ee safaaradda Israa'iil ku lahayd London.

Warqaddu waxa ay xoghaye Dr. Ami Schechori gaadhay xilli uu joogay xafiiskiisa, waxa aana wehelinayey Theodore Kaddar oo dhowaanahaas laga diray Israa'iil si uu u beddelo Dr. Ami oo shaqadu ka dhammaatay. Dr. Ami marka ay warqaddu gaadhay waxa uu sugayey bushqad uu ku jiro siidh uu dalbaday oo ahaa ubaxa Holland oo uu doonayey in uu ku beerto gurigiisa.

Dr. Ami markii uu warqadda furayba waxaa ka hor yimi qarax noloshiisa galaaftay, kaddib markii falliidh weyn oo ka dillaacay miiskiisa qaraxu ka dul dhacay inta uu saableyda ka gudbay uu wadnaha ka galay. Sidoo kalana waxa uu qaraxu dhaawac gaadhsiiyey Theodor Kaddar oo sida oo kalana uu muddo dareenka maqalka ka kaxeeyey.

Shilkan oo aad u damqay Israa'iil baadhitaankiisu waxa uu sabab u noqday in la helo silsilad dheer oo ahaa waraaqo kuwan la mid ah oo kooxda Cali Salaama qorshaysay in ay Yuhuud xilal sare haya ku disho.

Afar iyo lixdan dhambaal oo qarxaya ayaa la qabtay intii aanay gaadhin dadyowgii loogu talogalay. Siddeed ka mid ah dhambaalladaas oo isla safaaradda London loo soo diray waxaa la qabtay maalintan uu Dr. Ami u dhintay qaraxa, oo afar ka mid ahi waxa ay ku socdeen masuuliyiin kala duwan oo safaaraddan ka tirsan, halka afarna ay ku wadasocdeen danjiraha safaaradda Ingiriiska ee Israa'iil Michael Comay. Waraaqaha kale ee la qabtay waxa ay ku socdeen safaarado iyo dhismayaal dawladeed oo dunida oo dhan ku filqan, waxa aana ka mid ahaa meelaha ay ku yaallaan Kanada, Baariis, Feyeenna, Buruselis, New York, Tel Afiif, iyo magaalada Quddus ee Yuhuuddu ay ka taliso.

AlmaZ Books
Telegram



Hawlgalkaas sirdoon ee Israa'iil ay ku fashilisay dhambaallada qarxayey soo ma ay afjarin sii socoshadii weerarrada noocan ah; tusaale ahaan Sabtembar sagaal iyo tobankeedii oo maalmo yar uun ka dambaysay dilkii Dr. Ami, afar dhambaallo qarxaya ah ayaa loo soo diray isla safaaradda Israa'iil ee London. Waxa ay ku socdeen afar ka mid ah shaqaalaha safaaradda, laakiin intii aanay soo gaadhin ayaa lagu qabtay xafiiska boosta ee London.

Mid ka mid ah oo ay bilaysku si ammaan ah u fureenna waxa ay gudaheeda ugu tageen farriin kooban oo si cad u sheegaysa in ay ka timid kooxda Sabtembarta Madow. Isla maalintaas waxaa laba warqadood oo kale loo diray safaaradda Israa'iil ay ku leedahay Baariis, maalintii xigtay oo ahayd 20[kii] Sabtembarna, siddeed warqadood oo kuwa qarxaya ah ayaa ay kooxda Cali Salaama u direen masuuliyiin Israa'iiliyiin ah oo London joogay, laakiin intii aanay gaadhin raggan loogu talogalay ayaa uu bilaysku qabtay. Kooxda Salaama isla maalintan waxa ay lix ka mid ah waraaqahaas qarxaya u direen masuuliyiin Yuhuud ah oo hawlo kala duwan u joogay magaalada Ottowa ee Kanada, halka warqad kalana ay u direen qunusulkii guud ee Israa'iil u joogay magaalada Montriyal.

Waxa aad mooddaa bishaas in ay kooxda Cali Salaama si kutalagal ah ula eegteen weerarradooda ahaa waraaqaha qarxaya. Bishaas labaatankeedii waxa ay saddex dhambaal u u direen saraakiishii Israa'iil ee ku sugnaa New York, Maraykanka, gaar ahaan Yuusef Tekoah oo ahaa danjiraha Israa'iil u fadhiya Qaramada Midoobey, iyo Jacob Barrone iyo

AlmaZ Books
Telegram



Uri Gordon oo ka mid ahaa ergada joogtada ah ee Israa'iil u fadhiya Qaramada Midoobey. Waraaqahan dhammaantood waxaa qabatay boosta iyaga oo aan weli gaadhin halkii loogu talogalay.

Maalintan 20[ka] Sabtembar waxaa kale oo ay kooxda Cali Salaama waraaqo qarxaya u direen masuuliyiin Israa'iiliyiin ah oo kala joogay meelo ay ka mid ahaayeen Baraasels oo ah xarunta dalka Beljam, Tel Aviv, Quddus oo ay warqaddu ku qaraxday xarunta boosta ee laga gudbin lahaa, kuna dhaawacday nin shaqaalaha ka mid ahaa iyo Ustareeliya oo maalintan shan warqadood loo diray masuuliyiin Israa'iil u joogay dalkaas.

Maalintii xigtay ee 21[kii] Sabtembar, kooxda Sabtembarta Madow waxaa farriin digniin ah u dirtay shirkad Maraykan ah oo xarunteedu tahay magaalada Baranquilla ee gobolka Kolombiya. 1:35 habeennimo ayaa ciidamada ammaanka ee shirkadda ay is heleen nin aan la aqoonsan oo xarunta u soo dusaya, xaalad degdeg ah ayaana la geliyey xarumaha shirkadda. Laakiin markii dambe masuuliyiinta Maraykanku waxa ay sheegeen in ay ahayd digniin been ah.

Maalintan in ka badan 20 warqadood oo kuwa qarxaya ah ayaa laga helay xafiiska boosta ee magaalada Quddus, safaaradda Israa'iil ay ku leedahay magaalada Kinshaasa ee dalka Sa'iir, safaaradda Israa'iil ee magaalada Buenos Aires ee dalka Arjentiina iyo safaaradda Israa'iil ee dalka Kamboodiya.

AlmaZ Books
Telegram



23[kii] Sabtembar ciidamada ammaanka ee Cummaan, dalka Urdun, ayaa qabtay afar waraaqood oo kuwa qarxaya ah oo laga soo diray cinwaan magaalada Amsterdam ah.

4[tii] Oktooobar dhambaallo iyo walxo sida hadyadda loo bushqadeeyey oo qarxaya ayaa ay Sabtembarta Madow ka dirtay boos leh calaamadda boosaha ee dalka Malaysiya. Waxaa lagu socodsiiyey meelo ay ka mid yihiin; xafiiska madaxweynaha Maraykanka, hay'adda HIAS oo caawisa dadka Yuhuudda ah ee u soo haajira Maraykanka, iyo meelo badan oo muhiim ahaa. Qaarkood waa la qabtay, oo waxaa dib loogu celiyey halkii laga soo diray, halka qaar kalana ay ku qarxeen dadkii boosta ka shaqaynayey ama waraaqaha gaadhsiinayey cidda ay ku socdaan.

10[kii] Nofambar 1972, Vivian Prins oo madax ka ahaa shirkad macdanta ka shaqaysata oo Israa'iil ganacsiyo ku lahayd ayaa ku dhaawacmay warqad qarxaysay oo uga timid cinwaan Hindiya ah, isla maalintan waxaa kale oo dalkaas ku dhaawacmay nin ka shaqaynayey boosta oo warqad uu hayey ay ku qaraxday. Sidoo kale bilayska Ingiriiska ayaa magaalada Glasgow ku qabtay 20 warqadood oo qarxayey oo lagu socodsiiyey dad Yuhuud ah oo meelo kala duwan oo Ingiriiska ah joogay. Meelaha kale ee isla maalintan waraaqaha qarxaya lagu qabtay ama ay cid ku dhaawacantay waxaa ka mid ahaa Denmark.

Marka laga tago khasaaraha ay geysteen waraaqahan tirada badnaa, waxaa dheerayd cabsi joogto ah oo Israa'iil soo foodsaartay, sidoo kalana waxa ay cabsi geliyeen dhammaan dalalka dunida oo ku qasbanaaday in boostooda ay geliyaan


https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



xaalad feejignaan ammaan ah. Waxa ay dhibaato ku noqotay habsami u shaqayntii diblumaasiyiinta Israa'iil dunida u joogtay, maadaama oo waraaqaha boosta la isugu diraa ay xilligaas ahaayeen habka ugu badan ee la isugu gudbin jiray dhambaallada.

## Weerarkii Muunikh

Ciyaarihii Olambikada sannadkii 1972, qaybtii xagaaga oo lagu qabtay magaalada Muunikh ee Jarmalka, waxaa ka dhacay weerar aad u xanuunjiyey Israa'iil. Sida oo kalana lagu tilmaamay dhacdadii ugu foosha xumayd abid ee soo martay taariikhda Olambikada.

Xilli ay ciyaaryahannadii dawladaha dunida badankoodu ku soo hoydeen magaalada Muunikh, lix dharaarood oo keli ahina ka hadhsanaayeen bilowga ciyaaraha, ayaa siddeed nin Falastiiniyiin ahi ay si lama filaan ah gudaha ugu galeen huteelka ay deggenaayeen ciyaartoyga Israa'iil.

Waxa ay isugu jireen xubno hore u sii joogay Jarmalka iyo inta kale oo Muunikh yimid iyaga oo gooni-gooni u socda, mid kastaana u sito saanad ciidan oo ay ka mid yihiin baastoolado, garnayllada gacanta laga tuuro iyo qoryo ah kuwa gacanta ee Kalshnikov ka Ruushku sameeyo ah oo la furfuray.

Markii ay huteelka galeenba waxa ay toogasho ku dileen laba nin oo si degdeg ah ugu baraarugay sanqadha; midkood waxa uu ahaa masuulkii watay ciyaartoyga Israa'iil oo iskudayey in uu iska caabbiyo, midka kalana ciyaartoyga ayaa uu ka mid ahaa. Sagaal kalana madaxfurasho ayaa ay u qabsadeen.

AlmaZ Books
Telegram

Raysalwasaarahihii Yuhuudda, Golde Meir, oo hurudday saacaddii shilku dhacay, ayaa uu la taliyaheedii ammaanku waaga la sugi kari waayey oo uu si toos ah qolkeeda ugu garaacay.

Saraakiisha ammaanka ee Jarmalka ayaa daqiiqado gudahood wadaxaajood la furay afduubeyaasha. Waxa ay dalbadeen in loo sii daayo 232 ruux oo ah maxaabiista Falastiiniyiinta ah ee ku jira xabsiyada Israa'iil, in la sii daayo laba nin oo dhalashadoodu Jarmal tahay oo eedo argagaxiso oo Falastiin la xidhiidha ugu xidhan xabsiyada Jarmalka, iyo in marka shuruuddooda la wadafuliyo intooda maxaabiista Israa'iil haystana la siiyo diyaarad ka saarta Jarmalka Galbeed.

Shir degdeg ah oo ay isugu yimaaddeen golaha ammaanka ee xukuumadda Israa'iil oo ay guddoominaysay raysalwasaare Golda Meir, waxa ay xaaladaha si toos ah ugula socdeen shaashadaha talefishannada iyo xogta ilbidhiqsi kasta ka imanaysay waaxda sirdoonka MOSSAD ee safaaradda Israa'iil ku leedahay Jarmalka.Golde Meir iyo masuuliyiinta ammaanka waxa ay ku qanacsanaayeen in xoog lagu soo furto lahaystayaasha iyada oo la adeegsanayo ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee Israa'iil. Waxa ay ku gaadheen go'aan ay ku diidayaan in ay fuliyaan shuruudahaas kooxda Sabtembarta Madow dalbanayso.

Israa'iil waxa ay Jarmalka ka codsatay in ay iyadu ciidamadeeda gaarka u tababaran u soo dirto Jarmalka si ay lahaystayaasha xoog ugu soo furtaan, laakiin arrintaas waxaa diiday dawladda Jarmalka oo u aragtay in ay quudhsi ku tahay.


https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Taliyihii sirdoonka ee Israa'iil, Zvi Zamir, ayaa isaguna aan ka raalli ahayn sida uu Jarmalku hawshan u maamulayey. Isla maalinnimadii uu hawlgalku dhacay ayaa uu Zvi Zamir ka duulay Israa'iil,

isaga oo ku socda amarka Golda Meir, si uu Jarmalka ugala taliyo arrintan, laakiin markiiba masuuliyiinta Jarmalka ayaa si kooban ugu wargeliyey in aanu xaq u lahayn in uu farogeliyo hawlgalkan.

Waxa ay ugu niyadda ugu dejiyeen in shaqadan ay ciidamadoodu ku filan yihiin, kuna qanacsan yihiin in uu guulaysanayo qorshaha ay dejisteen. Sida oo kale, taliyaha MOSSAD waxaa loo diiday in uu goobta hawlgalka toos u tagao, sidaas awgeed waxa dhacaya waxa uu kala socday muraayad TV oo loogu keenay goobta la dejiyey. "Maalintaas ayaa aan si rasmi ah u aqoonsaday in Israa'iil ay leedahay cadow aan kaftamayn oo Sabtembarta Madow la yidhaahdo." Ayaa uu yidhi Zvi mar dambe oo uu ka hadlay arrintan.

Waxaa la sheegaa in maalintaas Golda Meir, haddii aanay qiimaynayn xidhiidhka Jarmalka oo adkaa, ay ku fikirtay in iyada oo aan dalkaas arrintu ka dhacday ka fasax qaadan ay ciidan u dirto si ay u soo furtaan lahaystayaasha. Waxaa se ay ku qasbanaatay in ay dhegeysato doonista Jarmalka iyo gacanyareyaasheeda ammaanka oo arrintan ku diiday. Waxa ay ka mid noqotay uun malaayiinta dad ee kala aragtida duwan ee dhacdadan kala socday talefishannada adduunka.

Haweenaydii 'Marwada Birta ah' loo yaqaannay, waxa ay noqotay shakhsi garbaduuban oo keliya ah daawade dhul dheer jooga oo muraayadda talefishanka hor fadhida intii xaalku dhan u dhacayey. Dood adag oo hal maalin la isku mari

AlmaZ Books
Telegram



waayey kaddib, Sabtembarta Madow waxa ay ku dhawaaqeen in wadahadalka ay ka baxeen. Waxa ay dalbadeen haddii nolosha lahaystayaasha cidi danaynayso, in loo furo jid ay ku gaadhaan garoonka diyaaraddaha, lana siiyo diyaarad ay dib ugu raacaan Bariga Dhexe.

Dalabkan masuuliyiintii Jarmalku waxa ay u arkeen fursad ay ku khiyaamayn karaan kooxda afduubka marka ay bannaanka u soo baxaan, waxa ay u fureen jid ay u maraan gegida diyaaraddaha Furstenfeldbruck oo ku taalla duleedka Muunikh, waxa aanay ku wargeliyeen in ay u diyaariyeen diyaarad.

Ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee Jarmalka ayaa lagu xeeray dhufayso garoonka dibaddiisa iyo gudihiisaba ahaa. Waxa uu ahaa dabin ay doonayeen in ay ku qabtaan kooxdan oo aan lahaystayaasha waxba yeelin.

Diyaarad xumaatay oo ay lahayd shirkadda duulimaadyada Jarmalka ee Lufthansa ayaa inta la qurxiyey waxaa la dhigay garoonkan diyaaraddaha. Waxa uu qorshahoodu ahaa in ay kooxda afduubku ay koraan. Kaddibna, shiishyahanno saqafka sare iyo meelo aan diyaaradda ka fogeyn ku jiraa ay shaqadooda qabsadaan.

Markii raggii Sabtembarta Madow iyo ciyaartoygii Israa'iil ee ay wateen u soo dhowaadeen garoonka ayaa uu hoggaamiyahoodu kelidii gaar uga dhex baxay kooxda, isaga oo si culus u hubaysan, si uu u soo indho-indheeyo xaaladda diyaaradda iyo gudaheeda cidda joogta.

AlmaZ Books
Telegram



Qorsheyaasha ugu horreeya ee hawlgallada Cali Salaama diyaariyo ayaa ay ka mid ahayd kooxda uu meelaha khatarta ah u dirayaa in ay ahaadaan xul dhalinyaro ah oo aqoon iyo tababar fiican u leh hadba nooca hub iyo xeeladda ay adeegsanayaan. Markii taliyihii kooxda afduubku u soo dhowaaday diyaaradda, waxaa u soo baxday runta ah in la khiyaameeyey.

Dhammaan calaamadaha uu arkay waxa ay u sheegayeen in aanay jirin diyaarad halkan ay nabad kaga duulayaan; ma ay saarnayn duuliyeyaal iyo hawlwadeenno, mana ay istaadhnayn, oo intaas ayaaba ku beertay in uu su'aal iska weydiiyo xaaladda mishiinka diyaaradda. Waxa uu is weydiiyey sida ay suurtogal u tahay in rag xaaladdoodan oo kale ku jira oo doonaya in ay ilbidhiqsi kasta ka faa'idaystaan ay u koraan diyaarad oo iska dhex fadhiyaan inta la istaadhayo ee weliba sida caadiga ah ay mishiinnadeedu u kululaanayaan.

Waxa uu fahmay in aanay diyaaraddani ahayn tii ay sugayeen, waxa aanu nafta u sheegay in la khiyaameeyey. Taas macnaheedu waa in daqiiqaddaas laga bilaabo uu halis u yahay in laga soo toogto meel uun ka mid ah garoonka ama diyaaradda gudaheeda. Waxa uu markiiba bilaabay in uu kaga horreeyo, oo rasaas badan dhan walba u rido, sida oo kale waxa uu tuuray bamboo gacmeedyo uu sitay.

Qorshaha afduubayaasha waxaa ka mid ahaa in taliyahoodu uu diyaaradda xaaladdeeda soo hubiyo iyaguna meel gaar ah joogaan, si haddii xaalku sax yahay ay diyaaradda u fuulaan isaguna dhabarkooda u ilaaliyo, haddii kale oo uu dagaal bilaabana ay iyagu u digniin qaataan.

https://t.me/maktabadasharciga 

AlmaZ Books
Telegram



Ciidamadii Jarmalkuna rasaas ayaa ay ugu soo jawaabeen, kooxdii kale ee afduubka ayaa iyaguna bilaabay in ay mid mid u khaarajiyaan ciyaartoygii Yuhuudda ahaa ee ay afduubka u haysteen. Intii ay shiishyahannada Jarmalku ku mashquulsanaayeen khaarajinta taliyaha kooxda afduubka, isagana saaxiibbadii waxa ay kaba faraxasheen kharaajinta sagaalkii ciyaartoy ee ay wateen. Waxaa kale oo ay dileen sarkaal sare oo bilayska Jarmalka ka mid ahaa.

Shan ka mid ah Sabtembarta Madow ayaa iyagana la dilay, saddexdii kalana maxaabiis ahaan ayaa ay u qabteen Jarmalku. Hawlgalkiina halkaas ayaa uu ku soo afmeermay.

Xeeladdan ay ciidamada Jarmalku ku fashilmeen waxa ay Israa'iil ku tilmaamtay mid doqonnimo ahayd oo muujinaysay waayoaragnimo la'aanta masuuliyiinta ammaanka Jarmalka Galbeed iyo weliba sida aanay waxba uga garan karin la dagaallanka kooxaha noocan Sabtembarta Madow ah.

In Israa'iil si aad ah uga xumaatay qaabkii Jarmalku u hawlgalay, waxaa marag labaad inoogu filan buugga 'MOSSAD: The Greatest Missions of the Israeli Secret Service'. Labada qoraa ee Bar-zohar iyo Mishal ayaa buuggan ku soo bandhigay hawlgalladii waaweynaa ee MOSSAD.

Hawlgallada uu ka warramayo ayaana ay ka mid tahay qisada dilkii ciyaartoyga Israa'iil. Waxa ay sheegeen in kooxda Sabtembarta Madow ay hawlgalkan ku dishay 11 kii ciyaartoy ee ka qaybgalayey Olambikada iyo laba tababare oo dhammaantood Yuhuud ahaa.

 https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Dareen cadho oo shacab iyo xukuumadba ay u simanyihiin ayaa ay Yuhuuddu ka qaadday natiijada hawlgalka Jarmalka ee fashilmay. Waxa ay u arkayeen in ay dhaceen falal xilskansimodarro ka muuqato, in aan Israa'iil iyo guud ahaan Yuhuudda la siinin xurmadii ay mudnaayeen, iyo in ay jirto aqoondarro dhinaca ammaanka ah oo Jarmalku qarsanayo. Waxaa iyaduna soo labakaclaysay colaaddii guunka ahayd ee quluubta Yuhuudda uga buuxday Jarmalka oo ay ka daba socdaan xasuuqii Hitler.

Buugga 'By the Way of Deception' oo qoraa Israa'iili ahi leeyahay, marka uu ka warramayo sidii ay wax u dhaceen waxa uu odhanayaa, "Shiishyahanno Jarmalka Galbeed ah oo aan tababar fiican lahayn, si aad u liidatana u qalabaysan, ayaa rasaas ku furay, argagaxisadiina waxa ay ugu soo jawaabeen rasaas iyo weliba in ay isticmaalaan bamboo gacmeedyo si ay u qarxiyaan diyaaradda. Iskudhacaas waxaa kale oo ku dhintay sarkaal bilayska Jarmalka ka tirsan iyo shan ka mid ah argagaxisadii."

Dhammaadkaas foosha xun, waxaa Yuhuudda kaga sii xanuundarnaa go'aankii uu Jarmalka ku sii daayey raggii afduubeyaasha ka hadhay ee uu nolosha ku qabtay. Saddexdaas dagaalyahan ee ka soo hadhay kooxda afduubka ayaa uu Jarmalku gacanta ku dhigay, laakiin muddo afar bilood ah ayaa uu xabsi ku hayey.

29[kii] Oktoobar 1972, ururka Sabtembarta Madow waxa uu ku guulaysatay in uu Jarmalka ku qasabo sii deynta raggan, kaddib markii uu afduubay diyaarad ay leedahay shirkadda Lufthansa, sii deynteedana ku xidhay in loo sii daayo saddexda

https://t.me/maktabadasharciga 

AlmaZ Books
Telegram



maxbuus, dalabkaas oo uu Jarmalku fuliyey. Tallaabadaas Jarmalku waxa ay xumaysay xidhiidhkii diblumaasiyadeed ee Israa'iil ka dhexeeyey.

Israa'iil go'aankeedu waxa uu noqday in ay dagaalkii ugu dhiig daadinta badnaa ku qaaddo ururrada Falastiiniyiinta, isla markaana ugaadhsato masuuliyiintooda ugu sarreeya.

Garoonka weyn ee ay ciyaaruhu ka furmayeen ayaa aroor hore ciyaartoyga geeriyooday loogu sameeyey xus baroordiiq ahaa oo ay ka qaybgaleen 80 Kun oo qof. Waxa se uu muran ka yimid waxa laga yeelo furitaanka ciyaaraha.

Israa'iil waxa ay dalbatay in ciyaaraha la joojiyo oo halkaas lagu soo xidho si loogu ixtiraamo ciyaartoyga Israa'iil ee la dilay. Laakiin Avery Brundage, oo ahaa madaxweynihii xilligaas ee guddida caalamiga ah ee Olambikada, ayaa amar ku bixiyey in ciyaaruhu halkii ka sii socdaan, si caadi ahna u qaataan waqtigooda illaa ay dhammanayaan. Go'aanka madaxweyne Avery Brundage, oo u dhashay Maraykanka, waxa uu abuuray muran caalamiya iyo doodo kulul. Wargeys arrimaha ciyaaraha ka faallooda oo sida muuqata ka xumaaday in sidaas wax u dhacaan, waxa uu qoray, in ciyaarihii Olambikadu ay iska sii socdaan iyada oo shilkaasi dhacay, "waxa ay ka dhigantay sida in xaflad

weyn oo jaas ah lagu qabto mid ka mid ah xeryihii Jarmalka ee uu Hitler ku gumaaday Yuhuudda."

AlmaZ Books
Telegram



## Aargoosigii

Israa'iil si fiican ayaa ay uga dheregsanayd xogta ururka Sabtembarta Madow oo marka hore aanay dan badan ka gelin kobociisa maadaama oo ay u arkaysay mid Carabta gudaheeda uun khuseeya. MOSSAD waxa ay ogeyd in badanna ku celcelisay in ururkan uu aasaaskiisa leeyahay Yaasir Carafaat oo si qarsoodi ah u maamula, gacantana ay ugu hayaan Abu Yuusuf iyo Cali Salaama oo daacad u ahaa Carafaat, isla markaana ahaa niman aad u dhiirran oo diyaar u ah in ay naftooda u huraan qaddiyadda ay u halgamayaan. Si kastaba ha ahaato 'e, in Yaasir Carafaat uu arrintan ku lug leeyahay waxa ay ku koobnayd eedayn keliya oo aanay dunidu isku waafaqsanayn. Yaasir Carafaat isagu si joogto ah ayuu u beenin jirey in ururkaas uu shaqo ku leeyahay.

Xogaha ay sirdoonka Israa'iil ogaadeen ee ururkan la xidhiidha waxaa kale oo ka mid ahaa, in Cali Salaama uu yahay maskaxda dejisa qorshayaasha iyo xeeladaha weerarrada Israa'iil ka dhanka ah ee laga fulinayo dibadda.

Weerarka lagu dilay ciyaartoyga, waxa uu ahaa kan ugu xanuunka badan ee haleela Yuhuudda. Habeenkii uu dhacay, intii uu hawlgalku dhammaanayey, sida ay qoraallo kala duwan ku caddeeyeen masuuliyiintii Yuhuudda ahaa ee ka ag dhowaa, 'waxa uu Yuhuudda ku beeray cadho aan abid ka hadhin oo ay u qaadday Falastiiniyiinta iyo xusuus aan guurin oo mar kasta maskaxdeedu soo celiso.'

Habeenkan hadallada laga reebay waxaa ka mid ahaa, "Mar labaad ayaa ay dhacday in dad Yuhuud ah oo la isku xidhxidhay lagu xasuuqo ciidda Jarmalka."

AlmaZ Books
Telegram



Laakiin Golda Meir oo ahayd gabadh aad u hal-adag ayaa markiiba qaadatay go'aankeedii ahaa in aanu hawlgalkaasi taariikhda ku gelin aargoosi la'aan.

Arrinta ugu xiisaha badanina waa in habeenkani uu ahaa kii Cali Salaama ay raacday naanaysta Amiirka Cas, kaas oo markii dambe noqday magaciisa ugu caansan ee xitaa isagu sheegto. Inkasta oo ujeedka uu magacani lahaa la isku khilaafo, haddana Yuhuddii ka ag dhoweyd habeenkii ay Golda Meir bixisay waxa ay sheegeen in hawlgalka Muunikh uu dhiig badan oo Yuhuud ahi ku daatay, sidaa awgeed midabka casaanka ah ay uga jeedday in uu Cali Salaama yahay nin dhiigyacab ah ama nin dhiig u harraadan.

Markii hawlgalku dhammaaday, Golda Meir waxa ay dhaqso isugu yeedhay masuuliyiinteedii ammaanka. Waxa ay fartay in ay ka soo fikiraan qorshihii aargoosi ee lagaga jawaabi lahaa falkan, iyada oo weliba hoosta ka xarriiqday hawlgallada ay soo jeedin doonaan in uu ka muuqdo mid ah in la khaarajiyo Cali Salaama [Amiirka Cas] iyo ragga kale ee muhiimka ah ee ku lug lahaa hawlgallada ka dhanka ah ammaanka iyo danaha Israa'iil.

Guddidii ay dhacdadan u saartay Golde Meir, maalmo yar gudahood ayaa ay soo celisay jawaabtii. Kulan galabnimo oo ay raysalwasaaruhu guddoominaysay ayaa la soo hor dhigay go'aanka guddida oo ahaa qorshe aargoosi oo MOSSAD ay kula kacdo Sabtembarta Madow, Amiirka Cas ee hoggaamiya iyo guud ahaan ururrada Falastiiniyiinta ee hubaysan.

AlmaZ Books
Telegram



Bilowgaba goldallooloooyinka qorshahan ka muuqday ee MOSSAD aanay jawaabta u haynin waxa ay ahaa, muddada ay qaadan karto in hawlgallo khaarajin ah lagula kaco hoggaanka Falastiiniyiinta hubaysan. Waxaa laga rabaa in ay raadiyaan oo aqoonsadaan wejiyada iyo meelaha laga helayo dhammaan hoggaamiyeyaasha Sabtembarta Madow, kaddibna ay khaarajintooda fuliyaan.

Golda Meir arrintaasi horraantii waa ay la adkaatay, sidaas awgeed dhaqangelinta hawlgalkan kuma ay degdegin, gaar ahaan qorshaha qaybtiisa khusaysa in mararka qaarkood ciidamo Sirdoonka MOSSAD ka socdaa ay gudaha u galaan dalal Carab iyo dunida kalaba leh, si ay ugu soo dhex khaarajiyaan hoggaamiyeyaasha Sabtembarta Madow.

Si kastaba ha ahaat 'e, saraakiisha MOSSAD ayaa arrintaas ku adkaystay, raysalwasaarahana ku qasbay in ay saxeexdo. Waxa ay ku cabsi geliyeen in haddii aan hadda ka hortag la samayn ay keeni karto khatar ah in la iska caabbin kari waayo qorsheyaasha khatarta ah ee Amiirka Cas oo aan diidayn in ay aqalka raysawasaaraha ee Tel Aviv soo gaadhaan.

"Kooxdani waxa ay wacad ku martay in tirada ugu badan ee Yuhuud ah ee u suurtogasha ay dilaan, askarta, rayidka, dumarka iyo carruurtana ma kala jecla" ayaa ay guddidu ku sheegtay warbixinta ay hor dhigeen Golda Meir. Waxa ay intaas ku sii dartay, "Sida keliya ee lagu joojin karaa waa in mid mid loo khaarajiyo hoggaamiyeyaasha kooxda, kii kasta ee hoggaanka loo doortana la dilo. Maska madaxa ayaa laga dilaa" Ayaa ay guddidu warbixinteeda ku tidhi.

Golda Meir waa ay yara walaacday, gaar ahaan waxaa ku adkaaday in ay qaadato go'aan ay ka dhalanayso in ay rag dhalinyaro Yuhuuda ah noloshooda ku miidaamiso gudaha dal kale oo qaar yihiin cadow aan la ogeyn waxa ka iman kara, si ay uga soo fuliyaan hawlgal khaarajin ah. Waxa ay ahayd tallaabo aanay Israa'iil intii ay jirtay hore u qaadin.

Sida ay qoraalladooda ku caddeeyeen saraakiisha sirdoon ee goobjoogga ahaa, maalintaas markii guddidani ay Golda Meir hordhigtay warbixintan, inta ay dib u fadhiisatay ayaa ay waqti dheer amusnayd oo jawaab laga sugayey. Goor la isla daalay ayaa ay hadalkeedii bilowday, iyada oo ku hadlaysa cod aad u gaaban oo dirqi ay ku maqli karayeen masuuliyiinta shirka ay la lahayd, illaa heer mararka qaarkood la moodayey in ay nafteeda la xanshaashaqayso.

Waxa ay ka sheekaysay xusuustii xanuunka badnayd ee Yuhuudda ka soo gaadhay xasuuqii Holocaust, iyo masiibadii riiqda xun ka tagtay ee ku dherernayd nolosha jiilalkii kala dambeeyey ee Yuhuudda oo ahaa dad mar kasta la dili jiray, la ugaadhsan jiray, xasuuq badanna loo geystay, sida ay dhigayso taariikhda Yuhuuddu.

Warkaa dheer ee calaacalka iyo xusuusaha taariikhda Yuhuudda ee foosha xun isugu jiray kaddib, Golda Meir oo markaas ahayd 70 jir ayeeyo ahi inta ay madaxa kor u qaadday oo ay si gaar ah indhaha ugu jeedisay taliyihii sirdoonka ayaa ay tidhi, "Dir Wiilasha" oo ah ereyo ay ku muujinayso lexejeclada ay ka qabto askarta loo diri doono gudaha dalalka ay joogaan hoggaamiyeyaasha Sabtembarta Madow.

AlmaZ Books
Telegram



Shirka markii go'aankaas lagu kala qaatay, Golda Meir waxa ay khudbad ka jeedisay xus baroordiiq ah oo loo sameeyey ciyaartoygii ay Sabtembarta Madow dishay, waxa ayna si rasmi ah ugu dhawaaqday in Israa'iil ay dagaal aargoosi ah qaadi doonto. Isla maalintaas waxa ay saxeexday liis dheer oo ay MOSSAD ku soo qortay magacyada 35 halgamaa oo ka mid ah raggii laga yaqaannay hoggaamiyeyaasha Sabtembarta Madow oo ay doonaysay in la khaarajiyo. Waxaa ka mid ahaa Maxamed Yuuusuf Najaar, oo loo yaqaannay abu Yuusuf, oo ahaa sarkaal aad ugu xeel dheer arrimaha sirdoonka iyo Cali Salaama, Amiirka Cas.

Xogaha MOSSAD ka haysay Amiirka Cas waxaa ka mid ahaa in uu yahay maskaxdii qorshaysay weerarka Muunikh, weliba markii hawlgalku fulayey uu tegey Jarmalka Bari, si uu uga agdhowaado goobta wax ka dhacayaan, xidhiidh dhowna ula yeesho dawladihii reer Bariga.

Saddex dharaarood kaddib hawlgalkan ciyaartoyga lagu dilay, ayaa ay timid jawaabtii koowaad ee Israa'iil oo iyadu ahayd tii ay ku muujinaysay in aanay falkaas ka hadhi doonin. 75 ka mid ah diyaaraddaheeda dagaalka ayaa garaacay goobo ka mid ah Suuriya iyo Lubnaan oo ay Israa'iil sheegtay in ay saldhigyo ku leeyihiin Falastiiniyiinta hubaysani. Weerarkan oo markaas lagu tilmaamay kii ugu cuslaa ee ay Yuhuuddu qaadday tan iyo dagaalkii Carabta ee 1967, waxaa ku dhintay 66 qof, dad tiro badanina waa ay ku dhaawacmeen.

Diyaaraddaha Israa'iil waxa ay weerarkan ku soo rideen saddex ka mid ahaa diyaaraddaha dagaalka Suuriya oo ku jiray hawada dhulka ay Yuhuuddu ka haysato Suuriya, Golan

AlmaZ Books
Telegram



Heights, taas oo Suuriyana ay kaga jawaabtay in ay iyaduna dhulka soo dhigto laba ka mid ah diyaaraddaha dagaalka ee Israa'iil.

Dhinaca kalana ciidamo dhulka ah ayaa ay Israa'iil gelisay gudaha Lubnaan, si ay dagaal fool-ka-fool ah ula galaan xoogagga Falastiiniyiinta. Inkasta oo weerarka Muunikh uu aad u xanuunjiyey Israa'iil oo go'aansatay in ay dabargoyso dhammaan dadka ku abtirsada hoggaanka Sabtembarta Madow. Kuwaas oo ay ugu horreeyaan, Abu Yuusuf oo kooxda madax u ahaa iyo Amiirka Cas oo ahaa madaxa hawlgallada dibadda iyo ka hortagga basaasiinta Israa'iil, iyo sidoo kale maskaxda qorshaysa dejinta iyo fulinta hawlgallada Israa'iil ka dhanka ah ee dibadda, haddana taasi ma ay waabin sii socoshada hawlgalladii kooxdan. Nabarkii xanuunka badnaa ee Muunich waxaa ay ugu sii dareen weerarro kale oo qaarkood guulo ay ka gaadheen.

29kii Oktoobar 1972 ayaa koox ay Sabtembarta Madow soo dirtay ay afduubeen duulimaadkii 615 ee shirkadda Lufthansa. Diyaaraddan oo isaga gooshi lahayd Dimishiq iyo Frankfurt, waxaa taladeedii la wareegay kooxdan oo uu hoggaaminayey Abu Cali. Waxa uu ahaa sarkaal tababar sare oo milateri ku haystay diyaaraddaha. Ujeeddada hawlgalkuna waxa ay ahayd in dawladda Jarmalku ay sii dayso saddexdii naftiihure ee ka hadhay siddeeddii fuliyey weerarkii ciyaartoyga Yuhuudda lagu dilay.

Dawladda Jarmalku isla markiiba waxa ay aqbashay dalabkaas afduubayaasha, iyada oo aan la tashan Israa'iil oo isu arkaysay in ay xaq u lahayd in lagala tashado masiirka raggan ayaa ay sii daysey una dirtey halkii heshiisku ahaa oo ahayd

AlmaZ Books
Telegram



magaalada Zagreb ee dalka Yuguslaafiya.

Abu Cali isna diyaaraddii oo weli lahaystayaashii saaran yihiin waxa uu u duuliyey magaalada Tiriboli ee xarunta Liibiya, halkaas oo uu ku sii daayey lahaystayaashii oo dhan. Arrintani Israa'iil waxa ay ku noqotay cadho hor leh oo u raacday cadhadii ay ka qaadeen qaabkii uu Jarmalku u galay hawlgalkii fashilmay ee la doonayey in lagu soo furto ciyaartoyga, iyo weliba sidii aanu mar keliya fursad u siinin Israa'iil in ay talo iyo cududba ku yeelato.

Golda Meir oo hadashay maalintaas uu Jarmalku sii daayey maxaabiistii uu ka hayey Sabtembarta Madow ayaa si murugo leh u sheegtay in qalbi ahaan iska daa ee ay xitaa jidh ahaan uga xanuunsatay warka sii deynta raggaas.

Werarkan Muunikh dabadii Israa'iil waxa ay bilowday weerarradeeda rogaalceliska ahaa iyo hawlgallada ay kaga aargoosanayso Falastiiniyiinta, khasaare badan ayaana ay u geysatay Falastiiniyiin rayid ah iyo kooxaha wax-iska-caabbinta. Waxa aanay dishay masuuliyiin sare oo Sabtembarta Madow ka mid ahaa, haddana taasi waxba kama ay beddelin ama sidii la rabay uma ay dhimin weerarradii ay xoogagga wax-iska-caabbinta iyo hay'adaha sirta ee Falastiiniyiintu sida joogtada ah u abaabulayeen, gaar ahaan kooxda markaas xanuunka gaarka ah ku haysay Israa'iil oo ahayd Sabtembarta Madow.

Inkasta oo weerarradaas kala duwan ee Falastiiniyiintu aanay badankoodu khasaare badan geysan, haddana dhibta ugu yar ee ka imanaysay waxa ay ahayd dareen ammaandarro oo ay ku abuuray Israa'iil iyo guud ahaan dalalka danuhu ka dhexeeyeen.

AlmaZ Books
Telegram



Waxa ay Sabtembarta Madow joogtaysay waraaqo qarxaya, weerarro gantaalo ah, afduub diyaaradeed, hawlgalo naf-hur ah oo ay gudaha Israa'iil ku galaan iyo khaarajinta masuuliyiinta diblumaasiyadda ama sirdoonka ee Israa'iil uga hawlgala dunida. Waxaa dareenka cabsida ah sii kordhiyey Amiirka Cas oo ku guulaystay in uu hawlgeliyo dad aan Carab ahayn, ama mararka qaarkood aan muslimiinba ahayn oo uu ku qanciyey in ay qaddiyaddiisa nafta u huraan.

Dabayaaqadii Disambar 1972, laba naftiihure oo ka tirsan ururka Sabtembarta Madow ayaa ay u suurtogashay in ay ku dhex dhuuntaan marti ka qaybgalaysay xaflad lagu qabanayey safaaradda Israa'iil ee Thailand.

Markii ay gudaha safaaradda isku hubsadeen, laba kale oo iyaguna dibadda ku sugayey ayaa dusha ka fuuley gidaarka safaaradda waxa aanay la soo baxeen qoryo kuwa darandoorriga u dhaca ah oo ay siteen. Afarta nin oo wadajira ayaa xoog kula wareegay safaaradda Israa'iil ee magaalada Bangkok, Thailand.

Afartii Falastiini ee hubaysnaa waxa ay afduub ku qabsadeen lix ka mid ah shaqaalihii safaaradda oo dhalashadoodu Yuhuud ahayd, waxa aanay sii daayeen dhammaan dadkii dhalashadoodu Tayga ahayd (Thailand).

Danjiraha Israa'iil u fadhiyey safaaraddan iyo afadiisu kuma ay jirin lixda ruux maadaama oo ay iyagu habeenkaas ku maqnaayeen xaflad kale oo ka dhacaysay qasriga boqortooyada dalkaas oo ay dawladdu ku casuuntay.

Kooxda Falastiiniyiinta ahi markii ay si buuxda ula wareegeen dhismaha safaaradda, gacantoodana ku hubsadeen lixda ruux ee Yuhuudda ahaa, mid ka mid ah daaqadaha bannaanka ee dhismaha ayaa ay ka soo dhiibeen warqad caddaynaysa waxa ay doonayaan. Sida warqadda ka muuqatay magaca ay kooxdani ku hawlgelaysaa waxa uu ahaa 'Kooxda Cali Daaha'.

Kooxdan naftood-hurayaasha ahi waxa ay lahaystayaasha la tageen sarta labaad ee dhismaha safaaradda oo saddex sarood ahaa, waxa aanay bilowgii dalbadeen in la sii daayo 36 maxbuus oo ku jiray xabsiyada Israa'iil, kuwaas oo uu ku jiray Kozo Okamoto oo ah nin u dhashay Jabbaan oo Sabtembarta Madow la shaqeeyey iyo labadii dumar ahaa ee ka badbaaday afartii ruux ee afduubay diyaaraddii duulimaadkeedu ahaa 571 ee shirkadda Sabena.

Kooxdani waxa ay ku hanjabeen haddii aan dalabkoodaas la fulin, inta ka horreysa siddeeda subaxnimo ee 29[keeda] Sabtembar, in ay qarxin doonaan safaaradda, dadka ay haystaanna dili doonaan. Wadahadal saacado badan socday kaddib, heshiiska la gaadhay waxa uu ahaa xal ay keeneen khubarada wadahadalka ee Thailand, kaas oo noqday in kooxda afduubka la siiyo marin nabadgelyo oo ay Qaahira ku gaadhaan, lahaystayaashana ku wareejiyaan dawladda Thailand.

Xalkan waxaa ka cadhooday masuuliyiinta Israa'iil oo dalbanaysay in kooxda afduubka la qabto, laakiin dawladda Thailand oo xilligaas ku jirtay dabbaaldegyo loogu damaashaadayey caleemasaarka amiirkii dhaxalka boqortooyada lahaa, waxa ay caddaysay in aanay doonayn in

AlmaZ Books
Telegram



farxaddaas dalka oo dhan ka socota uu qaso muran iyo khilaaf aan khusaynin. Qaar badan oo ka mid ahaa masuuliyiinta Falastiiniyiinta ayaa aan iyaguna jeclaysan in uu sidaas fudud u dhammaado, hawlgal miisaankaas leh oo ay u suurtogashay in ay gacanta ku dhigaan safaaradda iyo iyo lix ruux oo Yuhuud ah.

Wargeyska Maraykanka ee New York Times ayaa warbixin uu arrintan ka qoray isla maalintaas 29kii Disambar 1972, waxa uu sheegay in afarta naftiihure ee Falastiiniyiinta ahi ay 19 saacadood haysteen lixda lahayste, laakiin ay aakhirkii sii daayeen iyaguna u dhoofeen magaalada Qaahira ee dalka Masar, iyaga oo ay wehelinayeen danjirihii Masar ee Jarmalka Galbeed, taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ee Thailand Marsha Dawee Chulla Sapya, iyo wasiir-kuxigeenka arrimaha dibadda Thailand oo lagu magacaabi jiray Chartichai Choon Havan.

Waxaa kale oo uu sheegay in kooxda Falastiiniyiinta ahi ay dhamaantood afka duubteen markii ay diyaaradda korayeen iyo markii ay ka dageyeenba si ay uga taxaddaraan in warbaahintu ay muuqaalkooda sawirto, sida ay masuuliyiintii u dhashay Thailand ee wadaxaajoodka la galay qireenna kooxda afduubku waxa ay ahaayeen dhalinyaro dhammaantood 30 jir ka yar oo si fiican wax u bartay.

Wariyaha warbixintan diyaariyey, oo ahaa Craig R. Whitney,w axa uu sheegay in sababta danjiraha Masaarida iyo masuuliyiinta kale ee Thailand u raaceen afduubayaashu ay ahayd in loo damaanadqaado in la sii daayey oo ay Masar tagayaan, maadaama oo naftood-hurayaashu ay qabeen cabsi in lagu wacadfuro oo marka ay sii daayaan dadka ay haystaan ee diyaaradda kelidood raacaan ay diyaaraddu meel kale la fadhiisato si loo qabto.

AlmaZ Books
Telegram



Lixda la hayste waxa ay ahaayeen afar shaqaalaha ka mid ah iyo laba dumar ah oo ahaa xaasaska laba ka mid ah shaqaalahaas, dhammaantoodna waxa ay ahaayeen Israa'iiliyiin. Warbixinta New York Times waxa ay intaas ku dartay, in koooxda afduubku ay isdhiibeen 6:45 subaxnimo oo weli saacad iyo rubuc ka dhimanyihiin waqtigii ay marka hore qabsadeen in shuruuddooda lagu fuliyo. Iyaga oo aanay wax dhibaato ahi soo gaadhinna ay Qaahira ugu duuleen diyaarad ay leedahay Thailand.

Israa'iil inkasta oo ay muujisay dareen diiddanaa sii deynta afduubeyaasha, wanaagga aanay Israa'iil dafiri karin waxa uu ahaa in ay lahaystayaashu badqabeen, sidaas awgeed afhayeenkii Golda Meir ayaa isla markii afduubku dhammaaday, sheegay in Israa'iil ay Thailand ku mahadinayso sida ay u maamushay arrintan.

Arrinta sirta ahayd ee warbixintan New York Times lagu ogaaday ayaa ahayd, in lahaystayaasha Yuhuudda ah ee intii hore lagu sheegayey shaqaalihii safaaradda ee caadiga ahaa uu ku jiray danjiraha Israa'iil u fadhiya dalka Kamboodiya. Maalmahaas waxa uu dalxiis ku joogay Thailand oo qabtani ku qabsatay safaaradda dhexdeeda. Waxaa la dareensan yahay suurtogalnimada haddii kooxda Falastiiniyiinta ahi ogaan lahaayeen in safiir ku jiro dadka ay haystaan uu wadahadalkoodu intaas ka dhib badnaan lahaa, shuruud la'aan in ay sidaa ugu baxaanna adkaan lahayd.

AlmaZ Books
Telegram

## Kozo Okamoto

Inta aynaan ka bixin sheekada dhacdadaas safaaradda Yuhuudda ee Thailand aynu iskudayno in aynu ka jawaabno su'aasha laga yaabo in akhristayaal badani iska weydiiyaan ninka u dhashay dalka Jabbaan ee kooxda afduubku sii deyntiisa dalbanaysay.

Kozo Okamoto waxa uu ahaa muwaadin u dhashay dalka Jabbaan oo markaas ay da'diisu ahayd 24 jir, ahna arday ka dhashay qoys dabaqadda dhexe ah, oo markaa ka tirsanaa xoogaggii loo yaqaannay "Ciidanka Cas" ee ka soo horjeeday dawladdooda. Waxaa la sheegaa in uu mar dambe qaatay diinta Islaamka, aadna ula qiirooday qaddiyadda Falastiiniyiinta iyo dhibaatada ay Yuhuudda dhulkooda boobtay ku haysay.

Okamoto dhammaadkii Mey 1972, ayaa isaga oo ay weheliyaan Yasuyuki Yasuda iyo Tsuyoshi Okudaira, oo labaduba ahaa Jabbaaniis ka tirsanaa Ciidanka Cas, waxa ay magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga ka raaceen diyaarad ay leedahay shirkadda duulimaadyada ee Air France oo ku soo jihaysnayd gegida diyaaraddaha ee Lod ee magaalada Tel Aviv, taas oo hadda loo yaqaanno Ben Gurion.

Markii ay ka soo degeen garoonkan Tel Aviv ee ay galeen qaybta rakaabku shandadaha ka qaato, ayaa inta ay shandadahoodii fureen oo qoryaha gacanta ee darandoorriga u dhaca kala soo baxeen ay dadkii qaybta shandadaha ee garoonka joogay ku bilaabeen rasaas aanay u kala aaboyeelin. Waxa ana goobtii ku dhintay 26 ruux, halka 71 kalana ay dhaawacmeen.

AlmaZ Books
Telegram



Saddexdii nin midkood oo ahaa Yasuyuki Yasuda intii hawlgalkoodu socday ayaa uu u dhintay xabbad aan ku talogal ahayn oo uu riday mid ka mid ah labadiisa saaxiib; Tsuyoshi Okudaira waxa uu isna u dhintay qarax ka dhashay garnayl uu isagu qarxiyey, lamana garanayo in uu is dilayey iyo in uu qalad u dhacay; Kozo Okamoto oo soo hadhayna waxaa dhaawacay ciidamada ammaanka ee Yuhuudda, nolol ayaa aanay ku qabteen.

Mar dambe waxaa la ogaaday in sababta kooxda Jabbaan u dhalatay weerarkan ugu qaadeen Yuhuuddu ay ku timid heshiis uu ururka Jabbaan ee la baxay Ciidanka Cas la galay ururka jabhadda xoraynta Falastiin la odhan jiray, heshiiskaas oo ahaa in ay hawlgallada is weydaarsadaan, oo Israa'iilna ay weeraraan kooxaha Ciidanka Cas ee Jabbaanka ahi, Jabbaanna ay weeraraan kooxaha Falastiiniyiintu si loo dhimo shakiga Israa'iil ka qabto Falastiiniyiinta iyo ka Jabbaan ay ka qabto muwaadiniinteeda ka tirsan Ciidanka Cas oo labaduba caqabad ku noqday hawlgalladii labadan urur fulin lahaayeen.

Maxkamadda Israa'iil ayaa Okamoto ku xukuntay xabsi daayin. Dabayaaqadii Julay 1973, koox isugu jirtay Ciidanka Cas iyo jabhadda xoraynta Falastiin ayaa afduubay diyaarad ay lahayd shirkadda diyaaraddaha Jabbaan, waxa aanay dalbadeen in diyaaradda iyo lahaystayaasha saaran loogu beddelo sii deynta Okamoto, laakiin dalabkaas oo Jabbaan ay u dabacday, Israa'iil ayaa si adag u diidday.

Ugu dambayn Falastiiniyiintu waa ay ku gulaysteen in ay Okamoto ka sii daayaan Israa'iiil sannadkii 1985, oo uu xabsiga Israa'iil ku jiray 13 sanno. Waxa aana lagu sii daayey

AlmaZ Books
Telegram



heshiis maxaabiis isdhaafsi ah oo dhex maray Israa'iil iyo urur Falastiiniyiinta hubaysan ka mid ah oo gacanta ku dhigay askar Yuhuud ah. Okamoto waxa uu tegey Liibiya, kaddibna Suuriya, ugu dambayntiina waxa uu degey Lubnaan oo uu ugu tegey xubnihii kale ee kooxdiisa. 12 sanno kadib, oo ahayd 1997, ayaa dawladda Lubnaan ay xabsiga dhigtay shan nin oo xubno ka ahaa ururka Ciidanka Cas, kuwaas oo uu ku jiray Okamoto. Waxaa lagu eedeeyey in ay isticmaaleen baasaboorro been-abuur ah, nidaamka iyo shuruucda dalkugalka ee Lubnaanna ay jebiyeen, saddex sanno oo xabsi ah ayaa lagu xukumay.

Markii ay dhammaysteen oo ahayd 2000, afartii nin ee la xidhnaa Okamoto waxaa qasab loogu mustaafuriyey Urdun oo marka hore ay xaggeeda ka galeen Lubnaan, kaddibna diyaarad kiro ahayd ayaa lagu geeyey Jabbaan, laakiin Okamoto isaga Lubnaan ayaa magangelyo siyaasi ah siisay. Maadaama oo uu ka qayb qaatay hawlgallada iska-caabbinta Israa'iil isla markaana lagu xidhay laguna jidhdilay xabsi Israa'iil ku yaalla.

Si kastaba ha ahaato 'e, Okamoto weli waa ay doonaysaa dawladda Jabbaan oo marar kala duwan codsatay in loo soo gacan geliyo si ay u maxkamadayso. Sannadkii 1999 qisada Okamoto waxaa laga sameeyey filim.

***

Weerarrada Amiirka Cas qorshaynayey ee Yuhuudda ka dhanka ah tiro laguma soo koobi karo, oo isugu jirey kuwo guulaystay iyo kuwo aan gaadhin ujeedkii runta ahaa laakiin dareenkooda abuuray. Waxaa kale oo nacaybka Yuhuuddu u haysay Amiirka Cas sii kordhinayey, in uu noqday halyeey ay

AlmaZ Books
Telegram



ku daydeen ururradii kale oo iyaguna bilaabay in au sameeyaan garabbo hubaysan oo weerarro sirdoon fuliya.

Waxaa kale oo uu dhiirrigeliyey guud ahaan kooxihii dunida kale ka jiray ee mucaaradadda hubaysan dawladahooda kala soo horjeeday. Dabayaaqadii Maarso 1973, waxaa magaalada Madrid ku kulmay Baruch Cohen oo ahaa sarkaal ka tirsan hay'adda Shin Bet ee ammaanka iyo sirdoonka gudaha Israa'iil iyo nin Carbeed oo dhambaalside ahaa. Ninkan Carbeed waxa uu la xidhiidhay sarkaalka Yuhuudiga ah oo uu u sheegay in uu doonayo, in uu xog muhiim ah ka siiyo dhaqdhaqaaqa Carabta ku dhaqan Isbayn. Laakiin markii ay maqaaxi ku kulmeen, halkii uu Baruch Cohen war ka sugayey, hadyadda uu ninka Carbeed u siday waxa ay noqotay in uu xabbad madaxa kaga dhufto.

Arrinta ay Israa'iil aad uga sii xumaatay ma ay ahayn dilka sarkaalkan, balse waxa ay qaadan kari wayday xeeladdiisa uu ku badbaaday ee u suurtogelisay in uu goobtii dilka ka baxsado: Inta uu madaarka nabad ku tegey ayaa isaga oo badqaba uu ka baxay dalka Isbayn.

- Dabaqaayadii Nofambar 1973 ayaa koox Falastiiniyiin ahi weerar ku qaadeen diyaarad xammuul oo ay lahayd shirkadda duulimaadyada ee dalka Holland. Diyaaraddan ayaa ay Falastiiniyiintu afduubeen mar ay ka duulaysay garoonka diyaaraddaha ee magaalada Beyruut, kuna socotay magaalada Tokyo, iyada oo ku sii hakanaysay New Delhi. Waxaa saarnaa rakaab tiradoodu dhan tahay 244 qof iyo saddexda qof ee afduubay.

Afduubayaashu waxa ay sii deynta diyaaradda iyo rakaabka ku xidheen saddex shardi oo ahaa:

AlmaZ Books
Telegram



1. In la sii daayo saddex ka mid ah saaxiibbadood oo ku xidhnaa dalka Qubrus.
2. In dalka Holland uu ballan qaado in dalkiisu aanu oggolaanshaha soo marista madaarradooda (Transit) siinin Yuhuudda Ruushka oo xilligaa si weyn ugu soo qulqulayey gudaha dhulka Carbeed ee dawladda Israa'iil isku fidiyey iyaga oo doonaya in ay degaamayn ka helaan, inta badanna soo raaci jiray duulimaadyo khadkoodu yahay in ay ku soo nastaan dalka Holland.
3. In shirkadda duulimaadyada ee Holland ay ballan qaaddo in aanay dawladda Israa'iil ka kirayn diyaaraddaheeda marka ay doonayaan in ay ku soo rartaan hub iyo saanad milateri, sida hore u dhacday.

Kooxdan diyaaradda afduubtay waxa ay gaadheen guul amakaag ah, kaddib markii laga oggolaaday dhammaan shuruddoodii.

- Maalmo yar afduubkan dabadii, ayaa diyaarad kale oo rakaab oo uu Maraykanku leeyahay ay weerareen kooxda Cali Salaama. Waxa ay ahayd 17kii Disambar 1973kii, markii koox Falastiiniyiin ahi ay rasaas oodda kaga qaadeen qolalka lagu nasto ee garoonka diyaaraddaha ee caasimadda Talyaaniga ee Rooma, kaddibna ay gegida diyaaraddaha ka afduubeen diyaarad nooceedu yahay Boeing 707 oo ay leedahay shirkadda Pan American oo markaa taagnayd dhabbaha diyaaraduhu ka haadaan. Kooxdan reer Falastiin, inta ay diyaaradda oo fadhida galeen ayaa ay gudaheeda ku qarxiyeen bambooyin ay ku jirto maaddada sunta ah ee loo yaqaanno Phosphorus taas oo

AlmaZ Books
Telegram



sababtay in dad badan oo ah rakaabkii saarnaa diyaaraddan ee safarka isu diyaariyey ay ku dhex gubtaan diyaaraddii.

Kooxdan naftood-hurayaasha ahaa intan kuma ay koobnaan ee isla markiiba iyaga oo afduub u wata koox ka mid ah rakaabkii diyaaradda ay gudaheeda gubeen oo isaga dhigayeen xabadda ciidamada ammaanka, waxa ay xoog ku fuuleen diyaarad kale oo ay lahayd shirkadda Lufthansa oo qudheedu taagnayd isla garoonka. Diyaaraddan oo nooceedu ahaa Boeing 737 markii ay kooxda afduubku gudaha u galeen waxa ay u diyaar ahayd in ay kacdo, iyaguna waxa ay ku amreen in ay sii waddo kicitaanka.

Diyaaraddani waxa ay fadhiisatay garoonka diyaaraddaha ee magaalada Athena ee caasimadda u ah Giriigga. Halkaas oo markii wadahadalka lala bilaabay ay kooxdan afduubku dalbadeen in loo sii daayo saaxiibbadood oo maxaabiis ahaan loogu haystaytay Giriigga, taas oo loo fuliyey.

## Iskudayga dilka Golda Meir

Wiil uu dhalay Abu Yuusuf Najaar oo ahaan jiray taliyaha guud ee Sabtembarta Madow ayaa maqaal uu dhowaan qoray waxa uu kaga sheekeeyey iskudaygii dilka Golda Meir ee uu aabbihii fikirkiisa ugu weyn lahaa. Wiilkan oo lagu magacaabo Yaasir Maxamed Yuusuf waxaa kale oo uu soo bandhigay sawirrada baasaboorro dalal kala duwan ah oo aabbihii u adeegsaday safarro uu ugu baxay meelo kala duwan oo dunida ah. "Iskudaygani waxa uu ahaa Jenaweri 1973. Raysalwasaarihii Israa'iil Golda Meir ayaa booqasho ku tagtay magaalada Rooma ee dalka Talyaaniga.

AlmaZ Books
Telegram

Naftood-hurayaal ah oo ka tirsan Sabtembarta Madow oo iyagu hore ugu sii diyaar ahaa Rooma ayaa gantaal nooca garabka la saaro ah, oo lagu magacaabo Strela, waxa ay la galeen meel u dhow gegidii diyaaraddaha ee ay diyaaradda Golda Meir ka soo degeysay." Ayaa uu qoray Yaasir.

Dhinaca kalana buugga "By The way of deception" ayaa qisadan sidan u faahfaahiyey: 'Deyrtii sannadkii 1972, ayaa Golda Meir ay ku dhalatay fikrad ah in ay raadiso arrin ay ku jeediso maskaxda Israa'iiliyiinta oo markaas uu cusleeyey xanuunka weerarrada kooxihii gobannimadoonka ahaa ee Falastiiniyiintu joogtada kaga dhigeen iyo Israa'iil oo diblumaasiyad ahaan faquuqnayd intii ka dambaysay dagaalkii Carabta iyo Israa'iil ee Juun 1967. Golda Meir waxa ay doonaysay in ay indhaha rayulcaamka Israa'iil u jeediso dhinac kale oo ka durugsan dhibtaas aynu sheegnay. Sidaas awgeed waxa ay go'aansatay in ay arrintan uga faa'idaysato codsi ay hore ugu gudbisay wadaadkii markaas ugu sarreeyey kaniisadda Kaatoligga oo ahaa Pop Paul kii lixaad.

Juun ayaa ay Golda heshay jawaabta ay kaniisadda Kaatooliggu ugu oggolaanayso dalabkeeda booqasho rasmi ahayd. Isla markiiba waxa ay hawlgelisay masuuliyiinteedii ammaanka, si ay u dhammaystiraan arrimaha dhinaca ammaanka ah ee looga baahan yahay safarkeeda. Inkasta oo uu baaddarigu si rasmi ah u qaabbilayey Golda Meir, haddana arrintaas warbaahinta lama gelin. Sababtuna waxa ay ahayd Faatikaanka oo doonayey in uu dhawro shucuurta Falastiiniyiinta oo tiro ku dhow boqol kun oo ka mid ahi ay yihiin Kiristaan, isla markaana ururka xoraynta Falastiin uu xidhiidh aad u fiican la lahaa Faatikaanka.

AlmaZ Books
Telegram



Markiiba raggii sirdoonka Falastiiniyiinta uga hawgeli jiray Talyaanigu waxa ay Sabtembarta Madow soo gaadhsiiyeen, warka ku saabsan qorshaha Golda Meir ee ah in ay soo booqanayso Faatikaanka si ay ula kulanto baaddari Paul ka lixaad.

Abu Yuusuf oo ahaa hoggaamiyaha ururka Sabtembarta Madow, waxa uu dhambaal u diray Amiirka Cas oo mar ah kuxigeenkiisa, marka kalana ah madaxa kooxda Sabtembarta Madow u qaabbilsan hawlgallada Yurub, laakiin sidoo kalana aan loogala maarmi jirin qorshe kasta oo khaarajin ah oo Falastiiniyiintu muhiim u arkaan.

Abu Yuusuf warqadda uu u diray Amiirka Cas oo markan joogay Jarmalka Bari waxa uu ku yidhi, "Aynu dilno gabadhii dhiiggeenna daadisay." Sida ay Yuhuuddu sheegeen warqaddan iyo waraaqo kale oo muhiim ahaa oo ka mid ahaa kaydka ururka Sabtembarta Madow, waxa ay heleen xilligii dagaalkii Lubnaan ee 1982 oo ay ciidamada Israa'iil gudaha u galeen  Lubnaan.

Abu Yuusuf waxa uu warqaddan ugu sheegay Amiirka Cas, in sida loo dilayo Golda Meir iyo qorshaha hawlgalka oo dhan uu isaga u dhaafayo.

Amiirka Cas arrintan aad ayaa uu u soo dhoweeyey, waxa aanu markiiba gudagalay qorshihii fulinta. Waa run in colaad ka sii daran ta u dhaxaysa Falastiiniyiinta iyo Yuhuuddu ay si gaar ah ugu dhexeysay Sabtembarta Madow iyo xukuumadda Israa'iil oo ay ugu horreyso Godla Meir, laakiin waxaa dheerayd hawlgal noocan ah oo ay Falastiiniyiintu fuliyaan,

AlmaZ Books
Telegram



guul iyo guuldarra ta uu u dhacaba in uu yahay farriin xoog badan oo Yuhuudda iyo dalalka garabka siiyaba u sheegaysa in ururkan ay awoodo yaab leh iyo xeelado dagaal oo sarreeyaa u laaban yihiin.

Dabayaaqadii Nofambar 1972, xarun ay MOSSAD ku leedahay London waxaa ku soo dhacay talefan aan la filayn oo ka yimid nin magaciisa saxda ahi uu ahaa Akbar, laakiin Isxaaq sheegtay. Waa arday Falastiini ah oo caado ka dhigtay in hadba xogta uu soo helo uu ka iibiyo MOSSAD, gaar ahaan waqtiyada uu Yurub ku busaaradsado. Laakiin markaas uu soo hadlay muddo ayaa isugu dambaysay MOSSAD oo aanu sirdoonka Israa'iil wax war ah ka maqlin. Inkasta oo uu ahaa basaas kelidii iska xoogsada, haddana Akbar waxa uu xidhiidh qarsoodi ah la lahaa ururka xoraynta Falastiin. Waxa uu talefankan ku dalbaday in uu doonayo kulan. Maadaama oo aanu muddo wax xidhiidh ah la soo samayn xafiiskan, ma uu jirin sarkaal gaar ah oo arrimihiisa qaabbilsan. Caadi ahaan basaas kastaa waxaa lagu xidhaa sarkaal sirdoon oo uu warka siiyo, tilmaamaha iyo amarradana ka qaato.

Xafiisku markii uu hubiyey in ninka soo hadlay magaciisu uu ku jiro liiska dadkii xogta u keeni jiray, waxa uu ka dalbaday in uu ka tago lambarka talefankiisa, si dib loogala soo xidhiidho marka ballanta loo sameeyo. Gacanyarihii talefanka kala hadlay Akbar waxa uu kombiyuutarka ballamaha ee xafiiska MOSSAD geliyey, in nin magaciisa Isxaaq ku sheegay uu talefanka kala soo hadlay, isaga oo dalbanaya in Robert lala xidhiidhsiiyo. Waxaa kale oo uu kombiyuutarka geliyey talefanka ninka soo xidhiidhay iyo halka uu ka soo hadlay oo London ahayd.

AlmaZ Books
Telegram



Markiiba saraakiisha MOSSAD ee hore ula socday sheekada Akbar waa ay garteen, laakiin intii aanay la xidhiidhin ayaa ay u wardoon tageen, si ay u ogaadaan waxa u kala dambeeyey muddo aanay xidhiidh yeelan.

Waxa ay soo ogaadeen in Akbar uu hadda u soo guuray London oo uu doonayo in uu waxbarasho jaamacadeed ka bilaabo. Waxa aanay isku qanciyeen in ay qasab tahay in wiilkan lala kulmo oo laga warransiiyo si aan loo dayicin fursad kasta oo laga yaabo in lagu heli karo xog u dan ah Israa'iil.

Markii uu sirdoonka Yuhuudda la kulmay, Akbar waxa uu u muujiyey in uu nadiif yahay.

Waxa aanu bilaabay in uu ka warramo xidhiidh dhex maray isaga iyo masuuliyiin ka tirsan FATAX, kuwaas oo amar ku siiyey in uu tago Baariis si ay iyaguna halkaas ugu yimaaddaan, arrimo aad u muhiim ahna uga wadahadlaan.

Markiiba masuuliyiinta MOSSAD waxaa galay tuhun ah in hawshaas safarka u baahatay ee ninkan looga soo xidhiidhay ay aad u weyntahay, muhiimadda uu leeyahayna ay tahayba sababtaa loo doortay ruux iska ciyaalasuuq ah oo aan wax dareen shaki ah laga qaadan karin. Si kastaba ha ahaato 'e Akbar waxa uu muujiyey in illaa markaas aanu wax war ah ka ogeyn waxa kulankaas ay kagala hadli doonaan masuuliyiinta Falastiiniyiintu.

Wiilkan waxaa ka muuqatay baahi badan oo lacageed, sida oo kale sarkaalka MOSSAD ee la kulmay waxa uu ka dareemay cabsi iyo khalkhal badan. Waxaa wejiga Akbar laga dheehanayey xaqiiqada ah in aanu doonayn in uu mar dambe

AlmaZ Books
Telegram



dhex galo guud ahaanba arrimaha sirdoonka ee Yuhuudda iyo Falastiiniyiinta labadaba. Laakiin haddana sida hadalkiisa ka muuqatay waxa uu aaminsanaa in aanu u furnayn jid kale oo uu ku badbaadi karaa, maadaama oo uu hubay in ururka xoraynta Falastiin ay si fiican u garan karaan halka uu joogo, sidaa awgeed aanu ka badbaadin doonin.

Wakiilkii MOSSAD waxa uu Akbar ku qanciyey in uu tago Baariis oo uu la kulmo raggaas Falastiiniyiinta ah ee u yeedhay, waxa aanu siiyey waxoogaa lacag ah iyo lambar talefan oo uu la xidhiidho marka uu tago Baariis.

MOSSAD waxa ay aaminsanayd in waqtigu aanu Falastiiniyiinta u saamaxayn in ay kooxo kala duwan uga yeedhaan dhulalka Carabta, waayo waxaa hortaalla xaqiiqada ah in dadkaasi aanay la qabsan magaalooyinka Yurub, sidaas awgeed haddii ay iskudayaan in ay weerarro ka dhex fuliyaan si fudud loo qaban doono ama loo fashilin karo.

Ururka Sabtembarta Madow isaga oo dareensan in aanu helayn cid sidaas Yurub u kala taqaanna oo uu ka keeno gudaha dalalka Carabta, si ay hawlgallo u fuliyaan, waxa uu la xidhiidhi jiray ardayda iyo shaqaalaha Falastiiniyiinta iyo mararka qaarkood Carabta kale ah ee jooga Yurub si uu ugu qanciyo in ay hawlgalkaas fuliyaan ama gadhwadeen ka noqdaan, maadaama oo ay iyagu ku noolyihiin Yurub si fiicanna u kala garanayaan afka iyo magaalooyinkeeda isla markaana haystaan sharciyo ay iyaga oo aan laga shakiyin ama marmarsiinyo u baahan ku dhex socdaali karaan Yurub.

AlmaZ Books
Telegram



Akbar waxa uu u duulay Baariis, isaga oo ku socda qorshihii ay Sabtembarta Madow u dejisay ee ahaa in uu maalinta xigta ballanta koowaad ku leeyahay xarunta tareennada dhulka hoostiisa mara ee Baariis oo magaceeda la yidhaahdo Pyramides, laakiin dadka uu halkaas kula ballansanyahay aanu ka ogeyn wax dhaafsiisan in ay yihiin xubno ka tirsan ururka Xoraynta Falastiin.

Isla habeennimadii oo aanu weli Akbar u soo duulinba Baariis, xarunta MOSSAD ee London waxa ay xaruntooda Baariis ku wargelisay in laga warhayo Akbar oo isaga ay ka dhigtaan ruuxa ay dabagalayaan, si uu ugu gadhwado kulamada uu Baariis ku yeelanayo. Qaladkii ugu horreeyey waxa uu ka dhacay sirdoonka Yuhuuda oo ka dib dhacay waqtigii ay ballantu ahayd in ay yimaaddaan xarunta Pyramides, si ay halkaas uga bilaabaan dabagalka Akbar.

Xubnihii MOSSAD ee hawshan loo igmaday waxa ay goobtan yimaaddeen xilli ay Akbar iyo kooxdii martigelisay ka ambabaxeen. Waxa aana hubaal ah in haddii ay ku guulaysan lahaayeen in ay dabagalaan Akbar oo ay ogaadaan

kulankaasi halka uu ka dhacayo, si qarsoodi ahna sawirro uga soo qaadaan, ay u fududayn lahayd MOSSAD in ay ogaato wejiyada shabakadda qorshaha soo dejinaysa iyo raadka kooxda aakhirka loo soo xilsaaro in ay disho Golda Meir.

Waa run in MOSSAD aanay markan ogeyn in qorshaha ay Sabtembarta Madow ugu kulmayso Baariis uu yahay in la dilo raysalwasaaraha Yuhuudda, waxaa se la aaminsan yahay in halkaas oo laga soo raaco xididkani ay fududayn lahayd in aakhirka la dabagalo kooxda la soo qorsheeyo oo marka la

AlmaZ Books
Telegram



ogaado halka ay ku jihaysan yihiin la qaato dareenka ah waxa ay u socdeen.

Qorshaha ammaan ee ay Sabtembarta Madow u dejisay socdaalka xubnaheeda ayaa ahaa in ay laba laba u socdaalaan, sidaa awgeedna Akbar markiiba waxaa ku lammaanaaday mid ka mid ah ragga goobta ku sii sugayey oo u kexeeyey halkii qorshuhu ahaa oo aanu isagu weli ogeyn.

Waxaa se uu ku guulaystay in uu ka faa'idaysto fursad yar oo uu helay markii uu saaxiibkiisii la raacay xamaamka si kedis ah u galay, waxa aanu Akbar dhaqso u garaacay talefankii Baariis ee uu soo siiyey sarkaalkii MOSSAD ee ay London ku kulmeen. "Kulan kale ayaa jira" ayaa uu si dhaqso ah Akbar ugu yidhi xubintii MOSSAD ee talefanka ka qabtay. Markii dib loogu soo celiyey su'aasha ah, "Waa kuma?" waxa uu ku jawaabay, "Nin raggiina ka mid ah… Intaa ka badan hadda ma hadli karo" kaddibna talefankii ayaa uu dhigay.

Jaahwareer ayaa ku dhacay masuuliyiintii MOSSAD ee Baariis, waxa aanay markiiba wargeliyeen xaruntii MOSSAD oo warka gaadhsiisay dhammaan waaxyaha kala duwan ee Yurub. Waxa ay noqotay halxidhaale ay furfuri kari waayaan. Warka runta ah ee ay MOSSAD fahamtay waa in ururka Sabtembarta Madow uu wado qorshe uu ku beegsanayo bartilmaameed Israa'iili ah, laakiin waa kee? Waana halkee iyo goorma?

Waxaa heegan la geliyey dhammaan xarumihii MOSSAD ee Yurub. Waxa aana xeeldheereyaasha lafagurka xogaha sirdoonka la faray in ay maskaxda miiraan oo ay u saadaaliyaan bartilmaameedkaas. Laakiin arrinta muhiimka u ahayd ururka

AlmaZ Books
Telegram



Sabtembarta Madow waa in aanu jirin qof keliya oo ka mid ah khubarada la fadhiisiiyey, iyo dhammaan masuuliyiinta kala duwan ee MOSSAD oo ka fikiray in cidda loo shirayo shirqoolkeedu ay tahay raysalwasaaraha Yuhuudda, waayo safarka ay ku tegeyso Yurub waxaa weli ka hadhsanaa laba bilood. Weliba warbaahintana looma sheegin oo waxa uu ahaa war weli ku jira gudaha xafiisyada talada Israa'iil lagu gooyo oo keliya.

Maalintii labaad ayaa uu mar kale soo hadlay Akbar, waxa aanu si kooban sarkaalkii MOSSAD ee talefanka ka qabtay ugu sheegay in duhurka uu u duulayo magaalada Rooma ee xarunta dalka Talyaaniga. Waxaa kale oo uu u sheegay in uu u baahan yahay lacag oo weliba uu dhaqso ugu baahan yahay maadaama oo aanu waqti badan haysan oo markaas uu isu diyaarinayey tegista diyaaraddaha.

Akbar markan uu soo hadlayey waxa uu ku dhowaa xarunta tareennada ee Roosevelt. Masuulkii MOSSAD ee uu la xidhiidhay waxa uu faray in uu raaco tareen labaad oo geeya xarunta tareennada ee Place de La Concorde, marka uu tareenka ka degana uu u dhaqaaqo jiho loo cayimay, isaga oo muujinaya taxaddar badan.

Marka hore MOSSAD waxa ay ku fikirtay in ay qolka huteel kula kulanto Akbar, si ay fursad ugu helaan in ay xogo muhiim ah ka baadhaan, laakiin haddana waqtiga oo aad u yaraa ayaa aan u saamaxayn. Marka laga tago in uu Akbar degdegayo; waxaa iyaduna xakamaynaysay shuruucda ammaanka ee MOSSAD u yaalla oo ahaa, in haddii arrin sirdoon masuuliyiini ugu kulmayaan qol huteel ay qasab tahay

AlmaZ Books
Telegram



in aan qol keliya la kiraysan ee laba qol ay kiraystaan. Kaddibna qolka shirka marka la galo ay qolka kale oo hore loogu sii rakibay kamarado lagula socdo dhaqdhaqaaqa huteelka oo dhan iyo qolka shirka ay galaan rag ka tirsan MOSSAD oo kooxda shiraysa difaaca haddiiba ay dhibaato soo waajahdo.

Sidoo kale ragga qolka kale fadhiya ee ammaanka sugaya oo inta badan laba keliya laga dhigaa, waxa ay haystaan furaha qolkan shirku ka socdo, waxa aanay amar ku qabaan in haddiiba basaaska lala kulmayaa iskudayo in uu dhibaato u geysto masuuliyiinta la kulmaysa in dhaqso ay qolka xoog ku soo galaan si ay u badbaadiyaan saraakiishooda. Akbar markii uu tareenka ka degey, sidii loo sheegay shaaraca ayaa uu iska sii lugeeyey, cabbaar kaddib waxaa soo gaadhay gaadhi yar oo hareer istaagay, waxa aana la faray in uu dhaqso u soo fuulo. Waa saraakiishii MOSSAD ee doonaysay in ay la kulmaan.

Akbar waxa uu MOSSAD u sheegay in aanu haba yaraato ee waxba ka ogeyn bartilmaameedka weerarkan ay Sabtembarta Madow doonayso in ay ka fuliso Talyaaniga, waxaa se uu u caddeeyey in hawlgalkani uu yahay mid aan ku koobnayn in ay dhowr qof fuliyaan, balse uu jiro qalab iyo saanad la doonayo in loo tahriibiyo Talyaaniga. Waa xog fiican in la ogaado in uu jiro qalab, waayo waxa ay iftiiminaysaa xaddiga uu weerarku le'eg yahay, laakiin haddana waa xog aad u kala dhiman oo madow badani ku jiro.

Kooxda MOSSAD ee gaadhiga ku sidday Akbar waxa ay qabeen rajada ah in warkan ay hayaan uu yahay curiye muhiim ah oo laga yaabo in la shiilo xogna loo beddelo marka lagu rogrogo kulanka ay isugu imanayaan khubarada lafagura xogta

AlmaZ Books
Telegram



sirdoonku. Maadaama oo xogta hawlgalka Talyaaniga uu helay xafiiska MOSSAD ee Baariis, sidii nidaamkoodu dhigayey xaruntan ayaa ku qasbanaatay in ay Rooma u dirto sarkaal MOSSAD ah oo isaguna ka ag dhowaada Akbar si uu xogta uga qaato kaddibna warka u soo siiyo xarunta Baariis. Markii la is waraystay kadib, masuuliyiintii MOSSAD ee gaadhiga saarnayd laba nin oo MOSSAD ka tirsan oo ammaanka qaabbilsan ayaa ay amar ku siiyeeen in ay gaadhi yar ku qaadaan Akbar oo ay geeyaan garoonka diyaaraddaha ee Baariis.

Qalad labaad oo weyn ayaa ka dhacay masuuliyiinta MOSSAD ee Baariis. Inkasta oo labadan nin ee la raaciyey Akbar ay ahaayeen rag waayoarag isku tirinaya, isla markaana muddo ka mid ahaa ragga MOSSAD u qaabbilsan soo xerogelinta iyo shaqaalaysiinta basaasiinta, oo weliba midkood uu macallin ka soo noqday akadembiyadda MOSSAD, haddana maalintan waxa ay u dhaqmeen si xilkasnimodarro ah isla markaana hareer marsan dhammaan awaamirtii iyo nidaamkii shaqo ee MOSSAD u yaallay.

Markii ay gegidii diyaaraddaha soo gaadheen, sarkaalkii MOSSAD soo xerogelinta basaasiinta u qaabilsanaa, waxa uu tegey makhaayad ku taallay gegida diyaaraddaha si uu bun uga soo cabbo, halka kii kale uu Akbar u sii raacay gudaha garoonkad iyaaradaha si uu uga caawiyo hawlaha dhoofka iyo rarka shandadaha.

Muddadaas uu Akbar ku hawllanaa, cid kasta oo aragtaana dareemi karaysay in uu caawinayo kaddib ayaa uu ka tegey. Dabcan, sida saxda ahi waxa ay ahayd in labadan sarkaal ee MOSSAD iyaga oo aan wejigooda la arkin ay ambabixiyaan

AlmaZ Books
Telegram



Akbar kaddibna u kala tagaan isaga iyo safarkiisa, laakiin sidaas ma ay yeelin. Haddii ay labadan sarkaal u haysteen in Akbar uu yahay Falastiiniga keliya ee maalintaas gegida kasafrayey, sababtaasna uga tageen taxaddarkii loo baahnaa, been ayaa ay naftooda u sheegeen. Sida ay MOSSAD sannado badan kaddib ka ogaatay dhukumantiyo ay heshay xilligii ay ciidamadeedu galeen Lubnaan, waxaa jiray nin labaad oo ka tirsanaa Sabtembarta Madow oo isna maalintan gegida diyaaraddaha ka safrayey. Waxa uu ahaa xubin lagu kalsoon yahay, shaqadiisa ayaana ay ka mid ahayd in uu la socdo dhaqdhaqaaqa Akbar oo uu markiiba ka shakiyey sababta ruux aanu garanaynin garoonka diyaaraddaha ula joogo, ulana wado fududaynta hawlaha safarka.

Falastiinigani si uu shakigiisa u xaqiijiyo waxa uu si dhow ula socday Akbar iyo ninkan uu garan waayey, muddo kaddib markii uu ninkii Akbar hawlihiisii u dhammaystiray ee uu ka tegeyna waa uu dabagalay. Waxa uu arkay in ninkani uu u tegey nin kale oo isna ku sugnaa maqaaxida gegida diyaaraddaha.

Labada saraal ee MOSSAD marka laga tago in ay ka dib dhaceen xilligii saxda ku ahaa in ay iyagu ka noqdaan gegida diyaaraddaha, qaladka ka sii daran ee ay sameeyeen waxa uu ahaa in maqaaxidii ay muddo iska sii fadhiyeen, iyaga oo weliba si caadi ah ugu wadasheekaysanaya afka Cibriga ee ay Yuhuuddu ku hadasho.

Ninkii ka tirsanaa Sabtembarta Madow markii uu xaqiiqsaday in labadan nin ay wadasocdaan Akbarna iyagu ay madaarka keeneen, waxa uu si dhaqso ah ula xidhiidhay raggii Sabtembarta Madow ee iyagu Rooma joogay, hawshanna ku

AlmaZ Books
Telegram



lug lahaa, waxa aanu u sheegay in Akbar aanu nadiif ahayn, sidaa awgeedna uu uga digayo in ay wejiyadooda tusaan Akbar iyo in ay fahamsiiyaan hawsha loo socdo labadaba.

Akbar iyo labadii sarkaal ee MOSSAD waxa ay sameeyeen qalad aanay sharciga sirdoonka ku jirin in uu ciqaab la'aan taariikhda uun iska galo, waana ay heleen abaalkiisii.

***

Amiirka Cas waxa uu ahaa shakhsiyad aad u dhiirran oo MOSSAD ay ku tilmaami jirtay jar iska xoor, qallafsan oo ismiidaaminta ku raaxaysto, laakiin fariidnimadiisa iyo garaad badnidiisu ay ka sii badantahay qallafsanaantiisa. Isaga ayaa lahaa fikirka ah in gantaaaha Strela loo adeegsado weerarka lagu soo ridayo diyaaradda Golda Meir marka ay Talyaaniga booqanayso.

Gantaalaha Strela waxaa sameeya dalka Ruushka oo u yaqaanna SA7, waxaa kale oo lagu magacaabaa SAM-7 iyo 'Grail' oo ay u yaqaannaan ciidamada NATO. Waa gantaallo samayskoodii waqti badan laga joogo, kuwo aad u badan oo ka casrisan kana waxyeello badanina jiraan, laakiin hawlgalkan uu Amiirka Cas u isticmaalayey waxa ay ahaayeen hubka ugu habboon ee loo adeegsan karayey; oo haddii diyaaradda lala helo, waxaa hubaal ahayd in aanu dhaawacayn ee uu qarxinayo. Sidaas awgeed waxaa ku filan hal xabbo oo qorshuhu ahaa in lala beegsado diyaaradda Golda Meir, marka ay soo cagadhiganayso gegida diyaaraddaha ee Rooma.

AlmaZ Books
Telegram



Dhibaato badan ma ay lahayn helitaanka gantaalaha Strela ama SAM-7, oo ururka xoraynta Falastiiniyiintu waxa uu xarumo tababar ku lahaa dalka Yuguslaafiya, xeryahaas ayaana ay aad u yaalleen gantaalahani. Sidaa awgeed si fudud ayaa ay u helaan hab ay ugu soo qaadaan dalka Talyaaniga iyaga oo soo marinaya badda.

Waqtigaas Ururka Sabtembarta Madow waxa uu lahaa doon ahayd nooca lagu raaxaysto ee Yatch ka loo yaqaanno oo qolal hurdo leh. Doontaas oo aanay ciidamada ammaanka ee Talyaanigu ka warqabin cidda leh waxa ay ku xidhnayd xeebta dhacda bariga dalka Talyaaniga, si toos ahna ugu taalla qarka kale ee badda ka timaadda magaalada Dubrovnik ee dalka Yuguslaafiya.

Amiirka Cas ayaa baararka qiimaha jaban ee magaalada Bamburg ee Jarmalka ka soo helay nin Jarmal ah. Waxa uu ahaa naakhuude si fiican u kala garanaya badda, diyaarna u ahaa in uu ka shaqaysto wax kasta oo uu lacag ka heli karo.

Waxaa kale oo uu Amiirka Casi baar kale oo laga tunto isagana ka soo kiraystay laba dumarka jidhkooda ka ganacsada ah oo iyaguna diyaar u ah in ay helaan lacag, xidhiidh jinsi, maandooriye iyo safar raaxo leh oo badda Adriatic[1] ah. Kooxdan Jarmalka ahayd ee ka kooban ninka iyo labada dumarka ah waxa uu Amiirka Cas soo saaray diyaarad keentay

(1) Adriatic waa gacan badeed ka baydha Badweynta Dhexe (Medhitereeniyaanka) oo u dhexeeya dalalka Isloofeeniya, Kuruweeshiya, Montenegro iyo Albeeniya oo dhammaantood dhinaca bari ee gacankan dhaca iyo dalka Talyaaniga oo dhinaca galbeed ka xiga.

AlmaZ Books
Telegram



caasimadda ah ee Rooma. Intii gaadhigan la soo waday, oo masaafad dheer ahayd saddex magaalana laga soo gudbay, waxaa laga ilaaliyey in la maro jidadka waaweyn, inta badanna xilliga maalintii ayuun baa la wadayey, si looga

dheeraado wax shaki ahi in uu dhaco. Ugu dambayntii waxa uu gaadhigii rarnaa soo gaadhay guri la sii diyaariyey oo Rooma ku yaalla, waana lagu rogay.

***

Abu Yuusuf, taliyihii guud ee Sabtembarta Madow oo Amiirka Cas isagu ku dhaliyey dilka Golda, waxa uu xaalka kala socday Beyruut. Waxaa lagu wargeliyey in basaas khatar ah ay MOSSAD ku dhex beertay ragga loo xilsaaray hawlgalkan; waa Akbar oo ah wiilkii Ingiriiska laga soo diray. Abu Yuusuf waxa uu go'aamiyey in aan la dilin ama xitaa shaki la dareensiin, waayo dilkiisa ama in la dareensiiyo in la ogaaday waxa ay khatar gelinaysaa hawlgalka guud oo dhan. Sidaas awgeed uu xalka hadda yaallaa yahay in Akbar looga faa'idaysto in xog majarahabaabin ah loo mariyo MOSSAD. Talada kale ee Abu Yuusuf waxa ay ahayd in la sameeyo hawlgal kale oo ay MOSSAD u qaadato in uu yahay hawlgalkii lagu dabajiray.

Sida uu qorayo buugga "By Way of deception", Sirdoonka Yuhuuddu waxa uu aaminsanaa in ay isku xidhnaayeen hawgalkii aynu hore uga soo warrannay ee safaaradda Israa'iil ee Thailand galeen koox Sabtembarta Madow ka socota iyo hawlgalkan Talyaaniga ee lagu soo ridayey diyaaradda Golda Meir. Waxa uu buuggu sheegayaa in Abu Yuusuf iyo Amiirka Cas si ay u majarahabaabiyaan MOSSAD ay qorsheeyeen hawlgalkii safaaradda.

AlmaZ Books
Telegram



Rooma, kaddibna waxaa la saaray laashkii ururka Xoraynta Falastiin oo laga buuxiyey cunto, cabbitaan iyo maandooriye.

Amarka keliya ee kooxdan la siiyey waxa uu ahaa in ay laashkan u kaxeeyaan jasiirad yar oo ku taalla dhinaca kale ee Dubrovnik, kaddibna ay halkaas ku sugaan koox ku soo rari doonta sanaaduuq loox ah oo dib ugula soo noqonayaan xeebta woqooyiga Bari. Waxaa halkaas ku sugaya koox kale oo kala wareegi doona laashka iyo waxa saaranba, iyagana mid kasta la siindoonaa lacag lagula heshiiyey, waana la fasixi doono.

Amiirka Cas sababta uu u doortay in dadkan uu ku shaqaysanayaa Jarmal noqdaan, waxa ay ahayd isaga oo doonayey, haddiiba hawlgalku fashilmo ama si uun loo ogaado, in ay dawladda Talyaanigu u qaadato in uu ka dambeeyey ururka Ciidamada Cas (Red Army) oo Jarmalka awood ku lahaa, dalalka Yurub badankoodana ka soo horjeedeen. si uu meesha uga baxo tuhun laga qaado ururka xoraynta Falastiiniyiinta.

Markii kooxda Jarmalka ahi ay yimaaddeen Talyaaniga iyaga oo sida sanduuqyadii, waxaa loo keenay laash yar oo ka wareejiya rarkii, kaddibna inta ay kaxeeyeen kooxdii Jarmalka ahayd ayaa ay doontii geeyeen badweynta oo ah meel rubuc Mayl u jirta xeelliga, kaddibna waa ay daldalooliyeen si uu u qarqoonto.

Gantaalihii SAM-7 ka ahaa waxa ay Falastiiniyiintu ku rareen baabuur xammuul nooca Talyaaniga lagu sameeyo ee FIAT ka ah, kaddibna koox ka mid ah Sabtembarta Madow ayaa ka soo kaxeeyey magaalada Bari oo keenay magaalada

AlmaZ Books
Telegram



$28^{kii}$ Disambar 1972, saddex toddobaad oo keliya ka hor waqtigii ay qorshaysnayd booqashada Golda Meir ee Rooma oo ahayd $15^{ka}$ Jenaweri, Sabtembarta Madow waxa ay weerar ku qaadeen safaaradda Israa'iil ku lahayd magaalada Baankoog ee caasimadda Thailand. Waxaa yaab lahayd maalinta lagu beegay weerarkan oo ahayd maalin ay dalkaas ka dhacaysay munaasabad weyn oo dhaxalsugenimada boqortooyada dalkaas loogu caleemasaarayey Amiir Fajaayir Lungaran. Munaasabaddu waxa ay ka dhacaysay xarunta baarlamanka ee dalkaas, dadkii lagu casuumay ee joogayna waxaa ka mid ahaa danjiraha Israa'iil ee Thailand, sidoo kale inta badan diblumaasiyiinta dalkan joogta ayaa ka qaybgalayey munaasabaddan oo dalkaas si aad ah looga weynaynayey.

Hawlgalkan oo bilowgii ka nixiyey Israa'iil, markii dambe MOSSAD iyo dalal badan oo kalaba waxaa amakaag ku noqotay sida uu ku dhammaaday oo ay ahayd in ay shaki ka geliso asal ahaanba niyadda marka hore ka dambaysay qabsashada safaaradda.

Sabtemberta Madow waa ay ku guulaysatay damaceedii ahaa in ay qabsato safaaradda, laakiin hawlgalkani waxa uu dhammaantii ahaa masraxiyad ay doonaysay in ay indhaha Israa'iil kaga soo jeediso xogaha uu Akbar ka soo bixiyey dhaqdhaqaaqa ka jiray Rooma. Markii ay safaaradda qabsadeen oo weliba ay gudaha ku qafaasheen lix Yuhuud ah oo uu ku jiro safiir iyo xaaskiisu, haddana hal saac gudaheed ayaa ay ku oggolaadeen in ay sii daayaan dhammaan lixdii Yuhuudda ahaa ee ay safaaradda ku haysteen, kuwaas oo xitaa uu ku jiray nin ahaa danjiraha Israa'iil ee Komboodiya, oo waxa keliya ee

ay taas beddelkeeda heleenna uu ahaa in ay nabadqab kaga baxaan Thailand.

Inkasta oo arrintani abuuraysay dareen shaki oo ay ka mid tahay, kaalinta ay Masar ka qaadatay furdaaminteeda, iyo sida ay naftood-hurayaashu ugu tanaasuleen wadahadalkii lagaga xoog batay ee ahaa in aan dalabkooda loo fulinayn, iyaguna naftooda badbaadiyaan. Taas oo noqonaysa markii ugu horreysay ee la arkay Sabtembarta Madow oo guul u bislaatay sidaa fudud uga tanaasusha.

Warbaaahintii dhacdadan ka faallootay, xeeldheerayaashii lafaguray iyo xitaa masuuliyiintii sirdoonka MOSSAD waxaa seegtay in ay mar keliya maskaxdooda ku soo dhacdo suurtogalnimada in hawlgalkani aanu marka horeba ahayn mid ay Sabtembarta Madow doonaysay in ay khasaare ku gaadhsiiso Israa'iil, balse uu yahay ceeryaan ay ku asturayso waxa ka socda Rooma.

Waa marka laga reebo Shay Kuwli oo madax ka ahaa xarunta MOSSAD ee magaalada Milano Talyaaniga, oo isagu mar kasta masuuliyiinta kale ee MOSSAD kula doodayey in hawlgalkan Thailand uu qarinayo mid ka weyn oo Talyaaniga ka socda, cidi se aanay dhegeysan. Waxaa iyaduna xiise gaar ah leh sida yaabka leh ee ay Sabtembarta Madow ugu guulaysatay in ay jaahwareeriso xeeldheerayaasha MOSSAD, oo si fudud isaga rumaystay war ay si badheedh ah ugu soo mariyeen Akbar oo aan isaga qudhiisu dareensanayn in cidda uu cadowga ku yahay u adeegayo.

 https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Sabtembarta Madow waxa ay Akbar u sheegeen in hawlgalkii Talyaanigu uu ku adkaaday, sidaas awgeed loo wareejiyey dal kale oo aan laga filayn, horena aanay uga dhicin in Falastiiniyiintu ay ka fuliyaan hawlgallo ka dhan ah Israa'iil, laakiin isaga laga rabo in aanu markan raacin, maadaama oo dalalka Yurub ee uu aad u fahmayey laga baxayo. Akbar oo u haysta in uu xog muhiim ah soo helay ayaa si dhaqso ah MOSSAD u soo gaadhsiiyey, "Hawlgalkii waxaa loo wareejiyey dal aan Yurub ahayn oo aan laga filayn, isagana laga reebay." MOSSAD bilowgii warka Akbar su'aalo badan ayaa ay ka qabtay, laakiin haddana waa ay ku hawlgashay oo waxa ay heegan sare gelisay ammaanka dhammaan safaaradaheeda dunida, gaar ahaan kuwa ka baxsan Yurub oo aanay ku jirin safaaradda Thailand oo aanay iyada ka filayn.

Markii weerarka safaaradda Yuhuudda ee Bangkok uu dhacay, masuuliyiinta ugu sarraysa MOSSAD, iyo xitaa xukuumadda Israa'iil, aad ayaa ay ugu qanceen in hawlgalkani uu yahay kii loo socday ee illaa Faransiiska ay ku daba jireen. Si aad u weyn ayaa ay MOSSAD iyo guud ahaan Israa'iil ugu faraxday, in weerarkaasi uu dhammaaday isaga oo aanay waxba ku noqon cid Israa'iiliyiin ahi. Waxa ay u arkeen in Akbar uu xog lagu kalsoon yahay soo helay, Akbar qudhiisuna waxa uu si weyn ugu kalsoonaa in hawlgalkaas ka dhacay Bangkok uu yahay kii loo jeeday, sidaa awgeedna markii uu dhammaaday waxa uu dhaqso ula xidhiidhay masuuliyiintii MOSSAD ee Rooma joogtay oo uu kulan ka codsaday.

AlmaZ Books
Telegram



Maadaama oo ammaanka MOSSAD si aad ah u feejignaan jiray mar kasta oo ay la kulmayaan basaas Carbeed, isla markaana duruufta Akbar ay ahayd mid qasbaysa in la feejignaado, masuuliyiinta Sabtembarta Madow iskuma ay mashquulin in ay si gaar ah u dabagalaan kulamada Akbar la yeelanayo MOSSAD raggeeda jooga Talyaaniga, mar kasta oo uu ballan u baxayana ma ay ku samayn jirin dabagal aad u dhow iyaga oo ka cabsi qaba in cid MOSSAD ah oo dusha kala socota dhaqdhaqaaqa Akbar ay fahanto in ninkan lagu daba jiro. Maadaama oo Akbar aaminsanaa in hawlgalka Falastiiniyiintu u socdeen uu ahaa kaas uun, waxa uu MOSSAD ka dalbaday in ay lacagtii uu shaqaystay siiyaan isaga oo doonaya in uu dib ugu noqdo London.

Akbar markii uu sarkaalkii MOSSAD ee joogay London u sheegay in uu ku kalsoon yahay in hawlgalkii jiray ee ay ku raadjoogeen uu ahaa kaas ka dhacay Thailand, sidaa awgeed uu dib ugu soo noqonayo London si uu waxbarashadiisii u sii wato, ayaa waxaa uu sarkaalkani ka codsaday in uu u soo xado dhukumantiyada Falastiiniyiinta ee yaalla xafiiska ay ku leeyihiin Rooma, kaddibna u geeyo sarkaalka MOSSAD ee Talyaaniga ay ku kulmeen.

Arrintaas Akbar waa uu ka hawlgalay, Sabtembarta Madow oo ku daba jirtayna markii ay dareentay in uu xiisaynayo xafiiskan iyo waxa yaalla waxa ay siisay dariiq uu u maro, iyaga oo ka tabaabushaytay waxa muhiimka ah ee uu qaadan kari lahaa. Isaga oo kalsooni ku qaba in aanay Falastiiniyiintu fahamsanayn ayaa qaatay shandad kuwa dhukumantiyada lagu guro ah. Waxa uu la ballamay masuuliyiintii MOSSAD

AlmaZ Books
Telegram
https://t.me/maktabadasharciga



ee Talyaaniga oo qaab la mid ah kii ballantii Faransiiska markanna ula ballamay in uu waddada iska maro, kaddibna gaadhiga soo ag istaaga dhaqso u fuulo iyada oo gaadhi labaad oo sugaya ammaanka saraakiisha saaran gaadhigan uu Akbar raacayaana uu si aan la dareemayn isaga daba socdo, isla markaana looga dhex maqlayo hadallada ay is weydaarsanayaan Akbar iyo ragga MOSSAD, waxa aana hadalka soo gudbinayey qalab warlalis ah oo labada gaadhi isugu xidhan.

Akbar gaadhigii ayaa soo ag istaagtay, sidii caadadu ahaydna xagga dambe ayuu fuulay, isla markiibana sidii loo sheegay shandaddii uu sitay waxa uu dhigay xagga hore. Kaddib waxaa dhaqso u furay ninkii ammaanka qaabbilsanaa ee kursiga hore fadhiyey, laakiin dhukumantiyadii uu ka filayey in uu tiradooda hubin doono kama uu helin. Waxaa kaga soo baxay qarax aad u weyn oo gaadhigii gebi ahaantiiba baabi'iyey.

Waxa aana markiiba dhintay Akbar oo ahaa basaaskii reer Falastiin, sarkaalkii shaqaalaysiinta u qaabbilsanaa MOSSAD, iyo laba nin oo ammaanka u qaabbilsanaa oo ahaa Yuhuud, darawalkiina waxaa soo gaadhay dhaawac culus oo waaxyaha qaar jaray iyo mid aad u weyn oo dhinaca maskaxda ah, waxa uu noqdayna bukaan dhimirka ah oo aan abid ka soo kaban.

Gaadhigan waxaa daba socday mid labaad oo ay saarnaayeen saddex nin oo ammaanka gaadhigan iyo masuulka saaran qaabbilsanaa, weliba waxa ay dhegaha ku hayeen sameecadaha warlaliska ee ku rakibnaa gaadhiga masuulka MOSSAD iyo Akbar si ay arrinka u farogeliyaan haddiiba ay dhacdo in uu Akbar tacaddi kula kaco sarkaalka MOSSAD. Mid labadan nin ee ammaanka ka mid ah oo markii qaraxani dhacay isagu

AlmaZ Books
Telegram



dhegaha ku hayey sameecadaha warlaliska ayaa markii dambe sheegay in uu sameecadda ka maqlayey Akbar oo mar keliya inta uu qayliyey leh, "Ha furin" laakiin markiiba qaraxa ayaan ku simin

Sarkaalkani waxa uu sheegay in codkaas uu maqlay dartii uu aaminsan yahay in Akbar uu ogaa xaqiiqada waxa shandadda ku jiray, oo sidaa awgeed markii uu sarkaalka ammaanku damcay in uu furo uu uga digayey. Si kastaba ha ahaato 'e, MOSSAD warbixinno badan oo ay arrintan ka soo saartay waa ay caddayn kari weyday in Akbar uu basaas u wada ahaa MOSSAD iyo Sabtembarta Madow iyo in uu iyada u gaar ahaa.

Kooxdii gaadhiga dambe saarnayd waxa ay u yeedheen gurmad caafimaad oo ay iyagu lahaayeen, waxa aanay markiiba urursadeen hilbihii saaxiibbadood, Akbarna halkii ayaa ay kaga tageen oo mar dambe ayaa uu bilayska Talyaanigu qaaday.

Dad badan ayaa aaminsan in Sabtembarta Madow ay ku qaldantay in dilka Akbar ay ka horreeysiiso imaanshaha Meir ee Talyaaniga. Waayo waxa uu MOSSAD siiyey ishaaro cad oo ah in marti culus oo aanay jeclayni ay Rooma joogto, suurtogalna ay tahay in hawlgallo karayaan.

Mark Hensery oo ahaa ninka ugu sarreeyey xafiiska MOSSAD ee Talyaaniga, isagu waxa uu ku dagmay hawlgalkii Bangkok, oo ma uu aaminsanayn in hawlgal labaad oo Talyaaniga ahi uu hadhay. Lakaiin Shayi Kawli, madaxa MOSSAD ee magaalada Milano, ayaa isagu sidiisii weli ugu sii adkaysanayey in hawlgal Talyaaniga ahi dhiman yahay, waxa

AlmaZ Books
Telegram



aana la filayaa in adkaysigiisu uu ka mid yahay sababaha markii dambe badbaadiyey nolosha raysalawasaaraha Yuhuudda.

Kawli waxa uu dib u eegay dhammaan warbixinihii uu hore u soo diri jiray Akbar iyo weliba dhaqdhaqaaqyadii Sabtembarta Madow ee ay hore uga war heshay MOSSAD. Waxaa u soo baxay faham ah in hawlgalka uu xogtiisa ka warramayey Akbar aanu ahayn kan ka dhacay Bangkok.

Si kastaba ha ahaato 'e cid u garowda kama uu helin MOSSAD, isna caddayn sugan ma uu haynin oo wixiisu waxa uu noqonayey uun maleawaal iyo faham fog.

Dhinaca kalana MOSSAD waxa ay canaanta waxa dhacay oo dhan dusha u saartay sarkaalkii u qaabbilsanaa soo xerogelinta basaasiinta cusub ee joogay safaaradda London, oo waxa ay sheegeen in qaladka ugu weyn ee masuulkaas London joogaa sameeyey uu ahaa in uu Akbar ka dalbaday in uu dhukumantiyo ka soo qaado Falastiiniyiinta, isaga oo aan digniin iyo tababar hore midna ku siinin sida uu u feejignaan karo marka uu hawl sidan u khatar badan gelayo.

Kawli shakigiisii waxa uu ku qasbay in uu sii dabagalo arrintan, waxa aanu aakhirkii ku guulaystay in uu xog muhiim ah ka helo talefan si joogto ah ay MOSSAD u dhegeysan jirtay oo ay lahayd gabadh deggen Beljem oo si gaar ah ula shaqayn jirtay kuna xidhnayd Sabtembarta Madow, isla markaana gurigeeda ay marar badan kula hoyan jireen masuuliyiinta Sabtembarta Madow.

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

Nin uu isagu ku sheegay Salaama, balse aan la caddayn, iyo nin kale oo jooga Talyaaniga ayaa ka wadahadlayey talefanka guriga ee gabadha oo ah kan ay sida qarsoodiga ah MOSSAD u dhegeysato. Codka uu Cali Salaama ku sheegay waxa uu ruuxa Talyaaniga jooga farayey in, "Gurigii la banneeyo, sida ugu dhaqsaha badanna afar iyo tobankii xabbo ee keegga ahaa looga qaado." Kawli waxa uu qaatay xogtan ah in uu jiro nin Sabtembarta Madow ka tirsan oo Rooma jooga, lana amray in uu maalinta labaadba guriga ka guuro, weliba qalab tiradiisu 14 tahay ka raro guriga.

Waxa uu ku adkaystay in xogta runta ahi ay tahay in ninkaasi ku hawllan yahay arrin Israa'iil ka dhan ah; oo Inkasta oo aanay saaxiibbadiisii ka sarreeyey hawshaas ku wadaqancin, haddana markan warkiisu waxa uu noqday mid mudan in ay tixgelin siiyaan. Gurigii ninka lala hadlayaa joogay ayaa ay raadiyeen iyaga oo ka faa'idaysanaya khadka isgaadhsiinta ee lagula soo hadlayey.

Aakhirkii MOSSAD waxa ay heshay gurigan oo nasiibdarradooda laga guuray, sidii amarkii talefanku ahaa. Waxaa se amakaag ahayd markii raggii MOSSAD ay gurigan ka heleen caddayn xoojinaysa doodda Kawli oo ah in uu jiro hawlgal ka qarsoon, weliba cabsida ugu weynina tahay in uu ku waajahan yahay Golda Meir oo laba maalmood kaddib imanaysay Talyaaniga. Waa warqad ah kuwa yaryar ee lagu dhejiyo qalabka iyo waxyaabaha warshaduhu sameeyaan. Waxa ay ku qoran tahay Afka Ruushka, oo baadhistii ay caddaysay in waraaqdani ay ku dhegsan tahay xagga dambe ee gantaalka SAM-7 loo yaqaanno.

AlmaZ Books
Telegram



Mid ka mid ah baadhayaashii MOSSAD ee goobta taagnaa ayaa inta uu cadho ismadax maray, waxa uu isla kala jiiday nabar uu maxbuuskii Falastiiniga ahaa la miyirbeelay. Kaddib waxa uu soo qaatay aalad qaraxda oo lagu magacaabo PT-Active oo uu sitay Falastiinigu. Qalabkan ayaa inta badan ay naftood-hurayaasha Falastiiniyiintu ay qaraxyada u adeegsadaan. Sarkaalkii MOSSAD xadhiggii ku xidhnaa PT-Active ka ayaa uu xadhig kale ku dheereeyey, kaddib inta uu Falastiinigii ku duubay ayaa isaga iyo saaxiibbadiisii MOSSAD ay ka durkeen, waana uu qarxiyey.

Halkaas ayaa uu ku dhintay naftiihurihii Falastiiniga ahaa oo hilbihiisu googo'een. Goobtii oo dhami waxa ay isu beddeshay faran dagaal, jaahwareer badan ayaa ku dhacay labadii dhinacba. Saraakiisha MOSSAD iyo masuuliyiinta ammaanka ee lashaqaynayey waxaa maskaxdooda in badan ka sii guuxayey ereyo hanjabaad ahaa oo uu ku yidhi falastiinigii ay dileen. Waxaa u muuqatay runta ah in xaaladdu ay adagtahay, maadaama iyada oo 15 daqiiqo oo keliyi ka hadheen waqtiga imaanshiyaha Golda Meir ay weli garan kari la'aayeen in hawlgalkaasi fashilmay iyo in uu Golda Meir sahayan doono.

Saraakiisha Sabtembarta Madowna waa ay ka sii warwar badnaayeen, xaaladdoodu meel adag ayaa ay maraysay; dhowr nin waa laga qabtay, waxa aanay MOSSAD heshay dhowr ka mid ah goobihii ay dhigeen Gantaalaha SAM-7, Laakiin weli waxa ay ku adkaysanayeen in ay ku sii socdaan qorsihii khaarajinta Golda Meir.

Telegram

AlmaZ Books
Telegram
https://t.me/maktabadasharciga



Saraakiisha MOSSAD si ay uga hortagaan in qalad dhaco, waxa ay la xidhiidheen diyaaraddii sidday Golda Meir oo ay ka codsadeen in ay cabbaar hawada ku jirto. Waxa ay ahayd xeelad ay doonayeen in ugu yaraan la weydaariyo waqtigii ballanta imaanshiyuhu ahayd oo laga yaabo in Sabtembarta Madow xogtiisa hayso qorshaheeda ku salaysay. Waa fursad lagu tijaabinayey nasiibka ah in cadowga waqtigu ka khalkhalo oo sidaas diyaaraddu ku badbaaddo, waana sida ay ugu dambayntii u dhacday.

Bilayska Talyaanigu waxa uu xabsiga dhigay shan xubnood oo ka mid ah kooxdii ku lug lahayd hawlgalkan fashilmay, laakiin arrinta Israa'iil ay aadka uga xumaata,

wax sharraxaad ahna aan laga siinin waxa ay tahay, in dawladda Talyaanigu ay muddo kaddib sii deysay Shantii nin ee Falastiiniyiinta ahaa iyada oo aan si rasmi ah uga hadal sababta iyo sida wax u dhaceen. Waxaa jira dareen ah in Amiirka Cas uu ku guulaystay in uu dawladda Talyaaniga ku qanciyo sii deynta raggiisa, isaga oo wax uun dawladdaas u muhiim ahaa dhaafsaday.

Amiirka Cas waxa uu dhiggiisa dheeraa in uu ahaa maquuste aan dhayal isugu dhiibin guuldarrooyinka, waxaa tusaale fiican u ah sida bartilmaameed uu mar seegay aanu dhayal uga hadhi jirin. Guuldarradii uu kala kulmay qorshihiisii Rooma ee khaarajinta Golda Meir kagama uu rajo dhigin in uu mar kale iskudayo hawllo cusub.

AlmaZ Books
Telegram



Markii xaalku halkaa marayay ayaa waxaa raysalwasaare Golda Meir la xidhiidhay taliska guud ee MOSSAD oo ku wargeliyey in uu jiro dareen ammaandarro, kana codsaday in safarka dib loo dhigo. Laakiin dalabkaas waxa ay kaga jawaabtay, "Waan la kulmayaa Boobka (Baaddariga Vetican) maalintaas ballantu tahay, adiga iyo raggaaga ayaana laga rabaa in aad sugtaan in diyaaraddu si nabadgelyo ah ku degto." Sidaa waxaa lagu caddeeyey buugga 'By Way of deception'.

MOSSAD waxa ay isu diyaarisay in ay gudato waajibkeeda ay Golda Meir xasuusisay ee ah 'in iyadu ay ka masuul tahay ammaanka raysalwasaaraha iyo diyaaraddiisa'. Gegida diyaaraddaha ee Rooma ayaa ay hareerihiisa iyo deegaannada ka ag dhow oo dhan gelisay ciidamadeeda sirta ah iyo kuwa qaabbilsan sugidda ammaanka oo ay garab siinayaan ciidamada Talyaanigu.

Amiirka Cas ma uu ahayn nin sidaa dhayalka ah gal dadliq ah ku gala. Sirdoonkiisa jooga Rooma ayaa markiiba ku wargeliyey in uu jiro dareen ah in laga warhelay dhaqdhaqaaqooda iyo weliba qorshahooda. Sidaas awgeed waxa uu amray in ay taxaddar dheeraad ah sameeyaan, gaar ahaan in aanay habeenkii tegin xeebta si ay diyaaradda Golda Meir u beegsadaan, sidii markii hore qorshuhu ahaa. Waxaa kale oo uu faray in ay baabuurtooda gudahooda ay ku hoydaan, maalintaasna ay ka fogaadaan guryahooda, si ay uga badbaadaan baadhitaanka MOSSAD iyo ciidamada ammaanka ee Talyaanigu ku samayn doonaan guryaha ku dhow gegida diyaaraddaha oo dhan. Waa habeenkii ka horreeyey imaanshaha Golda Meir, wax raad ahna MOSSAD kuma ay soo helin baadhistii.

***

AlmaZ Books
Telegram



Raadin aan habeen iyo dharaar ah loo nasan kaddib, ayaa ay dhacday fashilaaddii koowaad ee hawlgalka Falastiiniyiintu. Mid ka mid ah kooxda raadinta ee MOSSAD ayaa isaga oo ku dhex wareegaya jidadka magaalada ee garoonka diyaaraddaha Rooma u jira masaafad uu gantaalka SAM-7 ka gaadhi karo diyaaradda Gold Meir, waxa uu si lama filaan ah u arkay gaadhi yar oo dul xidhan oo jidka dhinaciisa taagan. Gaadhigan oo lagu dul iibinayey cunto fudud ayaa uu saqafkiisa sare ku arkay wax ka yaabiyey.

Laba jeer oo hore uu jidkan u maray, gaadhiganna si gaar ah u eegay wax aanu ku arkin ayaa uu markan saddexaad ku arkay. Saqafka sare ee gaadhiga waxaa ka muuqday saddex dhuumood oo ah kuwa burmadda ama egsaaska loo yaqaanno ee qiiqa mishiinnadu ka baxo, midkood ayaa uu qiiq khafiif ahi ka baxayey, maadaama oo gaadhigu sida tallaagadda u shaqanayey oo sidaa awgeed aan la bakhtiin. Waxaa se uu is weydiiyey waxa ay qabtaan labada dhuumood ee kale ee aanu qiiqu ka baxayn, iyo sababta aanay mararkii hore ugu oollin.

Markii arrintii la baadhay waxaa caddaatay in Kooxda Sabtembarta Madow ay ka takhalluseen ninkii gaadhigan cuntada ku iibinayey ee lahaa, kaddibna inta ay laba meelood ka dalooliyeen saqafka sare ee gaadhiga ay ku rakibeen gantaalihii SAM-7, qorshahooduna ahaa marka ay diyaaradda Golda Meir ku soo dhowaato dhabbaha diyaaradda, oo marka ay fadhiisanayso ay imanayso meel liishaan ahaan gaadhigan ku beegan, ay keebta qabtaan, filashaduna ahayd in 15 ilbidhiqsi gudahood ay diyaaradda Golda Meir ku burburto.

AlmaZ Books
Telegram



Maarso 1973, Golda Meir waxa ay booqasho ku tegeysay magaalada New York ee dalka Maraykanka. Hay'adda Ammaanka Qaranka ee Maraykanka ayaa ogaatay in Falastiiniyiintu ay damacsanayd in ay qaraxyo ka sameeyaan magaalada New York. Waxa uu ahaa qorshe ay Sabtembarta Madow doonaysay in ay saddex gaadhi oo walxaha qarxa lagu cabbeeyey ku qarxiso New York.

Suurtogal uma ay ahayn in ay gaadhaan ama si toos ah u beegsadaan Golda Meir, laakiin waxaa ku filan in isla daqiiqadaha ay soo degto ay baabuurtan saddexda ahina qarxaan oo la isku beego xaaladdaa ammaan xumo iyo soo cagadhigashada Golde Meir. Dhinaca kalana waxa ay ahayd farriin ay Falastiiniyiintu Maraykanka ugu sheegayaan in aanay ka raalli ahayn qaabka eexda ah ee ay u garab istaageen dawladda dhulkooda qasabka lagaga dhisay ee Israa'iil.

Cillad farsamo oo ku timid awgeed, baabuurtii waa ay qarxi waayeen, laakiin ciidamada ammaanka Maraykanka muddo 18 sanno ah ayaa ay ku qaadatay in ay qabtaan sarkaalkii hawlgalkan Amiirka Cas u qaabbilsanaa oo ahaa Khaalid Duham Aljawaari.

Khaalid Duham Aljawaari oo da'diisu 27 sanno jir ahayd markaas, waxa uu ahaa Falastiini ku koray Urdun. Waxa uu sitay baasaboorka Ciraaq, waxa aanu ahaa ninka Amiirka Cas uu u xilsaaray fulinta hawlgalkan. Khaalid waxa uu u safray Kanada magaalada Montreal, kaddibna waxa uu uga gudbay magaalada Boston ee Maraykanka, halkaas oo uu ka soo gaadhay magaalada ujeedadiisu ahayd ee New York.

AlmaZ Books
Telegram



FBI ayaa sirdoonka Israa'iil ka heshay xog sheegaysa in Jawaari uu damacsanyahay qorshe ammaan oo aanu weli ujeedkiisa dhabta ahi caddayn. Laakiin markii ay FBI qabatay Jawaari waraysiga ay la yeelatay waxa uu u shegay in qorshihiisu yahay in uu dugsiyada tababarka duulimaadyada koorsooyin ka qaato, bil kadbibna ka tago Maraykanka si uu duuliye diyaaraddaha rayidka ah uga noqdo Bariga Dhexe.

Muddadii uu New York joogay waxa uu xidhiidh jacayl la sameeyey gabadh ahayd carmal wiil yar leh oo Maraykan ah, mar dambe waxa uu sirdoonku ogaaday in marka uu u baxo sahamin uu sii kaxaysan jiray wiilkaas Maraykan ee afadiisu dhashay, si uu uga dhigto gabbood. Tusaale ahaan mar ayaa isaga oo ka faa'idaysanaya kalsoonida uu wiilka hooyadii ka haysto iyo kalgacalka uu wiilka ku beertay, waxa uu wiilkan yar u kaxaystay jidadka iyo badhtamaha New York si uu u soo indho indheeyo, wiilka yarina shakigii laga qaadi lahaa meesha uga saaro.

Maalmo yar uun kaddib ayaa Aljawaari uu saddex gaadhi oo kuwa la kireeyo ah uu ka soo buuxiyey walxaha qarxa. Waxa uu dhigay saddex meelood oo ka ag dhowaa shirkado ay Yuhuuddu ku leedahay magaalada New York, Bangi Yuhuuddu ku leedahay magaalada iyo shirkad maaliyadeed.

Qorshaha Sabtembarta Madow waxa uu ahaa in baabuurtani ay qaraxdo 4[tii] Maarso oo ku beegan maalinta ay New York imanaysay Golda Meir. Nasiibdarrada Sabtembarta Madow baabuurtaasi ma ay qarxin, sababo ay markaas FBI ku sheegtay in ay la xidhiidho cillad farsamo oo la xidhiidha nidaamka dabka ee loo rakibay.

AlmaZ Books
Telegram



## Sidee lagu ogaaday?!

Baadhitaanno ay samaysay Wakaaladda Ammaanka Qaranka ee Maraykanka oo sannadkii 2009 ay baahisay wakaaladda wararka ee AP ayaa sheegaya, in wakaaladu ay qabatay dhambaal uu diblumaasi Ciraaqi ah oo Maraykanka joogaa u dirayey wasiirka arrimaha dibadda ee Ciraaq oo joogay Baqdaad. Farriintaas ayaa uu diblumaasigani wasiirkiisa uga warramayey qorshaha ay Sabtembarta Madow wadday oo uu ogaaday. Waxa uu si cad u sheegayey waqtiga ay Falastiiniyiintu doonayaan in ay qorshahooda fuliyaan, sidoo kale waxa uu tilmaamay goobo ka mid ah meelaha ay qorshaynayaan in ay beegsadaan.

FBI si qarsoodi ah ayaa ay u akhrisatay dhambaalka diblumaasigani u dirayey dawladdiisa, kaddib waxa ay markiiba ku hawlgashay xogtan. Waxa ay soo heshay dhammaan saddexdii gaadhi ee la qarxinayey oo diyaarsan Inkasta oo ay maalmo qaadatay in la soo wadahelo, kaddibna la ogaado shirkadaha baabuurta laga soo kiraystay iyo cidda ay ka soo kireeyeen. Khubarada FBI waxa ay sheegeen mid gaawaadhidan miinaysan ka mid ahi haddii uu qarxi lahaa ay suurtogal tahay in uu dili kari lahaa boqollaal qof.

FBI waxa ay markiiba bilowday olole baadhitaan oo aad u ballaadhan, kaas oo ay ka qayb qaadanayey saddex boqol oo baadhayaasha xeesha dheer ee hay'adda ka mid ah. Inkasta oo waaran qabasho markiiba loo jaray Jawaari, haddana waxa uu ku guulaystay in uu ka baxsado dalka.

Sannadkii 1991, ayaa la qabtay Jawaari oo ka soo duulay dalka Ciraaq, kuna socday dalka Tuuniisiya oo uu doonayey in uu kaga qaybgalo aaska Abu Iyaad oo ay Israa'iil dishay. Waxaa

AlmaZ Books
Telegram



lagu qabtay magaalada Rooma, Talyaaniga, oo ay diyaaraddu kula hakanaysay, dembiga marka koowaad loo qabtayna waxa uu ahaa in uu isticmaalayey baasaboor been abuur ah oo dalka Urdun leeyahay.

Dhowr bilood kaddib, dawladda Talyaaniga ayaa u dhiibtay FBI da oo u kaxaysatay Maraykanka. Laba sanno kaddib ayaa ay maxkamadi uga bilaabatay Maraykanka, waxa aana lagu xukumay 30 sanno oo xabsi ah. Jawaari maxkamadda Maraykanka horteeda waxa uu ka diiday in uu wax dembi ah galay, ama ku lug lahaa iskudaygaas weerar ee 1973 lala maagganaa New York.

Waxa uu ku dooday in magaciisa saxda ahi uu yahay Khaalid Muxammed Jaasim oo aanu Jawaari soo gelin abtirsiintiisaba, arrintaas oo beeninteedana ay hay'adda baadhista Maraykanka ee FBI u weyday caddayn, maadaama oo aanu magacan Jawaari baasaboorkiisa ku qornayn, halka laga helayna ahayd uun dhambaalkii loo dirayey wasiirka arrimaha dibadda ee Ciraaq ee FBI du akhriday. Waxa uu wareyska Alqudus sheegay in illaa hadda aanay FBI caddayn karin cidda uu dhab ahaan yahay ninkan ay qabteen ee ay iyagu u malaynayaan Jawaari isaguna diiddan in uu yahay.

Ugu damayntiina Jawari oo dhammaystay kala badh muddadii xukunkii ku dhacay dhigayey, ayaa waxaa la sii daayey Febarweri ee sannadkii 2009, waxa aanu xabsigii gacanta ku hayey ku wareejiyey waaxda socdaalka federaalka Maraykanka si sidii xukunku dhigayey ay dalka Maraykanka uga mustaafuriso, sida ay ku warrantay wakaaladda Associated Press.

AlmaZ Books
Telegram



Wargeyska Alqudus ee ka soo baxa London ayaa isna sheegay in Carl Rusnok oo ah afhayeenka rasmiga ah ee waaxda socdaalka iyo kastamada ee Maraykanku uu caddeeyey in Khaalid Jawaari oo markan 63 sanno jir ahaa, laga sii daayey xabsiga sida weyn loo ilaaliyo ee Super Max oo ku yaalla magaalada Florence ee gobalka Colorado.

Masuulkani waxa uu caddeeyey in garsooruhu uu saxeexay mustaafurinta Jawaari laakiin waxa uu ka gaabsaday in uu sheego dalka loo mustaafurinayey Jawaari oo socdaalladiisa u isticmaali jiray baasaboorro kala duwan, oo Ciraaqi iyo Urduni ka mid ahaa, iyo xitaa Faransiis. Si kastaba ha ahaato 'e, haddii uu ninkan yahay iyo haddii aanu ahaynba waxaa la aaminsan yahay in shakhsiga sita magaca Jawaari uu ka mid ahaa raggii ka qaybgalay hawlgalkii ciyaartoyga Yuhuudda lagu dilay magaalada Muunikh ee dalka Jarmalka sannadkii 1972, isla markaana uu ahaa xubin aad u firfircoon oo si weyn uga qaybgasha fulinta qorshayaasha ay soo dejiyaan Cali Salaama iyo kooxdiisa Sabtembarta Madow.

Dhinaca kalana wargeyska caanka ah ee Alqudus Alcarabi oo sii deyntii Jawaari wax ka qoray ayaa sheegay in aan si hubaal ah loo ogeyn dalka uu dhab ahaan u dhashay Jawaari oo sida aynu soo sheegnay sitay baasaboorro dhowr ah, iyada oo la ogyahay in Sabtembarta Madow ay ka mid ahaayeen dad Carbeed oo aan dhalasho ahaan Falastiiniyiin ahayn, balse la caaddifadooday qaddiyadda Falastiin.

Sii deynta Jawaari ee Maraykanka waxaa aad uga cadhooday rag badan oo ka mid ah sirdoonka iyo hay'adaha dambibaadhista ee Maraykanka; waxaa ka mid ahaa John

AlmaZ Books
Telegram

Sauron iyo Jim Phelan oo ka mid ahaa saraakiishii gacanta ku hayey kiiska qaraxyadaas New York lala damacsanaa sannadkii 1973, waxa aanay ku doodayaan in sii deynta shakhsigani ay tahay qalad weyn oo uu Maraykanku galay.

Labadan sarkaal ee hore waxa ay ku doodayaan in haddii saddexdan qarax dhici lahaayeen, marka loo eego culayska iyo farsamada qarax ee diyaarsanayd ay dad aad u badani ku waxyeelloobi lahaayeen. "Waa tallaabo xun. Ninkani (Jawaari) isma beddelayo" ayaa uu yidhi Phelan, sida uu ku warramay wargeyska Alqudus.

## Madmadowga ku jira hawlgalka New York

Warbixin baadhitaan oo ay wakaaladda wararka AP ka diyaarisay weerarradaas Sabtembarta Madow la doonaysay New York ayaa waxa ay su'aal gelisay sababta aanay saddex baabuur midkoodna u qarxin. Inkasta oo FBI ay ku sheegtay cillad farsamo oo ka timid dadkii diyaarinayey baabuurtan, haddana caqliga waa ay ku adag tahay in la rumaysto in cid khabiir ku ah arrintan oo u soo diyaargarowday ay qalad intaas le'eg oo isku mid ah ku samayso saddexda baabuurba.

Waxaa jira dareenno muujinaya in ay jirtay cid ka tirsanayd ragga hawlgalkan u waday Sabtembarta Madow oo si qarsoodi ah ula shaqaynaysay sirdoonka Maraykanka. Waxaa loo malaynayaa in sirdoonka Maraykanku uu xaalka la socday, balse si caddayn uu u helo isla markaana dadka ku lug leh hawlgalka noocan ah loo wada aqoonsado uu u sugay illaa heerkaas.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa iyaduna dhici karta in hawlgalkan ay FBI hore u sii ogaatay, balse ay badheedh uga aamustay cidna ku dhex darsatay illaa uu halkan soo gaadhay, si ay uga dhigto dhoollatus muujinaya feejignaanta hay'adda iyo sida ay u tahay mid waajibaadkeeda si habsami ah u gudanaysa. Waa hab ay marar badan sirdoonnada adeegsadaan oo hawlgalka laftiisa lala sugayo inta uu meel la wada ogaan karo soo gaadhayo, si fashilintiisu u noqoto mid la wada ogaado oo farriin u noqota cid kasta oo hawlgal noocan ah iskudayi doonta ama cid kasta oo shaki iyo madow kaga jiray kartida FBI.

Waxaa iyaduna jirta dood dhinaca Falastiiniyiinta ah oo sheegaysa in marka horeba aanay muhiimaddu ahayn in baabuurtani ay qaraxdo, taas oo cawaaqib badan ku keeni lahayd ururkooda, laakiin ay ujeeddada Sabtembarta Madow ahayd uun farriin ay xukuumadda Maraykan ugu sheegayso awoodda ay u leeyihiin in ay weerarro darandoorri ah u geystaan dalka Maraykanka iyada oo weerarkan New York uu daba socday weerarkii safaaradda Sucuudiga ee lagu dilay danjirihii Maraykanka ee Sudan, iyo in ay awood u leeyihiin in ay meel kasta oo xitaa Maraykanka ah ay ka dhex shaqayn karaan.

Waxaa se jiray hawlgallo kale oo ay Sabtembarta Madow ka fulisay gudaha Maraykanka oo iyagu guulaystay. Waxa aynu ka xusi karnaa hawlgalkii ay bilowgii Julay 1973, ku khaarajisay xoghayihii milateriga ee safaaradda Israa'iil ku leedahay Maraykanka, Kornayl Yussuf Caloon. Kornaylkan oo ahaa nin miisaan ku dhex lahaa ciidamada Israa'iil waxaa lagu khaarajiyey magaalada Chevy Chase oo ka tirsan gobalka Maryland, laakiin lama helin cidda fulisay.

AlmaZ Books
Telegram



FBI muddo dheer oo ay raadinaysay, waa ay ku guuldarraysatay in ay hesho Caloon cidda dishay, aakhirkiina waxa ay qiratay in ay ku fashilantay helidda cidda falkaas geysatay si rasmi ah ayaana ay u xidhay faylkaas baadhistiisa, laakiin ururka Sabtembarta Madow ayaa sheegtay.

## Hawlgalladii Gudaha Israa'iil

Kooxda Sabtembarta Madow ee marka hore uu Amiirka Cas ahaa madaxa faraceeda ka hawlgalayey Yurub, markii dambe ee taliyihii kooxda la dilayna uu isagu gacanta ku qabtay taladeeda, hawlgalladeeda ka dhanka ah Yuhuuddu kuma ay koobnayn afduubka diyaaraddaha iyo qabsashada xarumaha muhiimka ah sida safaaradaha ama khaarajinta masuuliyiinta Yuhuudda ah ee ku sugnaa Yurub.

Waxaa jiray hawlgallo kuwaas la mid ah ama aynu odhan karno inta badan waaba ay ka ballaadhnaayeen oo ahaa weerarro si joogto ah naftood-hurayaal abaabulani ugu qaadi jireen gudaha Israa'iil, waaxid iyo wadarba.

Waxaa ka mid ahayd koox Abril 1974, uu Amiirka Casi si aad u heer sarraysa u diyaariyey, tababarro fiicanna siiyey. Waxaa loo diray gudaha Israa'iil si ay weerarro fool-ka-fool ah iyo kuwo ku dhufo oo ka dhaqaaq ah ugu qaadaan ciidamada Israa'iil iyo maleeshiyooyinka Yuhuudda ee difaacayey dadkooda lagu deegaameeyey dhulka Falastiiniyiinta. Kooxdan waxaa la qorsheeyey in ay Israa'iil ka galaan dhinaca badda.

AlmaZ Books
Telegram



11[kii] Abril ayaana ay kooxdani gaadhay magaalada Kariyaat Shamuunah ee Israa'iil. Markii ay gaadhay magaaladan ayaa ay rasaas aad u xooggan oodda kaga qaadeen ruux kasta iyo goob kasta oo cammiran oo magaalada ka mid ahaa. Waxa ay dileen labaataneeyo ruux oo Yuhuuddii deegaanka magaalada ahayd, halka ay dhaawacyo kuwo aad u culusi ku jiraanna gaadhsiiyeen 48 kale.

Muddo gaaban kaddib ayaa haddana koox kale oo ka socotay Sabtembarta Madow, waxa ay gudaha u galeen Israa'iil iyaga oo markan maray dhulka, kana gudbay marinka Qabshu Alfajar.

Kooxd kamaandoos ahayd oo ku hubaysnayd qoryaha fudud ee darandoorriga u dhaca, baasuukayaal, gantaalaha garabka laga rido, bambooyin aad u khatar badan iyo weliba walxo qarxaya oo lagu sanceeyey xeryaha hubka ee Falastiiniyiinta ayaa weerarkoodan ku beegay xuska maalinta qarannimada Israa'iil oo qorshahoodu ahaa in ay galaan tuulada Macaluut kaddibna bartilmaameed ka dhigato dadka faraxsan ee dabbaaldegyada maalintan isugu soo baxa.

Kooxdani waxa ay tuuladan gaadheen 15[kii] Mey 1974, waxa ayna afarta jiho kaga bilaabeen gantaalo iyo baasuukayaal. Inkasta oo ay toddoba ruux oo keliya ahaayeen haddana waxa ay ku guulaysteen in ay gacanta ku dhigaan gebi ahaanba tuulahan yar. Ciidamo aan tiro yaraa oo deggenaa tuulaha ayaa iskudayey in ay difaacaan, laakiin laakiin weerarka oo qarqarbo ku qabsaday awgeed Falastiiniyiintu waa ay muquuniyeen, waxa aanay gubeen gaadiid dagaal oo tiro badan iyo qalab kale oo milateri.

AlmaZ Books
Telegram

Dagaal socday ku dhowaad toddoba saac ayaa ay kooxdan naftood-hurayaasha Falastiiniyiinta ahi ku dileen dad Yuhuud ah oo tiradoodu ka badan tahay 25, dad boqol ka badanna dhaawacyo kala duwan ay gaadhsiiyeen. Golda Meir oo markaas ahayd raysalwasaaraha Israa'iil ayaa dhacdadan kaga hadashay khudbad ay isla maalintan u jeedisay aqalka baarlamanka ee Knesset loo yaqaanno, iyada oo aad u ilmaynaysa ayaa ay sheegtay in koox argagaxiso ahi ay maalintan farxadeed ee Israa'iil u rogeen maalin murugo iyo baroordiiq.

Mar kale oo ahayd badhtamihii Mey 1974, ayaa koox ka tirsan kamaandoosta Sabtembarta Madow ay gudaha u galeen Israa'iil. Naftood-hurayaasha oo ku gaashaannaa qoryaha fudud iyo bambooyinka gacanta lagu tuuro oo khasaare badan geysanaya, bartilmaameedkoodu waxa uu ahaa in ay waaberiga hore weerar ku ekeysiiyaan tuulada Zarceet oo ka tirsan dhulka ay Israa'iil kala wareegtay Falastiiniyiinta. Nasiibdarro warkoodu waxa uu kaga sii horreeyey Israa'iil oo basaasad MOSSAD u joogta Lubnaan ay kooxdan warkeeda soo tebisay.

Dagaal waqti kooban socday ayaana ay ciidamada Israa'iil ku guulaysteen in ay dilaan naftood-hurayaasha Falastiiniyiinta ah oo tiradoodu siddeed nin ahayd, halka labada soo hadhayna ay nolosha ku qabteen, laakiin qudhooduna waxa ay ciidamada Yuhuudda gaadhsiiyeen khasaare, Inkasta oo aanay Israa'iil qiran.

AlmaZ Books
Telegram

## Basaasiintii MOSSAD

Waajibaadka MOSSAD waxaa ka mid ah in ay soo ururiso xog, in ay basaasid samayso, in ay afduubto cidda khatar ku ah ammaanka Yuhuudda oo ay geyso Israa'iil, in ay khaarajiso cadowga Israa'iil iyo in dadka Yuhuudda ah ee dunida ku filiqsan ciddii u baahan ama muhiim loo arko qarsoodi loogu soo daadgureeyo Israa'iil.

Shantan waajib oo ugu weyn shaqooyinka ay dawladda Israa'iil ka filayso hay'addeedan ayaa dhammaantood u baahan in ay xoogga saarto dhismaha shabakado basaasineed oo ka hawlgala dhammaan daafaha dunida. Dalalka iyo deegaannada cadowga Israa'iil ee aan loo diri karayn basaasiin Yuhuud ah ayaa ay qasabtahay in lagu beero basaasiin dalkaas dhalasho ahaan uga soo jeedda ama aan si fudud looga shakiyi karin.

Waxa kale oo ay Israa'iil dhistay shabakado xog ururineed oo u shaqaynayo qaab hay'ado madaxbannaan oo daraasado ku sameeya arrimo taabanaya dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha iyo ammaanka ee dalalka ay ka hawlgalaan. Xogaha laga soo ururiyo warbaahinta iyo daraasadaha ay hay'adaha dalku sameeyaanna waxa ay u dirayaan MOSSAD si mar labaad khubaradeedu ugala soo baxaan xogo dheeraad ah. Qaybtan dambe oo ah tan ay ugu adagtahay in la ogaado ama laga qaato dareen ah in ay qaab sirdoon u shaqeeyaan.

Waxa ay inta badan aad u caawisaa in la helo xogo la xidhiidha horumarinta hubka iyo qaabdhismeedka difaac ee dalka, tayeynta ammaanka, xasilloonida siyaasiga ah iyo xogo marar badan ka caawiya MOSSAD in ay fuliso hawlgallo

AlmaZ Books
Telegram

dibadeed, si ay u khaarajiso dadka hawlahaas doorka ku leh ee dalkaas.

Sidoo kale MOSSAD waxa ay abuurtaa shirkado ganacsi oo mararka qaarkood been-abuur ah, kuwaas oo dalalka ay u dan leedahay ka hawlgala si ay fursad ugu siiyaan in basaasiinteeda oo iska dhigaya maalgashadayaal, ama hawlwadeennada iyo shaqaalaha shirkadahaasi ay dalkaas u tagaan, ama mararka qaarkood shirkadahaasi khalkhal u geliyaan dhaqaalaha dalkaas.

Meelaha ugu badan ee ay MOSSAD qaabkan uga hawlgashaana waa dalalka Carabta ee ay u aragto in ay khatar weyn ku leeyihiin ammaankeeda, kuwaas oo waayadii hore uu ugu horreeyey dalka Lubnaan oo xarun u ahaa ururrada iyo jabhadaha hormuudka u ahaa halganka gobannimadoonka Falastiiniyiinta. Gaar ahaan intii ka horreysay dhammaadkii sagaashamaadkii qarnigii hore oo ay jabhadahani si aad u xoog badan dhulkaas uga hawlgeli jireen.

Dalalka kale ee Israa'iil bartilmaameedka u ahaana waxaa ugu sii muhiimsanaa Suuriya, Masar, Ciraaq, Sucuudiga iyo Imaaraadka oo ay dadyow iyo hay'ado kala duwani isugu yimaaddaan.

Israa'iil markii ay indhaheeda hor timi runta ah in Falastiiniyiinta awooddooda siyaasadeed, cududdooda milateri iyo awooddooda ammaankuba sii badanayaan, waxa ay qaadatay go'aan ah in ay saldhgiyadooda kula dagaalanto. Uma jeedno weerarrada tooska ah ee ciidamadeedu ku raadsanayeen masuuliyiinta Falastiiniyiinta, balse waa dagaal

AlmaZ Books
Telegram



adag oo dhinaca ammaanka ah oo ay ku qaadday cid kasta oo raad gobannimadoon galo. Waxa ay si gaar ah u beegsatay shakhiyaadka uu Amiirka Cas ugu sarreeyo ee ay ogeyd in noloshoodu khatar ku tahay dawladnimada Yuhuudda.

Aynu soo qaadanno dhowr ka mid ah basaasiinta ugu caansanaa ee ay Yuhuuddu ku dhex beertay ururka Xoraynta Falastiin, gaar ahaan kuwii sida aadka ah u dhex galay ururka oo xitaa qaarkood socdeen illaa darajooyinka maamul ee ugu sarreeya ururka, oo uu ku jiro illaa xafiiska hoggaamiyaha ururka Yaasir Carafaat.

## Riyaad Kancaan

2016 ayaa ay MOSSAD daaha uga fayday shakhsiyadda dhabta ah ee basaas ay siddeetamaadkii qarnigii hore ku dhex beertay hoggaanka sare ee ururka FATAX. Basaaskan oo magaciisa dhabta ahi yahay Amiin Alxaaj, balse MOSSAD ay u taqaannay Riyaad Kancaan, waxa uu sannado badan ku dhex jiray ururrada Falastiiniyiinta oo uu gaadhay heer uu noqdo shakhsiyaadka ku dhow Yaasir Carafaat. Laakiin, beri dambe waxaa caddaatay in Kancaan uu suurtogeliyey in Israa'iil ay khaarajiso rag badan oo ka mid ahaa hoggaanka Falastiiniyiinta; waxaa ka mid ahaa kuxigeenka Carafaat iyo gacantiisii midig, Abu Jihaad oo 1988 ay MOSSAD ku khaarajisay dalka Tuuniisiya. Sidoo kale Riyaad Kancaan waxa uu fashiliyey hawlgallo Sabtembarta Madow ay qorshaysay in ay naftood-hurayaal ugu dirto gudaha Israa'iil si ay weerarro uga geystaan.

AlmaZ Books
Telegram



Sarkaal ka tirsanaa MOSSAD oo ka masuul ahaa hawlgelinta iyo xog ka qaadista Kancaan, ayaa wargeyska Macaariif ee afka Cibriga ku hadla u sheegay in 'tan iyo sannadkii 1970, uu Kancaan oo MOSSAD u shaqaynayaa haddana ka mid ahaa hoggaanka sare ee FATAX. Laakiin sannadkii 1982, markii Israa'iil ciidamadeedu ay galeen gudaha Lubnaan, uu isagu u baxay dhinaca Yurub, kaddibna u gudbay Israa'iil.'

Riyaad Kancaan dhalasho ahaan waa Lubnaani ay si fiican isu garanayeen Yaasir Carafaat iyo raggii hoggaanka sare ee ururrada gobannimadoonka ah ee Falastiin ku jiray, kuwaas oo ay isku jiil ahaayeen. Muddo uu ku dhex jiray ururradan gobannimadoonka Falastiiniyiinta, gaar ahaan FATAX oo uu xilal muhiim ah ka qabtay kaddib, ayaa sida uu sarkaalka MOSSAD sheegay waxa ku dhacay niyadjab uu ka qaaday qaabka ay Falastiiniyiintu wax u wadeen iyo kalsoonidii uu ku qabay in wax la saxo oo ka luntay, ama jidkii ururka FATAX marayey oo uu u arkay mid qaldan diyaarna aan loo ahayn in la saxo; sidaas awgeed, waxa uu isku qanciyey go'aan ah in uu Israa'iil u shaqeeyo si uu lacag u helo.

Sarkaalka MOSSAD u qaabbilsanaa ayaa caddeeyey in Kancaan oo ka niyadgo'ay FATAX uu la xidhiidhay MOSSAD isaga oo adeegsanaya nin ay walaalo yihiin oo jooga dal ka mid ah Yurub. Waxa uu ka codsaday in uu la xidhiidho safaaradda Israa'iil ay dalkaas ku leedahay una sheego in Kancaan uu diyaar u yahay in uu la shaqeeyo, haddii ay lacag fiican siinayaan.

Dabayaaqadii 1977 ayaa uu Kancaan ka degey dalkaas Yurub, isaga oo ku marmarsoonaya in uu soo booqanayo walaalkii. Laba maalmood markii uu joogayna waxa uu la

AlmaZ Books
Telegram



kulmay MOSSAD oo markii ay isfahmeen, ku xidhay sarkaal uu warbixinaha sirta ah u gudbin doono, isla markaana awaamiirta iyo tilmaamaha loo soo marin doono.

Kancaan qudhiisa oo mar dambe ka sheekeeyey bilowgii mihnaddiisan basaasnimo ayaa ka warramay maalintaas, waxa aana hadalladiisa ka mid ahaa: "Waxa ay ahayd markii ugu horreysay ee aan la kulmo maamulahayga shaqada ee MOSSAD oo lagu magacaabo Micke.

Inta aan hor fadhiistay ayaa aan ku idhi, 'Gacmahaygu waa ka nadiif dhiigga Yuhuudda, waxa aanan diyaar u ahay in aan idiin qabto wax kasta oo ay MOSSAD iga dalbato.' Hadalkaas markii aan idhi, saacad kaddib waxa aan gacanta ku hayey baasaboor Israa'iili ah. Aniga iyo maamulahaygii shaqaduna waxa aannu u ambabaxnay Israa'iil, annaga oo raacnay diyaarad Israa'iil leedahay. Markii aanu nimid Israa'iil waxaa guri la iiga kireeyey degmada Ramaat Qaan, ee gudaha Israa'iil.

Bilowgii waxaa la i mariyey baadhis iyo waraysi, kaddibna waxa ay ii sheegeen in ay warkayga oo dhan hayaan, xilalka aan hayey iyo shaqadii aan Falastiiniyiinta ka dhex hayeyna ogyihiin. Waxa ay ii sheegeen in xitaa ay ogyihiin dadka aan xidhiidhka kala lahaa masuuliyiinta FATAX iyo si cad shakhsiyaadka aan ka aqaanno ee hoggaanka FATAX iyo dadka kalaba leh. Xogo badan oo igu saabsan ayaa ay ii sheegeen oo ay hayeen, oo sidaas awgeed ma ay doonayn in ay waqti badan ku lumiyaan in aan uga sheekeeyo wax ay ogyihiin, sida shaqadayda iyo dadka aanu xidhiidhka leenahay iwm.

Saddex maalmood waxa ay hadba dhan iga tusayeen nooca shaqooyinka ay iga rabaan, cidda aan u gudbin doono xogta, iyo arrimaha shaqadan la xidhiidha oo dhan. Saddexdaas

AlmaZ Books
Telegram



dharaarood dabadood ayaa aan dib ugu noqday Yurub oo aan uga sii gudbay gudbay Beyruut. Dhowr maalmood oo keliya markii aan Beyruut joogayna waxaa gurigayga iigu yimid basaas kale oo ka socda MOSSAD oo ii dhammaystiray diyaargarowgii lagama maarmaanka u ahaa shaqadayda. God ayaa aan ka dalooliyey gidaarka Suuliga gurigayga, waxa aan ku qariyey wax kasta oo sir u ahaa shaqadan, waxa aanan si buuxda u gudagalay shaqadii la ii soo diray."

## Xogihii uu MOSSAD gaadhsiiyey

Riyaad Kancaan 'Kun sagaal boqol iyo toddobaatanaadkii' waxa uu ahaa masuul aanu mansabkiisu aad u sarrayn oo ka hawlgala xafiiska hoggaanka Waaxda Galbeed ee ururka FATAX ee Beyruut, waxaa se uu xorriyad fiican u lahaa in uu gaadho ama tago dhammaan xafiisyada hoggaamiyeyaasha sare ee ururka FATAX oo uu xidhiidho shakhsi ah oo fiican la lahaa. Xafiiska uu ka tirsan yahay waxa uu uga masuul ahaa qaybta ururinta iyo kaydinta xogta, laakiin haddana waajibaadkiisa mid ka badan ayaa uu hayey.

Xafiiskiisa waxaa iman jiray wararka muhiimka ah oo dhan, oo xilligaas FATAX waxa ay aad u danaynaysay in ay xogo ka hesho waxa ka socda gudaha dhulka ay Yuhuuddu haysato. Shaqada Kancaanna waxa ay ahayd in uu xogtaas soo ururiyo oo uu kala shaandheeyo, kaddibna inta uu kala abla-ableeyo uu ka dhigo warbixinno xogeed oo muhiim ah.

Basaaskan Riyaad Kancaan muddo afar sanno ah ayaa xogta uu helo iyo tii hore u taallay xarunta waxa uu ka dirayey xafiiskiisa shaqada ee magaalada Beyruut dhexdiisa iyada oo

AlmaZ Books
Telegram



aan xitaa xaaskiisu ogaanin. Mar dambe oo uu ka warramayey nooca xogta uu bixiyeyna waxaa hadalladiisa ka mid ahaa, "Xog kasta oo baajin karaysay hawlgallada nafhuridda ah ee Israa'iil ka dhanka ah." Isaga oo sharraxaya sida uu xogtaas ku heli jirayna waxa uu yidhi, "Waxa aan ku wareegi jiray dhammaan xafiisyada guddiyada iyo laamaha kala duwan ee ururka FATAX, aniga oo raadinaya xog.

Dhammaantood albaabbadoodu waa ay ii furnaayeen, waayo mid kasta oo ka mid ahi waxa uu u baahnaa xogta aan anigu ka hayo arrimaha ururka iyo hawlaha la xidhiidha waajibaadkayga shaqo ee aan FATAX u hayo. Sidaas awgeed mid kastaa aniga ayaa uu xog i bidayey oo tan uu hayo in uu ii sheegaa wax buuran lama ay ahayn. Waa aan la fadhiisan jiray, oo aan la qaxwayn jiray, lana sheekaysan jiray, aniga oo uga sheekaynaya waxa Israa'iil gudaheeda ka jira, basaasiinta hadba ay ku dhex beerayaan ururka FATAX iyo guud ahaan dhulka ay Falastiiniyiintu joogaan, iyo weliba qoysaska ay ka soo jeedaan basaasiintaasi."

Wargeyska Almacaariif ee ka soo baxa Israa'iil ayaa 2009 baahiyey, waraysi dheer oo uu Kancaan kula yeeshay gurigiisa ku yaalla mid ka mid ah xaafadaha ugu faqiirsan magaalada Naasira Alculyaa ee ka mid ah dhulka ay Yuhuuddu Carabta ka qaadday 1948.

Wargeysku waxa uu waraysigan hordhac uga dhigay, "Dabayaaqadii kun sagaal boqol iyo toddobaatanaadkii ayaa uu halka ugu sarraysa gaadhay dagaalka MOSSAD iyo Falastiiniyiintu, gaar ahaan ururka FATAX oo waqtigaas uu si xirfad badani ku jirto u maamulayey Khaliil Alwasiir (Abu

AlmaZ Books
Telegram



Jihaad) oo lagu tilmaami jira gacanta midig ee Yaasir Carafaat. Xilligaas MOSSAD dhexdeeda waxaa caan ka ahaa basaas ay u taqaannay magac afgarasho ahaan ay ula baxday oo ahaa, Ishayada FATAX. Ishaasi waa Kancaan oo ay MOSSAD aad u tixgelin jirtay, muhiimadda xogta maalinlaha ah ee uu u soo diri jiray awgeed. Waxa uu uga soo warrami jiray dhaqdhaqaaqyada iyo hawlaha kala duwan ee ururka FATAX uu ka waday Beyruut."

Wargeyska Macaariif oo ka warramayey kulankan iyo hadalladii Kancaan oo markan ahaa hawlgab dhuumasho ugu nool gudaha Israa'iil ayaa qoray, "Kancaan oo kursi buush duugoobay ah ku dhex fadhiya gurigiisa magaalada Naasira Alculyaa, waxa uu warfidiyeenka Israa'iiliga ah u sheegay in magaaladiisii Beyruut uu ku haystay wax kasta oo noloshiisu u baahan tahay;

Waxa aan lahaa guri weyn oo filla ah iyo gaadhi Mercedes midabkiisu dahabi yahay, wax iga maqanina ma uu jirin; haddiiba aan wax u baahdana waxaa iga xigay in aan dhambaal yar u diro MOSSAD oo u sheego, si laba maalmood kaddib uu waxaasi iigu soo gaadho Beyruut. Laakiin markii aan imid Israa'iil ayaa ay wax kastaa joogsadeen, oo wixii aan doonayo muddo dheer ayaa aan daba wareegaa aniga oo weliba aan helayn."' Wargeysku waxa uu sheegay in Kancaan uu aad uga calaacalay nolosha ku haleeshay Israa'iil markii hawshiisii dhammaatay, waxa aanu si aan warwareeg lahayn u yidhi, "Xitaa maxaabiista Xamaas ee ku jira xabsiyada Israa'iil ayaa sidayda si ka fiican loola macaamilaa."

AlmaZ Books
Telegram



## Waxa uu ku wacadfuray saaxiibbadii

Sida inta badan lagu yaqaanno basaasiinta u adeega cadowga, cidda ugu horreysa ee ay oofwareemaan waa saaxiibbada ay isugu dhowaayeen xilliga halganka. Riyaad Kancaan laftiisuna jidkaas kama uu baydhin oo shaqadiisa ugu muhiimsan ee uu Israa'iil ka caawiyey, taas oo ahayd waxa ay ugu baahi badnayd dawladda Yuhuuddu xilligaas, waxa ay noqotay in uu mid mid farta ugu fiiqo raggii ay muddada dheer isku dhufayska ku jireen.

## 1. Khaliil Alwasiir

Khaliil Ibraahiim Alwasiir (Abu Jihaad) oo 1935 dhashay, isaga oo 13 sanno jir ah ayaa uu ka mid noqday qoysaskii ay sannadkii 1948 Israa'iil ka caydhisay dhulkooda, isaga oo 24 jir ahna waxa uu Yaasir Carafaat la aasaasay ururka 'Dhaqdhaqaaqa waddaniga ah ee xoraynta Falastiin' ee magaciisa loo soo gaabiyey 'FATAX' oo illaa maanta hoggaaminaya Falastiiniyiinta.

Waxa uu ka mid noqday hoggaanka sare ee ururka, isaga oo kuxigeen u ahaa Yaasir Carafaat, isla markaana waxa uu gacan weyn ku lahaa dhismihii ciidamada FATAX, isaga oo markii dambana noqdayba taliyiha guud ee garabka hubaysan ee ururka FATAX oo lagu magacaabi jiray Alcaasifah (Duufaanta).

1970 illaa 1971 waxa uu door muhiim ah ka ciyaaray iskudhacyadii hubaysnaa ee ciidamada Urdun iyo jabhadihii hubaysnaa ee Falastiiniyiinta, waxa aanu ahaa masuulkii koowaad ee dagaalyahannadii Falastiiniyiinta ee ciidamada

AlmaZ Books
Telegram

Urdun go'doomiyeen u geynayey saadka iyo saanadda.

Abu Jihaad waxa uu qorsheeyey weerarro badan oo naftood-hurayaal Falastiiniyiin ahi ku qaadeen bartilmaameedyo ciidan iyo rayidba ah oo Yuhuuddu leedahay. Waxaa ka mid ahaa weerarkii la baxay, 'Hawlgalka SAVOY'. $4^{tii}$ Maarso 1975, goor saacaddu 11 kii habeennimo ahayd ayaa koox Falastiiniyiin ahi ay weerar ku qaadeen huteel ku yaalla Tel Aviv. Kooxdan oo doon qarsoodi ah dhinaca badda kaga soo gashay xeebta Tel Aviv, waxa ay ka yimaaddeen Lubnaan.

Waxa aanay gudaha u galeen huteelka Savoy oo ku yaalla badhtamaha magaalada, halkaas oo ay ka galeen dagaal qadhaadh oo laba maalmood socday. Khasaaraha dagaalkaasi uu geystay waxaa ka mid ahaa; dhimashada shan qof oo Yuhuud rayida ah, saddex ka mid ah ciidamada argagaxiso la dagaallanka ee Israa"iil oo uu ku jiro taliyihii cutubkan iyo dhismaha oo qaybo badan oo ka mid ahi dumeen.

Abu Jihaad waxa uu qorsheeyey weerar ay bishii Maarso 1978, lix naftiihure oo FATAX ka tirsani ku afduubeen bas rakaab tiro badan oo Yuhuud ahi saarnaa. Waxa ay dileen 38 ruux oo isugu jiray rakaabkii baska, dad jidka marayey iyo dad ay afduubeen oo qasab baska ay ku saareen. Waxa aanay dhaawacyo qaarkood culus yihiin gaadhsiiyeen 71 kale oo ka mid ahaa rakaabka.

Weerarkan oo uu soo qorsheeyey Abu Jihaad, waxa uu marka hore ku socday huteel kuwa raaxada ah oo ku yaalla Tel Aviv, kaas oo ay aad u degi jireen danjireyaasha iyo diblumaasiyiinta shisheeyaha iyo dalxiisayaashu. Laakiin kooxda Falastiiniyiinta ah oo ay tilmaamtii Tel Aviv ka

AlmaZ Books
Telegram



qaldantay ayaa markii ay xaqiiqsadeen in 64 Kiiloomitir ay dhinaca woqooyi ka dhaafeen bartilmaameedkoodii, waxa ay go'aansadeen in ay afduubaan gaadiid.

Waxa uu ahaa khasaarihii ugu ballaadhnaa abid ee Falastiiniyiintu ay goob keliya oo gudaha Israa'iil ah Yuhuudda ku gaadhsiiso. FATAX oo weerarka kaddib hadashay, waxa ay sheegtay in uu aargoosi u ahaa dilkii Kamaal Cadwaan oo ka mid ahaa halyeeyada FATAX oo ciidamada gaarka ah ee Israa'iil ay ku dhex khaarajiyeen Beyruut.

Abu Jihaad waxa uu ahaa sarkaalkii dejiiyey qorshihii difaac ee 1982 ee la doonayey in lagu difaaco magaalada Beyruut oo ay ku soo fool lahaayeen ciidamada Israa'iil. Muddo kaddib waxaa laga eryey dalka Lubnaan, waxa aanu galay Urdun oo laba sanno kaddib, haddana laga caydhiyey. Sannadkii 1986 ayaa uu tegey magaalada Tuunis ee dalka Tuuniisiya, halkaas ayaa uu ka helay magangelyo rasmi ah, kana samaystay xafiis uu ka taageero kana qorsheeyo wax-iska-caabbinta Falastiiniyiinta.

## 2. Khaarajintii

Israa'iil waxa ay aqoonsatay khatarta Abu Jihaad ku yahay ammaankeeda, gaar ahaan MOSSAD oo ay damqeen xeeladaha iyo hal-abuurka aan dhayalka lagu heli karin ee uu ninkani ku dhiso qorshayaashiisa weerar, iyo dhiirranaantiisa uu xitaa Tel Aviv gudaheeda hawlgallo ka fulinayo. Sidaas awgeed waxa uu go'aankeedu noqday in lagu daro liiska dadka ay MOSSAD dhaqsaha u khaarajinayso, inkasta oo ay muddo ku qaadatay.

AlmaZ Books
Telegram

Abril 1988, ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee MOSSAD u qaabbilsan khaarajintu waxa ay afar doonyood, laba gujis, laashash rabadh ah iyo laba diyaaradood oo nooca qummaatiga u kaca ah ku tageen meel ku dhow dekedda Qardaaj ee magaalada Tuunis, caasimadda dalka Tuuniisiya. Goor habeennimo ah ayaa 20 xubnood oo ciidamadan ka mid ahi ay laashashkan ku tageen xeelliga. Waxa abbaareen gurigii uu magaalada ka deggenaa Abu Jihaad oo isagu warmoog ahaa balse maalmihii u dambeeyeyba lagu daba jiray, isla markaana gurigiisa hore lagu rakibay qalabka wax lagu dhegeysto iyo kamaradaha basaasidda.

Unuggan kamaandoosta MOSSAD ka tirsan markii ay xaqiiqsadeen in uu Abu Jihaad ku hoyday gurigiisa ayaa ay si sanqadh la'aan ah uga daba tageen, waxa aanay rasaas aan cod lahayn ku dileen ilaaladiisii oo aan tiro badnayn. Waxa ay toos u galeen guriga, waxa anay ku dhufteen 70 xabbadood oo sababay in uu jidhkiisa googo' nololna aanay cidi ku soo gaadhin. Khaliil Abu Jihaad waxa uu gurigiisa ku dhex dhintay labadii habeennimo iyada oo markaas da'diisu 52 sanno jir ahayd, waxa aana la sheegay in MOSSAD ay ku hor toogatay xaaskiisa.

Sida dib laga ogaaday ciidamada kamaandoosta ahaa ee MOSSAD waxa ay diyaar u ahaayeen in ay halwgalkan ku guulaystaan xitaa haddii ay ku tegeyso in ay dagaal fool-ka-fool ah la galaan ilaalada iyo ciidamada ammaanka ee Tuuniisiya. Waxa ay adeegsanayeen kaadhadhka aqoonsiga ee kalluumaysato Lubnaaniyiin ah oo ay afduubeen si ay kaadhadhkooda aqoonsi uga dhigtaan.

AlmaZ Books
Telegram



Xaaska oo ka sheekaysay sida ay wax u dhaceen habeenkaas ayaa sheegtay in odaygeedu uu guriga yimid 11 habeennimo, oo inta uu cabbaar u sheekeeyey uu tegey xafiiskiisa isla guriga uu ku dhex lahaa. Muddo markii uu xafiiskiisa ku jiray ayaa ay gabadhu dareentay dhaqdhaqaaq ka jira xafiiska odaygeeda. Xaggiisa ayaa ay u kacday, markii ay gashayna waxa ay la kulantay Abu Jihaad oo inta uu qudhiisa dareen galay, baastooladdiisa soo qaatay una socda dhinaca albaabka guriga laga soo galo. Waxa uu ka codsaday in ay ka fogaato, laakiin markiiba waxaa si kedis ah albaabkii uga soo galay wiil timo boosh ah leh, oo xidhan wax u eg marada afka ay dhakhaatiirta iyo hawlwadeennada caafimaadku ku duubtaan.

Abu Jihaad ayaa xabbad rasaas ah ku riday wiilkan, isna waxa uu ku faaruqiyey dhammaan rasaastii ku jirtay baastooladda uu gacanta ku sitay oo diyaar u ahayd markii uu guriga soo galayba. Waxaa dhaqso albaabkii uga soo dabagalay saddex nin oo kale oo iyaguna sidii hore si la mid ah khasnadaha qoryo ay siteen ku faaruqiyey jidhka Abu Jihaad. Markii uu dhulka u dhacay Abu Jihaad ayaa ay kooxdan hubaysani hore ugu socdeen gudaha guriga, waxa ay galeen qolka hurdada oo sida muuqata ay sii garanayeen.

Waxaa qolka jiifay wiilka uu dhalay Abu Jihaad oo Nidaal magaciisu yahay, da'diisuna ay laba sanno iyo badh ahayd. Ilmaha hooyadii oo horteeda odaygeeda lagu dilay ayaa u soo carartay dhinaca qolka ee ay wiilkeeda ku ogeyd, laakiin bannaanka ayaa ay ku joojiyeen, kaddibna gudaha qolka ayaa ay rasaas badan ka rideen. Nasiibwanaag markii ay baxeen waxa ay ogaatay in wiilku aanu aabbihii raacin. Sida markii

AlmaZ Books
Telegram



dambe loo fahmayna waxa ay kooxdu qolka u tagtay in ay burburiso qalabka isgaadhsiinta iyo kamaradaha sirdoonka ee qolka ay hore sida qarsoodiga ah ugu rakibteen.

Abu Jihaad oo dilkiisu dhabarjab ku noqday FATAX iyo guud ahaan wax-iska-caabbinta Falastiiniyiinta, waxa ay Israa'iil ku eedaysay in uu isagu sabab u ahaa kacdoonnada dadweyne ee 'Intifaadada' loo yaqaanno oo xilligaas ka bilaabmay dhulka Falastiiniyiinta ee Israa'iil haysato. Sidoo kale waxa ay sheegtay in uu ahaa injineerka farsameeyey weerarro tiro badan, waxaa ka mid ah weerar saddexan oo xilliyadaas uun lagu qaaday xarun ganacsi oo Israa'iil gudaheeda ah.

Mar walba Falastiiniyiinta dhexdooda waa uu ka jiray tuhunka ah in basaasiin lagu dhex beeray, marar badanna waaba la qabtay ama siyaabo kala duwan loo ogaaday, sidaa awgeed dilka Abu Jihaad waxa uu markaba muujinayey in ay jirtay cid gudaha FATAX ka mid ah oo si aad u adag Israa'iil ugala shaqaysay, oo ugu dambayntiina, sannado badan kaddib, waxaa la ogaaday in Riyaad Kancaan oo dil kasta ka dul barooranayey uu ahaa cidda ay raggaas badankoodu sababsadeen ee MOSSAD xogtooda lagu helay gaadhsiisay.

Sannadkii 1997, oo ku dhowaad 20 sanno ka soo wareegeen dilka Abu Jihaad, wargeys ka soo baxa Israa'iil oo lagu magacaabo Macaariif ayaa qoray warbixin ka hadlaysa qaabkii loo khaarajiyey Abu Jihaad. Warbixintan oo aanay xukuumadda Israa'iil beenin waxa ay sheegtay in hawlgalkan lagu khaarajiyey Abu Jihaad uu watay, qorshayntiisana lahaa Ehud Barak.

AlmaZ Books
Telegram



Ehud Baraak waxa uu markaas ahaa kuxigeenka taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ee Israa'iil, balse habeenkan waxa uu ahaa isuduwaha iyo xidhiidhiyaha hawlgalkan oo ay iska kaashanayeen MOSSAD, Laanta Sirdoonka ee Milateriga Israa'iil, Ciidamada cirka, Ciidamada badda iyo cutub ka tirsan ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee Sayereet Maktaal oo Israa'iil ay u adeegsato la dagaallanka ururrada Falastiiniyiinta ee ay argagaxisada u aqoonsan tahay. Habeenkaas Ehud Baarak waxa uu saarnaa doon gantaallo ku rakibnaayeen oo Israa'iil ay soo gelisay badda Tuuniisiya si uu si dhow ula socdo hawlgalkan.

Israa'iil dilka Abu Jihaad marnaba si rasmi ah uma ay qiran iyada oo ka cabsi qabta in maxkamado magdhow lagu weydiisto iyo in uu muranno diblumaasiyadeed geliyo, maadaama oo loo arkayey weerar lagu qaaday siyaasi rayid ah, dunidunа aanay soo dhoweyn dilkiisa oo xitaa wasaaradda arrimaha dibadda ee Maraykanku ay ku tilmaamtay 'Fal khaarajin siyaasadeed ah', sidoo kalana Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey uu cod midaysan ku soo saaray qaraar uu ku dhaleecaynayo weerarkaas lagu xadgudbay qarannimada iyo nabadgelyada dhulka Tuuniisiya.

Si kastaba ha ahaato 'e, sannadkii 2013 Israa'iil waxa ay si dadban u iftiimisay in ay masuul ka ahayd weerarkaas, oo sarkaalkii ciidamada kamaandoosta Israa'iil ee habeenkaas hoggaaminayey weerarkaas ayaa si aan toos ahayn ugu sheegay wariye Yuhuudi ah oo waraysanayey. Waxaa xusid mudan in waraysigan qudhiisa sarkaalkan laga qaaday muddo ku siman 2002, laakiin muddo toban sanno ah ay faafintiisa si rasmi ah

AlmaZ Books
Telegram



u hortaagnaayeen ciidamada Israa'iil. Warbixinta wargeyska Macaariif waxaa lagu sheegay in MOSSAD ay muddo bilo ah basaasaysay guriga Khaliil Alwasiir (Abu Jihaad).

Bilowgiiba waxaa iska caddayd in hawlgalka khaarajinta Abu Jihaad aanu suurtogal noqon kareen haddii aanay jirin basaasiin ku dhex jirta Falastiinta oo fududaysay, laakiin waqti baa ay qaadatay in la fahmo xaqiiqada ah in shakhsigaasi uu yahay Kancaan Riyaad, gaar ahaan markii uu ka badheedhay khiyaamada ee uu Israa'iil u goostay, xogo badan oo dheeraad ahna laga helay raadadkiisii shaqo ee muddada dheer ahaa.

Wareyska Macaariif ayaa sheegay in Abu Jihaad saddex jeer oo hore ay MOSSAD ku fashilantay in ay khaarajiso. Markan ay dishay oo markii afaraad ahaana ay fududaysay xogta uu Kancaan siiyey MOSSAD. Kancaan ayaa isna mar dambe qirtay in muddo toban sanno ah uu ka shaqaynayey uun sidii xog muhiim ah MOSSAD uga heli lahayd Abu Jihaad. Waxa uu qiray in si xogtaasi ugu dhammaystiranto uu xitaa ku qasbanaaday in uu dego guri aan ka fogeyn xafiiskiisa.

Talefishan Kanaal 10 ee Israa'iil oo waraysi ka qaaday Riyaad Kancaan markii u uu goostay Israa'iil, waxa uu ku tilmaamay in uu ahaan jiray ninka ay Israa'iil ku leedahay ururka xoraynta Falastiiniyiinta dhexdiisa. Waxaa loo sameeyey xafiis aan ka fogeyn xafiiskii uu deggenaa Abu Jihaad. Subax kasta isaga ayaa warbixinaha ammaanka toos ugu geyn jiray; fiidkiina dib ayaa uu uga soo noqon jiray xafiiska si uu isla xogtan ugu gudbiyo MOSSAD. Waxa uu ku diri jiray qalab warlalis oo uu ku dhex qarsaday god uu ku samaystaty gidaarka suuliga.

AlmaZ Books
Telegram



Kancaan waxa uu warbixintan kaga sheekeeyey sidii uu ahaan jiray xidhiidhkii uu la lahaa MOSSAD markii uu shaqaynayey, iyo hadda waxa dhacay. Waxaa hadalladiisa ka mid ahaa, "Raggii gacanqaadkayga u soo kala dheerayn jiray markii aanu joognay Saydaa (Magaalo Lubnaan ka mid ah oo markaas Israa'iil haysatay) ayaa maanta iska dhiga kuwo aan i garanayn. Muddo ayaa aan Israa'iil u adeegayey, se aakhirkii waxa aan noqday nin aan dan noloshiisa laga lahayn, oo buuraha, iyo beeraha dadweynuhu ku nastaan ku dibjira habeenkii."

Warbixintu waxa ay sheegtay in muddo sannado ah markii uu u ashkatoonayey xafiisyada dawladda ee Israa'iil, uu aakhirkii Kancaan helay guri afar qol ah oo ku yaalla xaafadda sabool ah oo aan xitaa adeegyada dawladda ka dheregsanayn, halkaas cidhiidhiga ah ayaana ay ku nool yihiin isaga iyo qoyskiisa oo 14 ruux ka kooban, isaga oo bishiina mushahar ahaan u qaata 3400 (Saddex kun iyo afar boqol) oo ah lacagta Israa'iil ee Shekel la yidhaahdo, una dhiganta 900 oo doolar taas oo marka la eego nolosha iyo qiimaha suuqa ee Tel Aviv aanay suurtogelayn in noloshiisa ay daboosho.

Kancaan waxa uu MOSSAD kaga cawday in ay kaga baxday ballanqaadyadii ay u samayn jirtay markii uu la shaqaynayey, waxa aanu sheegay in sarkaalkii MOSSAD ee isaga madaxda u ahaa uu u ballanqaaday in shaqadan lagu siin doono magdhow aad u badan, laakiin markii uu hawlgabay ay ballanqaadyadii oo dhami been noqdeen.

AlmaZ Books
Telegram

Waxa uu sheegay in markii Israa'iil uu yimid uu xitaa waayey qof u soo istaaga oo uu la hadlo. "Sidaas ayaa ay ku soo afmeerantay qisadii basaasnimo ee mid ka mid ah khasnadihii muhiimka ahaa ee Israa'iil labaatankii sanno ee u dambeeyey xogta muhiimka ah ku qabtay" ayaa lagu soo gabagabeeyey warbixintan oo la baahiyey 23$^{kii}$ Febarweri, 2015.

## Dilkii Kamaal Cadwaan

Markii ururka FATAX uu si buuxda uga wareegay Urdun, waxa uu isku sameeyey dib-u-habayn, waxa aanu dib ugu noqday nidaamkiisii shaqo iyo halgan. Waxaa la sameeyey aagag ama waaxyo waaweyn oo uu u shaqeeyo halganka uu ururka FATAX kula jiray Israa'iil. Aagga galbeed oo ugu gacanta kululaa ee Yuhuudda jiifka u diiday, waxaa madax looga dhigay halgamaagii weynaa ee Kamaal Cadwaan.

Waxa uu lahaa xafiis qol keliya ah oo looga kireeyey xaafad ka mid ah daafaha Beyruut. Dib-u-habayntaasi waxa ay fursad siisay Kancaan Riyaad oo ka mid noqday masuuliyiinta iyo hoggaannada la ixtiraamo ee dagaalyahannada aagga galbeed ee FATAX. Kancaan waxa uu ka mid noqday qaybtan aagga galbeed oo weliba uu ahaa haldoorkeeda.

Habeen ka mid ah bishii Maarso 1973, ayaa ciidan ka tirsan kamaandoosta Israa'iil oo uu hoggaaminayey Ehud Barak, waxa ay isku xeereen xafiiska Kamaal Cadwaan oo ay ku dhex khaarajiyeen. Ehud Barak oo ka mid ahaa askartii gudaha u gashay xafiiska Cadwaan, waxa uu xidhnaa dharka dhaqanka u ah dumarka Lubnaaniyiinta. Isla habeenkaas ayaa saraakiisha FATAX oo warmooog ka ah Kancaan basaasnimadiisu,

AlmaZ Books
Telegram



isaga iyo ciidan yar oo uu wato, ay u direen xeebta Beyruut, si uu u soo sahamiyo in shidaal uu ku jiro jiiddaas. in uu wax dhaqdhaqaaq ahi ka jiro goobtaas, waayo waxa ay FATAX qabtay dareen ah in ciidamada gaarka ah ee Israa'iil ay weerar qarsoodi ah ku soo qaadi karto xarumaha FATAX.

Habeennimadii qaraxyo iyo rasaas ayaa la maqlay laakiin cid badani waxba ma ay dhaadin, subaxnimadiina waxaa caddaatay in xalay la dilay Kamaal Cadwaan, ciidamada Israa'iil ee dilayna ay badda ka soo galeen magaalada, isla baddana ka noqdeen. Waxaa yaab noqotay, marinka ay ciidamada Israa'iil ka soo dageen kana noqdeen in ay dhowr boqol oo tallaabo oo keliya u jirtay halka uu Kancaan Riyaad habeenkaas roondada u joogay.

Arrintan oo ay is biirsadeen hawlgallo aagga galbeed ay Falastiiniyiintu ka wadeen oo si mucjiso ah Israa'iil uga war heshay, ayaa ururka dhexdiisa ka abuuray dareen ah in basaas uu ku dhex jiro, weliba basaaska markan ku dhex jiraa uu ka mid yahay hoggaanka sare ee ururka ama dadka aadka ugu dhow. Waxaa taas caddayn ay uga dhiganayeenna ahaa xogaha ay Israa'iil helaysay oo qaarkood ahaayeen kuwo weli aan kaba soo gudbin masuuliyiinta ugu sarreeya ama tafaasiil aanay cid badaniba ogeyn oo hawlgalka la xidhiidha. Waxaa ka mid ahaa, in naftood-hurayaal gudaha Israa'iil loo diraa ay ka war helaan ciidamada Israa'iil oo ku sii sugaya halka ay ku socdaan.

Waxaa kale oo dhacday jidad naftood-hurayaashu marayeen in saacadihii u dambeeyey ee ay dhaqaaqayeen la beddelay, haddana Israa'iil ay ka war heshay oo marinka cusub ee loo wareegay ay u sii gashay. Waxa ay gaadhay in dadkii sida

AlmaZ Books
Telegram



wax u dhacayaan xogogaalka u ahaa ay soo saaraan halkudheg ah, "Haddii aad doonayso in aad ogaato waxa ka dhex socda xabsiyada Israa'iil (In Yuhuuddu ku qabato oo ay ku xidho), waxa aad ka mid noqotaa hawlgal uu Abu Jihaad qorsheeyey."



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

# 3

# BAACSASHADII AMIIRKA CAS

Muddadaas dheer kaddib, markan Amiirka Cas iyo MOSSAD mid kastaa waa uu ogaa xaqiiqada ah in la gaadhay waqtigii la kala calafqaadi lahaa. Dhibta se MOSSAD illaa markan haysatay waxa ay ahayd in cadawga ay la dagaallamayso aanay wejigiisa garanayn. Waxa ay taasi sii fogeynaysay rejada ah in ay dhaqso u aargoosato. Hawlgal muhiim ah oo aqoonsiga wejiga Amiirka Cas ah ayaa u yaalla.

Saraakiisha MOSSAD waxaa hor yaallay fulinta amarka Golde Meir ee ahaa Amiirka Cas oo nool ama madaxiisa. Haddii aanay dhaqso u fulin amarkaas, wejigabax iyo ceeb baa ay u ahayd MOSSAD oo isku daraysay liiska hormoodka sirdoonnada adduunka. Amiirka waxa uu muddo dheer ku guulaysanayey in magaciisa mooyee, muuqiisa runta ah aanay arkin ama helin MOSSAD. Waxa uu dhaqan u lahaa in uu tago meelo aan laga filayn.

https://t.me/maktabadasharciga 

AlmaZ Books
Telegram


## Dilkii Mudalabka

Lillehammer waa magaalo dhaqameed taariikhiya oo ka tirsan dalka Norway. Inkasta oo ay tahay magaalo dadkeeda 27 kun oo ruux oo keliya lagu qiyaasayey waqtigaas, haddana dabeecaddeeda yaabka leh iyo deegaankeeda iyo buuraleyda ku xeeran ayaa ka dhigay magaalo dalxiis oo aad loo tago, laguna qabto munaasabadaha caalamiga ah.

1973 sirdoonka Israa'iil oo ay ku dhacday canaan badan iyo sumcaddarro ka raacday hawlgallada Falastiiniyiinta ee ay xakamayn kari waayeen, isla markaana qaba canaanta raysalwasaarahooda Golda Meir oo doonaysay madaxa Amiirka Cas, ayaa waxaa soo gaadhay xog cusub oo ah in Amiirka Cas uu si qarsoodi ah ku galay Yurub, kuna sugan yahay magaalada yar ee Lillehammer.

Kulan ay isugu yimaaddeen masuuliyiinta ammaanka ee Israa'iil ayaa lagu go'aamiyey in si degdeg ah loo diro unug ka tirsan ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee KIDON si ay tallaabooyinkeeda oo markiiba la fuliyey.

MOSSAD waxa ay cabsi badan ka qaadday waxa uu Amiirka Cas ka qabanayo magaaladan aan dhaqdhaqaaqa badan ee siyaasadeed ka jirin, laakiin kooxda la diray haysatay waxa ay ahayd in aanay wax sawir ah ka haynin muuqaalka Amiirka Cas, marka laga reebo sawirgacmeed maleawaal ah oo farshaxanka MOSSAD ay sameeyeen, iyaga oo ka qiyaas qaadanaya tilmaamaha ay basaasiintooda aragtay Amiirka Cas ka heleen.

AlmaZ Books
Telegram



Dadka tilmaamahaas lahaa waxaa ugu muhiimsanayd Amiina Almufti oo ay Amiirka Cas muddo ay kulamo joogto ah Lubnaan ku yeesheen.

Kooxdii la diray waxa ay ku faafeen magaaladan aadka u yar, iyaga oo raadinaya ruuxa Amiirka Cas loogu sheegay. Maalmo yar kaddibna waxa ay heleen Amiirkii oo maqaaxi cunto oo magaalada ku taalla mudalab ka ah. Sawirro ayaa ay si qarsoodi ah uga qaadeen, waxa aanay u direen xarunta dhexe ee MOSSAD si loo hubiyo in qofkaas uu yahay Amiirkii. Jawaabta ay MOSSAD soo celisayna waxa ay noqotay in qofka ay soo sawireen uu qudhiisii yahay; sidaa awgeed waxaa la gaadhay waqtigii ay fulin lahaayeen waajibaadkii loo igmaday.

Maalmo door ah ayaa basaasiinta MOSSAD ay ninkan ku sameeyeen dabagal iyo in ay daraaseeyaan guud ahaan noloshiisa. Inta uu shaqada huteelka joogo, marka uu rawaxo iyo meelaha uu tago ama cidda uu u tago ayaa ay ay warkeeda soo heleen. Tallaabo kasta oo uu qaado waxa ay u gudbinayeen MOSSAD. Waxyaabaha ay ogaadeen waxaa ka mid ahaa in ninkani uu inta badan marka aanu shaqada lahayn la joogo ama raaco gabadh u dhalatay dalka Norway oo uur leh.

Xogtaas markii la helay, waxaa la bilaabay qorshihii fulinta hawlgalka oo si aad u xeel dheer ay uga shaqeeyeen khubarada ugu sarreysa MOSSAD. Basaasiin dheeraad ah oo MOSSAD ka socota ayaa Israa'iil laga soo duuliyey si loo keeno magaaladan yar ee Lillehammer si ay kooxda hore u xoojiyaan, taas oo tirada kooxda ka dhigaysay 15 ruux. Laakiin saddex keliya oo kooxda ka mid ah ayaa loo xilsaaray in ay iyagu dilka tooska ah fuliyaan.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa ka mid ahaa Zvi Zamir (Tasfi Samiir) oo ahaa sarkaal sare oo ka tirsan MOSSAD, beri dambana taliye ka noqday.

Kooxdan oo tababarro dheeraad ah loo soo siiyey in ay khaarajiyaan Amiirka Cas, waajibaadka ay qabanayaan waa loo qaybiyey. Tobankii habeennimo markii ay 35 daqiiqo dhaaftay, oo ahayd 21[kii] Julay 1973, ayaa ninkan oo tan iyo maalinnimadii lagu daba jiray uu ka soo baxay shaneemo (Goobta filimada lagu daawado), isaga oo ay wehelinaso gabadhii reer Norway ee uurka lahayd. Waxa ay farxad ku soo wadadaawadeen filim. Sarkaal MOSSAD ka tirsanaan jiray oo qoray buugga MOSSAD: Hawlgalladii Waaweynaa ayaa sheegay in habeenkaas uu sinimooga ka socday filinka Maraykanka ah ee "Eagles attack at dawn—Gorgorradu waaberigay wax weeraraan".

Lammaanihii wadasocday waxa ay fuuleen bas. Kooxdii MOSSAD oo baabuurtoodii wata ayaa si yar u daba galay. Markii la gaadhay halkii gurigooda ugu dhoweyd ayaa ay lammaanihii ka degeen baskii, kaddibna waxa ay lugeeyeen jid aad u sanqadh yar, cagtuna aad uga yartahay. Si kedis ah ayaa uu gaadhi ka mid ah kuwii ay wateen MOSSAD oo midabkiisu caddaan ahaa u hareer istaagay lammaanahan iska laafyoonayey.

Laba nin oo baastoolado gacmaha ku sita ayaa ka soo booday oo durbadiiba rasaas ku bilaabay ninkii. Waxa ay ku dhufteen 14 xabbadood oo sababay in aanu nololba dhulka ula dhicin. Isla markiiba kooxdii MOSSAD oo dhan waxaa lagu wargeliyey in la gaadhay waqtigii ay ka bixi lahaayeen magaalada Lillehammer iyo guud ahaanba dalka Norway.



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram

Waxa uu amarku ahaa in aan maalin keliya la wadabixin, iyo in kooxdii dilka toos u geysatay ay ugu hor baxaan iyaga oo baabuurkii ay wateenna kaga tegeya mid ka mid ah jidadka aan dadka badnayn ee magaalada Lillehammer.

Sidoo kale waxa uu qorshuhu ahaa in laga tago koox iyagu guryaha kiradooda bixisa isla markaana fasaxda, baabuurtana ku celisa meelihii laga soo kiraystay, marka laga reebo gaadhiga hawlgalka geystay oo marka horeba qolada dilka fulisay ee baxsanaysaa ay soo kireeyeen. Laakiin feejignaan badan oo lammaanaha is jeclaa ay sameeyeen ayaa sabab u noqday in fashilaaddii abid ugu weynayd ay soo gaadho MOSSAD, mushkilad uu xalkeedu la fogaadayna soo kala dhex gasho Norway iyo guud ahaan dalalka Yurub.

Nin iyo gabadh haasaawayey oo isku beegay jirridda mid ka mid ah dhir badan oo si urursan uga baxday meel aan ka fogeyn goobta dhagartu ka dhacday, ayaa markiiba gaadhiga istaagay iyo ragga baastooladaha sita ee ka soo degey ku war helay. Lammaanahani waxa ay si fiican uga bogteen muuqaalka gaadhigan, isla markii falku dhacay ee ay ragga hubaysani meesha ka dhaqaaqeenna waxa ay la xidhiidheen bilayska. Arrintan ayaa qorshihii MOSSAD gebi ahaantiiba madaxiisa mijo u rogtay.

Bilayska Norway oo ka faa'idaystay dhaqsaha warku ku soo gaadhay iyo tilmaamaha lammaanahan caashaqu siiyeen, waxa ay isla saacado gudahood soo heleen gaadhigii dembiga lagu geystay. Waxa ay durbadiiba xabsiga ku hubsadeen labadii nin ee watay gaadhigaas oo ahaa Dan Erbil iyo Marban Jeldnikov. Isla saacado yar gudahooda ayaa baadhayaasha Norway ku

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



guulaysteen in ay labadan nin ku qasbaan in ay xogta oo dhan sheegaan.

Waxa ay qirteen in ay iyagu dilka ka dambeeyeen iyo in ay ka tirsan yihiin MOSSAD. Qiraalkii labadan nin ayaa bilayska ku hoggaamiyey in ay soo qabtaan Sylivia Rafael oo ahayd gabadh kooxda ku jirtay iyo Abrahaam Jumar oo isna ka mid ahaa kooxda MOSSAD ee hawlgalkan ku lug lahayd. Sidoo kale waxaa uu bilayska Norway qabtay laba basaas oo kale.

Erbil iyo Jeldnikov ayaa baadhayaasha u qirtay xogo la xidhiidhay hawlgalkan oo miisaankooda bilayska iyo xitaa xukuumadda Norway u qaadan waayeen. Waxaa ka mid ahaa magacyada dadkii hawlgalkan ka qayb qaatay ee MOSSAD ka tirsanaa, guryaha iyo gabboodka ay Norway kaga dhuuman jireen, xarumo qarsoodi ah oo ay MOSSAD ku leedahay Norway iyo guud ahaan qaaradda Yurub iyo awaamirtii laga soo siinayey taliskooda dhexe ee Tel Aviv.

Bilayska Norway oo ka duulaya xogtan faraha badan ee ay baadhayaashoodu ka heleen basaasiinta la qabtay ayaa waxa ay si kedis ah xoog ugu galeen guri ku yaallay magaalada Oslo ee caasimadda Norway, waxa aana laga soo helay dhukumantiyo muhiim ah oo la xidhiidha hawlgalka khaarajinta ahaa iyo xitaa guud ahaan hawlgallada MOSSAD ee Norway ku waajahan. Waxaa kale oo dhukumantiyada gurigan laga soo helay ay xaqiijiyeen in falkan ay safaaradda qudheeduna ku lug lahayd, gaar ahaan xoghayaha ammaanka.

Waxaa lagu macneeyey dhirbaaxadii ugu xumayd ee cuskatay sumcaddii iyo sharaftii hay'adda sirdoonka iyo ammaanka dibadda u qaabbilsan Yuhuudda.

AlmaZ Books
Telegram



Isla subaxnimada maalintii labaad ayaa warbaahinta dalka Norway baahisay warka xadhigga basaasiinta MOSSAD.

Waxaa se xanuunka ugu darani ahaa warka sheegaya in MOSSAD ay dishay nin aan waxba galabsan oo ahaa danyare noloshiisa ka dabbara maqaaxi uu ka shaqaysanayey. Habeenkan uu fasaxa ahaana farxad kula qaadanayey xaaskiisa oo uur toddoba bilood ah lahayd. Ka sii daran ee ninka oo lagu magacaabi jiray Axmed Bashawqi, Falastiini ma ahayn ee waxa uu isir ahaan ka soo jeeday dalka Marooko, magaaladan dalxiiska caanka ku ahna shaqo raadis ayaa uu u yimid, kaddibna inta uu shaqadan ka helay oo uu degey ayaa uu ku guursaday gabadhan reer Norway.

MOSSAD waxaa ceeb ku noqotay in ay kala saari kari wayday sarkaalka Sabtembarta Madow u qaabbilsanaa hawlgallada ee Amiirka Cas iyo ninkan iskii u shaqaysanayey. Waxa ay noqotay dhibic madow oo ku dhegtay sumcadda MOSSAD iyo masiirkeeda.

Norway basaasiintii ay qabatay waxa ay dhaqso ugu gudbisay maxkamadda. Israa'iil waa ay qiratay qaladkaas foosha xun ee ay ku dishay Axmed Bashawqi, waxa aanay qoyskiisa siisay magdhow qasab lagaga dhigay oo ahaa 4 boqol oo kun oo doolarka Maraykanka ah. Sidoo kale qaladkani waxa uu Israa'iil ku qasbay in ay dib ugu noqoto gebi ahaanba qaabka ay MOSSAD uga hawlgasho dibadda iyo habka diyaarinta qorshayaasheeda khaarajinta ah.

Xogo sirdoon oo mar dambe soo baxay ayaa lagu ogaaday in sababta ay MOSSAD ninkaas u dishay aanay ahayn u

AlmaZ Books
Telegram



ekaanshaha Amiirka Cas, balse ay ahayd majarahabaabin uu Amiirka Cas ku sameeyey. Waxa uu helay basaasiin MOSSAD uga shaqaynaysay la socoshada dhaqdhaqaaqa Amiirka Cas, kaddibna iyagii ayaa uu sii dhex mariyey xogo ay run moodayaan oo la xidhiidha dhaqdhaqaaqiisa.

Amiirka Cas in uu MOSSAD xog majarahabaabin ah siiyaa, markan oo keliya ma ay dhicin, marar badan oo kale ayaa ay MOSSAD fulisay hawlgallo ay filayeen in ay Amiirka Cas ku dili doonaan ama ay ku soo qaban doonaan, laakiin dad kale ay ku waxyeelloobeen ama ay Amiirka Cas ka waayeen meeshii laga filayey. Waxa ay ahaayeen qorsheyaal dhafoortaabad ah oo uu Amiirka Cas si ulakac ah ugu samayn jiray, si uu u dareensiiyo feejignaantiisa iyo sarraynta khibradda iyo aqoonta sirdoon ee uu adeegsanayo.

Xilliyadaas Israa'iil waxa ay si aad ah isugu hawshay in ay basaasiin ku dhex beerto ururrada kala duwan ee Falastiiniyiinta, weliba in ay noqdaan Falastiiniyiin awood u leh in ay ka agdhowaadaan madaxda iyo golayaasha arrimaha muhiimka ah lagu gorfeeyo.

Lubnaan, Suuriya, Masar, Liibiya, Ciraaq, Tuuniisiya iyo Sudan ayaa ahaa meelaha sida aadka ah ay uga hawlgaleen basaasiinta MOSSAD, iyaga oo sita jinsiyado iyo baasaboorro aan dalalkan aynu soo sheegnay laga jidh diidayn. Waxa ay ku gabban jireen ganacsiyo, warfidiyeennimo ama hawlo bani'aadamnimo, kaddibna dad dalalkaa u dhashay iyo Falastiiniyiinta joogta ayaa ay raadsan jireen si ay uga dhigaan basaasiin MOSSAD u shaqaysa.

AlmaZ Books
Telegram



Sababta ay MOSSAD si gaar ah dalalkan xoogga ugu saartay waa in ay Falastiiniyiintu ku lahaayeen xarumo iyo xafiisyo, ama ay ahaayeen dalal qaddiyadda Falastiin hiil iyo hoo la garab taagans, sidaas awgeed ay aad u tagaan masuuliyiinta ururka Xorayntu.

Amiirka Cas waxa uu arrintan uga faa'idaystay si dan u ah ammaankiisa. Tusaale ahaan waxa uu sameeyey dhalinyaro Falastiiiyiin aad u tababaran ah oo ku nool dalalkaas kala duwan ee aynu soo sheegnay, waxa aanay jili jireen ardaynimo ama hawlo kale, balse runtu waxa ay ahayd in ay tagaan meelaha uu Amiirka Cas ugu sheego in ay dillaaliinta MOSSAD basaasiinta u ururiyaa ku badan yihiin, si iyagana looga dhigo basaasiin.

In badan oo dhalinyaradan ka mid ah ayaa xeeladdaas kaga mid noqday basaasiinta MOSSAD oo iyadu u haysata dad ay ku soo xeragelisay dadaalkeeda. Waxa aanay siyaabo kala duwan u gaadhsiin jireen farriimo majarahabaabin ah oo ay ugu sheegayaan dhaqdhaqaaqa Amiirka Cas. Si aanay xeeladdani u fashilmin mararka qaarkood waxa ay basaasiintani MOSSAD siinayeen xogo run ah balse aan shaqaynayn. Waxaa ka mid ahaa, in ay MOSSAD u sheegaan meel uu kulan ku leeyahay ama hawl u tegeyo ama dal uu ku sii jeedo, laakiin xogtu ay kala dhimantahay, tusaale ahaan taariikhda ama goobta.

Muddo dheer ayaa uu Amiirka Cas xaaladdan ku badbaadayey. Meelaha sida foosha xun ay MOSSAD ugu majarahabaabiyeen waxaa ka mid ah hawlgalkii magaalada Lillehammer ee dalka Norway.

AlmaZ Books
Telegram



Khubaro MOSSAD ka tirsan ayaa qirtay in cidda dabinkaas ceebaynta ah ku ridday ee xogta u soo samaysay ay ahayd, basaasiinta uu Amiirka Cas ku dhex beeray MOSSAD oo uu xogtan isagu u dhiibay.

## Amiina Almufti

Fashilaaddaas MOSSAD ka raacday hawlgalka mudalabka ay ku dishay, waxa uu qasab kaga dhigay in ay xisaabteeda dib ugu wada noqoto. Waxa ay bilowday hawlgalkii abid ugu ballaadhnaa ee ay muuqaalka Amiirka Cas ku raadinayso, iyada oo markan go'aansatay in ay si toos ah u abbaarto. Dadyowga ay MOSSAD qorshahan cusub u adeegsatay waxaa ugu muhiimsanaa Amiina Almufti. Waxa ay ahayd gabadh reer Urdun ah oo qoyskeedu, isir ahaan ka soo jeedo qawmiyadda Sharaakiska (Cherkess) ee Bariga Yurub. Waa qawmiyad badankeedu muslimiin ah oo ku filqan dalalka Bariga Yurub, gobalka Shaam loo yaqaannay ee Carabeed, Masar, Turkiga iyo meelo kale.

Nolol raaxo iyo koolkoolin ah oo ay qoyskeedu ku soo barbaariyeen ayaa lumyey, waxa se u raacday cadho gaamurtay oo ay ka qaadday wiil Falastiini ah oo jacayl carruurnimo kaga baxay, dhaqan lun badan oo ay ka qaaday nolosha Yurub oo uu qoyskeedu waxbarasho ugu diray, guuldarro ay kala kulantay waxbarashadii oo ku abuurtay wejigabax iyo niyadjab ay kula soo noqon kari weyday Urdun, cadaadis bulsho iyo wiil Yuhuudi ah oo ay jeclaatay, tabaalahaas adduun ayaa isu biirsaday Amiina oo da' yar.

AlmaZ Books
Telegram



Midka keliya ee ay ku tuntuunsatay waxa uu noqday in ay guursato wiilka Yuhuudiga ah ee ay isjeclaadeen. Waxa ay filaysay in uu xallin doono dhibaatooyinkaa haysta oo dhan.

Markii ay wiilkii guursatay, muddo gaaban kaddib waxaa uu ku biiray ciidamada cirka ee Israa'iil. Kaddib markii ay iyadu sidaas ku dirqiday, iyada oo doonaysa in ay Israa'iil u guurto si ay carab uga sii fogaato.

Mosh, oo ah ninkii ay guursatay ayaa la waayey, kaddib markii sahan ahayd oo uu waday ay kula dhacday buuraleyda u dhexeysa Israa'iil iyo Suuriya, dibna raq iyo ruux midna looma helin.

Nacaybkii Carabta oo ku sii batay iyo nafteeda oo ay ku haaraantay in ay sabab u ahayd dhimashada saygeeda maadaama oo ay ciidamada iyadu ku dhiirrigelisay, waxa ay sababeen in ay qaadato go'aan ah in ay ka aargoosato. Israa'iil oo taas ka faa'idaysanaysaana waxa ay ka dhigtay basaasad uga hawlgasha dhulka Lubnaan ee Falastiiniyiinta wax-iska-caabbinta saldhigyada u ahaa.

Labada hawlood ee ugu muhiimsan ee loo diray waxa ay ahaayeen, in ay keento xogaha la xidhiidha hawlgallada Falastiiniyiinta ee Israa'iil ka dhanka ah; kuwa ay naftood-hureyaashu ku gelayaan gudaha Israa'iil iyo kuwa danaha Yuhuudda ee Yurub lagu beegsanayaba. MOSSAD waxa ay xiisaynaysay in ay hesho magacyada saraakiisha Sabtembarta Madow ee uu Amiirka Cas ku beeray qaaradda Yurub, si ay u raadsadaan danaha iyo masuuliyiinta Yuhuudda. Waajibka labaad ee Amiina la saaray waxa uu ahaa in ay mar uun soo hesho sawirka runta ah ee Amiirka Cas.

AlmaZ Books
Telegram



Amiina Almufti waxa ay Lubnaan ku joogtay in ay tahay dhakhtarad reer Urdun ah oo shahaadada sare ee PhD ku sidata Caafimaadka dhimirka iyo dabiibka xaaladaha nafsiga ah, diyaarna u ah in carabnimada awgeed ay cilmigeeda iyo waayoaragnimadeeda ugu adeegto danaha walaalaheeda reer Falastiin.

Amiina oo ka faa'idaysanaysay fursadaha tirada badan ee u saamaxayey dhexgalka madaxda iyo hay'adaha Falastiiniyiintu, waxa ay xidhiidho badan la yeelatay qaybo kala duwan oo ka mid ah hay'adaha Falastiiniyiinta, gaar ahaan waaxda caafimaadka. Waxaa kale oo ay aad ugu xidhantay xafiiska hoggaamiyaha Falastiiniyiinta Yaasir Carafaat.

Inkasta oo uu ahaa qof aad u furfuran oo dad jecel, qisada Amiina si gaar ah ayaa ay u soo jiidatay Carrafaat. Waxa uu u arkayey gabadh iyada oo da' yar haddana cilmigeedii ugu deeqday u adeegista Falastiiniyiinta. Amiina waxaa kale oo ay xidhiidho fiican la samaysatay cid kasta oo ay u arkaysay ama MOSSAD u sheegtay in ay caawin karto hawlaha sirdoon ee laga rabo. Tusaale ahaan, qolyaha ku lug leh shirkadaha socdaalka iyo isgaadhsiinta si ay ula socoto dhaqdhaqaaqa masuuliyiinta Falastiiniyiinta iyo si ay u dhegeysato talefannada Amiirka Cas (Marka ay hesho).

Dadka ay Amiina sida aadka ah ugu adeegsatay hawlaheeda sirdoon waxaa ka mid ahaa Maruun Alxaayik oo ahaa Lubnaani ka shaqaynayey shirkadda isgaadhsiinta ee Lubnaan. Waxa uu u sahlay in uu ku xidho taleefanno xasaasi ah oo ay ku xidhiidhayeen masuuliyiinta Falastiiniyiintu. Waxaa kale oo uu ahaa qofkii Amiina baray wejiga Amiirka Cas.

AlmaZ Books
Telegram



Juun 1973, ayaa ay Amiina Almufti si kedis ah u baratay Amiirka Cas, xilliyadaas waxa uu weli ku jiray ayaamihii farxadda arooska Georgina Risq oo 21 sanno oo keliya jirtay. Waxa ay ahayd gabadh masiixiyad ah oo u dhalatay dalka Lubnaan. Isla sannadkaas ayaa lagu maamuusay taajka quruxda haweenka adduunka.

Goor subaxnimo ah ayaa Amiina iyo Alxaayik oo joogay huteel ku yaalla xeelliga badda oo dabbaasha iyo laydhsiga loo yimaaddo xilliyadan xagaaga, ayaa uu mar keliya saaxiibkeedii Alxaayik ee soo hor fadhiyey indhaha ugu ishaaray tilmaamta nin dhinaca barkadda dabbaasha ka xigay, isaga oo cod gaaban ku leh, "Eeg… Eeg… waa kaas Cali Salaama!!"

Amiina sawir indhaha ah oo aad u buuxa ayaa ay aroortaas ka qaadatay Amiirka Cas. Waxa ay adeegsatay xirfaddii sida heerka sare ah maskaxdeeda loogu soo carbiyey. Waa in qofka ama shayga ay aragto ay si fiican ugu sawiri karto maskaxdeeda, si ay dib uga xasuusato dhammaan tilmaamihiisa kaddibna, xeeldheereyaasha farshaxanka iyo sawirgacmeedka uga caawiso in ay sawiraan qofka ama shayga ay soo aragtay. Maalintan intaas ayaa ay kala tagtay huteelka, habeennimadii markii ay warbixinta gaadhsiisay Tel Aviv waxaa loo soo sheegay in ay qunyar u socoto, waxaa looga digay khatarta Amiirka Cas, iyada oo lagula taliyey in aad u kala fogeyso ballamaha ay ku tegeyso huteelka ay ku soo aragtay, isla markaana si aad ah uga feejignaanayso jidka ay u marayso barashadiisa.

Xogo ay Amiina ka qortay nolosheeda basaasnimo, muddadii ay maxbuuska u ahayd Falastiiniyiinta iyo mar dambe waxa ay ku sheegtay in Amiirka Cas uu isagu bilaabay

AlmaZ Books
Telegram



isbarashada, kaddib markii uu dhowr maalmood huteelka ku arkay. Waxaa jira dareenno ah in shaki uu gabadhan ka qaaday sabab u ahaaba in uu barto, laakiin Amiina iyadu waxa ay aaminsanayd in ay ahayd barasho caadiya oo la xidhiidha dabeecadaha shabeelnaagoodnimo ee Amiirka lagu xaman jiray.

Barasho dheer oo uu isagu marka hore isugu sheegay ganacsade Falastiini ah ayaa u bilaabatay Amiina oo si fiican u garanaysa ninka ay la macaalmilayso iyo Amiirka Cas. Waxa ay ahayd isbarasho Amiina u horseedday laba guulood iyo guuldarradii ay taariikhda kaga baxday.

MOSSAD waxa ay kaga kasbatay kalsooni iyo kalgacal aad u weyn oo gaadhsiiyey heer ay noqooto qofkii Carbeed ee abid ay Israa'iil taallo xusuusreeb ah u dhisto, iyada oo weliba uga dhex dhistay xarunta sirdoonka Qaranka. Marka labaadna, barashada Amiirka Cas waxa ay ka dhigatay fure ay si sahal ah ugu furato kadin kasta oo ay u baahato si ay xog uga soo hesho.

Meelo aanay abidkeed gaadhin oo ay xogo muhiim ah Israa'iil uga soo heshay ayaa ay barashadan ka faa'iday, waxa ay kalsooni ka heshay masuuliyiintii Falastiiniyiinta oo sababta Amiirka Cas ku aaminay. Waxa aanay gaadhay heer ay xidhiidh barasho iyo galangal u yeelato hoggaamiyihii Falastiiniyiinta Yaasir Carafaat, laakiin guuldarradii ay eeddayna barashadan ayaa ay ku gaadhay.

Amiirka Cas oo ka faa'idaystay qaladaad sirdoon oo ay Amiina Almufti samaysay ayaa ugu dambayntii fahmay qofka ay tahay. Waxa uu fashiliyey Amiina oo aan weli sawir rasmi

AlmaZ Books
Telegram



ah ka qaadin, laakiin arrintaasi markan warwar badan kuma ay haynin MOSSAD. Waxa ay ku kalsoonayd Amiina, sidaas awgeed waxa ay u arkaysay in Cali Salaama uu gacanteeda ku jiro, sidaas awgeed waxa ay ka fikiraysay habka ugu fudud ee loo khaarajin karo.

Nasiibdarro qaladaad sirdoon oo ay Amiina samaysay ayaa baraarujiyey Amiirka Cas oo dadka yaqaannay ay ku tilmaamaan in uu lahaa dareen sirdoonnimo oo dheeraad ah. Inkasta oo ay Amiina iskudayday raadgadasho iyo xitaa baxsasho, Gacanta ayaa uu ku dhigay, ciqaab dheer oo shan sanno ah kaddibna waxa uu dhaafsaday maxaabiis tiro badan oo ahaa raggiisa Yuhuudda u xidhnaa.

## Kala diristii Sabtembarta Madow

Ururka Sabtembarta Madow waxa uu ahaa quwad milateri oo qadiyadda Falastiiniyiinta ku soo jeedisay indhaha dunida oo dhan. Sida oo kalana Carabta iyo dunida muslimka ayaa ay ku abuureen rejo ah in la samayn karo wax iska caabbin ka dhan ah Yuhuudda. Waxaa kor u kacay qiiradii halganka Falastiiniyiinta, waxa aana soo baxay ururro iyo shakhsiyaad caan ah oo dunida oo dhami ku qasbanaatay in ay tixgeliso.

Waxaa kale oo ay Sabtembarta Madow kor u qaadday awoodda diblumaasiyadeed ee Falastiiniyiinta. Kaddib markii lagu qancay khatarta ammaandarro ee ka soo socota, waxaa qasab noqotay in la dhegeysto qadiyaddooda, ugu yaraanna laga shaaqeeyo sidii loo heli lahaa koox Falastiiniyiin ah oo si guud qadiyaddan loogala xaajoodo. Laakiin dhinaca kalana waxaa sii kordhay kordhay nacaybka ay hoggaamiyeyaasha

AlmaZ Books
Telegram



Carabtu u qabeen Sabtembarta Madow. Waxa ay u arkayeen gacan ay Falastiiniyiintu kaga aargoosan karaan siyaasadahooda gurracan ee ku waajahan Falastiiniyiinta oo mararka qaarkood ahaa kuwo ay u xaglinayeen danaha Israa'iil iyo Reer Galbeedka.

Dhinacyadan kala duwani waxa ay culays badan saareen Yaasir Carafaat oo ay ka doonayeen in uu kala diro Sabtembarta Madow, waxa aanu culayskaas miisaankiisu waxtaray intii ka dambaysay shirmadaxeedkii Carabta ee Marooko oo go'aamada ka soo baxay ay ka mid ahaayeen in ururrada kala duwan ee Falastiiniyiinta laga dhex doorto ururka Xoraynta Falastiin ee Yaasir Carafaat hoggaamiyo, loona aqoonsado in uu yahay ururka keliya ee meteli kara qadiyadda iyo arrimaha Falastiiniyiinta.

Isla go'aankaas waxaa ku dhaqmay dalalkii Reer Galbeedka oo Maraykanku ugu horreeyo iyo Qaramada Midoobey, maadaama oo uu haatan ka mid noqday nidaamka caalamiga ahna Carafaat waxa uu noqday ruux lala xisaabtami karo, lana ogolaysiin karo arrimaha culayska lagu saarayey ee uu ugu horreeyey kala dirista ururka Sabtembarta Madow.

Ugu dambayntii waxaa qasab noqotay in wax laga beddelo qaabdhismeedkii ammaanka ee Falastiiniyiinta, waxaa laga saaray ururka Sabtembarta Madow oo marka horeba uu Carafaat dafirsanaa inuu xidhiidh ka dhexeeyo. Si kastaba ha ahaato e' Carafaat waa uu qarsan kari waayey jacaylka uu u qabay Amiirka Cas oo uu aad u soo dhoweystay.

Amiirku ma uu ahayn nin ay Yuhuuddu dhayal isu illowsiin karto xanuunkii uu soo mariyey dadkeeda iyo khalkhalkii

AlmaZ Books
Telegram



ammaanka ee uu ku sumcad dilay MOSSAD.

Inkasta oo ay Israa'iil isafgarad badan la yeelatay Carafaat, haddana Golda Meir kama ay laaban go'aankeedii ay wacadka ku martay in ay mar uun ka aargoosato Amiirka Cas.

Carafaat kala diristii Sabtembarta Madow kaddib, waxa uu dhisay garab hubaysan oo ururkiisa ka mid ah, waxa aanu u bixiyey Xoogga 17aad. Garabkan oo si ka duwan Sabtembartii Madoobayd isagu noqday garab si rasmi ah loo iclaamiyey laguna daray garabyada uu ka kooban yahay ururka Xoraynta Falastiin, aasaaskiisana waxaa qayb libaax ku lahaa Amiirka Cas. Waxa aana shaqada ciidankan laga dhigay ama lagu sheegay ilaalada Yaasir Carafaat iyo hoggaamiyeyaasha kale ee Falastiiniyiinta; laakiin haddana garabkani waxa uu ka koobnaa faracyo ay ka mid tahay qayb ammaanka gudaha iyo arrimaha sirdoonka ka shaqaysa.

Ciidankan Carafaat dhisay tiradooda waxaa lagu qiyaasi jiray illaa 7000, waxa aanay u shaqayn jireen laba weji oo kala ah ciidamada rigliga ah iyo qaybo sirdoon ah. Xoogagga 17aad waxa ay tababarro, tayeyn iyo qalabaynba ka heli jireen dalal ay ka mid yihiin Masar iyo Urdun. Markii dambe ee Falastiiniyiinta la siiyey maamul hoosaadka ay dawladda hadda u jirta kaga dhisteen Daanta Galbeed iyo Marinka Qasa, waxaa ciidankan lagu dhex daray ciidamada ilaalada madaxweynaha oo ah ciidanka keliya ee hubaysan, ciidan ahaanna u diyaarsan, ee heshiiskii Yuhuudda iyo Falastiiniyiintu oggolaanayey.

# 4

# KHAARAJINTII AMIIRKA CAS

Kulankii Qaramada Midoobey ee uu Yaasir Carafaat ka qaybgalay, waxaa garab socday kulamo qarsoodi ah oo ay dawladda Maraykanku la yeelatay. Waxa uu Maraykanku doonayey in uu aad u daraaseeyo Carafaat oo ay qasab ahayd in fagaarayaasha siyaasadda ee caalamiga ah ay isugu iman doonaan. Waxaa kale oo uu Maraykanku doonayey in uu iskaashi dhinaca ammaanka ah la yeesho ragga arrimaha sirdoonka ku xeel dheer ee ururka Xoraynta Falastiiniyiinta. Kulamadaas waxaa qayb ka ahaa Amiirka Cas oo uu u arkayey in uu yahay awood soo koraysa iyo xeeldheere sirdoon oo wax badan ka caawin kara.

Kulan aad u miisaan cuslaa oo masuuliyiin sare oo Maraykan ah, gaar ahaan dhinaca ammaanka iyo sirdoonku, ay Amiirka Cas kula yeesheen huteelka caalamiga ah ee Waldorf Astoria, waxa ugu muhiimsan ee ka soo baxay waxa uu ahaa in iskaashi iyo wadashaqayn ay labada dhinac ka yeeshaan arrimaha ammaanka. Maraykanka iyo Carafaat waxa ay isla garteen in iskaashiga labada dhan uu isagu maamulo una

AlmaZ Books
Telegram



hagarbaxo, isaga oo ku duulaya garbihiisa ammaanka ee uu hoggaamiyo Amiirka Cas.

Kulankaas Yaasir Carrafaat waxa uu Maraykanka ku wargeliyey in Amiirka Cas uu yahay wakiilkiisa rasmiga ah ee wadashaqayta iyo iskaashiga uu la yeelanayo Maraykanka, gaar ahaan arrimaha ammaanka. Waa suurtogal in sababta Carafaat xilkan ugu dhiibayey saaxiibkiisa mararka qaarkood wiilkiisa lagu tilmaami jiray, ay ahayd isaga oo doonayey in uu ka badbaadiyo gacanta MOSSAD, maadaama oo xilkani ka dhigayo nin meeqaam diblumaasiyadeed leh oo dawladweyn la shaqaynaya.

Aqalka Cad ee Maraykankuna dhinaciisa waxa uu isku xidhka iyo wadashaqaynta Falastiiniyiinta iyo Maraykanka u wakiishay Robert Clayton Ames oo caan ku ahaa Bob Ames. Ninkan oo si qarsoodi ah uga tirsanaa wakaaladda sirta Maraykanka ee CIA ayaa la sheegay in uu aad ugu xeel dheeraa arrimaha Bariga Dhexe.

Bob Ames (1934 illaa 1983), waxa uu ahaa sarkaal darajo sare ka gaadhay CIA oo uu mar ugu magacownaa agaasinka hawlaha dalalka dhaca gobolka Bariga Dhexe, Turkiga iyo Qubrus. Isaga ayaa abuuray xidhiidhkii ugu horreeyey ee heerkiisu ugu sarreeyey ee uu sirdoonka Maraykanku la yeesho ururka Xoraynta Falastiin ee FATAX (PLO). Xidhiidh saaxiibtinnimo oo uu la samaystay Yaasir Carafaat iyo Amiirka Cas, ayaa loo tiriyaa in uu wanaajiyey xidhiidhka wadashaqayneed ee Maraykanka iyo ururkan si guud, iyo si gaar ah Amiirka Cas iyo Maraykanka.

AlmaZ Books
Telegram



Qoraaga Kai Bird oo buuuggiisa 'The Good Spy: The Life and Death of Rembert Ames' si aad ah ugaga warramayaa hawlihii sirdoon ee Bob Ames, xidhiidhka uu la lahaa masuuliyiinta Falastiiiyiinta iyo dhimashadiisii. Waxa uu sheegayaa in xeeladihiisa sirdoonnimo ay aad uga duwanaayeen kuwii xilligaas caanka ahaa ee ay ka mid ahaayeen dilka iyo xog raadin keliya. Waxa uu ku dhaqmi jiray hab u shaqaynaya sida hawlaha bani aadamnimada iyo siyaasadda, waxa aanu aaminsanaa jidka nabadda.

Buuggani waxa uu sheegay in CIA ay Amiirka Cas u taqaannay magac afgarasho oo ahaa MJ Trust / 2, Xogo tiro badan oo uu Amiirka Cas Maraykanka u gudbiyey ayaa uu sheegayaa in ay badbaadiyeen nolosha dad badan oo Maraykan ah oo khatar ku jiray. Si kastaba ha ahaato 'e waxa uu Amiirka Cas aad uga difaacayaa in uu marnaba basaas u noqday CIA, sida ay dadka qaar ku doodaan.

Bob Ames waa uu dhex galay Falastiiniyiinta iyo guud ahaan Carabta oo mar uu xaaskiisa Effon ee Maraykanka joogtay warqad u diray ku tilmaamay, dad ixtiraam, sooryeyn, deeqsinimo iyo soo dhoweyn badan. Waxaa la aaminsan yahay dhexgalkaas bulshada iyo saaxiibbada badan ee uu ku dhex samaystay in ay ka mid tahay sababaha marar badan ka badbaadiyey iskudayo dil oo ay la beegsadeen kooxo hubaysan oo Falastiiyiin ahaa.

Xidhiidhka CIA waxa uu gaadhay in Amiirka Cas uu casuumad booqasho oo rasmi ah ka helay agaasimaha guud ee wakaaladda sirdoonka Maraykanka CIA, waxaa markaas agaasime ahaa George Bush kii weynaa. Kulamo aad u heer sarreeya ayaa uu Amiirka Cas Maraykaka ku soo qaatay.

AlmaZ Books
Telegram



Arrintaasi waxa ay si aad ah uga cadhaysiisay Yuhuudda oo dareentay in xidhiidhka sii xoogaystay ee Maraykanka iyo Falastiiniyiintu uu khatar ku yahay dagaalka ay kula jirto Falastiiniyiinta, gaar ahaan xidhiidhkan dhinaca ammaanka ah ee gaadhay in madaxa ugu sarreeya CIA uu qaabilo Amiirka Cas oo Israa'iil ay muddo dheer dunida ka iibinaysay in uu argagaxiso yahay. Cabasho rasmi ah oo arrintan la xidhiidha ayaa ay Israa'iil u gudbisay Maraykanka, iyada oo ku andacoonaysay in mid ka mid ah cadaawaha Israa'iil uu soo dhoweyn ka helay masuuliyiinta ugu sarraysa Maraykanka.

Cabsida arrintani Israa'iil ku haysay ee ah in xidhiidhkani uu caqabad ku noqon doono dagaalladii arxandarrada ahaa ee ay Falastiiniyiinta ku haysay, waxaa dheeraa sas ay ka qabtay in uu Falastiiniyiinta u horseedo in ay kor ugu sii siqaan meeqaam dawladnimo. Midda se ka sii darani waxa ay ahayd MOSSAD oo ka baqaysay in xogaha uu Amiirka Cas siiyo Maraykanku ay ka duwanaadaan ama beeniyaan xogaha ay hore CIA du uga heli jirtay MOSSAD, oo markan ka hor ahayd isha ay xogta ugu muhiimsan ka qaataan, aadna loo dareensanyahay in ay siisay xogo qaldan iyo been-abuur badan oo ka dhan ah Falastiiniyiinta, Lubnaan iyo guud ahaanba Carabta.

Bob Ames marar badan ayaa uu arrimo muhiim ah ku khilaafay masuuliyiinta hay'adda uu ka tirsan yahay ee CIA; waxaa ka mid ahaa in aanu xogaha qaarkood ka qarin jirin saaxiibbadiisa Falastiiniyiinta, taas oo uu u arkayey in ay kalsoonida xoojinayso.

AlmaZ Books
Telegram



Mar kale Bob Ames waxa uu CIA ka diiday talo ah in loo xagliyo Urdun oo aan aad loo wada aaminin, taas beddelkeeda waxa uu aaminsanaa in Falastiiniyiintu ay yihiin jaal muhiim ah. CIA waxa ay doonaysay in la shaqaaleeyo Amiirka Cas oo uu ka mid noqdo basaasiinta rasmiga ah ee mushaharka la siiyo, laakiin tanna Bob Ames waa uu diiddanaa isaga oo mar kasta ku celcelinayey in uu yahay saaxiib muhiim ah, sidaas awgeed isaga oo aan basaas u ahayn lala samayn karo iskaashi, xogo muhiim ahna laga heli karo.

Masuuliyiinta CIA da oo aan aad ugu qancin qaabka uu Bob Ames doonayey in Amiirka loola shaqeeyo ayaa 1970 soo diray koox xeeldheereyaal ah oo si gaar ah ula kulantay Amiirka Cas. Kooxdan oo lagu tilmaamay ruugcaddaa basaasiin ahi, waxa ay u soo bandhigeen qorshe ah in uu si rasmi ah uga mid noqdo CIA, mushaharna ku yeesho. Waxa ay afka ku dhufteenba mushahar iyo kharashaad wadartoodu tahay 3 kun oo doolar bil kasta, laakiin Amiirka Cas arrintaas waa uu ku gacansaydhay.

18$^{kii}$ Abril 1983, ayaa uu Bob Ames ku dhintay qarax lala beegsaday safaaradda Maraykanka ee magaalada Beyruut, waxa uuna ka mid ahaa masuuliyiin iyo saraakiil ciidan oo markii weerarku dhacay ku sugnaa gudaha safaaradda. Waxa ku dhintay 52 qof oo isugu jiray 18 ciidamada Marines ka ah iyo inta kale oo ahaa diblumaasiyiin iyo shaqaale kala duwan oo Maraykan ah.

AlmaZ Books
Telegram



## U gogolxaadhkii dhagarta

Muddo dheer ayaa uu sirdoonka Israa'iil maal iyo maskaxba geliyey in uu helo sawirka iyo muuqaalka rasmiga ah ee Amiirka Cas, waxaa fashilmay iskudayo kala duwan oo ay MOSSAD damacsanayd in ay riyadan ku gaadho. Waxa aana ka mid ahaa kii Amiina Almufti oo aakhirkii ku dhammaaday in ay iyadii u gacangasho Amiirka Cas.

22$^{kii}$ Nofamber 1974, Yaasir Carafaat waxa uu markii ugu horreysay galay xarunta Qaramada Midoobey ee New York. Waxaa lagu casuumay kulankii guud ee Qaramada Midoobey ee sannadkaas, iyada oo loo aqoonsaday in isaga iyo ururkiisa xoraynta Falastiin ay yihiin wakiilka rasmiga ah ee qaddiyadda Falastiiniyiinta.

Khudbad aad u qiiro iyo xamaasad badnayd oo uu ka jeediyey kulanka guud, waxa uu ku sheegay in maalintaas ay tahay maalin uu dunida oo dhan soo hor istaagay isaga oo labadiisa gacmood mid ku sita laan saytuun ah, midna seef. Waxa uu u duurxulayey in dunida ay u taallo in Falastiiniyiinta ay la wadaan nabadda ay qaateen oo xaqooda si nabad ah loogu soo celiyo iyo in seef iyo dhiig daata ay xaqooda ku raadsadaan.

Kulanka Qaramada Midoobey waxa uu kor u soo qaaday magaca iyo ixtiraamka hoggaamiyenimo ee Yaasir Carafaat, sidoo kale waxa uu sii xoojiyey sharciyadda ururka uu hoggaaminayey Yaasir Carafaad oo ay Israa'iil u arkaysay in uu yahay urur argagaxiso, dawlado badan oo Reer Galbeed ahina ku raacsanaayeen.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa se intaas ka weynaa oo ka qaybgalka kulanka guud ee Qaramada Midoobey u soo kordhiyey Falastiiniyiinta awood diblumaasiyadeed oo keentay in dalal badan oo caalami ah, gaar ahaan dalalka Qaaradda Afrika, ay aad uga garaabeen garta ay Falastiiniyiintu madashaas ka akhristeen.

Marka laga tago cadhada ay Israa'iil ka qaadday in Yaasir Carafaat iyo guud ahaan qaddiyadda Falastiiniyiintu ay timaaddo fagaarahan caalamiga ah oo ay dunida oo dhami si aad u diirran ugu sacabba tunto hoggaamiyaha Falastiiniyiinta, waxaa maalintaas u soo baxay hal faa'ido: waxa ay ahayd in ay aqoonsatay muuqaalka rasmiga ah ee Amiirka Cas.

Hay'adda sirdoonka dibadda ee Israa'iil waxa ay ku dhisantahay hal-ku-dheg ay caan ku noqotay oo ah, "MOSSAD waxba ma cafido". Si kasta oo nabad iyo isfaham loola yeesho iyo xaalad kasta oo lagu jiro, marnaba MOSSAD lagama filo cafinta ruuxa ay u aragto in uu dembi mar uun ka galay.

Bilowgii intii aan aad loo fahmin habdhaqanka MOSSAD iyo aragtiyaha ay ku shaqayso, Falastiiniyiin badan ayaa ku kaadsoomay nabadda iyo wadahadallada wadanoolaansho ee u bilowday Yuhuudda iyo Falastiiniyiinta.

Intii dambe Falastiiniyiintu waa ay qaateen dersigaas oo marnaba ma dhacdo in nabad iyo wadahadal u dhexeeya Israa'iil dartood ay u aaminaan in laga saaray liiska khaarajinta, taas tu la mid ah ayaana ay qudhoodu ku dhaqmayeen oo iyada oo wadahadalladu socdaan ayaa ay haddana sii socdeen hawlgalladooda ka dhanka ah Israa'iil.

AlmaZ Books
Telegram



Amiirka Cas waxa uu ka mid ahaa masuuliyiintii Yaasir Carafaat u raacday Maraykanka si ay ugala qaybgalaan kulanka Qaramada Midoobey. Arrintani waxa ay fursad dahabi ah siisay MOSSAD oo si fiican uga bogatay sawirrada Amiirka Cas ee ay ku dhowaad toban sanno raadinaysay. Dad badan ayaa ku tilmaamay qaladkii ugu weynaa ee Carafaat iyo Amiirka Cas galeen, waxa aanay jeclaan lahaayeen in Amiirku uu sidiisii u sii qarsoonaado, ugu yaraan illaa waqtig dambe.

Dhinaca kalana waxaa jirta aragti ay qabeen dad badan oo ah in Yaasir Carafaat uu markan isu diyaariyey in uu hannaan nabad iyo diblumaasiyadeed ku raadiyo xuquuqda Falastiiniyiinta, sidaa awgeed uu u baahan yahay in uu helo garbo maamul oo la hawlgala oo wejiyadooda iyo awooddooda dunidu aqoonsan tahay.

Waxa uu isu diyaariyey in uu u hawlgalo qaab dawladnimo, Amiirka Casna uu noqdo madaxiisa sirdoonka iyo masuulka uu ammaankiisa shakhsiga ah ku aamino. Waxaa iyaguna jira dadyow badan oo sheega Amiirka Cas uu ahaa qofka uu Carafaat ugu kalsooni badan yahay ragga ay halganka ku wadajireen, isla markaana uu doonayey in uu xilka uga dambeeyo.

MOSSAD colaaddii hore ay ugu qabtay Amiirka Cas, waxaa raacay cadhada xidhiidhka uu la yeeshay ee gaadhay in uu martiqaad ka helo agaasimaha guud ee CIA. Taas oo ah farriin caddaynaysa in hadda kaddib aanay MOSSAD sii ahaan doonin il-xogeedka keliya ee CIA ka quudin doonta Bariga Dhexe. Arrintan dambe awgeed, waa in la dilo Amiirka si loo badbaadiyo mustaqbalka xidhiidhka sirdoon ee MOSSAD iyo CIA.



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



CIA oo si fiican u garanaysa dabeecadaha MOSSAD, waxaa markiiba soo dhex gashay doodda la xidhiidha mawqifka laga qaadanayo ammaanka Amiirka Cas, marar door ahna masuuliyiinta ugu sarraysa CIA waa ay ka ka wadaxaajoodeen sida ugu habboon ee MOSSAD looga hor istaagi karo in ay ugaadhsadaan Amiirka Cas. Laakiin mar kasta dooddu waxa ay u qaybsamaysay saddex waaxood oo laba ka mid ahi ka midaysan yihiin danayn la'aanta ammaanka Amiirka Cas.

Si kastaba ha ahaato 'e, masuuliyiin badan oo CIA ka mid ah ayaa aamisanaa in aanay marnaba suurtogal ahayn in Amiirka Cas noloshiisa awgeed uu u xumaado xidhiidhka MOSSAD iyo CIA. Kooxdani xitaa waxa ay ka awood badnayd dhinacyo aaminsanaa in anshaxa iyo sumcadwanaaggu ay CIA ku waajibinayaan in ay ilaaliso nolosha qofka u adeegaya ama shaqowadaagga ay yihiin.

Buugga 'The Good Spy' waxa uu sheegayaa, in sannadkii 1978 masuul ka tirsan wakaaladda MOSSAD uu xanshaashaq kula soo dhowaaday masuul sare oo ka tirsanaa CIA, xilli ay ka wadaqaybgalayeen shir ka dhacayey magaalada London.

Masuulkan Yuhuudiga ahaa waxa uu sarkaalka Maraykanka dhegta u saaray su'aal toos ah oo uu weydiinayo, "Salaama CIA da miyaa uu u shaqeeyaa?" Sarkaalka Maraykanku su'aashan soo booddada ku noqotay kama uu jawaabin oo waxa uu iska sii watay socodkiisa. Sida muuqatana ulakac ayaa uu jawaabta su'aashan uga aamusay, maadaama oo uu ogaa in aanay wakaaladdiisu weli go'aan rasmi ah ka qaadan ilaalinta ammaanka Amiirka Cas.

AlmaZ Books
Telegram



Si kastaba ha ahaato 'e sarkaalka CIA waa uu fahmay farriinta dhabta ah ee su'aashani xambaarsantahay: Waxa ay ahayd in Israa'iil ay ka go'an tahay in ay khaarajiso Amiirka CAS, sidaa awgeed ay sarkaalkan u dhiibayso farriintan ay ku rabto in CIA caddayso danta runta ah ee ay ka leedahay Amiirka Cas.

Sarkaalkani markii uu dib ugu noqday dalkiisaba arrintii waa uu hor dhigay madaxda CIA oo ay masuuliyiinta sare ee uu ku jiray kulan rasmi ah ka yeesheen. Kulankan oo dood adagi ka dhacday waxa uu ku dhammaaday go'aanka ahaa in su'aashaas farriinta Israa'iil ku soo dirtay aan 'Haa' iyo 'Maya' midna lagaga jawaabin.

Waxa ay isku qanciyeen in 'jawaab la'aantu' ay tahay jawaab ka fiican in ay MOSSAD ku yidhaahdaan, 'Haa' ama 'Maya' Iyada oo ay runtu tahay in haddii ay jawaabta, 'Haa' siiyaan ay keenayso in mar uun ay soo baxdo in aanu u shaqayn, taasina tahay khiyaamo ay kula kaceen saaxiibbadood, ama in CIA aanay doonaynba in ay marnaba sheegato in uu la shaqeeyo ninkan. Haddii jawaabta ay bixinayaan, 'Maya' noqotana ay ka cabsi qabeen in Israa'iil ay khaarajiso Cali Salaama oo markan ay CIA du u arkaysay in noloshiisu dan u tahay.

Aamuska CIA waxa uu ahaa qaladka ugu weyn ee galaaftay Amiirka Cas, waana suurtagal in uu Maraykanku sidaasba doonayey. Kulamada CIA gudaheeda ayaanay masuuliyiin badan oo u niyad wanaagsanaa Amiirka Casi ka sheegeen in aamuskaasi uu soo dedejin karayo dilka Amiirka Cas, maadaama oo MOSSAD ka fahmi doonto in ninkani aanu u shaqayn Maraykanka.

AlmaZ Books
Telegram



## Mawqifkii Bob Ames

Bob Ames waxa uu ogaaday su'aasha farriinta sirdoon xambaarsan ee sarkaalka MOSSAD ka socday dhegta u saaray masuulkii CIA da ahaa, waxa aanu markiiba gartay khatar soo foodsaartay Amiirka Cas oo uu u arkayey saaxiib dhow. Sida uu Kai Bird ku sheegayo buugga 'The Good Spy', Bob Ames waxa uu dhambaal digniin adag ah u diray Israa'iiliyiinta, isaga oo uga digaya in ay dhib u geystaan Amiirka Cas. Laakiin sida uu qoraagu sheegayo masuulka MOSSAD ee uu Bob Ames digniintan gaadhsiiyey si cad ayaa uu hortiisa uga diiday dalabka ah in aan la dilin Amiirka Cas.

Wanaagga keliya ee CIA ka gaadhay arrintan waxa uu ku koobnaaday in ay Cali Salaama ku caawiso gaadhi nooca aanay xabbaddu karin ah iyo furayaasha isgaadhsiin sir ah oo uu kula xidhiidhi karo masuuliyiinta CIA haddii uu khatar dareemo si loo ogaado waxa ay tahay, dabagalna lagu sameeyo. Waxaa kale oo ka soo baxay in si guud CIA isaga xilsaarto wanaajinta ammaanka guud ee Amiirka Cas—in la siiyo talooyinka uu u baahan yahay, oo isla markaana ragga ammaankiisa qaabbilsan la tayeeyo. Nasiibdarro, go'aankan fulintiisa CIA aad ayaa ay ula dib dhacday.

Kai Bird waxa uu sheegayaa in Israa'iiliyiintu ay markii dambe si toos ah dilka Amiirka Cas ugala hadleen Maraykanka, weliba ay u sheegeen shardiga keliya ee ay ku deyn karaan in uu yahay CIA oo caddaysa in Amiirka Cas uu u shaqeeyo, weliba macluumaad ay ku qanci karto oo shaqaalayntiisa la xidhiidha la soo hor dhigo.



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



Bob Ames waa uu bixin kari waayey caddaynta MOSSAD dalbatay, waayo waxaa xaqiiqo ahaydba in Amiirka Cas aanu basaas u ahayn CIA.

Bob Ames markii uu arkay in Israa'iil aanay nabadgelin doonin Amiirka Cas, haddii aanay CIA caddayn basaasnimadiisa ah hor dhigin, waxa uu si badheedh ah ugu tegey Carafaat iyo Amiirka Cas oo uu hor dhigay xaqiiqadan, una sheegay in sida keliya ee lagu badbaadin karaa ay tahay in uu isu diiwaangeliyo basaasnimada CIA. Ames waxa uu Carafaat iyo saaxiibkii Amiirka Cas ka codsaday in ay u fasaxaan in uu Israa'iiliyiinta u sheego been ah in Amiirka Cas uu si rasmi ah ugu shaqeeyo CIA, si aan loo khaarajin.

Si kastaba ha ahaato 'e, Amiirka Cas waa uu isu quudhi waayey in qoraal rasmi ah lagu bixiyo in uu basaas u yahay CIA, isaga oo ah hoggaamiye halgan oo Falastiiniyiinta hormuud u ah. Waa uu ogaa haddii MOSSAD loogu sheego in uu CIA basaas u yahay, in ay dhaqso u faafin doonto, caddayntaasna ka dhigan doonto hub ay isaga mustaqbalkiisa hoggaamiyenimo ku burburiso.

Amiirka Cas laba daran mid dooro ayaa hor taallay; in uu badbaadiyo naftiisa oo uu basaasnimada CIA sheegto iyo in uu geeri doorbido oo sharaftiisa hoggaamiyenimo ilaashado, midda dambe ayaana uu doorbiday. Waxa uu saaxiibkii Ames u sheegay in aanu arrintaas aqbali karin. Laga bilaabo maalintii go'aankaas diidmada ah ay kala qaateen Cali Salaama iyo Ames, CIA duna ay MOSSAD ku wargelisay go'aankeeda kama dambaysta ah ee ah in aanay sheegayn in uu Cali Salaama basaas u yahay iyo in kale, waa la dareemi karayey in khaarajintii Amiirku dhowdahay.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa se gefafka Amiirka Cas ka mid ahaa in duruufahaas uu arkayey aanay waxba ka beddelin dareenkiisa ammaan, oo tan iyo heshiiskii Qaramada midoobey uu dabciyey.

## Galbashadii Halyeeyga

Sida ay masuuliyiin kala duwan oo MOSSAD ka tirsani ku qireen qoraallo iyo hadallo ay bixiyeen, Amiirka Cas arrinta uu muddooyinkii hore kaga yaabiyey sirdoonka MOSSAD waxa ay ahayd isqarinta iyo sida xeeladda badan ee uu u raadgadan jiray.

Weerarrada MOSSAD ee sigay noloshiisa inta la ogyahay tiradoodu waxa ay ka badnayd 10 iskuday. Waxa aana la aaminsan yahay in ay tiradu intaas aad uga sii badanayso, gaaar ahaan marka lagu daro iskudayada dil ee aan sigin iyo kuwa iyada oo aan la ogaan uu ka badbaaday, tusaale ahaan qorsheyaasha dil ee seegay markii halkii lagu khaarajin lahaa uu ka baaqday ama saacaddii ka dib dhacay.

Feejignaantaasi mar kasta waxa ay MOSSAD u kordhinaysay in ay xoojiso xeeladaha qorshayaasha ay ku khaarajinayso, nasiibdarro se Amiirka Cas muddooyinkii dambe xaalkiisa ammaan waa uu sii dabcayey.

MOSSAD ugu dambayntii waxa ay isticmaashay qorshe aad u ballaadhan oo ay adeegsatay basaasiin ay ugu awood badnayd haweenay ahayd farshaxan u dhalatay Ingiriiska oo lagu magacaabi jiray Sylvia Erika. Muddo ayaa ay MOSSAD gabadhan siinaysay tababarro heersare ah oo loogu diyaarinayo khaarajinta Amiirka Cas. Kaddib, waxaa lagu daray urur

AlmaZ Books
Telegram



bulsheed oo been-abuur ah, kaas oo loogu sheegay in uu ka shaqaynayo qaadhaan u gurista qaxootiga Falastiiniyiinta iyo daryeelka carruurta.

Hay'addan been-abuurka ah ee hawlaha samofalka ku hoos dhuumanaysay ayaa si sharci ah looga diiwaangeliyey dalka Lubnaan, kaddibna Sylvia Erika Arovaia ayaa timid Lubnaan iyada oo loo ekeysiiyey ruux shaqaale ah oo ka tirsan hay'adda.

Inta badan dadka wax ka qoray khaarajintii Amiirka Cas, waa ay isku khilaafaan shakhsiyadda runta ah ee Erika oo ay qaarkood kuba tilmaamaan in uu yahay magac been ah oo ka soo baxay dhinaca Israa'iil, iyada oo MOSSAD ku qarinaysa magaca basaasadda aan abid laga maqal Yuhuudda ee Amiina Almufti. Sidoo kale waxa siyaabo kala duwa looga warramaa qaabkii ay Sylvia Erika Arovaia u hawlgashay iyo guushii ay gaadhay.

Arrintani waxa ay innagu kallifaysaa in aynu dul istaagno qaababkaas laga warramay kuwooda ugu xiisaha badan, si aanay akhristayaasha qaar jaahwareer ugu keenin hababkaas kala duwani, ama aanay dadka qaar u fahmin in ay is burinayaan.

Gashaanti isirkeedu Ingiriis yahay oo qurux u dhalatay. Ruux aan la fahmi karin, haddana si sahal ah ula jaanqaadi karta nolosha bulshada ay qariibka ku tahay, goonisocod, shaqo badnaan iyo karti dheeraad ah laga dareemayo ayaa lagu tilmaamay.

Waa Sylvia Erika Arovaia oo inta badan qoraallada laga sameeyey magaceeda lagu soo koobay Erika Arovaia, markii ay Beyruut timid waxa ay muddo wadday dabagal iyo in ay

AlmaZ Books
Telegram



xaaladda fahanto, kaddib iyada oo ku socota tilmaamta iyo awaamirta MOSSAD oo ka duulaysa xogaha sugan ee ay ka hayaan Amiirka Cas.

Waxa ay kiraysatay guri ka mid ah fooq guryo ahaan loo kireeyo oo hoostiisu dukaan weyn oo laga adeegto tahay. Gurigani waxa uu ka horjeeday guriga uu deggenaa Amiirka Cas oo ku yaallay xaafadda ugu qaalisan Beyruut.

Markii ay degtay gurigan ay ka kiraysatay ka soo horjeedka guriga Amiirka Cas waxa ay bilowday habdhaqan dadkii bartay u muujiyey in ay tahay ruux qalbi wanaagsan, naxariis badan oo hawlaha bani'aadamnimo ee ay ku jirtaa yihiin kuwo ruuxdeedu oggoshahay ee aanay shaqo keli ahi la gelin.

Dadka deggenaa xaafaddu waxa ay ku naanaysi jireen Penelope oo ah magac dumarka loo bixiyo oo asal ahaan ka soo jeeda Giriiggii hore, waxa aana lagu xasuustaa in uu ahaa magaca mid ka mid ah boqorradii dagaalka oo ay iyagu ku andacoon jireen in ay ilaahyo yihiin. Sababta ay magacan ugu doorteenna waxa ay ahayd ammaanid ay ku ammaanayeen daryeel xad dhaaf ah oo ay arkeen in ay u hayso xayawaanka, gaar ahaan bisadaha.

Waxa ay u arkayeen gabadh daryeesha ubadka baahan, gabadh waqtigeeda iyo cilmigeedaba ugu tabarrucday hawlaha bani aadamnimada, waxa ay arki jireen iyada oo ka dhex muuqata hawlaha caafimaadka ee cisbitaallada lagu daweeyo dadka qaxootiga ah, iyo hay'adaha caawiya.

Waxaa u dheeraa daryeel iyo xannaanayn gaar ah oo ay u samayn jirtay bisadaha aanay cidi lahayn ee shaaracyada ku nool, sidaa awgeed waxa gurigeeda hortiisa iyo agagaarkiisaba

AlmaZ Books
Telegram



ka buuxi jiray bisadahan oo sugaya cuntada ay siinayso ama inta ay cuneen aan jeclaysanayn in ay ka fogaadaan gurigan.

Amiirka Cas waxa uu lahaa laba xaas, laakiin muddooyinkii dambe waxa uu aad ugu dhowaa minyarada, Georgina Risq. Muddooyinkii dambe dad badan ayaa ogaa in Amiirka Cas uu gurigan deggenyahay, mararka kooban ee uu ka maqanyahayna ay ahayd waqtiyada safarrada iyo marka uu qoyskiisa minweynada ku maqan yahay.

Sylvia Erika Arovaia muddo ayaa shaqada keliya ee ay qabataa ahayd in ay la socoto dhaqdhaqaaqa Amiirka Cas. Saacadaha uu guriga ka baxo aroortii, gaadiidka ilaaladiisa ah ee raaca, jidka uu ka baxo, duhurkii xilliga qadada jidka uu ka soo galo xaafadda, kolonyada ilaalada ah ee soo raacda, tirada ilaalada gaarka ah ee gurigiisa mar kasta joogta, qaabka ay u baadhaan dadka gurigiisa tegeya, gelinka dambe goorta uu baxo, maalmaha aanu inta badan guriga ka bixin, waqtiyada ay isaga iyo xaaskiisu wadabaxaan iyo marka uu kelidii baxo, jihada uu subaxdii u baxo marka uu tegeyo xafiiskiisa xarunta dhexe ee FATAX ku yaalla iyo dhinaca uu guriga ka soo galo marka uu xilliga qadada soo noqdo.

Erika waxa ay xaqiijisay in gaadhiga rasmiga ah ee uu Amiirka Cas raacaa uu noociisu yahay Chevrolet Station Wagon, inta badanna uu daba socon jiray gaadhi noociisu yahay Jiib (Jeep) oo ay ilaaladiisu saarantahay. Waxa ay ogaatay in Amiirka Cas inta uu gaadhiga saaranyahay ay labada hareerood ka fadhiyaan laba askari oo ah ilaaladiisa gaarka ah, halka gaadhiga dambana ay saaran yihiin tiro askar ah oo si aad u heer sarraysa u tababaran. Xogtan iyo xog aad u badan oo la mid ah

AlmaZ Books
Telegram



ayaa ay Sylvia Erika ururisay si joogto ahna ugu gudbinaysay saraakiisha MOSSAD u qaabbilsanayd khaarajinta Amiirka Cas, si ay xogtan ugu saleeyaan qorshaha khaarajinta ee ay wadaan.

Markii dabagalkii dhammaystirmay, si fiicanna loo sugay in aanay muddooyinkii dambe isbedbeddelin guriga uu deggen yahay Amiirka Cas, saacadaha uu ka baxo, waqtiga uu ku soo noqdo iyo jidadka uu maro marka uu ku socdo ama ka yimaaddo.

Waxaa bilowday wejigii fulinta, MOSSAD waxa ay dejisay qorshihii ay ku khaarajin lahayd Amiirka Cas, warbixintii oo dhammaystiran ayaa aana la hordhigay raysalwasaarihii Israa'iil ee xilligaas oo ahaa Menaaxiim Biigen, si uu u gaadho go'aanka kamadambaysta ah.

Menaaxiim Biigen diyaar uma uu ahayn in uu sidii hoggaamiyeyaashii ka horreeyey qaarkood isaguna ku fashilmo khaarajinta Amiirka Cas, sidaas awgeed waxa uu go'aansaday in uu dhinaciisana sii hubiyo xogtan.

Raafi Etaan oo ka mid ahaa lataliyeyaashiisa daahsoon ayaa uu u diray booqasho dhuumasho ah oo uu ku tago Beyruut isaga oo iska dhigaya ganacsade, si uu isagu indhihiisa ugu soo arko arrimo badan oo madmadow kaga jiray, in uu horfadhiisto basaasadda xogta soo diraysay si uu u xaqiijiyo warkeeda iyo in uu hubiyo in xogta sirdoon ee ka imanaysa Beyruut ay u qalanto hawlgalka khaarajinta ee la qaadanayo.

Raafi Etaan, lataliyihii raysalwasaaraha Yuhuuddu waxa uu ka degey Beyruut isaga oo iska dhigaya ganacsade maalqabeen ah oo u dhashay Giriigga. Waxa uu ku safrayey baasaboorka dalkaas oo magac kale ku qoran yahay.

AlmaZ Books
Telegram


Markii uu xog aad u dhammaystiran urursaday, kaddib waxa uu ku noqday Israa'iil oo uu warbixin lagu kalsoon yahay u gudbiyey saraakiisha fulinta hawlgalkan. Isla markii uu noqday waxaa Lubnaan yimid labada nin ee Peter Scriver iyo Ronald Kolberg iyo gabadha Erika, waa kooxda fulinaysay hawlgalka.

13[kii] Jenaweri 1979, talefanka wakaaladda iibka iyo kiraynta gaadiidka ee Lancar oo xarunteedu tahay Beyruut, waxaa soo garaacay nin ka soo hadlaya magaalada London ee xarunta dalka Ingiriiska. Waxa uu masuuliyiintii wakaaladda u sheegay in uu yahay dalxiise lagu magacaabo Peter Scriver oo doonaya in uu Beyruut yimaaddo 18ka isla bishaas oo shan maalmood kaddib noqonaysa. Peter waxa uu codsaday in wakaaladdu u sii diyaariso gaadhi yar oo kiro ah.

Runtii ayaa ay ahayd oo waxa uu Beyruut yimid 18[kii] Jenaweri. Xilligaas dalka Lubnaan waxa uu aad ugu hanqaltaagayey in uu horumariyo waxsoosaarkiisa dalxiiska oo ahaa isha dhaqaale ee ugu muhiimsan dalka, sidaas darteed waxa uu sameeyey nidaam ruuxa dalxiisaha ah u sahlaya in uu si fudud oo dhaqso ah ku soo geli karo dalka.

Peter waxa uu ka degey Beyruut huteelka caanka ahaa ee Mediterranee, halkaas oo uu ugu sii diyaar ahaa gaadhigii uu sii dalbaday oo ahaa Volkswagen Golf midabkiisu cirka oo kale yahay. Isla maalintan Peter waxa uu la kulmay dalxiise u dhashay Kanada oo ay hore ugu sii ballansanaayeen. Dalxiisaha reer Kanada, Ronald Kolberg, waxa uu magaalada yimid maalin ka hor imaanshaha Peter waxa aanu deggenaa huteelka Royal Garden, isla shirkadda hore ayaa uu isaguna ka sii kiraystay gaadhi noociisu yahay Simca Chrysler.

AlmaZ Books
Telegram



Maalintii saddexaadna waxaa xafiiska wakaaladda kiraynta gaadiidka yimid macmiilkii saddexaad. Waa Erika oo dalbatay in laga kireeyo gaadhi adkaysi leh oo iska xejin kara safarrada buuraha, iyada oo ku andacoonaysa in ay doonayso in ay gaadhi ugu dalxiis tagto buuraleyda dalxiiska loo tago ee dalka Lubnaan.

Wakaaladda Lancer waxa ay Erika ka kiraysay gaadhi noociisu yahay Datsun oo ay dhigatay rug baabuurta la dhigto oo aad ugu dhoweyd gurigeeda.

Markii saddexdan ruux ay gacanta ku dhigeen gaadiidkan ay kiraysteen oo mid kastaa uu la tegey halkii uu deggenaa, iyaga oo jilaya in aanu midina mid aqoon, saddex doonyood oo kuwa gantaalaha xambaara ah ayaa barroosinka dhigtay xeebta lamadegaanka u dhexeeya Beyruut iyo dekedda Juniya, waxa aanay ku rogeen rar aad u culus oo ahaa walxaha qarxa.

Kolberg iyo Scriver ayaa xeebtan diyaar ku sii ahaa meel aan ka fogeyn halka ay doonyuhu ku rogi doonaan walxaha qarxaya, si ay u raraan walxaas oo ay saareen gaadhigii Volkswagen ka ahaa.

21[kii] Jenaweri ayaa Peter uu huteelka uu degganaa ku wargeliyey in uu guuray, isla maalintaasna waa uu baxay isaga oo sii kaxaystay gaadhigii Volkswagen ka ahaa. Waxa uu toos u abbaaray jidka Rue Verdun ee magaalada Beyruut oo ah halka uu ku yaallay guriga Erika deggen tahay, kana soo horjeeday guriga Amiirka Cas, waxaa u dhexeeyey jidyare ku darsama jidkan halbawlaha ah ee Verdun. Waxa uu gaadhiga dhigay meel ku toosan daaqadda guriga ay deggen tahay Erika ee dabaqa sare ahaa.

AlmaZ Books
Telegram


Peter Scriver dalxiise ma uu ahayn, waa sarkaal ka tirsan sirdoonka MOSSAD oo weji aan ahayn kiisa runta ah ku yimid Beyruut. Markan waa uu dhammaystirtay hawsha intii isaga ka khusaysay, sidaa awgeed inta uuu gaadhigii si aamin ah u dhigay rug baabuurta la dhigo oo dhinaca ku haysa jidka ayaa uu tagsi ka raacay, waxa aanu toos u tegey gegida diyaaraddaha ee magaalada Beyruut, si uu ugu dhoofo tigidh u go'naa oo dalka Qubrus ahaa.

Dalxiisihii labaad ee reer Kanada, Ronald Kolberg, isna isla maalintan ayaa uu fasaxay qolkii uu ka deggenaa huteelka. Waxa uu u guuray huteel kale oo lagu magacaabo Montmartre, kaas oo ku yaalla degmada Juniya. Huteelka uu deggenaa Peter iyo labada huteel ee uu isu maray Ronald Kolberg, dhammaantood waxa ay ahaayeen huteellada dabaqadda sare; in ay degaanna waxa ay ahayd xeelad ay ku nabadgelayeen maadaama oo loo arkayey dad ladan oo dhaqaale la yimid dalka.

Degmada Juniya ee uu ku yaallay huteelka dambe ee uu u guuray Kolberg, waxa ay 16 kiiloomitir dhinaca woqooyi ka xigtaa magaalada Beyruut, laakiin si guud waxa ay ugu tirsan tahay degmooyinka caasimaddu ka kooban tahay oo la isku yidhaahdo Beyruudda Weyn. Waa degmo badda xeelligeeda dhacda oo leh goobo dalxiiska iyo nasashada loo tago. Waxaa ku yaalla baarar waaweyn oo aan habeenkii lagu kala seexan, dalxiisayaasha Lubnaan yimaaddana lamahuraan ayaa ay u ahayd in ay qorshahooda ku darsadaan tegitaanka degmadan. Waxyaabaha kale ee ay degmadani caanka ku ahayd waxaa ka mid ahaa wiishashka xadhkaha ku xidhan ee meelaha sare ka soo lusha ee buuraha figtooda sare la isaga gudbo.

AlmaZ Books
Telegram



Maalintii xigtay oo ahayd Isniin gelinkeedii hore uu waagu Amiirka Cas iyo ururka Xoraynta Falastiiniyiintaba ugu beryey dhib la'aan, gelinkeedii dambe waxa uu noqday masiibo ay muddo qaadatay ka soo waaqsashadeedu.

22kii Jenaweri 1979, oo Amiirka Cas u ahayd maalin kale oo ka mid ah maalmihiisii caadiga ahaa, ayaa uu saacaddii go'nayd ee lagu yaqaannay aqalkiisa u soo qado doontay.

Afartii galabnimo oo rubuc dhiman (3:45 galabnimo) ayaa uu Amiirka Cas mar kale caadadiisii raacay oo isaga oo degdegsan uu soo fuulay gaadhigiisii Chevrolet ka ahaa, ilaaladiisiina iyaga oo ordaya ay boobeen gaadhigii Land Rover ka ahaa ee ay ku daba geli jireen, sidoo kale waxa dhaqso loo istaadhay gaadhi yar oo ahaa nooca laydhka bilaysku dusha sare kaga xidhan yahay ee inta badan madaxda horgala si uu jidka uu ugu banneeyo. Sidii ayaana ay saddexda baabuur kaga soo dhaqaaqeeyn guriga Amiirka Cas iyaga oo ku socda xafiiskiisa ku yaallay xarunta maamulka ee ururka Xoraynta Falastiin.

Kolonyadii Amiirka Cas saarnaa waxa ay markiiba ku soo dhaceen jidka Rue Madame Curie, kaddibna waxa ay u baydheen jidka weyn ee Rue Verdun. Dabaqa siddeedaad ee fooqa ka soo horjeeda guigiisa waxaa soo taagnayd Erika oo gacanta ku haysa qalabka meesha durugsan wax lagaga maamulo ee "Remote" ka loo yaqaanno, waxa ay si feejignaan iyo hubsiimo leh ula socotay xawaaraha ay ku socdaan baabuurta Amiirka Cas saaran yahay iyo hadba masaafada ay u jiraan gaadhiga walxaha qarxa laga soo buuxiyey ee uu Peter dhigay goobta indhaheedu hayaan ee daaqadda gurigeeda ku toosan.

AlmaZ Books
Telegram



Remuutka ay gacanta ku haysaa waxa uu la shaqaynayaa qalab ku rakiban gaadhiga, marka ay gujiso Remuutka ayaa uu qalabkaasi samaynaa shoodhka koronto ee qaraxa sababaya. Waxa ay ogtahay in qalad yar oo ka dhacaa uu badbaadin karo Amiirka Cas, haddii ay taasi dhacdana in ay badbaaddaa waa ay adagtahay. Markii ay hubisay in gaadhiga Amiirka Cas saaranyahay uu hareer marayo gaadhiga walxaha qarxaa ka buuxeen ayaa ay qarxisay.

Waxaa dayaamay qarax dhul aad u durugsan laga soo malqay oo mar keliya gaadhigii Volkswagen ka ahaa ka dhigay sida kubbad olol ah. Waxa uu markiiba dabku qabsaday gaadhiga Chevrolet ka ahaa ee ku dhowaa oo isna ilbidhiqsiyo gudahood ku qarxay, waa gaadhigii uu saarnaa Amiirka Cas.

Burburkii ka soo dhambalmay baabuurta qaraxday oo weli ololaya iyo falliidhadii qaraxa ayaa inta ay isla oogsadeen kor u kacay oo dhul ballaadhan ku faafay, ilbidhiqsiyo ayaa ay sida roobka dhulka ugu soo da'ayeen. Jiho kasta waa ay u firdheen falliidhadu, waxa aanay daaqadaha ka daadiyeen guryihii ku dhowaa dhulkaas oo dhan. Maydkii dadka baabuurta saarnaa oo inta uu wadagubtay dhuxul weyn u ekaaday ayaa isna ka soo duulay gawaadhida oo ku firdhay baabuurta gubanaysa hareerahooda.

Muddo yar gudaheed waxaa goobta masiibadu ka dhacday yimid baabuurta bilayska iyo kuwa gurmadka Caafimaadka. Kooxihii caafimaadka ayaa baabuurta gudahooda iyo hareerahooda ka soo ururiyey maydka afar ruux, waa darawalkii gaadhiga Chevrolet ka ahaa, labadii askari ee ilaaladiisa shakhsiga ah u ahayd iyo Amiirka Cas.

AlmaZ Books
Telegram



Waxaa kale oo qaraxan ku geeriyooday Cali Xuseen Cabdarasaaq, Khaliil Axmed Xuseen, Jumayl Xasan Rumxi iyo nin magaciisa lagu soo koobay Saayid, dhammaan afarta nin oo dhallinyaro ahaa waxa ay ahaayeen ilaalada gaarka ah ee Amiirka Cas.

Erika Chambar ayaa ah gabadha xogta ugu badan ka ururisay Amiirka Cas, muddo ayaa ay kamarad kuwa aragtida soo dhoweeya ah dhaqdhaqaaqiisa oo dhan kula socotay iyada oo ku sugan guriga ay deggen tahay ee ka soo horjeeday guriga Amiirka Cas. Erika ayaa sida oo kalana noqotay ruuxa gacanteeda ku fulisay weerarkan galaaftay ninkii Israa'iil 10 sanno ka badan ku daba jirtay.

Nabarka ugu weyn ee geerida Amiirka Cas waxa uu ku dhacay hoggaamiyihii Falastiiniyiinta Yaasir Carafaat. Maalintan masiibadu dhacday waxa uu joogay magaalada Dimishiq ee xarunta dalka Suuriya, waxa aanu warka dhiillada lihi gaadhay isaga oo ka qaybgalayey shir ka socday huteelka Meridien ee magaalada Dimishiq.

Mid ka mid ah gacanyarayaashiisa ayaa ula soo galay warqad lagu soo diray isgaadhsiinta Telegaraam oo warkan dhiillada leh lagu soo qoray. Isla markiiba ilmada ayaa indhihiisa soo boobtay, hirar murugo oo xanuun badan ayaa ku furmay. Waxa uu waayey gacantiisii midig ee uu ku hallayn jiray hawl kasta oo uu u baahdo; siyaasad, diblumaasiyad, sirdoon iyo ammaanka intaba. Waxa uu ahaa ergeygiisa gaarka ah ee uu u diro kulamada xasaasiga ah ama qarsoodiga ah ee aanu doonayn in isagu tago. Marar badanna si badheedh ah ayaa isaga oo ka wakiil ah Carafaat waxa uu la soo kulmay masuuliyiin sare oo caalami ah oo ay ku jiraan madaxweynayaal dawladeed.

AlmaZ Books
Telegram



Doonni yar oo kuwa dagaalka ee gantaalaha xambaara ah ayaa isla habeennimada maalintii qaraxu dhacay, waxa ay ku soo xidhatay badweynta shishe ee dekedda Juniya, duleedka Beyruut. Waxa ay sidday laash rabadh ah oo ay dhigtay xeelliga badda.

Waxaa halkan ku sii diyaar ahaa Ronald Kolberg iyo Erika Chambers, waxa ay xeebta ku yimaaddeen labadooda baabuur ee u kiraysnaa oo mid kastaa kiisa si gaar ah u watay. Labadan basaas ee ku soo guulaystay hawlgalkii loo diray iyo ciddii laashka yar waddayba, markiiba waxa ay dhaqso u raaceen laashkii oo ay doonnida ku gaadheen. Saacado aad u yar kadib, iyaga oo bedqaba waxa ay joogeen Israa'iil. Bilayska Lubnaan ayaa helay labadan baabuur oo badda xeelligeeda iyaga oo istaadhan ay kaga tageen.

Cali Xasan Salaama waxaa lagu aasay xabaalaha shuhadada ee magaalada Beyruut, waxa aana janaasadiisa ka qaybgalay tobannaan kun oo dad ah oo ay horkacayaan Yaasir Carafaat iyo dhammaan madaxda sare ee ururrada iyo jabhadaha kala duwanaa ee Falastiiniyiinta.

## Halkee ay ku dambaysay Erika?

Erika Chambers, waxa ay ahayd Yuhuudiyad muddo dheer ku noolayd Ingiriiska, Ustareeliya iyo Jarmalka, laakiin markii dambe u guurtay Israa'iil oo ay waxbarasho jaamacadeed ka bilowday. Xilli ay ka mid ahayd ardayda jaamacadda Hebrew ayaa ay heleen saraakiisha shaqaalaysiinta basaasiinta ee MOSSAD, waxa ay caan ku ah in ay jaamacadaha ka qortaan basaasiinta.

AlmaZ Books
Telegram



Erika magaceeda iyo shaqadeeda sirdoon lagama maqal wax ka baxsan soo gelitaankeeda Hawlgalkan khaarajinta Amiirka Cas. Kaddibna, warka keliya ee hubaal looga hayaa waa in ay dib ugu noqotay Israa'iil, laakiin lagama helin xog dambe.

Si kastaba ha ahaato 'e, waxaa jira warar marar kala duwan soo baxay oo ka warramaya masiirkeeda, waxaa ka mid ah xog taariikhyahanno badan ku kalsoonadeen oo sheegaysa in Erika ugu dambayntii ku baxday gacanta Falastiiniyiinta.

Falastiiniyiinta ayaa iyaguna qoraallada ay ka sameeyeen qisada gabadhan, waxa ay ku sheegay in iyada iyo laba sarkaal oo MOSSAD ka tirsan ay ku khaarajiyeen Giriigga.

Dr. Samiir Maxamuud Qaddiix oo ah cilmibaadhe ka faallooda arrimaha ammaanka iyo istaraatijiyadda iyo qoraa caan ah, ayaa qisada dilka Amiirka Cas oo uu ku baahiyey shabakadda Arab Military waxa uu ku sheegay, in taliyihii hay'adaha ammaanka gaarka ah ee Falastiiniyiinta Salaax Khalaf (Abu Iyaad) uu dhammaan gacanyareyaasha iyo basaasiinta Falastiiniyiintu meel kasta oo ay dunida ka joogaan amar ku siiyey in la soo khaarajiyo Erika.

Baadhitaan muddo dheer ahaa kaddib, sirdoonka Falastiiniyiintu dalka Giriigga ayaa uu ka helay Erika oo ay wehelinayeen laba ka mid ah saraakiisha sare ee MOSSAD.

Koox ka tirsan wakaaladda sirta ee Falastiiniyiinta oo si gaar ah loogu soo xulay fulinta amarka Abu Iyaad ee ahaa in saddexda ruuxba la khaarajiyo ayaa ku guulaystay in ay dilaan, saddexdoodaba. Waxa uu qoraagu sheegayaa in Erika ay iyada

AlmaZ Books
Telegram


si gaar ah bambo kelideed ugu dhufteen taasina ay keentay in jidhkeedu googo'o.

## Qaladaadkii ammaan ee Amiirka Cas galaaftay

Muddadii uu Cali Salaama hoggaaminayey halganka Falastiiniyiinta qaybihiisa ugu khatarta badan oo ahaa sirdoonka iyo dagaalka dahsoon ee ka dhanka ah MOSSAD, waxaa Israa'iil gaadhay dhirbaaxooyin kulul oo dhiig badani ka daatay; ciidamadeeda, dadkeeda rayidka ah, hay'adaheeda ammaanka, diblumaasiyiinteeda, danaheeda gudaha iyo dibadda iyo masuuliyiin muhiim ah oo ka tirsanaa sirdoonka Israa'iil.

Canaasiir Falastiinihyiin ah oo si heer saraysa u tababaran milateri ahaan iyo sirdoon ahaan ayaa uu Cali Salaama ku beeray inta badan dalalka ay Israa'iil danaha ku leedahay. Shaqadooduna waxa ay ahayd in ay ugaadhsadaan saraakiisha MOSSAD ee jooga iyo danaha dhaqaale iyo diblumaasiyadeed ee ay Yuhuuddu ku leedahay. Dhinaca kalana, Amiirka Cas waxa uu joogto ka dhigay in gudaha Israa'iil uu geliyo naftood-hurayaal kamandoos ah oo dagaallo geeri ah la galay ciidamada ammaanka ee Israa'iil.

Amiirka Cas waxa uu Israa'iil ula dagaallamay si kasta oo suurtogal ah, sidaa awgeed waxaa qasab ku ahayd feejignaan dheeraad ah iyo indhafurnaan sirdoonnimo. Bilo wgii si yaab leh ayaa uu ammaankiisa u ilaaliyey, laakiin ugu dambayntii waxa uu u soo dabcay duruufihii cusbaa ee ay ka mid ahayd, guurkiisa boqorrada quruxda adduunka, wadashaqayntii Maraykanka dhexmartay iyo xidhiidhkii ururkiisa FATAX iyo dunida oo sidii hore ka wanaagsanaaday.

AlmaZ Books
Telegram



Marka laga hadlayo xaaladihii ammaan ee uu Amiirka Cas ku jiray waqtiyadii yaraa ee dilkiisa ka horreeyey, isla markaana dib loogu noqdo dabcinta uu ku sameeyey habnololeedkiisa iyo ilaalinta ammaankiisa; waxa aynu dul istaagaynaa afar qodob oo ay xeeldheereyaasha ammaanku ku celceliyeen in ay ahaayeen qaladaad Amiirka Cas sameeyey ee naftiisu ay sababsatay,

## 1. Duruus uu dayacay

MOSSAD marar badan ayaa ay ku fashilantay khaarajinta Amiirka Cas, hoggaamiyeyaal kale oo ka mid ahaa Sabtembarta Madow iyo guud ahaan laamaha ammaanka ee Falastiiniyiinta. Xilliga jabhadaynta iyo mar kasta oo cadow awood badan lala dagaallamayo, waxaa qalad ah in ruuxu uu wejigiisa iyo magaciisa shaaciyo, haddii aanu ahayn qof marka hore la sii yaqaannay.

Sirdoon ahaan qaladka ugu weyn ee Amiirka Cas iyo Yaasir Carafaat galeen waxa uu ahaa isaga oo cadowga koowaad ee MOSSAD ah, wejigiisana aan hore loo haynin, in ay si badheedh ah isugu raaceen xarunta guud ee Qaramada Midoobey.

## 2. Minyaradii caanka ahayd

Amiirka Cas afadii caanka ahayd ee uu guursaday waxa ay khatar ku ahayd noloshiisa. Qodobbada ugu muhiimsan ee masuuliyiinta sirdoonka, gaar ahaan kuwa isqarinaya lagala taliyaa waa in aanay la saaxiibin, guursan ama xidhiidh muuqan

AlmaZ Books
Telegram



kara la yeelan dadka caanka ah. Waa raad fiican oo ay aalaaba sirdoonnadu u maraan cidda ay ugaadhsanayaan.

Ruuxa caanka ahi waxa uu leeyahay galaangal badan oo bulsho, waxa aana u fudud in uu dadyow kala duwan barto, dano gaar ahina dhex maraan. Dhinaca kalana inta badan waa qof ilaashada sumcad iyo dano gaar ah sidaas awgeed waa uu u nugulyahay in sirdoonnadu ay ka dhigtaan basaasiin. Tusaale ahaan waxaa dhacda in wakaaladda sirdoonku ay qofka caanka ah ugu hanjabto sumcad dilis ama in danihiisa la dhaawaco haddii aanu sirdoonka ka caawin hawsha uu ka doonayo. Waa qodob muhiim ah oo ay tahay in uu maskaxda ku hayo qofka xaaladaha ammaan ee gaarka ah lihi, waa in uu ka fogaado la saaxiibista dadka caanka ah ee loo soo mari karo.

In qofka caanka ahi yahay shakhsi wejigiisa la wadagaranayo oo si sahal ah cid kasta oo isku hawsha ama loo diraa u soo heli karto, halka uu deggen yahay iyo jadwalkiisa dhaqdhaqaaq ayaa iyaguna ah arrin kale oo sirdoonnada u fududaysa in ay soo helaan ruuxa ku xidhan ama xaaska/sayga u ah.

Mid kasta oo ay noqoto arrimaha aynu soo xusnay, waxa uu nuxurku yahay in ruuxa caanka ahi khatar ku yahay ruuxa ammaankiisu khatarta yahay.

Waxa aanay dad badani aamisan yihiin in uu qalad ahaa guurkii Amiirka Cas ee Gorgiana Risq. Boqoraddii quruxda adduunka oo si weyn ugu xidhnayd warbaahinta iyo shirkadaha waaweyn ee xayeysiiska. Waxa ay u arkaan xitaa haddii Cali Salaama aanu Carafaat u raaci lahayn Qaramada Midoobey, in garashada wejigiisa iyo helidda halka uu deggenyahay ay fududaatay maalintii uu guursaday Geogina Risq.

AlmaZ Books
Telegram



## 3. Sirdoon Aamin maleh

In ruuxa milateriga ah ama sirdoonka ahi kalsooni dheeraad ah u qaado kartidiisa, awooddiisa, xirfaddiisa iyo xeeladihiisu waa bilowga burburka iyo fashilaadda. Waxa se ka sii foolxun, guuldarrana bilow u noqon karta, in ruuxa milateriga ah ama sirdoonka ahi uu ku kalsoonaado cid kale oo aan ahayn dadka ay hawsha ku wadajiraan ee isku masiirka yihiin.

Amiirka Cas intii ka dambaysay xidhiidhkii isaga iyo Maraykanka dhex maray iyo saaxiibtinnimadii dhoweyd ee uu la yeeshay Bob Ames, waxaa ku beerantay kalsooni badan oo ah in saaxiibbadii CIA ay ilaalin doonaan. Henry Kissenger oo xilliyadaas Amiirka Cas shaqaynayey ahaa wasiirka arrimaha dibadda Maraykanka ayaa qudhiisu sheegay in Amiirka Cas isku dhigtay kalsoonidaas ah in Maraykanku ilaalin doono, laakiin aanay taasi rumoobin.

Basaaska xariifka ahi ma aamino cid aanu hubin in ay isku masiir yihiin, xitaa saaxiibbadiisa ay aad isugu dhow yihiin iyo xubnaha qoyskiisa ee aanay isku shaqada ama mustaqbalka ahayn.

Marka arrintan la eego gef weyn ayaa ay noqonaysaa in Cali Salaama uu aaminay shakhsiyaad shisheeye ah iyo masuuliyiin sirdoon oo aanay isku dal iyo dan ahayn. Si kasta oo ay CIA isugu xidhmeen, haddana waxaa mar kasta taallay runta ah miisaanka xidhiidhka iyo danaha ka dhexeeya Israa'iil iyo Maraykanka.

Waxaa iyaduna gef kale ah in aad abaalcelin ka fisho wakaalad sirdoon oo shaqo idin dhex martay.

AlmaZ Books
BOOGAAG AQOONEED
AFKAAGA HOOYO
Telegram

AlmaZ Books
Telegram



Waxa ay dad badani aaminsan yihiin in Amiirka Cas uu sameeyey gef weyn oo ah in uu u qaatay in CIA uga abaalcelinayso xogaha muhiimka ah ee uu siiyey. Waxa uu ka caawiyey hawlgalkii Maraykanku ku badbaadinayey lahaystayaashii kooxda dableyda ahi ku dhex qafaalatay safaaradda Maraykanka ee Beyruut, taas oo uu xitaa madaxweynihii xilligaas ee Maraykanka Gerald Ford ka maragkacay, ugana mahadceliyey Amiirka Cas. Waxaa iyaguna jiray abaallo kale oo tiro badan oo Cali Salaama u tirsanayey Maraykanka. Waxa se iyaduna xaqiiqo ah in Amiirka Cas iyo Maraykanka qudhooda xaalado ammaan oo aan fiicnayni hore u soo dhex mareen.

Waxaa ka mid ahaa weerarkii ay Sabtembarta Madow xoogga ku gashay safaaradda Sucuudiga ee Khartuum, Suudaan, iyaga oo ku dhex dilay safiirkii Maraykanka oo joogay munaasabad ka dhacaysay safaaraddan. In Amiirka Cas uu Sabtembarta Madow odaygeeda ahaa, godobta ka dhalatayna qaybta ugu weyn ku yeelanayey, waxa ay ahayd arrin biyo-kamadhibcaan ah, balse Amiirka Cas waxaa kala weynaaday xidhiidhkii dambe ee dhex maray isaga iyo Maraykanka.

Waxaa seegtay si kasta oo nabarradii hore looga bogsado, in haddana aanay meesha ka saari karin hawlgalladii iyo ficilladii xanuunka badnaa ee ururka Sabtembarta Madow gaadhsiiyey Maraykanka, taasina aakhirka noqonayso culays kafadda abaalka dhankeeda kale fadhiisanaya; waana xusuus ay ahayd in ay jaangoyso illaa heerka ay tahay in uu aamino Maraykanka.

AlmaZ Books
Telegram

# TIXRAACYO

1. وثائق: جاسوسة الموساد التي قتلت أبو علي حسن سلامة - بقلم: د . سمير محمود قديح:

http://www.karamapress.com/images_lib/images/4_1421996915_3655.jpg

2. جريدة المدينة - قصة جاسوس السي آي إيه "الطيب" الذي صادق عرفات رغماً عن كيسنجر إبراهيم عباس – الترجمة : تاريخ الخبر: 06 / 06 / 2014

3. أبو علي حسن سلامة - بقلم : د . سمير محمود قديح:باحث في الشئون الأمنية والإستراتيجية

http://www.karamapress.com/images_lib/images/4_14

4. « فدائي في المخابرات الإسرائيلية » : من ملفات المخابرات الفلسطينية

5. الأمير الأحمر: المركز الفلسطيني للإعلام - December 30, 2011

https://web.archive.org/web/20111230014805/http://www.palestine-info.info/arabic/books/moosad/mosad10.htm

https://t.me/maktabadasharciga 

AlmaZ Books
Telegram



6. الجزيرة الوثائقية (10-03-2017), الأمير الأحمر - قاهر الموساد الإسرائيلي, مؤرشف من الأصل في 17 مارس 2020, اطلع عليه بتاريخ 26 يوليو 2017

Aljazeera Documentary: https://www.youtube.com/watch?reload=9&app=desktop&v=QLAHPZWmeB0

7. Eye for an Eye: Israel's Swift and Devastating Response to the Munich Massacre at the 1972 Olympic Games - Benjamin Mapes: Ben Mapes, an undergraduate History major, wrote this paper for Dr. Roger Beck's HIS 2500 course, Historical Research and Writing, in spring 2009.

8. The 1972 Munich massacre, or was it rescue? By: James Kenyon and Joel Rookwood - Retrieved on: 05 June 2016

9. Gloal Directions: THE 1972 MUNICH OLYMPICS MASSACRE. By: Dr. Keith Suter - www.Global_Directions.com

10. The Good Spy: The Life and Death of Robert Ames (May 26, 2015 – Kai Bird.

11. Hasan: Playboy guerilla - Daily Union - Jan 24, 1979: https://news.google.com/newspapers?id=ffZfAAAAIBAJ&sjid=3FYMAAAAIBAJ&pg=1398,1709184&dq=yasser+arafat+georgina+rizk&hl=en



https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram



12. The Intelligence held key to success - Spokane Daily Chronicle - Jul 26, 1971:

13. The hunt for Black September - By Noam Shalev: BBC January 2006.

http://news.bbc.co.uk/2/hi/programmes/this_world/4627388.stm

14. "How MOSSAD got the Red Prince". The Montreal Gazette - Feb 1, 1979: https://news.google.com/newspapers?nid=1946&dat=19790201&id=3pQuAAAAIBAJ&pg=7100,5559702

15. Ronen Bergman, Rise and Kill First Random House 2018 pp.216-218.

16. washingtonpost.com - Penetrating Terrorist Networks. By David Ignatius. Sunday, September 16, 2001; Page B07.

https://web.archive.org/web/20110604225635/http:/www.washingtonpost.com/ac2/wp-dyn/A34478-2001Sep14?language=printer

17. One Day in September: The Full Story of the 1972 Munich Olympics Massacre and the Israeli revenge operation (Rath of God) By Simon Reeve – 2000

https://t.me/maktabadasharciga

# SAWIRRO XUSUUSEED



(Midig) Georgina Risq iyo Cali Salaama xafladdii arooskooda

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram





(Midig) Cali Salaama iyo hooyadii




(AP Wire photo): Jorjiina Risq – 1971 markii ay boqoradda quruxda noqotay

AlmaZ Books
Telegram






Cali Hasan Salaama

https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram





Ciidamada Israa'iil oo ku hareeraysan diyaaradda afduubka lagu haystay ee fadhiday Tel Aviv




Thresa Halse, 9 May 1972, waxaa laga soo dejinayaa diyaaraddii ay afduubeen ee Israa'iil ay xoogga ku furatay




https://t.me/maktabadasharciga

AlmaZ Books
Telegram







11 kii ciyaartoy ee Israa'iil lagaga dilay Muunikh




Wiilka Cali Salaama oo isna Cali Salaama la yidhaahdo iyo hooyadii Georgina Risq

AlmaZ Books
Telegram





Wiilka Cali Salaama oo lasawiran Yaasir Carafaat



Wasfi Tel, raysalwasaarihii Urdun ee ururka Sabtembarta madow uu dishay





https://t.me/maktabadasharciga



(Bidix)- Wasiirkii difaaca Israa'iil Moshe Dayan, iyo raysalwasaare Golde Meir oo isu diyaarinaysa in ay baarlamaanka u jeediso khudbaddii la xidhiidhay weerarka Muunikh 5 Sabtembar 1972, ciyaartoyga lagu dilay.

Kan Waa Tik Tokeygana Waxaan ku soo Gudibanaa Wax yaabo Faaido Leh

